o

Nofeembar 4, 2025 Doorashada Guud iyo Gaarka

Degmada King

# Buug-yaraha Rasmiga ah ee Codbixiyeyaasha Deegaanka

codeyn!

Warqaddaada codbixinta waxay imaan doontaa ugu dambeyn Oktoobar 20

206-296-VOTE (8683) | kingcounty.gov/elections

King County Elections

codeyn!

# *Warqad ka socota*
# Agaasimaha



Codbixiyeyaasha iyo Codbixiyeyaasha Mustaqbalka ee Qaaliga ah,

Wax kasta oo ay yihiin aad danayneyso, doorashadaan Nofeembar waxay saameyn ku yeelan doontaa sannado badan oo soo socda. Waxaad u codeynaysaa wakiilladaada laga soo bilaabo Senatarka Gobolka ilaa iyo Guddoomiyaha Degmada Biyaha. Waxaa sidoo kale jira dhowr cabbir sharci oo ku jira warqadda codbixinta, halkaas oo aad fursad u leedahay inaad si toos ah u go'aamiso sharciga.

Arrin kasta ama aragti kasta oo kugu dhiirigelisa inaad dhaqaaqdo – tag oo codee.

Ka fiiri warqaddaada codbixinta boostada ka dibna buuxi goobaabinyaashaada, saxiix, oo isla markiiba soo celi. Ku rid sanduuqa lagu rido ee deegaankaaga (waxaa ka jira 85 gudaha Degmada King). Maalinta Doorashada waa Nofeembar 4 laakiin uma baahnid inaad sugto. Tag oo codee sida ugu dhaqsaha badan ee aad awooddid.

**Isku qor si aad u hesho ogeysiisyada warqadda codbixinta si aad u hesho ogeysiis qoraal ama iimeel ah marka warqadda codbixintaada dib loogu soo celiyo Xarunta Doorashada, iyo marka ay diyaar u tahay in la tiriyo.**

Markaad u diyaar garoowdo inaad codeyso, qaado dhowr daqiiqo si aad u buuxiso qorshaha codeynta ee bogga 8-aad, ka dibna ka caawi saaxiibbadaada iyo qoyskaaga inay sameystaan qorshahooda codeynta si codkooda loo maqlo.


Naga soo wac 206-296-VOTE (8683) haddii aad u baahan tahay caawinnaad si aad isku diiwaan geliso, helitaanka warqaddaada codbixinta, ama fursado kale oo codbixin la heli karo. Sida caadiga ah, waxaan halkan u joognaa inaan ku caawinno.

Codeyn wacan,

Julie Wise

Julie Wise

**Isku qor si aad u hesho ogeysiisyada warqadda codbixinta!**



# Mawduucyada


**Macluumaadka Guud**
Is diiwaan geli si aad u codeyso ... 4
Xarumaha codbixinta ... 5
Sida loo codeeyo ... 6
Raad-raac warqaddaada codbixinta ... 7
Qorshe codeyn samayso ... 8
Waajibaadyada xafiisyada ee doorashadan ... 9
Goobaha sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ... 12
Qof Walba Codkiisa Waa Muhiim ... 14
Khariiradda Degmooyinka Sharci Dejinta ee 2024 ... 15
Khariiradda Degmooyinka Golaha Degmada King ee 2022 ... 19

**Gobolka**
Degmada Sharci Dejinta Lr. 33 ... 16
Degmada Sharci Dejinta Lr. 34 ... 18

**Degmada**
Degmada King ... 20
Golaha Degmada Lr. 1 ... 21
Golaha Degmada Lr. 5 ... 22
Dekedda Seattle ... 23

**Magaalooyinka**
Magaalada Burien ... 25
Magaalada Des Moines ... 27
Magaalada Lake Forest Park ... 29
Magaalada Normandy Park ... 32
Magaalada Renton ... 34
Magaalada SeaTac ... 37
Magaalada Seattle ... 40
Magaalada Shoreline ... 46
Magaalada Tukwila ... 48


**Degmooyinka Dugsiga**
Degmada Dugsiga Highline Lr. 401 ... 50
Degmada Dugsiga Northshore Lr. 417 ... 54
Degmada Dugsiga Renton Lr. 403 ... 57
Degmada Dugsiga Seattle Lr. 1 ... 59
Degmada Dugsiga Shoreline Lr. 412 ... 63
Degmada Dugsiga Tukwila Lr. 406 ... 64

**Degmooyinka Ujeeddada Gaarka**
Degmada Ilaalinta Dabka ee Degmada King Lr. 2 ... 66
Degmada Ilaalinta Dabka ee Degmada King Lr. 16 ... 67
Degmada Ilaalinta Dabka ee Degmada King Lr. 20 ... 68
Degmada Dab-damiska ee North Highline ... 68
Waaxda Dab-damiska ee Shoreline ... 69
Dab-damiska South King ... 70
Degmada Biyaha ee Highline ... 71
Degmada Biyaha ee Degmada King Lr. 20 ... 72
Degmada Biyaha ee Degmada King Lr. 49 ... 72
Degmada Biyaha ee Degmada King Lr. 125 ... 73
Degmada Biyaha ee Lake Forest Park ... 73
Degmada Biyaha ee North City ... 74
Degmada Adeegyada Tamarta ee Highlands ... 74
Degmada Bullaacadda ee Midway ... 75
Degmada Bullaacadda ee Southwest Suburban ... 76
Degmada Bullaacadda ee Valley View ... 76
Degmada Adeegyada Tamarta ee Northshore ... 77
Degmada Biyaha iyo Bullaacadda ee Skyway ... 78
Degmada Isbitaalka Dadweynaha Lr. 1 ... 79
Degmada Isbitaalka Dadweynaha Lr. 2 ... 81
Degmada Jardiinka Magaalo Weynta ee Barkadda Des Moines ... 83
Degmada Jardiinka Magaalo Weynta ee Barkadda Tukwila ... 85

**Cabbirrada Sharciga**
Qaraarka Wadajirka ah ee Senatka 8201 ... 87
Degmada King ... 90
Magaalada Burien ... 92
Magaalada Lake Forest Park ... 94
Magaalada Seattle ... 96
Degmada Dugsiga Highline Lr. 401 ... 100
Degmada Dugsiga Renton Lr. 403 ... 102
Degmada Isbitaalka Dadweynaha ee Degmada King Lr. 1 ... 106
Jardiinka iyo Aagga Adeegga Madadaalada ee Northshore ... 108

**Tusmada Musharaxa**
Tusmada Musharaxa ... 123


**Waxaan halkan u joognaa in aan ku caawinno!**




206-296-VOTE (8683)
1-800-325-6165
TTY Relay: 711

elections@kingcounty.gov


kingcounty.gov/elections

**Uma codeyn doontid wax walba oo ku jira buug-yarahaan codbixiyeyaasha.**

Ka eeg warqaddaada codbixinta tartannada iyo cabbirrada sharciga.

## Waxaad heli doontaa **Laba** Buug-yaraha Codbixiyeyaasha

Marka lagu daro buug-yarahaan codbixiyeyaasha, waxaad heli doontaa mid ku qoran Af-Ingiriis oo ka socda Xoghayaha Gobolka. Haddii aadan helin buug-yaraha Gobolka, wac 1-800-448-4881.



1

## Yaa is diiwaan gelin kara?

**Si aad isku diiwaan geliso oo aad uga codeyso Washington, waa inaad tahay:**

- Muwaadin Mareykan ah,
- Degane sharci ahaan ku nool gobolka Washington,
- Ugu yaraan 18 sanno jir ah maalinta doorashada,*
- Aan laga mamnuucin codeynta amar maxkamad awgeed,
- Qof aan lagu haynin xabsi guud oo hoos taga xukunka Waaxda Asluubta ee gobolka Washington xukun dambi-weyn oo ka dhacay Washington awgeed iyo,
- Aanan iminka xabsi ugu jirin xukun dambi-weyn oo federaal ah ama mid ka dhacay gobolka Washington dibadiisa.




*Haddii aad tahay 16 ama 17 jir, waxaad isku diiwaan gelin kartaa kan **Codbixiyaha Mustaqbalka** ahaan oo si toos ah ayaa laguu diiwaan gelinayaa oo aad u helaysaa warqad codbixin marka aad u qalanto.

2

## Sidee baan isku diiwaan geliyaa?

### Oonleenka

Booqo **VoteWA.gov** si aad oonleenka isaga diiwaan geliso. Is diiwaan gelinta oonleenka ee Doorashadaan Guud ayaa la heli karaa ilaa iyo **Oktoobar 27**.

### Boostada

Ka soo degso oo daabaco foomka diiwaan gelinta barta **kce.wiki/VoterReg**. Boostada ugu dir Doorashooyinka Degmada King, 919 SW Grady Way, Renton, WA 98057. Doorashooyinka Degmada King waa inay foomka **helaan** ugu dambeyn **Oktoobar 27**.

### Shakhsi ahaan

Iska diiwaan geli Xarunta Codbixinta ilaa iyo 8 p.m. Maalinta Doorashada, Nofeembar 4. Ka hel saacadaha iyo goobaha Xarunta Codbixinta Bogga 5-aad, iyo barta **kingcounty.gov/elections**



## Booqo Xarunta Codbixinta

**Codbixiyeyaasha u baahan caawinaadda waxay isticmaali karaan cutubka codeynta ee la heli karo si ay uga caawiyaan inay ku codeeyaan si qarsoodi ah oo sugan. Shaqaalaha Xarunta Codbixinta ayaa diyaar ah inay:**

- diiwaan geliyaan codbixiyeyaasha cusub,
- cusboonaysiiyaan macluumaadka codbixiyeyaasha hore u jira,
- daabacaan warqad codbixin beddelaad ah iyo bakhshadda soo celinta,
- ka jawaabaan su'aalo.

## Booqo Xarun Codbixin si aad u hesho caawinaad shakhsi ahaan ah

Shaqaalaha doorashooyinka ayaa diyaar u ah inay kaa caawiyaan is diiwaan gelinta si aad u codeeyso oo aad u hesho warqad codbixin ilaa iyo Maalinta Doorashada. Shaqaalo tababaran iyo qalab gaar ah ayaa diyaar u ah si loo caawiyo codbixiyeyaasha naafada ah in ay dhiibtaan warqad codbixin qarsoon, oo madax banaan.

| Goobaha | | Saacadaha Shaqada |
|---|---|---|
| **Renton** | **Doorashooyinka Degmada King**<br>919 SW Grady Way, 98057 | Maalmaha shaqada, Oktoobar 15 – 24,<br>8:30 a.m. – 4:30 p.m.<br>Maalmaha shaqada, Oktoobar 27– 31,<br>8:30 a.m. – 6:00 p.m.<br>Sabti, Nofeembar 1,<br>10:00 a.m. – 4:00 p.m.<br>Isniin, Nofeembar 3,<br>8:30 a.m. – 6:00 p.m.<br>Maalinta Doorashada, Nofeembar 4,<br>8:30 a.m. – 8:00 p.m. |
| **Bellevue** | **Xarunta Bulshada ee Crossroads**<br>16000 NE 10th St, 98008 | Sabti, Nofeembar 1,<br>10:00 a.m. – 4:00 p.m.<br>Isniin, Nofeembar 3,<br>8:30 a.m. – 6:00 p.m.<br>Maalinta Doorashada, Nofeembar 4,<br>8:30 a.m. – 8:00 p.m. |
| **Federal Way** | **Federal Way City Hall (Aqalka Magaalada)**<br>33325 8th Ave S, 98003 | |
| **Kenmore** | **Kenmore City Hall (Aqalka Magaalada)**<br>18120 68th Ave NE, 98028 | |
| **Kent** | **Kambaska Green River College ee Kent**<br>417 Ramsay Way Ste 112, 98032 | |
| **Seattle** | **Xarunta Dhacdada ee Lumen Field / Tiyaatarka WAMU**<br>800 Occidental Ave S, 98134<br>Ku taal Xarunta Dhacdada ee Lumen Field ee uuna gelitaankeedu yahay Occidental Ave S iyo S Royal Brougham Way. | |

**Baarkinka waa bilaash Xarumaha Codbixinta.**

Baarkin lacag ah ayaa laga heli karaa Goobaha Ka-Qaybgalka Ardayga.

## Goobaha Ka-Qaybgalka Ardayga

### Kambaska University of Washington ee Seattle

Waxay ku yaallaan qolka 145 ee Husky Union Building (HUB), goobaha ka-qaybgalka ardayga ee UW Seattle waxay ardayda siisaa fursad ay isku diiwaan geliyaan si ay u codeeyaan markii ugu horreysay, cusbooneysiiyaan diiwaan gelintooda, helaan warqadda codbixinta beddelka ah, ama ay u isticmaalaan qalabka caawinnaadda. Shaqaalaha doorashooyinka ayaa diyaar u ah inay ka jawaabaan su'aalaha oo ay bixiyaan caawinnaad.

### Kambaska University of Washington ee Bothell

Ardayda u diiwaan gashan inay codeeyaan waxay isticmaali karaan goobta la siiyay si ay u daabacaan warqaddooda codbixinta.


Wax dheeraad ah ka ogow saacadaha shaqada iyo adeegyada.

# Sida loo codeeyo!


1 Akhri buug-yarahaaga codbixiyeyaasha si aad u barrato waxa ku qoran warqaddaada codbixinta.




2 Warqaddaada codbixinta, buuxi goobaabinta ku dhinac taal dookhyadaada.



3 Saxiix xagga dambe ee bakhshadda soo celinta ee warqaddaada codbixinta.




4 Soo celi warqaddaada codbixinta. Haddii ay tahay sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ama boostada, wakhti horre codeey!




5 Raad-raac warqaddaada codbixinta. Booqo kce.wiki/TrackMyBallot ama isku qor helitaanka digniimaha warqadda codbixinta barta kce.wiki/BallotAlert. Kuwani waa hababka ugu wanaagsan ee lagu ogaado in warqaddaada codbixinta la tiriyay oo codkaaga la maqlay.





## Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah?

Haddii warqaddaada codbixinta ay dhunto ama xumaato, waxaad daabacan kartaa warqad codbixin beddelaad ah adigoo jooga guriga, maktabadda, ama meel walba oo ku habboon.

Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka (OBMP) waxaa heli kara dhammaan codbixiyeyaasha diiwaan gashan. Waxaa loogu talagalay inuu u oggolaado codbixiyeyaasha naafada ah, gaar ahaan kuwa indhooleyaasha ah ama uu araggoodu hooseeyo, inay warqaddooda codbixinta si qarsoodi ah u calaamadaystaan.



### Sida loo isticmaalo Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka

- Tag halka **kingcounty.gov/elections/obmp.**
- Macluumaadkaaga geli foomka.
- Oonleenka ku calaamadee dookhyadaada warqadda codbixinta oo ka dibna daabac warqaddaada codbixinta ee aad buuxisay,

AMA

- Daabac warqaddaada codbixinta oo ka dibna gacanta ku calaamadee.
- Hubi in warqaddaada codbixinta si sax ah loo calaamadeeyay.
- Ku soo celi warqaddaada codbixinta sida caadiga ah, halka sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ama boostada.

Lacagta boostada looma baahna haddii aad isticmaasho xaashida lifaaqa bakhshadda ee la socota marka aad daabacayso warqaddaada codbixinta.




**Haddii aad u baahan tahay caawinaad dheeraad ah ama hab kale oo aad u dhiibato warqaddaada codbixinta, fadlan la xiriir xafiiskeena halka 206-296-VOTE (8683).**

# Isku Qor Inaad Hesho Digniimaha Warqadda Codbixinta!

Waxaad heli kartaa digniimo qoraal taleefan ama iimeel oo toos ah marka warqaddaada codbixinta ay marayso qayb kasta oo ka mid ah nidaamka, laga bilaabo marka laguugu soo diro boostada ilaa iyo laga tiriyo. Digniimaha warqadda codbixinta sidoo kale waa habka ugu dhaqsaha badan ee lagu ogaan karo haddii ay jirto arrin ku saabsan saxiixaaga.

Markaad doorato, waxaad heli doontaa ogeysiisyada doorashadaan iyo doorashooyinka mustaqbalka. Waad iska bixin kartaa wakhti kasta.

**Raad-raac warqaddaada codbixinta oo isku qor si aad u hesho digniimaha warqadda codbixinta barta kce.wiki/TrackMyBallot**







## Aaway warqaddayda codbixinta?

Booqo **kce.wiki/TrackMyBallot** si aad oonleenka uga raad-raacdo ama aad isugu qorto inaad hesho digniimaha warqadda codbixinta oo aad ku heli doonto iimeel ahaan ama/iyo fariin qoraal taleefan.




## Agabyada lagu heli karo 7 luqadood!

Waxaad heli kartaa warqadaha codbixinta, agabka codeynta, iyo isgaarsiinta oo ah afka Ingiriiska, Shiinaha, Kuuriyaanka, Ruushka, Soomaaliga, Isbaanishka, iyo Fiyatnamiiska.

Ka buuxi foomka codsiga oonleenka barta **kce.wiki/languages** oo waxaad xafiiskeena ka heli doontaa dhammaan agabka codeynta oo ku qoran luqaddii dookhaaga ah.

# Qorshe codeyn! Samayso.

**Bisha(Billaha):**
Oktoobar iyo Nofeembar

**Hadafka(Hadafyada):**
Codeeyo oo aan codkayga ka dhigo in la maqlo!

**Xasuusin:**
Maalinta Doorashada waa Nofeembar 4, 2025

Codbixiyeyaasha Degmada King ayaa si toos ah boostada ugu hela warqadahooda codbixinta ku dhawwaad laba asbuuc ka hor Maalinta Doorashada! Waxaan kugula talinaynaa inaad wakhtigaas u isticmaasho inaad baaritaan ugu samayso musharaxiinta iyo arrimaha, oo aad u samaysato Qorshe Codeyn.

## Qorshahayga Codeynta Doorashada Guud ee Nofeembar!

*Goorma ayaad calaamadayn doonta warqaddaada codbixinta? Dooro taariikh!*

*Dadka qaarkood waxay ka codeeyaan miiska jikada, qaar kalena kafateeriyaha xaafadda. Halkee ayaad ka codeyn doontaa?*


Halkan ku sawir


Halkan ku qor

*Halkee ayaad ka heli doontaa macluumaadka kaa caawin doona inaad samayso doorashadaada? Tusaalooyinka waxaa ka mid ah wararka deegaankaaga, xisbiyada siyaasadeed ee deegaankaaga, iyo Ururka Codbixiyeyaasha ee Haweenka.*

*Warqaddaada codbixinta ma ku soo celin doontaa boostada, mise waxaad isticmaali doontaa sanduuqa rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta?*


Goobaabi Mid








* Haddii aad qorshaynayso inaad isticmaasho boostada, waxaan si heer sare kugula talineynaa inaad warqaddaada codbixinta boostada ku soo dirto ugu dambeyn Jimcaha ka horreeya Maalinta Doorashada.





*Haddii aad isticmaalayso sanduuqa rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta, sanduuqa lagu rido midkee ayaad isticmaali doontaa?*

Booqo **kce.wiki/Sanduuqyada** si aad u aragto khariiradda dhammaan goobaha oo dhan.





*Waxaad codeyn kartaa adigoo isticmaalaya qalin qori, qalin, ama qalinka kalarka! Ma leedahay qalin aad ugu jeceshahay oo aad ku codeyn doonto?*

**Ma fikiraysaa in Qorshahaaga Codeynta uu si gaar ah u wanaagsan yahay? Nagu taag-garee qoraalladaada baraha bulshada @kcelections**

## GOBOLKA

### Senatarka Gobolka

Mushahar (2025):
**$61,997**

Sannadaha adeegga ayaa kala duwan

Senatka Gobolka iyo Golaha Wakiillada ee Gobolka ayaa waxay isku noqdaan laanta sharci dejinta ee dowladda Gobolka. Waxay leeyihiin mas'uuliyad siman oo ah dejinta sharciyada, canshuur ku soo rogidda iyo ururinta canshuuraha, iyo ka gorgortanka mudnaanta miisaaniyadda Gobolka.

Waxaa jira 49 Senatarro Goboleed iyagoo sidoo kale mas'uul ka ah ansixinta magacaabisyada uu sameeyo guddoomiyaha.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha Degmada Sharci Dejinta*

### Wakiilka Gobolka

Mushahar (2025):
**$61,997**

Adeeg ah muddo-xilleed 1-sanno wakhtigeedu weli dhammaanin

Senatka Gobolka iyo Golaha Wakiillada ee Gobolka ayaa waxay isku noqdaan laanta sharci dejinta ee dowladda Gobolka. Waxay leeyihiin mas'uuliyad siman oo ah dejinta sharciyada, canshuur ku soo rogidda iyo ururinta canshuuraha, iyo ka gorgortanka mudnaanta miisaaniyadda Gobolka.

Waxaa jira 98 Wakiillo Goboleed. Laba xubnood ayaa laga soo doortaa mid kasta oo ka mid ah 49-ka Degmooyinka Sharci Dejinta ee Gobolka.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha Degmada Sharci Dejinta*

## DEGMADA

### Madaxa Fulinta

Mushahar (2025):
**$296,028**

Adeeg ah muddo-xilleed gaaban iyo mid buuxda 3-sanno

La shaqeeya Golaha Degmada ee ku aaddan hirgelinta sharciga. Wada hawl-maalmeedka dowladda hoose ee degmada.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha Degmada King*[1]

### Xubinta Golaha Degmada

Mushahar (2025):
**$183,312**

Adeeg ah 3 sanno

Dejiya siyaasado oo hirgeliya sharciyo, horumariya oo ansixiya miisaaniyadda degmada, iyo kormeera adeegyada degmada.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha degmada golaha ee Degmada King*[1]

## DEKEDDA

### Guddoomiyaha Dekedda Seattle

Mushahar (2025):
**$61,997**

Adeeg ah 4 sanno

Adeeg ku aaddan hawlgelinta, maamulidda, qalabaynta, iyo joogteynta dekedda, iyo dejinta siyaasadda dekedda.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha Degmada King*

## MAGAALADA

### Duqa Magaalada

Mushahar (2025):
**Kala duwan magaalo ahaan**

Adeeg ah 4 sanno

La shaqeeya golaha magaalada ee ku aaddan hirgelinta sharciga. Wada hawl-maalmeedka dowladda hoose ee magaalada.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha magaalada*

**Liiska waajibaadyada xafiisyada ee doorashadan ayaa sii socda** →



Mushahar (2025): Kala duwan magaalo ahaan

Adeeg ah 4 sanno

### Xubinta Golaha Magaalada

Ansixiya miisaaniyadda magaalada, horumariya sharciyada iyo siyaasadaha, iyo kormeera adeegyada dadweynaha.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha magaalada*



Mushahar (2025): **$224,492**

Adeeg ah 4 sanno

### Qareenka Magaalada Seattle

U shaqeeya sida qareenka magaalada wuxuuna dacweeyaa dambiyada heerka magaalada.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha magaalada*



Mushahar (2025): **$217,337**


Adeeg ah 4 sanno

### Garsoore Maxkamadda Dowladda Hoose

Dhegaysta oo go'aamiya kiisaska dambiyada yaryar.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha magaalada*

## DEGMADA DUGSIGA



Mushahar (2025): **Mushahar sannadeed ma jiro**


Sannadaha adeegga ayaa kala duwan

### Agaasimaha Degmada Dugsiga

Dejiya siyaasadaha dugsiyada, bixiya kormeerka hawlgallada nidaamka dugsiga, oo wakiilna ka ah danaha bulshada ee ku aaddan arrimaha waxbarashada dadweynaha.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha degmada dugsiga*[2]

## DEGMADA UJEEDDADA GAARKA AH



Mushahar (2025): **Mushahar sannadeed ma jiro**

Sannadaha adeegga ayaa kala duwan

### Guddoomiyaha Degmada Dab-damiska

Adeeg ku aaddan sameynta miisaaniyadda degmada dab-damiska iyo siyaasadaha iyo bixinta oggolaanshaha dab-damiska.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha degmada*




Mushahar (2025): **Mushahar sannadeed ma jiro**

Sannadaha adeegga ayaa kala duwan

### Guddoomiyaha Degmada Biyaha

Adeeg ku aaddan sameynta miisaaniyadda iyo siyaasadaha degmada biyaha ee deegaanka iyo dejinta heerarka biilka.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha degmada*




Mushahar (2025): **Mushahar sannadeed ma jiro**

Sannadaha adeegga ayaa kala duwan

### Guddoomiyaha Degmada Bullaacadda/Biyaha Wasakhda

Kormeera degmada bullaacadda si uu u joogteeyo xarumaha, loo daboolo baahiyaha biyaha, loona buuxiyo shuruudaha deegaanka.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha degmada*



Mushahar (2025): **Mushahar sannadeed ma jiro**

Sannadaha adeegga ayaa kala duwan

### Guddoomiyaha Isbitaalka Dadweynaha

Kormeera hawlaha isbitaalka bixiyana adeegyo lagu horumarinayo caafimaadka.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha degmada*



Mushahar (2025): **Mushahar sannadeed ma jiro**

Sannadaha adeegga ayaa kala duwan

### Guddoomiyaha Garoonka Diyaaradda

Adeeg ku aaddan sameynta miisaaniyadda iyo siyaasadaha degmada garoonka diyaaradaha ee deegaanka.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha degmada*



Mushahar (2025): **Mushahar sannadeed ma jiro**

Sannadaha adeegga ayaa kala duwan

### Guddoomiyaha Degmada Jardiinka

Adeeg ku aaddan horumarinta yoolalka, dejinta siyaasado, kormeeridda nidaaminta jardiinooyinka degmada.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha degmada*

*[1]Sannadkii 2022, codbixiyeyaasha ayaa ansixiyay Wax-Ka-Beddelka Lr. 1 ee Sharciga Degmada King, taasoo u guurisay tartankan sannadaha dhabanka ah. Doorashadaan ka dib, tartankan waxaa lagu go'aamin doonaa sannadaha dhabanka ah oo aan lagu go'aamin doonin sannadaha kisiga ah. Sidaa darteed, qofka la doorto sannadka 2025 ayaa xilka hayn doono 3 sanno.*

*[2]Marka ay dhacayso Doorashada Hordhaca, tartannada Degmada Dugsiga Seattle ayaa waxaa ka codeeya codbixiyeyaasha ku nool gudaha degmada agaasimaha. Marka ay dhacayso Doorashada Guud, dhammaan codbixiyeyaasha diiwaan gashan ee Seattle ayaa ka codeyn kara dhammaan tartannada Degmada Dugsiga Seattle.*

**Ku Saabsan Doorashada Guud ee Nofeembar ee Washington**

Haddii doorasho hordhac loo qabto jago xafiis oo bannaan, labada musharax ee hela codadka ugu badan ee Doorashada Hordhaca ayaa u gudbi doona Doorashada Guud.

Musharax kasta oo u tartamaaya xafiis xisbinimo loo doorto ayaa laga yaabaa inuu sheegto xisbi siyaasadeed oo uu musharaxu doorbido. Doorbididda musharaxa micnaheedu ma aha in musharaxaas uu xisbiga soo magacaabay ama uu xisbiga taageero ka haysto, ama uu xisbigu ansixiyay ama musharaxaas xiriir la leeyahay.

Booqo **kce.wiki/sanduuqyada** si aad u hesho liiska dhammaan sanduuqyada lagu rido warqadda codbixinta ee la heli karo doorashadan. Dhammaan sanduuqyada lagu rido waxay xirmaan markay tahay 8 p.m. oo gaw ah Maalinta Doorashada.

**Auburn**

Maktabadda Auburn, 1102 Auburn Way S, 98002

Auburn Park & Ride, 101 15th St NE, 98001

* Xarunta Bulshada Muckleshoot, 17432 SE 392nd St, 98092

**Bellevue**

Maktabadda Bellevue, 1111 110th Ave NE, 98004

Xarunta Ganacsiga ee Crossroads (albaabka koonfurta), 15600 NE 8th St, 98008

Maktabadda Newport Way, 14250 SE Newport Way, 98006

CUSUB * North Bellevue Community Center (Xarunta Bulshada ee Waqooyiga Bellevue), 4063 148th Ave NE, 98007

**Black Diamond**

Maktabadda Black Diamond, 24707 Roberts Dr, 98010

**Bothell**

Maktabadda Bothell, 18215 98th Ave NE, 98011

University of Washington - Kambaska Bothell (u dhaw Xarunta Hawlaha & Madadaalada), 18220 Campus Way NE, 98011

**Burien**

Maktabadda Boulevard Park, 12015 Roseberg Ave S, 98168

Fagaaraha Magaalada Burien (geeska 5th Ave SW iyo SW 152nd St), 480 SW 152nd St, 98166

**Carnation**

Maktabadda Carnation, 4804 Tolt Ave, 98014

**Covington**

Maktabadda Covington, 27100 164th Ave SE, 98042

**Des Moines**

* Highline College (albaabka laga soo galo ee ka soo horjeeda 27th Ave), 2400 S 240th St, 98198

**Duvall**

* Duvall Police Department (Waaxda Booliiska Magaalada Duvall) - Jardiinka Depot, 26225 NE Burhen Way, 98019

**Enumclaw**

Maktabadda Enumclaw, 1700 1st St, 98022

**Fall City**

Maktabadda Fall City, 33415 SE 42nd Pl, 98024

**Federal Way**

Maktabadda Federal Way 320th, 848 S 320th St, 98003

Federal Way City Hall (Aqalka Magaalada Federal Way), 33325 8th Ave S, 98003

* Safeway – Star Lake, 28810 Military Rd S, 98003

**Issaquah**

Issaquah City Hall (Aqalka Magaalada Issaquah), 130 E Sunset Way, 98027

**Kenmore**

Kenmore City Hall (Aqalka Magaalada Kenmore), 18120 68th Ave NE, 98028

**Kent**

Maktabadda Kent Panther Lake, 20500 108th Ave SE, 98031

Kent YMCA, 10828 SE 248th St, 98030

Regional Justice Center (Xarunta Caddaalad Goboleedka) u dhaw albaabka laga galo baarkinka, 401 4th Ave N, 98032

**Kirkland**

Maktabadda Kingsgate, 12315 NE 143rd St, 98034

Kirkland City Hall (Aqalka Magaalada Kirkland), 123 5th Ave, 98033
*Sanduuqaan waxaa loo guuriyay Goobta Baarkinka ee Kirkland Wester, oo koonfur ka xigta Dhismaha Aqalka Magaalada ee ku yaal 3rd Avenue.*

**Lake Forest Park**

Lake Forest Park City Hall (Aqalka Magaalada Lake Forest Park), 17425 Ballinger Way NE, 98155

**Maple Valley**

Suuqa Cuntada Hobart, 20250 276th Ave SE, 98038

* Dhismaha Degmada Dugsiga Tahoma, 25720 Maple Valley-Black Diamond Rd SE, 98038

**Mercer Island**

Mercer Island Community & Event Center (Xarunta Bulshada & Dhacdada Mercer Island), 8236 SE 24th St, 98040

**Newcastle**

Newcastle City Hall (Aqalka Magaalada Newcastle), 12835 Newcastle Way, 98056

**Normandy Park**

Normandy Park Towne Center (Fagaaraha Magaalada Normandy Park), 19901 1st Ave S, 98148

**North Bend**

Maktabadda North Bend, 115 E 4th St, 98045

**Pacific**

Maktabadda Algona-Pacific, 255 Ellingson Rd, 98047

**Redmond**

* Redmond City Hall (Aqalka Magaalada Redmond), 15670 NE 85th St, 98052
* Redmond Community Center at Marymoor Village (Xarunta Bulshada ee Redmond ee Xaafadda Marymoor), 6505 176th Ave NE, 98052

CUSUB * Redmond Ridge Park & Ride (Corner of NE Cedar Park Cres and Redmond Ridge Drive NE), 98053

**Renton**

Maktabadda Fairwood, 17009 140th Ave SE, 98058

* Doorashooyinka Degmada King, 919 SW Grady Way, 98057
* Powell Avenue, 725 Powell Ave SW, 98057
*Sanduuqa warqadda codbixinta wuxuu yaalaa goob laba baloog u jirta Doorashooyinka Degmada King si fudud ayaana lagu tagi karaa wakhtiyada uu taraafik jaamka jiro.*
* Xarunta Caafimaadka Dadweynaha Renton, 3201 NE 7th St, 98056

**Sammamish**

Sammamish City Hall (Aqalka Magaalada Sammamish), 801 228th Ave SE, 98075

CUSUB South Sammamish Park & Ride, 3015 228th Ave SE, 98075

**SeaTac**

Angle Lake Transit Station (Saldhiga Gaadiidka ee Angle Lake), 19955 28th Ave S, 98188

Maktabadda Valley View, 17850 Military Rd S, 98188

**Shoreline**

Maktabadda Shoreline, 345 NE 175th St, 98155

Shoreline Park & Ride, 18821 Aurora Ave N, 98133

**Snoqualmie**

Maktabadda Snoqualmie, 7824 Center Blvd SE, 98065

**Tukwila**

* Tukwila Community Center (Xarunta Bulshada Tukwila), 12424 42nd Ave S, 98168

CUSUB Tukwila Justice Center, 15005 Tukwila International Blvd, 98188

**Vashon**

Maktabadda Vashon, 17210 Vashon Hwy SW, 98070

**Woodinville**

Woodinville City Hall (Aqalka Magaalada Woodinville), 17301 133rd Ave NE, 98072

Maktabadda Woodinville, 17105 Avondale Rd NE, 98072

## Sanduuqyada Seattle

**Ballard**

Ballard Branch Library, Geeska NW 57th St and 22nd Ave NW, 98107

**Beacon Hill**

Maktabadda Beacon Hill, 2821 Beacon Ave S, 98144

Kambaska Xaafadda NewHolly, 7054 32nd Ave S, 98118

**Broadview/Greenwood**

Maktabadda Broadview, 12755 Greenwood Ave N, 98133

**Bryn Mawr-Skyway**

Maktabadda Skyway, 12601 76th Ave S, 98178

**Capitol Hill**

Seattle Central College (geeska waqooyi bari ee Broadway-Edison Building), 1701 Broadway, 98122

**Central District**

Garfield Community Center (Xarunta Bulshada Garfield), 2323 E Cherry St, 98122

CUSUB 12th & Cherry, 1223 E Cherry St, 98122

**Chinatown/International District**

Uwajimaya, 713 6th Ave S, 98104

**Columbia City**

Rainier Community Center (Xarunta Bulshada Rainier), 4600 38th Ave S, 98118

**Crown Hill**

Safeway – Crown Hill (geeska NW 83rd St iyo Mary Ave NW), 8340 15th Ave NW, 98117

**Downtown**

Sanduuqa King Street (Kingdome Deli horteeda), Geeska 2nd Ave S iyo S King St, 98104

**Fremont/Wallingford**

Waterway 19 Park (ku dhegan Jardiinka Gas Works), 2119 N Northlake Way, 98103

**Green Lake/Phinney**

Green Lake Community Center (Xarunta Bulshada Green Lake), 7201 E Green Lake Dr N, 98115

**Lake City**

Maktabadda Lake City, 12501 28th Ave NE, 98125

**Magnolia**

* Jardiinka Magnolia, 1461 Magnolia Blvd W, 98199

**Northgate**

North Seattle College (u dhow geeska waqooyi bari ee N 95th iyo College Way N), 9600 College Way N, 98103

**Queen Anne**

* Maktabadda Seattle Pacific University, 310 W Bertona St, 98119

**Rainier Valley**

Rainier Beach Community Center (Xarunta Bulshada Rainier Beach), 8825 Rainier Ave S, 98118

**Sand Point/Laurelhurst**

* Jardiinka Magnuson – Dhismaha 406, 6344 NE 74th St, 98115

**South Lake Union**

South Lake Union, 310 Terry Ave N, 98109

**South Park**

Maktabadda South Park, 8604 8th Ave S, 98108

**University District**

Kambaska University of Washington, Hoolka Schmitz (albaabka dhanka Waqooyi NE 41st St), 1410 NE Campus Pkwy, 98195

**Uptown**

Suuqa Magaalo Weynta ee Queen Anne, Geeska 1st Ave N iyo Mercer St, 98109

**West Seattle/Delridge**

Isgoyska Alaska, Geeska SW Alaska St iyo 44th Ave SW, 98116

Maktabadda High Point, 3411 SW Raymond St, 98126

CUSUB Isgoyska Jardiinka Morgan, 6401 California Ave SW, 98136

South Seattle College (halka laga galo ee dhismaha Robert Smith), 6000 16th Ave SW, 98106

**White Center**

CUSUB Jardiinka Steve Cox Memorial, 1321 SW 102nd St, 98146
*Sanduuqa horrey u yaallay Maktabadda White Center ayaa loo wareejiyay Jardiinka Steve Cox Memorial.*

* *Sanduuqyada lagu rido warqadda codbixinta adigoo gaariga saaran*

# Qof Walba Codkiisa Waa Muhiim




Haddii aad maxkamad u sugayso si laguu xukumo, xabsi ugu jirto xukun dambi-yar awgeed, ama aadan hadda xabsi ugu jirin xukun dambi-weyn awgeed, **waad codeyn kartaa**.



## 1. Is diiwaan geli.

Iska diiwaan geli oonleenka halka **VoteWA.gov** si aad u codeyso ama ka wac Doorashooyinka Degmada King taleefanka **206-296-VOTE (8683)** si aad u codsato foomka diiwaan gelinta codbixiyaha. Buuxi foomka oo boostada ugu dir **King County Elections, 919 SW Grady Way, Renton, WA 98057.**

**!** Xuquuqdaada codeynta ayaa si toos ah laguugu soo celinayaa markii aad dhammaysato xukunkaaga xabsiga, **laakiin waa inaad is diiwaan gelisaa!**



## 2. Hel warqaddaada codbixinta.

Waxaad ciwaanka xarunta xabsiga u qoran kartaa sida ciwaankaaga boostada ahaan, ama qof aad jeceshahay ayaa sidoo kale kuu soo gudbin kara warqaddaada codbixinta.

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo helitaanka warqaddaada codbixinta, naga soo wac taleefanka **206-296-VOTE (8683)**. Waxaan la shaqeyn doonaa adiga iyo xarunta xabsiga si aan warqaddaada codbixinta kuu siino.





## 3. Soo celi warqaddaada codbixinta.

Uma baahnid istaambo si aad warqaddaada codbixinta u soo celiso. Waxaa loo baahan yahay inay lahaato shaabadda boostada oo ah Maalinta Doorashada ama ka hor, sidaa darteed waxaan kugula talinaynaa inaad u codeyso sida ugu dhakhsaha badan ee suurto galka ah si aad u xaqiijiso inay gaarto boostada wakhtigii loogu talagalay oo loogu dhufto shaabadda boostada.

Doorashooyinka Degmada King waxay aqbashaa wicitaannada ka yimaada xarumaha xabsiga. Naga soo wac taleefanka 206-296-VOTE (8683) oo shaqaale tababaran ayaa ku caawin doonna. Waxaan halkaan u joognaa inaan ku caawinno!

# Degmooyinka Sharci Dejinta



## Senatarka Gobolka



### Tina L. Orwall

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 409-3038
tina.orwall@gmail.com
www.electtinaorwall.com

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Senatarka Gobolka; Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga Caafimaadka & Daryeelka Muddada Dheer; Xeerarka, Adeegyada Aadanaha, Guriyeynta iyo Guddiga Wadajirka ah ee Arrimaha Halyeeyadii Hore iyo Militariga. Wakiilkii Hore ee Gobolka; Afhayeenka Ku Meel Gaarka; Isku-Duwaha Golaha Sharci-dejiyeyaasha Qaranka ee Arrimaha Halyeeyadii Hore iyo Militariga.

**Khibrad Xirfadeed Kale:** Xiriiriye Jaamacadeed ee UW (Affiliate Faculty) oo leh waayo-aragnimo labaatan sanno ah ee caafimaadka habdhaqanka, la-talinta, iyo qorista deeqaha, la shaqeynta dowladda iyo ururada si aan si wanaagsan ugu adeego bulshadeena.

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Hawlaha Bulshada & Shahaado Jaamacadeedka Cilmi-nafsiga ee ka socota UW

**Adeegga Bulshada:** Ururka Ganacsiga ee Kent, Guddiga Bulshada Hawlgabka ee Judson Park, Golaha Saameynta ee United Way, Guddiga Ka Hortagga Is-dilidda ee Halyeeyga Hore, Kooxda Guriyeynta Qoysaska Dhaqamada Kala Duwan ee Albaabada Furan.

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ah inaan kuugu adeego Senatka Gobolka, halkaas oo aan ku dhisay diiwaankayga hoggaaminta sharci dejinta oo aan horumariyay sharciyada si wax looga qabto baahiyaha guryaha iyo caafimaadka habdhaqanka iyadoo la maalgelinayo badqabka dadweynaha, gaadiidka iyo waxbarashada gaarka ah. Waxaan u doodaa halyeeyadii hore iyo qoysaska militariga waxaanan sannadkan ka shaqeeyay si aan bulshada uga ilaaliyo waxyeellada isticmaalka AI ee aan la xakamayn. Waxaan ku faanayaa sharciyada sannadkan ee ilaaliya dadka waayeellada ah ee xusuusta daryeelka, ardayda ku sugan xarumaha dugsiga, iyo mulkiileyaasha guryaha ee la tacaalaaya sidii ay guryahooda u sii haysan lahaayeen.

Sida xirfadle shaqaalaha bulshada ahaan, ilaalinta dadka nugul ee Washington had iyo jeer waxay ahayd diiraddayda, oo ay ku jiraan kuwa ka badbaaday kufsiga, rabshadaha hubka, iyo is-dilidda. Iyada oo ay jaritaannada federaalku ay khatar ku tahay barnaamijyada ee qoysaska halganka ku jira, waxaan kaga jawaabay sharci maalgeliya 988, bixiya caymiska qalabka caawiya maqalka ee cusub, kordhiya badqabka bulshada iyo ilaalinta dhiirigelinta macallinka ee uu Guddiga Shahaadeeyay, iyo kuwo kale oo badan.

Haddii aan helo codkaaga, waxaan sii wadi doonaa ka shaqeynta guriyeynta la awoodi karo, daryeel caafimaad oo dhammaystiran, yareynta wasakheynta garoonka diyaaradaha, helitaanka luqadda ee gudaha dugsiyada, helitaanka daryeelka carruurta ee qoysaska shaqeeya iyo helista xalalka cimilada.

**Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta xaqiiqda saxda ah ee bayaannada musharaxa iyo cabbirka.**

## Wakiilka Jagada Lr. 1

### Edwin Obras



(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 265-0335
info@edwinobras.org
edwinobras.org

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Wakiilka Gobolka, Degmada 33aad Jagada 1aad, La magacaabay 2024

**Khibrad Xirfadeed Kale:** 25+ sanno ku jiray adeegyada aadanaha; Ku-xigeenka Agaasimaha Qaybta, Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Seattle; Guddoomiyaha Guddiga, Jaaliyadda Filibiinka ee Seattle.

**Waxbarashada:** M.P.A., Northeastern University; B.A. (Shahaadada Jaamacadda), University of Washington.

**Adeegga Bulshada:** Guddoomiyihii hore, Guddiga La-talinta Adeegyada Aadanaha ee SeaTac; u doode guryo la awoodi karo, xuquuqda shaqaalaha, iyo badbaadada dadweynaha.

**Bayaanka:** Siyaasiyiin badan oo dhaqameed ayaa noqday kuwo raaxo u arka xaaladda hadda jirta. Gobolkeenu wuxuu noqday mid aan la awoodi karin, hoy la'aanta ayaa si aad ah u kordhaysa iyo maamulka Trump ayaa wuxuu oo keliya xaaladaha ka sii dhigayaa mid sii xun. Kalfadhiga ugu horeeyay, waxaan u halgamay in aan kor u qaado mushaharka iyo hagaajinta xaaladaha shaqada. Waxaan xaddiday kororka kirada. Waxaan hoggaamiyey oo dhisay guryo la awoodi karo. Waxaan ku sii dhisi doonaa rikoorkaan: Maalgelinta waxbarashada K-12, gaadiidka iyo maalgashiga gaadiidka dadweynaha, daryeelka ilmaha la awoodi karo, si degdeg ah u dhisa guryo, iyo aan taageero ganacsiyadeena yaryar. Waxaa taageeray: Golaha Shaqaalaha Gobolka, Ururka Waxbarashada Washington, Ficilka Ilaalinta Washington, Waalidnimada Qorsheysan, FairVote, Tina Orwall, Mia Gregerson, Mohamed Egal, John Boyd, Sarah Moore iyo qaar kaloo badan...

### Kevin Schilling



(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 948-0381
kevin@electkevinschilling.com
electkevinschilling.com

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Duqa Magaalada Burien 2024 - Hadda; Golaha Magaalada Burien 2019 - Hadda

**Khibrad Xirfadeed Kale:** Agaasimaha Arrimaha Dowladda ee Ururka Ilkaha Gobolka Washington, Agaasimaha Siyaasadda ee Xildhibaan Derek Kilmer, Baadariga Dhallinyarada iyo Da'yarta ee St. Francis of Assisi Parish iyo Dugsiga, Karaaniga Cuntada UFCW, iyo Shaqaale Makhaayad

**Waxbarashada:** Dugsiga St. Francis of Assisi, Dugsiga Sare ee Raisbeck Aviation, Washington State University, Dugsiga Dhaqaalaha ee London, Dugsiga Harvard Kennedy ee Maamuleyaasha Sare ee Gobolka iyo Dowladda Hoose

**Adeegga Bulshada:** Jawaabta Degdegga ah ee AmeriCorps ee COVID-19, Guddiga Siyaasadda Ururka Ganacsiga ee Seattle-ta Weyn, Guddiga Arrimaha Sharci-dejinta ee Isbahaysiga Rugta Ganacsiga ee South Sound, Golaha Seattle Opera BRAVO, Wiilasha Kacaanka Mareykanka

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa inaan hagaajiyo waxa ka burbursan Washington—monoboliyada shirkadeed iyo siyaasiyiin aan waxba la socon oo xannibay *xalalka caqligalka ah ee badqabka, hoy la'aanta, iyo waxa la awoodi karo*. Waxaan ahay musharax keliya ee leh rikoor la xaqiijiyay oo ku saabsan si guul leh wax uga qabashada mudnaantaada. Sida Duqa Magaalada Burien ahaan, waxaan ku hoggaamiyey ficil: caawinaadda in dadka laga soo kaxeeyo waddooyinka oo guryo la geeyo, balaarinta adeegyada daaweynta, xoojinta amniga dadweynaha, iyo dheelitirka miisaaniyadda iyadoo aan dhaqaalaha kobcinaayay.

Waxaan ka shaqeyn doonaa inaan ka dhigo Washington mid la awoodi karo oo aan abuurro fursad. Waa wakhti aan dadka Washington dhigi lahayn jagada hore oo aan dowladda ka dhigno mid run ahaantii idiin shaqeyso. *Waxaa taageeray Xildhibaan Adam Smith, Guddoomiye Dave Upthegrove, iyo Hey'adaha Ururka Shaqaalaha.*

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

## Senatarka Gobolka

### Emily Alvarado

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)



(206) 745-2010
emily@emilyalvarado.com
emilyalvarado.com

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Wakiilka Gobolka (2023-2025); Senatarka Gobolka (loo magacaabay 2025)

**Khibrad Xirfadeed Kale:** Hoggaamiye urur aan faa'iido doon ahayn oo dhisaya guryo iyo daryeel carruur oo tayo leh oo la awoodi karo; Agaasimihii hore ee Xafiiska Guryaha ee Seattle oo maalgeliyay $290 milyan si looga hortago barakaca, taageeridda adkeysiga cimilada, dhisidda guryo taageero ah oo loogu talagalay deriska hoy la'aanta ah, ilaalinta kiraysteyaasha, iyo balaarinta lahaanshaha guryaha; qabanqaabiye Waalidnimada Qorsheysan oo abaal marin ku guuleystay; Qareen

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda, Scripps College (summa cum laude); JD (Shahaadada Sharciga), University of Washington School of Law (Aqoonyahan Sharciga Adeegga Dadweynaha ee Gates)

**Adeegga Bulshada:** Xubin Guddigii hore, Isbahaysiga Guriyeynta Dakhliga Hoose ee Washington; xubin hore, Guddiga Haweenka Seattle; Qareenka Mutadawac, Ururka Qareennada ee Latino-ga ee Rugta Sharciga ee Bulshada Washington; Waalidka PTA ee labo arday oo Dugsiga Dadweynaha Seattle

**Bayaanka:** Waa mudnaan inaan kugu matalo Senatka Gobolka. Sida u doode nolosheeda oo dhan ee guryaha la awoodi karo iyo fursadda dhaqaalaha ahaan, waxaan keenay khibrad qoto dheer iyo rikoor la xaqiijiyay oo ah keenitaanka natiijooyin.

Sida Senatarkaaga ahaan, waxaan horey u socodsiiyay arrimaha muhiimka ah: dugsiyo dadweyne oo tayo sare leh, guryo la awoodi karo, iyo helitaanka daryeelka carruurta iyo daryeelka caafimaadka. Waxaan ku faanayaa inaan hormuud ka noqday siyaasado wax ka qabta qiimaha nolosha oo sareeya anigoo balaarinaya ilaalinta kiraysteyaasha, shaqaalaha, iyo macaamiisha.

Waxaan sii wadi doonaa inaan riixo dib-u-habeynta si aan uga dhigo lahaanshaha guriga mid la awoodi karo, horumarinta natiijooyinka waxbarashada carruurta, iyo xoojinta shabakadda badqabka bulshada ee dhallinyarada iyo waayeellada. Dhammaanteen waxaan mudannahay adeegyo dadweynaha oo la isku halayn karo, waxaanan sii wadi doonaa u doodista dakhliga iyo maalgashiga loo baahan yahay si aan bulshooyinkeena uga dhigno kuwo caafimaad qaba oo ammaan ah.

Waxaad igu kalsoonaan kartaa inaan u istaago dimuqraadiyaddeena iyo xuquuqdeena madaniga ah, xorriyadda taranka, dib u habeynta hubka caqligalka, iyo ficilka cimilada. Waxaa iga go'an inaan ka dhigo dowladda inay u shaqeyso dadka—maaha kuwo wata dano gaar ah. Had iyo jeer waxaan u dagaalami doonaa mustaqbalka halkaas oo qof kastaa uu helo fursad uu ku horumaro. Waxaa sharaf ii ahaan lahayd inaan kasbado taageeradaada sii socota. *Waxaa taageeray: Waalidnimada Qorsheysan, Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington, Ururka Kalkaaliyeyaasha Gobolka Washington, iyo qaar kaloo badan.*

## Wakiilka Jagada Lr. 1

### Brianna K. Thomas

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)



(206) 321-9890
brianna4the34th@gmail.com
www.briannathomas.org

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Waxaa loo magacaabay Golaha Sharci-dejinta Janaayo 2025. Musharax Golaha Magaalada Seattle 2015, 2021


**Khibrad Xirfadeed Kale:** 15+ sanno oo adeeg dadweyne ah oo ay ku jiraan, laakiin aan ku koobnayn: La-taliyaha Sare ee Shaqaalaha ee Xafiiska Duqa Magaalada, Madaxa Shaqaalaha ee Guddoomiyaha Golaha Magaalada Seattle, Madaxa Shaqaalaha ee Xafiiska Kormeeraha Guud, Agaasimaha Ololaha ee Haa! ee ku aaddan Seatac.

**Waxbarashada:** University of Washington, Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Siyaasadda 2010

**Adeegga Bulshada:** U adeegtay guddiyada Working Washington (Washington-ta Shaqeynaysa), Seattle City Club (Naadiga Magaalada Seattle), Golaha Kaniisadda ee Seattle-ta Weyn, the Washington Bus (Baska Washington), Fuse Washington, Kutlada Siyaasadeed ee Haweenka ee NW, Machadka Mustaqbalka Dimuqraadiga, Degmada Sharci-dejinta 34aad iyo Xarunta Adeegga Degdegga ah ee Bartamaha Magaalada.

**Bayaanka:** Waxaan aaminsanahay in loo dagaalamo dadka shaqeeya, guryo la awoodi karo, badqabka bulshada, iyo barwaaqada la wadaago. Halkan gudaha degmada sharci-dejinta 34-aad, waxaan nasiib u leenahay inaan leenahay derisyo weli isha ku haya midba midka kale oo ka qayb qaata hagaajinta bulshadeena. Laga soo bilaabo Vashon ilaa Delridge, White Center ilaa Pioneer Square dadka bulshadaan ayaa ahmiyad siiya. Waxaan ku weydiisanayaa taageeradaada sababtoo ah waxaan ogahay sida ay muhiimka u tahay in la keeno xaqiiqo iyo adkaysi si loo hubiyo in qof kasta oo 34-aad ah uu cod ku leeyahay Olympia, iyada oo aan loo eegin luqadda ama xaafaddooda. Waxaa taageeray: Golaha Shaqaalaha ee Gobolka, Mashiinisteyaasha, iyo One America Votes (Hal Ameerika way Codeysaa).

# Degmooyinka Golaha Degmada King




**Calaamooyinka**

Xuduudaha Degmooyinka Golaha Degmada King

Magaalooyinka

0 1 2 4 6 8 Miles


King County

Waxaa soo diyaariyay:
Qaybta GIS
Waaxda Doorashooyinka

N

**Febraayo 2022**

**Degmooyinka Golaha Degmada King**




**Khariiradda Goobta**

# Madaxa Fulinta

## Girmay Zahilay



campaign@electgirmay.com
electgirmay.com

**Waxbarashada:** University of Pennsylvania (Shahaadada Sharciga); Wharton School of Business Certificate (Shahaadada Dugsiga Ganacsiga ee Wharton); Stanford University; Dugsiga Sare ee Franklin

**Shaqo iyo Xirfad:** Guddoomiyaha, Golaha Degmada King; Guddiga Sound Transit; Qareen Hore, PerkinsCoie

**Bayaanka:** Waxaan ku faanayaa inay i taageereen Guddoomiyaha Gobolka Bob Ferguson, Xildhibaan Pramila Jayapal, Xildhibaan Adam Smith, Xeer Ilaaliyaha Guud Nick Brown, U doodeyaasha Isbahaysiga Waalidnimada La Qorsheeyay, Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka, Dimuqraadiyiinta Degmada King, hoggaamiyeyaasha ganacsiga iyo inta ugu badan ururada shaqaalaha. Waxaan kasbaday taageeradooda sababtoo ah rikoodhkayga aan lala barbardhigi karin cid kale iyo aragtidayda cad ee mustaqbalka Degmada King.

Dad badan ayaa wax walba si sax ah u sameynaya haddana weli dib u dhacaya. Kadib tobanaan sanno oo ballanqaadyo fashilmay iyo qorshe aan isbeddel lahayn, dhammaanteen waan niyad jabsanahay. Waxaan sameyn karnaa si ka wanaagsan. Madaxa fulinta ahaan, waxaan si joogto ah diiradda u saari doonaa isla xisaabtanka. Doolar kastaa oo canshuur ah waa inuu keenaa bulshooyin ammaan ah, caafimaad qaba, oo la awoodi karo.

Waan ogahay sida ay u adag tahay in la daboolo baahiyaha nolosha. Waxaan ku soo barbaaray Koonfurta Seattle anigoo ay i korisay hooyo keliya ka dib markii qoyskeena uu ku yimid qaxooti ahaan. Waxaan la kulanay hoy la'aan, waxaan ku noolayn guryaha dadweynaha, waxaana ku tiirsanayn kaararka raashinka. Maanta, waxaan ahay nin xaasle ah iyo aabbe ku korinaaya isla qoyskiisa halkan. Taasi waa waxa i wada sidii aan dowladda uga dhigi lahaa mid si ka wanaagsan ugu shaqeysa qof walba.

Khibraddaas ayaa sidoo kale igu hoggaamisay nolol adeeg ah. Waxaan karaani ka ahaa Aqalka Cad ee Maamulka Obama, waxaan ka shaqeeyay sharciga ee halka shirkadaha ugu sareeya ee qaranka, waxaanan aasaasay oo maamulay urur qaran oo aan faa'iido doon ahayn oo waxbarashada dhallinyarada ah. Waxaan xirfaddayda shaqo ku kharash gareeyay ballaarinta fursadaha iyo keenista natiijooyinka.

Sida Guddoomiyaha Golaha ahaan, waxaan hoggaamiyey shaqada lagu maalgelinayo xarumaha soo kabashada balwadda cusub, maalgelinta nidaamka jawaab-bixiyeyaasha koowaad ee ammaanka dadweynaha, ansixinta sharciyada ka hortagga ka saarista si dadka loo dejiyo, horumarinta istiraatijiyadda ka hortagga rabshadaha hubka ee Degmada King, kordhinta mushaharka ugu yar, iyo maalgelinta kumanaan guryo la awoodi karo oo cusub.

Kuwani waa xalal dhab ah. Madaxa Fulinta ahaan, waxaan si toos ah u wajihi doonaa caqabadaha degdegga ah ee na haysta—soo afjaridda hoy la'aanta, hagaajinta amniga dadweynaha, difaacidda xuquuqda taranka, ballaarinta daryeelka la xiriira balwadda, wax ka qabashada isbeddelka cimilada, iyo ka caawinaadda ganacsiyada yaryar inay kobcaan. Haddii aad diyaar u tahay hoggaamiye cusub oo wax qabta, sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

## Claudia Balducci



info@claudiabalducci.com
claudiabalducci.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Sharciga, Columbia University; Shahaadada Jaamacadda, Providence College; Xarunta Sharciga Haweenka ee NW (Codka Sharciga)

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubinta Golaha Degmada (Guddoomiye 2020-2023); Ku-xigeenka Guddoomiyaha Sound Transit; Meeyarkii Hore ee Bellevue

**Bayaanka:** Degmada King waxay ku sugan tahay marxalad adag — ganacsiga sidii caadiga ahaydna ma shaqeynayso. Deris badan ayaa laga saaray qiimaha. Hoy la'aannimada weli waa dhibaato. Ka-noqoshada xuquuqda waxay khatar ku tahay badqabka iyo dhaqaalaha bulshadeenna. Wakhtiyadan aan la hubin waxay u baahan yihiin hoggaamin la xaqiijiyay tobanaan sano oo aan keeno. Aniga ayaa ah musharaxa keliya ee leh waayo-aragnimo fulineed oo hoggaaminaya hay'ad weyn iyo rikoodh hagaajinta nidaamyada jaban. Sida Madaxa Fulinta ahaan, waxaan hubin doonaa in doolar kasta uu keeno natiijooyin dhab ah oo la cabbirri karo. *Seattle Times ayaa iigu yeertay "kan ugu habboon ee ku hoggaamin kara gobolka maalmo wanaagsan."*

Waxaa iga go'an inaan noqdo "Maamulaha Guryaha" ee Degmada King, waxaan keenay kumanaan guryo cusub ah oo aan dhigay aasaaska boqolaal kun oo kale, iyo sidoo kale hoyga degdegga ah iyo guryaha taageerada leh. *Urbanist ayaa taageeray qorshahayga ah in la dhiso 44,000 oo kale, isagoo ku tilmaamay "mid hammi leh oo la gaari karo."*

Horrey u ahaan jiray hoggaamiye amni oo heer degmo ah, waxaan isku dheelitiri doonaa isla xisaabtanka iyo naxariista si aan bulshooyinka u sugo amnigooda. Ururka Moms Demand Action ayaa i siiyay "Sharaf Musharax" sababtoo ah yareynta rabshadaha hubka *iyo shariifkii hore Sue Rahr ayaa taageertay "fahamkayga nidaamka, awoodda aan u leeyahay in aan isbeddel sameeyo, iyo shaqadayda joogtada ah ee ku wajahan bulshooyin ammaan ah."*

Waxaan ka adkaaday mucaaradad xooggan si aan u ballaariyo tareenka fudud ee Eastside waxaanan u keenayaa adeegga South County ka hor jadwalka, marka lagu daro hagaajinnada gaadiidka dadweynaha iyo lugeeyeyaasha/baaskiillada. *Transportation4WA waxay iigu yeertaa "hoggaamiyaha aan la isku qilaafi karin ee gobolka ee ballaarinta tareenka fudud, amniga gaadiidka, & dhisidda waddooyinka socodka ee guud ahaan degmada."*

Waxaan adeegsan doonaa khibraddayda sharciga si aan ula dagaalamo faragelinta federaalka, laga bilaabo caddaaladda taranka ilaa xuquuqda soogalootiga iyo LGBTQ+. *Hagaha Codbixiyeyaasha Horusocodka ah wuxuu ammaanay aragtidayda ku saabsan "degmo midaysan, firfircoon, oo cimilada u wanaagsan halkaas oo dhammaan deganeyaashu ay ku barwaaqoobi karaan."*

Ballanqaadkayga adiga kugu aaddan: hoggaamin la xaqiijiyay si loo gaarsiiyo natiijooyin geesinimo leh *iyo* kuwo la gaari karo. *Waxaa taageeray: The Seattle Times; Dab-damiyeyaasha; Dimuqraadiyiinta Degmada King ; Golaha Guryaha La Awoodi Karo; ransportation4WA; Qabiilka Snoqualmie; La Guulayso Dumarka; Isbahaysiga Ganacsiga Eastside; Ururada Shaqaalaha; 18 Duq Magaalo; in ka badan 100 hoggaamiyeyaal la doortay iyo kuwa bulshada.*

## Golaha Degmada Lr. 1

### Rod Dembowski



(206) 922-8822
info@vote4rod.com
www.vote4rod.com

**Waxbarashada:** Dugsiyada Dadweynaha ee Renton; Georgetown University, Maamulka Ganacsiga & Dowladda, cum laude; UW Law School.

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubinta Golaha Degmada; Hore: Qareenka shaqada gaarka ah; Falanqeeyaha Maaliyadda

**Bayaanka:** Rod Dembowski waa Xubin Golaha oo diiradda saaraya bulshada, natiijooyinka ku jihaysan, oo ku xidhan adeegga iyo ka go'an inuu horumariyo nolosha deganeyaasha degmada King. Rod, oo leh rikoor la xaqiijiyay oo ah sameeye siyaasado madax-bannaan oo horumarsan, waligiis ma seegin cod. Waxaa loo magacaabay Masuulka La Doortay ee Sannadka ee Ururka Degmooyinka. Rod wuxuu heellan yahay in uu wax ku ool ah uga jawaabo dhibaatooyinka ugu waaweyn ee gobolka: caafimaadka iyo badbaadada, awoodda wax iibsiga, ilaalinta, iyo saboolnimada.

*Caafimaadka & Ammaanka.* Rod ayaa hogaaminayay dadaallada lagu maalgelinayo Barnaamijka Jawaabta Dhibaatada Goboleedka ee Waqooyiga Degmada King, kaas oo isku xira xirfadlayaasha caafimaadka maskaxda iyo kuwa ugu horreeya ee ka jawaaba xaaladaha degdegga ah. Rod wuxuu taageeray Machadka Daryeelka Dhaqanka ee Harborview, wuxuu sii waday in la furo rugaha caafimaadka dadweynaha, wuxuuna ka shaqeynayaa in la dhiso xarumaha daryeelka degdegga ah iyo kooxaha jawaabta moobilka, guud ahaan degmada. Rod wuxuu kordhiyay ammaanka Metro Transit, wuxuu abuuray barnaamijka iibsashada hubka ee Degmada King, wuxuuna hirgeliyay nidaamyada kormeerka waxtarka leh ee fulinta sharciga.

*La awoodi karo*. Sida Guddoomiyaha Guddiga Miisaaniyadda, Rod wuxuu ka shaqeeyay inuu maareeyo kharashka barnaamijyada degmada King, isagoo hubinaya waxtarkooda iyo horumarinta dib-u-habeynta. Wuxuu yareeyay soo jeedimaha canshuurta iyo kharashaadka, wuxuu ka dhigay gaadiidka dadweynaha mid la awoodi karo, wuxuuna hubiyay in waayeelka iyo halyeeyada naafada ah ay helaan dhimista canshuurta hantida ee ay kasbadeen.

*Ilaalinta*. Rod wuxuu helay in ka badan $100 milyan oo loogu talagalay jardiinooyinka, waddooyinka socodka, goobaha furan iyo biyaha ee waqooyiga degmada King. Wuxuu afar jibaaray maalgelinta Barnaamijka Mustaqbalka Ilaalinta ee Degmada King. Wuxuu qoray sharci lagu yareynayo gaaska aqalka lagu koriya dhirta ee Metro Transit, wuxuuna ansixiyay qorshaheenna tallaabooyinka cimilada.

*Taageeridda Kuwa U Baahan.* Rod wuxuu aaminsan yahay awoodda Degmada King inay nolosha beddesho oo ay caawiso deriskeenna baahan. Wuxuu ka shaqeeyay furitaanka hoyga haweenka waayeelka ah ee Kenmore iyo hoyga Oaks ee Shoreline. Wuxuu kordhiyay maalgelinta taageerada cuntada wuxuuna ka shaqeynayaa sidii uu u hubin lahaa in qofna uusan gaajo ugu dhiman degmada King.

*Taageerayaasha waxaa ka mid ah:* Waalidnimada la qorsheeyay, Waxqabadka Ilaalinta Washington, Dab-damiyeyaasha Shoreline/Northshore, Ururka Shaqaalaha MLK, Mashiiniisteyaasha, Hawl-wadeennada Gaadiidka, Dallaalyaasha Hantida Ma Guurtada, Dimuqraadiyiinta Degmada King, Gudoomiyaha Gobolka Ferguson, Xildhibaan Jayapal & DelBene, Duqooyda Magaalada Degmada 1aad oo dhan.

**Doorashooyinka Degmada King ma waafajiyaan, wax kama beddelaan, ama dib u eegis kuma sameeyaan bayaannada musharaxiinta iyo cabbirka warqadda codbixinta xaalad kasta oo lagu jiro.**

**Dhammaan bayaannada waa tarjumaadda erey iyo erey ee dhabta ah, oo ah bayaannada ay soo gudbiyeen musharaxa, guddiga, ama maamulka, laguna dhammeeyay wakhti xaddidan. Sababtaas awgeed, bayaannada la tarjumay ayaa laga yaabaa in meelaha qaarkood aysan kaga caddeyn maxaa yeelay isticmaalka luqadda, fikradaha, iyo sharaxaadda ayaa ku kala duwan luqadaha.**

# Golaha Degmada Lr. 5

## Peter Kwon



(425) 417-8454
PeterSeaTac@gmail.com
www.PeterKwon.com

**Waxbarashada:** Shahaado-Bellevue College/University of Washington: Shabakadda iyo Xisaabinta Kombuyuutarka; Ururka Magaalooyinka Washington, Shahaadada Hoggaaminta Dowladda Hoose.

**Shaqo iyo Xirfad:** Injineer Sare ee Nidaamyada, Farsamada Dhijitaalka ah; Agaasimaha Mashruuca, Korean American Institute (Machadka Kuuriyaanka Ameerika).

**Bayaanka:** Koonfurta Degmada King waxay u qalantaa hoggaamiyeyaal xalliya dhibaatooyinka – ma aha oo keliya kuwa ka hadla. Markii xaafaddayda ay la kulantay xatooyo boosto, waxaan abaabulay oo aan helay sanduuqyo boosto oo sugan. Markii waayeellada ay ku dhibtoonayeen ilaalinta deyrarkooda, waxaan abaabulay nadiifinta xaafadaha. Kadib markaan arkay dadaalladayda heer-hoose oo helaya natiijooyin, derisyadu waxay igu dhiirigaliyeen inaan u tartamo golaha magaalada.

Waxaan u soo shaqeeyay sida Xubinta Golaha ee Magaalada SeaTac muddo toban sanno ah anigoo leh rikoor guul leh. Anagoon kor u qaadin canshuuraha magaalada, waxa aanu u rognay hoos u dhac dhaqaale mid xad-dhaaf ah anagoo balaadhinay jardiinooyinka, yaraynta wakhtiyada ka jawaabta booliiska 40%, iyo kordhinta adeegyada aadanaha. Magaalada SeaTac ma laha hoy la'aan - waxaan u helnaa guryo.  Waxaan ka caawinay furitaanka 30 xarumo cusub oo lagu xanaaneeyo carruurta.  Intii lagu jiray cudurka faafaha, waxaanu ilaalinay adeegyada muhiimka ah, waxaanu siinay deeqo ganacsiyada halgamaya, waxaanu mudnaanta siinay baahiyaha dadkayaga aadka u nugul. Waxaanu dhisnay in ka badan 2,000 oo guri oo la awoodi karo oo laga dhisay saldhigyada tareennada fudud.

Hadda waxaan u tartamayaa Golaha Degmada King si aan u keeno isla anshaxa maaliyadeed, hoggaaminta bulshada loo hormariyo, iyo muhimadda wada shaqeynta ee halka Degmada King. Waxaan diiradda saari doonaa kordhinta helitaanka adeegyada caafimaadka habdhaqanka iyo dadweynaha, guryaha la awoodi karo, hagaajinta amniga dadweynaha, iyo ballaarinta gaadiidka.  Waxaan caawin doonaa ganacsiyada yaryar, tababarada ururka shaqaalaha, iyo barnaamijyada tababarka shaqada si aan u hubiyo in qof kasta oo degane ah uu horumari karo.

Waxaan aaminsanahay in madaxda la doortay ay tahay inay dhegaystaan. Subax kasta oo Axad ah tobankii sanno ee la soo dhaafay, waxaan diyaar ka ahaa dukaannada kafeega xaafadda si aan u maqlo welwelka iyo fikradaha deganeyaasha. Waxaan ka shaqeeyaa Guddiga Ururka Qaranka ee Magaalooyinka oo aan ka soo shaqeeyay in ka badan 20 guddiyada gobolka iyo komishannada horumarinta nolosha ee Koonfurta Degmada King.

Aad ayaan ugu faraxsanahay in ay i taageeraan hoggaamiyeyaal badan oo deegaanka ah, xubnaha bulshada, iyo u doodeyaasha shaqada. Si kastaba ha ahaatee, taageerada ugu muhiimsan waa adiga. Waxaa sharaf ii ah inaan kasbado codkiina oo aan kugu matalo, khibrad, hawlkarnimo, edeb, iyo dadaal qoto dheer oo aan u hayo bulshadeenna.

## Steffanie Fain



(253) 237-3361
steffanie@steffaniefain.com
www.steffaniefain.com

**Waxbarashada:** Seattle University Law School, Macalester College

**Shaqo iyo Xirfad:** Qareenka daryeelka caafimaadka iyo shaqaaleynta; Madaxweynaha Guddiga Xarunta Caafimaadka ee Harborview

**Bayaanka:** Koonfurta Degmada King waxay u qalantaa hoggaamin adag oo keenta natiijooyin dhab ah. Muddo aad u dheer, bulshadeenna waa la iska indho-tiray marka laga hadlayo kheyraadka iyo taageerada. Waxaan u tartamayaa Golaha Degmada King si aan mudnaan uga dhigno baahiyadeenna: hoos ugu dhigno kharashaadka maalinlaha ah, xoojinta ammaanka dadweynaha, dhisidda guryo badan, iyo horumarinta helitaanka adeegyada caafimaadka dhimirka iyo daaweynta balwadda.

Dhammaanteen waan daalnay nidaamyo jabay iyo ballanqaadyo maran. Sida qareen ahaan, hooyo ilmo u dhigtaan dugsiyada dadweynaha ah, oo xubin ka ah PTSA ah, iyo Madaxweynaha Guddiga Wakiillada ee Harborview, waxaan xirfaddayda u huray isku keennida dadka si aan u xallino dhibaatooyinka. Waxaan garanayaa sida loo helo kheyraadka halka loo baahan yahay, oo waxaan hoggaamiyeyaasha kula xisaabtamayaa inay keenaan natiijooyin. Taasi waa nooca khibrad iyo degdeg ah ee Koonfurta Degmada King u baahan tahay hadda.

Sida musharaxa keliya ee Xisbiga Dimuqraadiga iyo musharaxa keliya ee tartankan, kaas oo si guul leh u hoggaamiyey hey'ad maamul goboleed, waxaan ku faraxsanahay inaan helo taageerada Xildhibaan Adam Smith, 10 duq magaalo oo Koonfurta Degmada King, Madaxa Fulinta Degmada King Shannon Braddock, xubno hadda iyo kuwii hore ee Golaha Degmada King, iyo isbahaysi ballaaran oo ay ka mid yihiin ururada shaqaalaha, hoggaamiyeyaasha ganacsiga, ciidamada gurmadka degdegga ah, iyo u-doodeyaasha bulshada, kuwaas oo igu aaminay inaan horumar dhab ah ka sameeyo ammaanka, hoy la'aanta, iyo awood u lahaanshaha kharashaadka nolosha.

Aniga iyo ninkayga waxaan halkan kula nool nahay laba wiil iyo qoys ballaaran oo noo dhow. Waxaan sidoo kale tababaraa dhallinyarada kubadda kolleyga, waxaan ka shaqeeyaa guddiyada ururrada aan faa'iido doonka ahayn, waxaanan si mutadawacnimo ah ula shaqeeyaa deriska si aan u xoojino Koonfurta Degmada King min hoose ilaa sare. Koonfurta Degmada King waa guryaheena—waxaana iga go'an in aan u dhiso mustaqbal ka nabdoon oo jaban dhammaanteen. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

*Taageerooyin Dheeraad ah: Xildhibaan Marilyn Strickland, Guddoomiyihii hore Gregoire, The Seattle Times, Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci Dejinta 47aad, Seattle-Degmada King Ururka Shaqaalaha Dhismaha, LiUNA Local 242, Xubin hore oo ka tirsan Golaha Degmada King Julia Patterson, Guddoomiyeyaasha Sam Cho iyo Toshiko Hasegawa, iyo qaar kaloo badan.*

## Guddoomiye Jagada Lr. 1

### Ryan Calkins



(206) 682-7328
ryan@ryanforport.com
www.ryanforport.com

**Waxbarashada:** M.A. (Shahaadada Mastarka) Xiriirka Caalamiga ah, Yale University; B.A. (Shahaadada Jaamacadda), Willamette University

**Shaqo iyo Xirfad:** La-taliyaha siyaasadda tamarta, mulkiilaha ganacsi yar oo hore, xirfadle horumarinta dhaqaalaha

**Bayaanka:** Anigoo ah Guddoomiyaha Dekedda, maalin kasta waxaan ka shaqeeyaa in Dekedda Seattle ay noqoto dekedda ugu cagaaran Waqooyiga Ameerika, in la abuurro shaqooyin mushahar-ku-filaan ah oo qoysaska maxalliga ah, isla markaana la hubiyo khibradda ugu wanaagsan ee rakaabka iyo lamaane-yaasha ku sugan SEA iyo dekedda.

Waxaan u tartamayaa dib-u-doorasho si aan dadaalladan u sii wado oo aan u dhiso Deked la jaan qaadda mudnaanta iyo qiyamka mustaqbal ee bulshadeenna.

Dekeddeennu waa matoorka dhaqaalaha ee gobolka, waxayna taageertaa shaqooyin badan oo aan la koobi karin oo kobciya koritaanka dhaqaale. Taasi awgeed, waxaan maalgeliyey horumarinta shaqaalaha, waxaan taageeray ganacsiyada maxalliga ah, waxaanan hubiyey in faa'iidooyinka hawlaha dekeddu si caddaalad ah loo wadaago. Taageeradiinna, waxaan sii hormarin doonaa abuurista shaqooyin tayo-sare leh oo qoysaska sii haya.

Waxa innagu waajib ah in aynu noqono hoggaamiye deegaan. Taas darteed, waxaan hormuud ka noqday u-gudbidda maraakiib iyo qalab aan qiiq lahayn, hagaajinta waxtarka, iyo la shaqeynta shirkadaha diyaaradaha, shixnad-daabulaayaasha, iyo mulkiileyaasha gaadiidka si ay ugu gudbaan tamar waara. Waxaan sii wadi doonaa yareynta kaarboonka hawlgalladeenna, nadiifinta wasakhowga taariikhiga ah, iyo dhimista wasakhowga hawada iyo biyaha ee maxalliga ah.

Waxaan ku dadaaleynaa in SEA yeelato garoon heer-caalami ah oo u qalma malaayiinta rakaab iyo kumannaanka ganacsiyo yaryar ee halkaas ku xirma. Gudaha Dekedda, waxaan horumariyay hal-abuurnimo dedejisa habraacyada laga bilaabo markaad timaaddo garoonka, waxaanan maalgeliyey hagaajinta kaabayaasha. Aan sii wadno ka dhigidda Dakaddeena midka ugu sarreeya Xeebta Galbeed, anagoo ku dhisanayna taariikhdeenna badeed.

*Waxaa taageeray: Dimuqraadiyiinta Degmada King; Dab-damiyeyaasha Dekedda & Seattle; Tallaabada Ilaalinta Washington; Ururka Shaqaalaha MLK, Shaqaalaha Longshore (Dekedda) iyo in ka badan dersin ururo shaqaalo kale; FairVote Washington; Xubnaha Kongareeska Larsen & Smith; Xubnaha Golaha Degmada Dembowski, Perry, Barón, Balducci, Mosqueda, Zahilay; Duqooyda Magaalada Seattle, Bellevue, Redmond, Shoreline & Bothell; iyo qaar kaloo badan!*

## Guddoomiye Jagada Lr. 3

### Hamdi Mohamed



electhamdi@gmail.com
www.electhamdi.com

**Waxbarashada:** University of Washington: Shahaadada Jaamacadda, Shahaadada Mastarka ee Daraasaadka Siyaasadda; Shahaadada Ganacsiga Caalamiga ee Dugsiga Ganacsiga ee Harvard

**Shaqo iyo Xirfad:** Guddoomiyaha Dekedda Seattle iyo Agaasimaha Waaxda ee Magaalada Seattle

**Bayaanka:** Ka Guddoomiyaha Dekedda tan iyo 2021 ahaan, waxaan qabtay doorar hoggaamineed oo muhiim ah, oo ay ku jiraan Guddoomiyaha Guddiga iyo Guddoomiyaha Guddiga Hantidhawrka. Waxaan ku soo barbaaray qoys shaqaale ah oo ay ku jiraan darawal gaari xamuul iyo shaqaale garoon diyaaradeed, waxaan fahamsanahay sida go'aannada Dekedda ay u saameeyaan nolol maalmeedka, laga bilaabo helitaanka shaqo ilaa sida alaabtu u gaarto bulshadeenna. Waxaan sii wadi doonaa inaan diiradda saaro daah-furnaanta, natiijooyinka, iyo dadka oo aan horumariyo.

Shaqooyinka iyo Tababarka: Waxaan ka caawiyay labanlaabidda maalgashiga horumarinta shaqaalaha, oo ay ku jirto hoggaaminta Barnaamijka Maritime Youth Career Launch, barnaamij $4 milyan ah oo dhallinyarada u diyaarinaya xirfadaha badda. Waxaan sidoo kale horumariyay Xarunta Hal-abuurka Badda, xarun u noqon doonta tababarka shaqada, ganacsiga, iyo dhaqaalaha badda (blue ecomomy), abuurista fursado mustaqbalka ee bilowga iyo ganacsiyada.

Horumarinta Dhaqaalaha: Waxaan ansixiyay Qorshe Horumarinta Raasumaalka oo ah $5.6 bilyan, taas oo abuuraysa shaqooyin iyo kor u qaadista qandaraasyada ganacsiyada maxalliga ah. Waxaan helay $7.1 milyan si loo hagaajiyo waayo-aragnimada garoonka diyaaradaha ee rakaabka iyo shaqaalaha. Waxaa iga go'an in aan sii wado hagaajinta terminal-ka, taageeridda koritaanka xamuulka, iyo xoojinta doorka Dekedda ee horumarinta ganacsiga goboleedka.

Caddaaladda Deegaanka: Waxaan taageeray amarka ilaalinta joogtada ah ee dhulalka cagaaran ee North SeaTac Park waxaanan wada maalgeliyay amarkii ugu horreeyay ee awoodda xeebta ee maraakiibta dalxiiska, taas oo yaraynaysa qiiqa 80 boqolkiiba. Waxaan sidoo kale hoggaamiyey barnaamij $5 milyan ah oo lagu yaraynayo dhawwaaqa guryaha ee ka yimaada garoonka diyaaradaha. Bulshooyinkani waxay xambaarsan yihiin culayska garoonka diyaaradaha goboleedka waxayna mudan yihiin taageero macno leh, taas oo ah sababta, anagoo kaashanayna Senatar Patty Murray, aan u helnay maalgelin federaal ah si aan u ballaarinno shaqadaan.

Muddo-xilleedkayga soo socda, waxaan diiradda saari doonaa taageeridda ganacsiyada yaryar, abuurista shaqooyin qoys-wax ku ool ah, ballaarinta helitaanka ganacsiga iyo gaadiidka, iyo in dekedda lala xisaabtamo dadka ay u adeegto. *Waxaan rajeynayaa inaan kasbado codkaaga.*

Taageerooyinka: Dhammaan Guddoomiyeyaasha Dekedda Seattle, Guddoomiye Ferguson, Xeer Ilaaliyaha Guud Brown, Guddoomiye Upthegrove, Khasnajiga Pellicciotti, Xubnaha Kongareeska, duqooyda magaalooyinka deegaanka, xubnaha golaha, iyo ururrada ay ka mid yihiin SEIU6, IBEW46, iyo Mashiinisteyaasha 751.

## Guddoomiye Jagada Lr. 4

### Toshiko Grace Hasegawa



(206) 992-7156
toshiko@hasegawaforport.com
www.hasegawaforport.com

**Waxbarashada:** MA (Shahaadada Mastarka) Seattle University; BA (Shahaadada Jaamacadda) Caddaaladda Dambiyada & BA (Shahaadada Jaamacadda) Isbaanish, Seattle University

**Shaqo iyo Xirfad:** Madaxweynaha, Guddiga Dekedda Seattle; mulkiilaha ganacsi WMBE

**Bayaanka:** Waxaan ka faa'iidaystay lix sanno oo aan madax ka ahaa wakaalad ka tirsan Maamulka Inslee si aan u horumariyo abuurista shaqo iyo heer sare oo hawlgal ah. In kasta oo dowladaha gobolka oo dhan ay la kulmaan yaraanta miisaaniyadda, Dekedda Seattle waxay ku jirtaa xaalad dhaqaale oo aad u wanaagsan. Waxaan fulineynaa $5,300,000,000 oo mashaariic raasumaal ah, abuurista shaqooyin qoyska u fiican, iyo qandaraasyo ganacsiyada maxalliga ah. Hoggaankayga hoostiisa, waxaan ballaarinay helitaanka xirfadaha ee bulshooyinka aan si wanaagsan loo adeegsan iyada oo loo marayo heshiisyo lala galay shaqaalaha, iskaashiyo rasmi ah oo lala yeeshay saddex qabiil, maalgeshiyo waxbarasho, tababarro, iyo hindisaha shaqooyinka cagaaran. Waxaan hagaajinnay hannaanka iyo siyaasadaha qandaraasyada si aan u kordhino kharashka la geliyo ganacsiyada ay leeyihiin dadka laga tirada badan yahay iyo haweenka.

Sida hooyada, waxaan rabaa in dhammaan carruurteennu ay dhaxlaan mustaqbal ifaya oo ka sii wanaagsan. Waa inaan hadda tallaabo qaadnaa. Waxaan soo bandhigay Teal New Deal, qorshahayga ah in aan ka dhigo mid aan kaarboon lahayn badda (buluug), iyo in aan dhaqaajiyo dhulalka warshadaha si loo soo saaro, loo keydiyo, loona qaado tamarta nadiifka ah (cagaar). Isku-duwiddan waxay kor u qaadaysaa waaraanshaha *adduunka oo dhan*, iyadoo abuuraysa shaqooyin jiilba jiil *gobol ahaan* kontonka sanno ee soo socda. Waxaan sidoo kale nadiifinnaa goobaha wasakhaysan, waxaanan furnay Beerta Dadka ee Webiga Duwamish halkaas oo salmon-yar ay dib ugu soo noqdeen!

Garoonka diyaaradaha ee SEA wuxuu daboolaa baahiyaha safarka caalamiga ah ee gobolka oo dhan. Si aan u soo jiito oo aan u sii hayo shaqaalaha ka shaqeeya garoonka diyaaradaha, waxaan taageeray in la bixiyo tigidhada orca bilaash ah, alaabada nadaafadda bilaash ah, iyo barnaamij hagaha daryeelka carruurta. Waxaan hoggaaminayaa hirgelinta xarun daryeel carruur oo dhismo ah si aan u daboolo baahida dadweynaha ee fursado badan.

Bulshooyinka garoonka diyaaradaha hadda waxay leeyihiin kalsooni in North SeaTac Park la ilaaliyo, iyo sidoo kale $14,000,000 oo fursado deeq ah oo ka socda dekedda. Waxaan rabaa ka-qaybgal xooggan oo ka dhaca South King oo ku saabsan Qorshaha Guud ee Garoonka Diyaaradaha ee Waara.

Waxaan la kulmi doonaa hanjabaadaha federaalka ee dhaqaalahayaga anigoo abuuraya fursado dadka ay ku horumari karaan. Aynu hubinno in bulshooyinka oo dhan ee degmada ay ka faa'iideystaan kobaca dhaqaale ee $929,000,000 ee ka imaanaya FIFA 2026.

Habkayga wuxuu shaqeeyaa: dhaqaalaha, deegaanka, iyo sinnaanta waxay horumaraan si wadajir ah. Waa saddexda gunaanad ee hoose ee aan leenahay. Waxaa sharaf ii ah inaan idin matalo.

## Yaa deeq ku bixiya ololeyaasha?

Eeg ku tabarruceyaasha dhaqaale ee musharaxiinta iyo cabbirrada sharciga ee gobolka iyo deegaanka:
**Guddiga Kashifaadda Dadweynaha**
**www.pdc.wa.gov**
**Lambarka Lacag La'aanta 1 (877) 601-2828**

CODBIXIYAHA ★ MUSTAQBALKA ★

## Hore isku diiwaan geli si aad u codeyso.

Haddii aad tahay ugu yaraan 16 jir, waxaad wakhti kasta hore iskaga diiwaan gelin kartaa oonleenka ama boostada si aad u codeyso.

Waxaanu hayn doonaa diiwaan gelintaada oo aan si toos ah kuugu soo diri doonaa warqad codbixin markii aad u qalanto inaad codeyso.

## Golaha Jagada Lr. 1

### Hugo Garcia



(801) 896-8076
hugo4burien@gmail.com
hugoforburien.com

**Waxbarashada:** Dugsiga Sare ee Evergreen iyo xoogaa jaamacad

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubin Golaha Magaalada Burien, La-taliye Ganacsi Yar, Xubinta Guddiga, Ganacsade

**Bayaanka:** Khibraddayda balaaran, oo ay ku jirto ka shaqeynta Guddiga Qorsheynta iyo Iskaashiga Horumarinta Dhaqaalaha, waxay Burien ugu adeegtay si wanaagsan inta lagu jiray muddo xilleedkaygii koowaad. Waxaan sii ahaan doonaa u doodaha xooggan ee qoysaska shaqeeya, ganacsiyada yaryar iyo shaqaalaha.

Wakiilnimada caqligalka guud, naxariista leh ayaa ku yaraatay Golaha waxayna carqaladeysay waxtarkeenna. Asalkayga qaxootinimada iyo waayo-aragnimadayda nololeed waxay i xasuusisaa in isbahaysiyo xooggan oo loo dhisay in kor loogu qaado kuwa ugu nugul ay mudan yihiin in loo dagaalamo. Waxaan sii wadi doonaa inaan dhegaysto deriska oo aan kor u qaado codkooda si aan u abuuro magaalo adkaysi leh oo dhammaan qoysaskeenu, ayadoon loo eegin sida ay isu aqoonsadaan ama halka ay ku dhasheen, ay ku barwaaqoobi karaan.

Diiraddaydu waxay noqon doontaa in Burien laga dhigo mid la awoodi karo oo qoysaska iyo shaqaalaha ay udub dhexaad u noqdaan siyaasadaha magaalada. Taageerooyinkii ugu horeeyay waxaa ka mid ah: Dimuqraadiyiinta Degmada King, Ururka Shaqaalaha MLK, Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci-dejinta 33aad, Xubinta Golaha KC Girmay Zahilay, Xisbiga Qoysaska Shaqeeya, Ururka Rakaabka Gaadiidka, Haweenka Midabka leh ee Siyaasadda, UFCW 3000.

### Jessica Ivey



(206) 251-7581
info@jessica4burien.com
www.jessica4burien.com

**Waxbarashada:** MBA (Shahaadada Mastarka), Shahaadada Cilmiga ee Suuqgeynta, Western Governors University; Shahaado Jaamacadeedka Labada Sanno, Naqshadeynta, El Paso College

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha Suuqgeynta ee Seattle Orcas

**Bayaanka:** Aniga oo ah hooyo shaqeynaysa oo ku soo korisay carruurteyda Koonfurta Degmada King, waxaan fahamsanahay cadaadiska dhabta ah ee qoysaska Burien ay la kulmaan—kororka kharashaadka iyo baahida loo qabo xaafado nabad ah, oo soo dhawweyn leh. Ka Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga Qorsheynta ee Burien ahaan, waxaan ka caawiyay dejinta aragti wax ka qabata guryaha la awoodi karo, si siman u maalgelisa xaafadaha, oo kor u qaada kobaca waara. Aniga oo leh taariikh xirfadeed oo ah hoggaamiye suuqgeyn, waxaan keenayaa waayo-aragnimo dhisidda bulshooyin xooggan iyo ku mideynaya dadka oo aan u marayo yoolal wadajir ah.

Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada si aan uga gudbo kala qaybsanaanta oo aan u keeno natiijooyin dhab ah. Waxaan u ololeyn doonaa guryo la awoodi karo iyo habab cusub oo guri lahaansho ah, waxaan taageeri doonaa kobaca dhaqaalaha anigoo soo jiidanaya shaqooyin iyo taageeraya ganacsiyada yaryar, waxaanan ka shaqeyn doonaa in Burien ay ahaato mid ammaan ah, lagu socon karo, oo firfircoon. Waxaan sidoo kale mudnaan siin doonaa jardiinooyinka, adeegyada, iyo barnaamijyada caafimaadka maskaxda ee ka jawaabidda wadajirka ah.

Ka xubin ka tirsan bulshada LGBTQ+ ahaan, waxaa iga go'an inaan dhiso Burien oo barwaaqo ah, oo loo dhan yahay qof walba. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

## Golaha Jagada Lr. 3

### Sam Méndez



(206) 651-5045
sam@electmendez.com
electmendez.com

**Waxbarashada:** JD (Shahaadada Sharciga), University of Washington School of Law, BA (Shahaadada Jaamacadda) Dhaqaalaha & Siyaasadda, UC Santa Cruz

**Shaqo iyo Xirfad:** Qareen, Maamulka Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington (Washington State Health Care Authority)

**Bayaanka:** Burien waa meesha aniga iyo xaaskeyga ku korinayno ilmohayaga laba sanno jir ah, waanan jeclaanay. Waxaan rabaa waxa ugu wanaagsan qoysaskeena: waxaan u baahanahay guryo la awoodi karo oo ka badan, waddooyin qoysaska u ammaan ah, iyo dowlad hoose oo inoo shaqeysa. Aniga oo la jira kuwo badan, waxaan u dagaallamay—oo ku guuleystay—kordhin xooggan oo mushaharka ugu yar ah, iyadoo dadka ay u codeeyeen 57% ilaa 42%, balse golahayagu waxa uu khasaarinayaa lacagta canshuur-bixiyeyaasha isagoo maxkamad ku diidan. Taasi waa khalad. Magaaladeenu waa inay kala shaqeysaa Degmada King arrinta hoy-la'aanta, halkii ay ka diidi lahayd $1 million oo maalgelin muhiim ah iyada oo aan sharaxaad la bixin.

Waxaan mudan nahay wax ka wanaagsan. Waxaan u taaganahay xuquuqda shaqaalaha, xuquuqda kiraystayaasha, iyo caddaaladda deegaanka. Waxaa ii taageeray Dimuqraadiyiinta Degmada King, Dimuqraadiyiinta Degmada 33aad & 34aad, Teamsters 117, Sanduuqa Waxqabadka Isbahaysiga Guriyeynta WA, Xildhibaan Adam Smith, Xubnaha Golaha Degmada King Teresa Mosqueda iyo Girmay Zahilay, Senatarrada Tina Orwall & Emily Alvarado, Guddoomiyaha Dhulalka ee Gobolka Dave Upthegrove, iyo qaar kaloo badan. Nagu soo biir!

### Marie Barbon



(253) 693-8435
info@marieforburien.com
marieforburien.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Labada Sanno ee Kalkaalinta

**Shaqo iyo Xirfad:** Kalkaaliye Diiwaan gashan

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada Burien si aan hoggaanka magaaladeenna ugu keeno isla-xisaabtan, masuuliyad, iyo garasho caadi ah. Aniga oo ah kalkaaliye caafimaad diiwaan-gashan iyo deggane Burien muddo 16 sano ah, waxaan arkay saameynta qalbi-jabinta leh ee balwadda firfircoon ku yeelatay bulshadeenna. Barnaamijyo sida yareynta waxyeellada iyo guryo taageero leh ayaa noqday astaan waxa dhaca marka la dayaco masuuliyadda iyo isla-xisaabtanka. Waa waqtigii aan taas beddeli lahayn.

Anigoo ah Guddoomiyaha Guddiga Adeegyada Aadanaha, waxaan si toos ah uga shaqeeyay wax ka qabashada caqabadahan, waxaanan garwaaqsaday sida ay lama huraan u tahay in la maalgeliyo badbaado dadweyne oo wax-ku-ool ah, guryo la awoodi karo, iyo adeegyada bulshada. Tan waxa aynu ku gaadhi karnaa naxariis iyo xalal wax-ku-ool ah. Waxa aynu u baahan nahay in aynu korinno kheyraadka magaaladeenna annagoo soo jiidanayna ganacsiyo oo dhisayna dhaqaalaha maxalliga ah.

Burien waxay u qalantaa hoggaan diiradda saaraya badbaadada dadweynaha, la-awoodi-karaanta, iyo korriin waara. Waxaa i taageeray Ururka Saraakiisha Booliiska ee Degmada King. Sharaf bay ii noqon lahayd inaan kasbado taageeradaada iyo codkaaga.

## Golaha Jagada Lr. 5

### Sarah Moore



(360) 499-3186
sarahmooreforburien@gmail.com
sarahforburien.com

**Waxbarashada:** BS (Shahaadada Jaamacadda) ee Bayoolajiga, Bates College, Lewiston ME

**Shaqo iyo Xirfad:** Iskuduwaha Barnaamijka, Madaxa Beeralayda ee KC, Xubin Golaha Magaalada Burien

**Bayaanka:** Waxaan arkay sida dowladda hoose ay ugu shaqeyn karto dadka degan magaalada Burien. Waxaan ku faanay inaan helay $5 milyan oo loogu talagalay xakamaynta fatahaadaha ee Boulevard Park. Waxaan taageeray ilaalinta kiraysteyaasha, xasilloonida guryaha, mushahar caddaalad ah, kordhinta adeegyada aadanaha iyo iskaashiga goboleed sida barnaamijka 911 ee wada-jawaabta. Waxaan taageeray biyo nadiif ah, hawada, dhulka, geedaha iyo yareynta saameynta cimilada. Sida guddoomiyaha Guddiga Garoonka Diyaaradaha, waxaan u doodaa dadka degan magaalada Burien ee ay saameeyeen buuqa garoonka iyo ballaarinta.

Waxaa iga go'an xaafadaha lagu lugeyn karo, adeegyada ammaanka dadweynaha ee caqliga leh, caddaaladda deegaanka, iyo Burien oo u shaqeysa dhammaan. Waxaan sii wadi doonaa inaan si wadajir ah uga shaqeeyo maamulada kala duwan oo aan si cad oo daacad ah ula xiriiri doono dadka deegaanka, xitaa mawduucyada adag, anigoo ku weydiinaya su'aalo adag adiga dartaa. Waxaan si qushuuc leh u weydiisanayaa codkaaga.

Taageerooyinka waxaa ka mid ah: 33aad, 34aad iyo Dimuqraadiyiinta KC, Guddiga Siyaasadda Haweenka Qaranka, Ururka Shaqaalaha MLK, UFCW3000, Ururka Rakaabka Gaadiidka, Katie Wilson, The Urbanist, Wakiillada Gregerson, Obras, Thomas, iyo Fitzgibbon, Senatarrada Orwall iyo Alvarado.

### Gabriel Fernandez



(206) 795-2234
gabriel4burien@gmail.com
gabriel4burien.com

**Waxbarashada:** Dugsiga Sare ee Evergreen, South Seattle College

**Shaqo iyo Xirfad:** Shaqaalaha dhismaha iyo maareeyaha ganacsi yar oo dib-u-habeyn sameeya

**Bayaanka:** Sida qof weligiis deganaa oo ku noolaa magaalada Burien, waxaan ka warqabaa caqabadaha aan wajahno. Waxaan ku soo barbaaray halkan. Waxaan arkay jihada aan ku soconay sannadihii u dambeeyay. Magaaladaan ayaa i korisay. Waxaan diyaar u ahay inaan qaado tallaabo, u adeego bulshadeenna, oo aan hoggaamiyo anigoo leh aragti cusub.

Waxaan doortay inaan u tartamo golaha, gaar ahaan jagada 5, sababtoo ah waxaan arkay mas'uuliyad darro weyn oo ku saabsan fikradaha la dhiirigelinaayo. Laga soo bilaabo isticmaalka daroogada furan iyo teendhooyinka oo naafo ka dhigay bulshadeenna, ilaa isbeddelada cusub ee aagga iyo riixitaanka kordhinta canshuuraha deganeyaasha, waa in la joojiyaa.

Hadafkaygu waa inaan keeno maalgelin shakhsiyadeed oo taageero leh oo qalbi furan golaha. Waxaan rabaa inaan sii wado horumarka aan ka gaarnay adeegyada ammaanka dadweynaha, dib u eegista miisaaniyadda magaalada iyo inaan aragno sida aan u yarayn karno kharashka xad-dhaafka ah halkii aan canshuuraha kordhin lahayn, iyo inaan tixgelinno saameynta muddada dheer ee fikradaha sida isbeddelada xeerarka dhulka. *Fadlan u codee Gabriel Fernandez*.

## Golaha Jagada Lr. 7

### Stephanie Mora



(413) 349-8166
FriendsOfStephanieM@gmail.com
StephanieMoraForBurien.com

**Waxbarashada:** Dugsiga Sare ee Evergreen, Highline Community College

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubin Golaha Burien, Hooyo Gurijoog ah, Macallinka Waxbarashada Guriga

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ahayd in aan idiin adeego Golaha Magaalada Burien. Anigoo ah hooyo leh 6 carruur ah oo 25 sanno deganaa Burien, amniga xaafadda waa mid aniga ii gaar ah. Afartii sanno ee la soo dhaafay, waxaan si adag uga soo horjeeday siyaasado iyo saameynno dibadeed oo waxyeello u geysta Burien, xitaa marka loo ekaysiiyo dadaallo lagu doonayo in la noqdo mid "soo dhawweyn" badan. Waxaan sii wadi doonaa inaan diiradda saaro xalalka dhabta ah, ma aha fikrado guuldarreystay.

Waxaan u qalannaa hoggaamiye difaaca xaafado nabad leh, taageera ganacsiyada yaryar, oo garab istaaga siyaasadaha ka caawiya in la yareeyo kharashka nolosha. Taasi waxay run ahayd afar sanno ka hor, welina maanta waa run. Waxaan ahay hoggaamiyahaas, idiin ahaa, waana sii ahaan doonaa.

Waxaan ka soo horjeedaa kordhinta canshuurta iyo siyaasado oggolaanaya in xeryo dadka guryo la'aanta la dhiso. Waxaan u taaganahay hoggaan isku dheelitiran oo wax ku ool ah, oo bulshadeenna hore u dhigaya. Waxaan si sharaf leh ii taageeray Ururka Saraakiisha Booliiska Degmada King. Fadlan dib u door Stephanie Mora si aan u sii wado horumarkayaga!

### Rocco DeVito



(206) 657-7182
electroccodevito@gmail.com
electroccodevito.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Cilmiga Ilaalinta Bayoolajiga, SUNY ESF; Shahaadada Mastarka ee Maamulka Dadweynaha, University of Vermont

**Shaqo iyo Xirfad:** Maamulaha Xiriirka Macaamiisha, King County Metro

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada sababtoo ah *waxaan jeclahay magaaladaan*! Waxaan ahaa adeegaha dadweynaha nolosheyda oo dhan, waxaanan rabaa inaan xirfadayda u adeegsado sidii aan magaalada Burien uga dhigi lahaa meel ka wanaagsan. Waxaan u qalannaa golaha magaalada oo ixtiraama dhammaan muwaadiniinteena oo diiradda saaraya waxa aan u baahanahay, sida waddooyin ammaan ah, mushaharro caddaalad ah, iyo daah-furnaanta dowladda.

Sannadihii la soo dhaafay waxaan waqti aad u badan ku luminay isqabqabsi; waxaan ballanqaadayaa inaan la shaqeeyo bulshadeenna iyo xubnaha kale ee golaha si aan u helno xalal halabuur leh oo macquul ah oo ku saabsan arrimaha inoo wadakhuseeya. Waxa kale oo aan u dagaallami doonaa dadka shaqeeya iyo xuquuqda iyo ilaalinta dhammaan dadka Burien guri ugu yeera.

Ku soo biir aniga oo aan wada dhisno Burien ka wanaagsan! Waxaa taageeray: Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci Dejinta 33aad/34aad, Senatarrada, iyo Wakiilada; Dimuqraadiyiinta Degmada King; Xubinta Golaha Degmada Teresa Mosqueda; Xisbiga Qoysaska Shaqeeya, Golaha Ururka Shaqaalaha MLK; Protec17; ATU; UFCW 3000 iyo in ka badan!

## Golaha Jagada Lr. 1

### David Denino



(206) 414-8569
david.denino@gmail.com
ElectDavidDenino.com

**Waxbarashada:** Koorsada Isgaarsiinta iyo Taariikhda; tobanaan sanno oo waxbarasho wax ku ool ah oo ku saabsan nidaamyada adag iyo horumarinta hannaanka

**Shaqo iyo Xirfad:** Khabiir ku takhasusay ganacsiga caalamiga ah oo isku dubaridaya baahiyaha ganacsiga iyo xeerarka adag ee dowladda

**Bayaanka:** Waxaan maqleeynay tan iyo intii aan xasuusan karno: Magaalada Des Moines waxay leedahay awood badan. Waxaa naloo sheegay inaan dulqaad yeelano. In lagu kalsoonaado siyaasiyiinta. Laakiin sannadba sannadka ka dambeeya, isla murankii ayaa soo noqnoqda, isla dhibaatooyinkiina way sii jiraan.

Waxaan halkan ku noolaa 20 sano. Waxaan ogahay waxa magaalada tani noqon karto. Laakiin awoodda suurtagalka ah ma shaqaaleysiiso waaxda booliiska mana soo celiso adeegyada xayawaanka. Ma isku xirto xaafadaha, ma soo jiidato ganacsiyada, mana caawiso qoysaska shaqeeya inay koriyaan carruur guuleysata. Iyadoo cadaadis dhaqaale oo culus uu sii kordhaayo, ma awoodno inaan sii dayacno fursadaha.

Waa wakhtigii dib loogu jeedin lahaa diiradda—ma aha oo keliya degmada mariinada (xeebta), laakiin magaalada oo dhan. Taasi waxay ka bilaabataa qorshe cad oo lagu kobcinayo dakhliga xasilloon iyo in la soo afjaro miisaaniyadda xaaladaha degdegga ah. Shaqadaydu waa in aan daah-furnaan iyo kalsooni ku dhiso nidaamyada shaqeeya. Anigu ma ihi siyaasi; waxaan ahay xalliyaha dhibaatooyinka oo diyaar u ah in aan awoodda magaaladeena u beddelo xaqiiqo. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

### Harry Steinmetz



(206) 387-1333
Hsslaw@me.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Sharciga (J.D.) ee Dugsiga Sharciga ee Santa Clara University; Shahaadada Jaamacadda (B.A.) ee San Diego State University

**Shaqo iyo Xirfad:** Ku-xigeenka Duqa Magaalada Des Moines, Xubin Golaha Magaalada. Qareen. Garsoore Hore.

**Bayaanka:** Magaalada Des Moines waxay la kulantay caqabado tan iyo 2022: isbeddelada hoggaanka, gaabiska miisaaniyadda, iyo saameynta ka timid cudurka faafa. Ka ku-xigeenkaaga Duqa Magaalada iyo xubinta golaha magaalada ahaan, waxaan ka shaqeeyay ilaalinta adeegyada muhiimka ah sida booliiska, anigoo miisaaniyadda si mas'uuliyad leh u dheelitiraaya. Waxaan diiradda saaray daah-furnaanta, la xisaabtanka, iyo natiijooyinka bulshadeenna.

Waxaan maalgelin ku sameyneynaa dhisidda mustaqbal xooggan: dib-u-soo noolaynta bartamaha magaalada, hagaajinta hannaanka oggolaanshaha, iyo cusbooneysiinta mashaariicda sida Marina Steps iyo Redondo Pier si ay u noqdaan kuwo bulshada diiradda saaraya oo kharash-ku-ool ah.

Waxaan ku faanayaa in ay i taageereen Xisbiga Dimuqraadiga ee Degmada 33aad, Senator Karen Keiser, Wakiilka Tina Orwall, Guddoomiyaha Dhulalka Dadweynaha Dave Upthegrove, LiUNA 242, iyo hoggaamiyeyaal badan oo maxalli ah. Dhammaantood waxay aaminsan yihiin ballanqaadkayga bulshadeenna, ammaanka dadweynaha, iyo hoggaaminta mas'uulka ah. Waxaa sharaf ii ah inaan sii wado u adeegiddaada iyo inaan ka shaqeeyo sidii aan magaalada uga dhigi lahaa mid ammaan ah, mid isku xiran, oo ka jawaab celin badan dadka ku nool. Waxaan si xushmad leh ku waydiisanayaa codkaaga.

## Golaha Jagada Lr. 3

### Gene Achziger



(253) 941-3785
gene4DM2025@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda Isgaarsiinta, Washington State University; AAS (Shahaadada Jaamacadda Labada Sanno) Naqshadaynta Garaafyada, Highline College; AA Guud, Tacoma Community College

**Shaqo iyo Xirfad:** Wariye hawlgab ah, Seattle P-I; ex-bare kaaliye, Highline College; naqshadeeye garaafik

**Bayaanka:** Waxaan guuleysan doonaa marka hoggaamiyeyaasha magaalada ay dhegaystaan. Waxaad laba jeer ka hadasheen Soo Jeedinta 1 ee sannadkii hore. Waxaa idin maqlay. *Labada jeer*. Anoo ah adeege aad doorateen ma aanan canaanan ama ma aanan soo jeedin inaad waxbarasho la'aan tihiin. Waad saxan tihiin inaad ku xanaaqdaan kuwaas idin eedeeyey.

Ma aadan iibsan lacag lagu badbaadsho golaha laguna qariyo iney tahay tallaabo amniga dadweynaha ah. Waxaad aqoonsatay in kharashka aan loo baahnayn uu yahay khatarta ugu weyn ee amniga dadweynaha iyo xasilloonida maaliyadeed. Miisaaniyadda xaaladaha degdegga ah ayaa naga qaadatay 25 sanno oo fursado la seegay iyo koboc dhaqaale oo hakaday.

Waxaad ii dooratay inaan ka caawiyo soo afjaridda wareeggan ee u dhexeeya barwaaqada iyo khaati-galidda. Laakiin waxay u baahan doontaa ugu yaraan afar cod oo ka tirsan golaha si taas loo sameeyo. *Codkaagu waa muhiim*. Waxaan beddeli karnaa jihada sannadkan haddii aad doorato dad ku tiirsan *fikirka macquulka ah halkii ay ka ahaan lahaayeen rabitaan*. Waxaan si xushmad leh idiinka codsanayaa codkiina, iyo hoggaan ixtiraama codkiina iyo garaadkiina.

## Golaha Jagada Lr. 5

### Lloyd Elliott Lytle Jr.



(323) 605-5548
lloydelytle@gmail.com
lytlefordesmoinescitycouncil.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga ee Bayoolajiga Kimistariga Univ. of Washington, M.A. Waxbarashada Cal State LA

**Shaqo iyo Xirfad:** Macallinka Sayniska ee Dugsi Sare

**Bayaanka:** Des Moines waa magaalo cajiib ah oo gaar ah, halkaas oo aniga iyo qoyskeygu aan ku noolayn ku dhowaad 30 sano iyo sidoo kale carruurnimadaydii hore. Xeebaha, ganacsiyada yaryar, taariikhda, dabeecadda, duur-joogta, iyo dadka ayaa ka dhigaya meel gaar ah. Waxaan aaminsanahay in bulshada, TLC, badbaadada dadweynaha, iyo daryeelka deegaanka iyo duur-joogta ay sii hayn doonaan Des Moines barwaaqo.

Waxaa aad iiga go'an ilaalinta deegaanka, laga bilaabo saqafka geedaha, ilaa durdurada salmon, madadaalada bannaanka, iyo gaadiid waara. Waxaan ka tirsanaa Guddiga Talo-bixinta Muwaadiniinta 2023, waxaan ka caawiyey abuurista Baaqa Magaalada (City Proclamation) oo aqoonsanaya Southern Resident Orcas, waxaanan u dagaallamay ilaalinta calaamadaha taariikhiga ah, kaymaha, iyo goobaha madadaalada dadweynaha, iyo soo-celinta guddigeenna qorshaynta dadweynaha. Sidoo kale, waxaan jeclaan lahaa in la arko xulashooyin gaadiid oo la hagaajiyey sida kordhinta adeegga shuttle-ka.

Waxaan ahay ka qalin-jebiyey UW, iyo bare saynis oo khibrad leh. Waxaan aaminsanahay in hoggaan fikir leh oo daah-furan oo miisaaniyadaha isu dheellitira, mudnaanta siiya adeegyada aasaasiga ah, oo ilaaliya deegaanka waxay Des Moines ku sii hayn doontaa barwaaqo ah oo dabeecad ku jirta wadnaheeda!

### Pierre Blosse



(346) 298-1984
pierre@pierrefordesmoines.com
pierrefordesmoines.com

**Waxbarashada:** UC Berkeley, BS (Shahaadada Jaamacadda) Hiddaha iyo Bayoolajiga Dhirta; KGI, Mastarka Ganacsiga iyo Sayniska ee Biotechnology (Bayoolajiga Farsamada)

**Shaqo iyo Xirfad:** Aasaase iyo Madaxweynihii hore, IVYX Scientific; VP, Des Moines Legacy Foundation

**Bayaanka:** Anigoo ah saynisyahan, ganacsade, iyo aabbe laba carruur, waxaan xiise u qabaa dhisidda mustaqbal ka sii xooggan magaalada. Waxaan ahay aasaasaha IVYX Scientific, shirkad u adeegta bulshada sayniska ee caalamka, waxaanan doonayaa in khibraddayda iyo aragti cusub aan u keeno Hoolka Magaalada.

Ku dhawwaad rubuc deganeyaasha waa ka hooseeyaan 18, hase yeeshee qoysaska dhallinyarada si yar ayaa si yar looga dhex matalaa hoggaanka magaalada maanta. Waxaan u doodi doonaa jardiinooyinka, goobaha carruurtu ku ciyaarto, garoommo ciyaareed, iyo barnaamijyo dugsiga ka dib - annagoo dhiseyna magaalo ammaan ah oo qoysasku ku kori karaan.

Caqabadaha miisaaniyaddu waa dhab. Keydadka Magaalada waxaa la dhimmay kala bar. Habka ugu fiican ee dib loogu soo celiyo xasilloonida maaliyadeed looguna ballaariyo adeegyada aasaasiga ah, *iyadoo aan canshuuraha la kordhin*, waa koriin dhaqaale oo caqli-gal ah oo magaalada oo dhan ah, soo noolaynta xeebteena, iyo ka-faa'iidaysiga fursado badan oo ka imaanaya garoonka diyaaradaha. Waxaan ku dadaalli doonaa macluumaad maaliyadeed oo si fudud loo heli karo, adeegyo online oo ka wanaagsan, iyo ka-qaybgal bulsho oo badan. Sharaf bay ii noqon lahayd inaan kasbado codkaaga.

## Golaha Jagada Lr. 7

### Robyn Desimone



info@desimonefordesmoines.com
www.desimonefordesmoines.com

**Waxbarashada:** Dugsiga Sare ee Kennedy Catholic

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha Ganacsi Yar

**Bayaanka:** Anigoo ah deggane noloshiisa oo dhan ku qaatay Koonfurta Seattle iyo hooyo ku faanta laba gabdhood, waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada ee halkan Des Moines. Anigoo ah mulkiilaha dukaanka ubaxa ee maxalliga ah Iris & Peony, waxaan maamulaa ganacsi yar oo bulshada si toos ah ula macaamilla, taas oo iga dhigaysa mid qof walba heli karo isla markaana i siisa fursad aan ku dhegaysto walaacyada dadka ee ku saabsan magaaladeenna. Tan iyo markii aan ganacsigayga u soo raray Des Moines, waxaan qaban-qaabiyey dhacdooyin badan waxaanan bixiyey u-doodid ganacsiyada bulshada; sidoo kale waxaan ku faanayaa inaan helay taageerada Ururka Tafaariiqlayda Washington.

Xubin ka noqoshada Golaha Magaalada waxay ii siin doontaa fursad aan ugu doodo ganacsiyada yaryar, aan uga kaalmeeyo horumarinta dhaqaalaha, aanna xoojiyo badbaadada dadweynaha. Magaaladeennu waxay leedahay awood aad u weyn oo la hirgelin karo, waxaana sharaf ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

## Golaha Jagada Lr. 1

### Semra Riddle



semra@semraforlfp.com
SemraforLFP.com

**Waxbarashada:** UW Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka ee Dhismaha

**Shaqo iyo Xirfad:** Naqshadaynta Muuqaalka iyo Maareeyaha Dhismaha, Xubinta Golaha oo 9 sannadood

**Bayaanka:** *La xaqiijiyay. Daacadnimo leh. Waaqici Taxadara* Aragtidayda had iyo jeer waxay noqon doontaa LFP firfircoon, iyadoo la ilaalinayo waxa nagu weyn oo aan si mas'uuliyad leh u abuureyno xalal loogu talagalay caqabadaha cusub. Xalka sida sanduuqyada boostada ee la xiro si kharash yar si looga hortago xatooyada. Hoggaaminta miisaaniyaddeena si aan u ilaalino jardiinooyinkeena, durdurradeena, iyo geedahayaga. In kasta oo sicir barar taariikhi ah uu jiro, haddana xakamaynta kharashyada iyadoo la hubinayo in amniga aan la khatar gelin. Hubinta in kaalmada caafimaadka maskaxda ay caawiso marka booliisku awoodi waayaan.

Si wadajir ah, waxaan maalgelin ku sameyn doonaa amniga, dhiiragelin doonaa fursadaha ganacsi, horumarin doonaa aragtideena ku saabsan guryaha iyo kaabayaasha, iyo waxyaabo kale oo badan. Dhibaatooyinka adag ma laha jawaabo fudud oo sahlan. Caqabadaheena hadda waxay u baahan yihiin faham *daacad ah* iyo *dhammaystiran* ee miisaaniyaddeena iyo siyaasadaha, iyo si gaar ah, ka-qaybgal joogto ah oo ka yimaada bulshadeenna cajiibka ah ee firfircoon.

Waxaa si sharaf leh u taageeray Dimuqraadiyiinta KC, FairVote, The Urbanist, Kutlada Siyaasadeed ee Haweenka Qaranka, iyo 14+ mas'uuliyiin la soo doortay ee deegaanka oo ay ku jiraan 4 xubnood oo hadda iyo hore uga tirsanaa golaha magaalada LFP, duqa magaalooyinka Bothell, Shoreline, iyo Kenmore iyo xubnaha golaha, Wakiillada Degmada Sharci Dejinta 1aad, iyo aqoonsiga Moms Demand Action (Hooyooyinka Waxay Dalbanayaan Ficil).

### Bryce James



(206) 910-2701
bryce@lfpcommunity.org
www.lfpcommunity.org

**Waxbarashada:** Central Washington University Taqasusyo: Xisaabaadka, Maaliyadda, Suuqgeynta. Taqasus Yar: Cilmiga Sayniska Kombuyuutarka. Wharton Business School - CIMA

**Shaqo iyo Xirfad:** Madaxweyne, Smart Portfolios - RIA, Madaxweyne, Portfolio Mason

**Bayaanka:** Waxaan halkan u joogaa inaan noqdo codkaaga mas'uuliyadda maaliyadeed, ilaalinta dabeecadda iyo dabeecadda gaarka ah ee magaalada. Khibraddayda adeegga rayidka ah iyo 40 sanno oo aan ku soo jiray maaliyadda waxay *adiga* kugu adeegi doonaan marka aan si buuxda u maalgelino Adeegyada Ammaanka Dadweynaha, taageerno waajibaadka guryaha ee gobolka ee ADU's & guryaha laba qoys iyo dib u dhisno Guddiyada Muwaadiniinta ee muhiimka ah. Waxaan ka shaqeyn doonaa taageeridda iyo hirgelinta qorshaha hagaajinta gaadiidka dadweynaha ee Magaalada oo badbaadinaya 400 geed, ilaalinaya mulkiileyaasha guryaha, isla markaana yaraynaya saameynta safrayaasha.

Waa in aan dib u dhigno kor-u-qaadista canshuurta la soo jeediyay, taas oo si degdeg ah loo sameeyay, aan la hubin, oo aan la oggolaanin 2/3 meelood oo ka mid ah Guddiga Hoosaadka Miisaaniyadda. Uma baahnin kor-u-qaadid canshuur iyadoo aan haysano $10 milyan oo kayd ah - 4.5 jeer inka badan inta loo baahan yahay. Waxaan soo celin doonaa Guddiga Miisaaniyadda Muwaadiniinta, waxaan soo celin doonaa daah-furnaanta, isla xisaabtanka, waxaanan ka hortagi doonaa guuldarooyinka canshuurta, sida 2010 iyo 2021.

Qoyskayga ayaa Lake Forest Park guri ugu yeerayay jiilal badan; waxaan jecel nahay halkan. Yaynaan arkin magaalada oo loo qoondeeyay ganacsi ahaan, baahida baarkinka oo la qaaday, ama dhismeyaasha guryaha dabaqyada ah oo ku yaal xaafadaha.

## Golaha Jagada Lr. 2

### Fred Grant



(206) 769-5558
electfredgrant@gmail.com
electfredgrant.com

**Waxbarashada:** GSU Shahaadada Cilmiga Adabka ee Filimka iyo Fiidiyowga / Taqasus Yar ee Suuqgeynta

**Shaqo iyo Xirfad:** Khabiirka Isgaarsiinta iyo Suuqgeynta

**Bayaanka:** Markii aan noloshayda kala bar ku qaatay Xeebta Bari iyo kala bar Xeebta Galbeed, waxaan arkay sida kala qaybsanaanta iyo macluumaadka khaldan ay bulshada dib ugu celin karaan, iyo sida fahamka iyo ka mid noqoshada ay horrey noogu sii wadi karaan. Waxaan bartay dhaqamada adduunka oo dhan waxaanan aaminsanahay in dadka ay wax badan ka siman yihiin intii ay ogyihiin.

Magaalada Lake Forest Park waa magaalo qurux badan, laakiin qiimaha sii kordhaaya ayaa keenaaya caqabado dhab ah. Maadaama aan ahay mulkiilaha ganacsi yar, waxaan miisaaniyadaha ku dheelitiray anigoo adeegsanaya qalabyo cusub, iskaashi daacad ah, iyo xalal hal-abuur leh. Waxaan taageersanahay ballaarinta hareeraha waddooyinka ee dugsiyada agtooda, hagaajinta gaadiidka dadweynaha, iyo hindiseyaasha tamarta cagaaran sida saldhigyada koronto siinta dadweynaha.

Waxaan u baahanahay inaan xoojino isgaarsiinta u dhexeysa golahayaga, shaqaalaha magaalada, booliiska, iyo dab-damiska. Waxaan sidoo kale damacsanahay inaan ka caawiyo kor u qaadista ganacsiga maxalliga ah iyo inaan hubiyo in goobta cusub ee xeebta ay u furan tahay dadka dhammaan. Waxaan u tartamayaa inaan keeno horumar maskax leh, midnimo leh, oo wakhti dheer ah una keeno magaalada Lake Forest Park.

### Matt Muilenburg



(206) 376-9993
matt@haveyoumetmatt.org
www.haveyoumetmatt.org

**Waxbarashada:** University Of Washington Shahaadada Jaamacadda iyo Sharciga

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareynta Alaabta

**Bayaanka:** Muddo 47 sano ah oo aan ku noolaa bulshadeenna, waxaan si toos ah u arkay xiriirrada qotada dheer, falalka aamusnaanta leh ee daryeelka, iyo taariikhda wadaagga ah ee ka dhigaya magaalada Lake Forest Park mid gaar ah. Waxaan ogahay in bulshada rayidka ah lagu dhiso xiriirradeenna maalinlaha ah—deris gacan ka geysanaya, mashruuc fasalka ah, cado maxalli ah oo sanadba sanadka ka dambeeya la xuso. Isbeddel waara waxaa lagu dhisaa aasaas ixtiraam iyo kalsooni.

Waxaanu tartamayaa inaan mideeyo xaafadahayaga si aan u gaarno mustaqbal wadajir ah—mid noo diyaariya caqabadaha cusub iyadoo aan ilaalinayno waxa aan ugu qiimaha badan nahay. Midnimada dhabta ah ma aha oo keliya heshiis; waxay ku saabsan tahay in la aqoonsado kala duwanaanshaheena iyo in la abuuro xalal wadajir ah, si cod walba loo maqlo, qof walbana uu ka faa'iidaysto dadaalkeena wadajirka ah.

Albaabkaygu waa furan yahay, waxaan rabaa inaan hadlo. www.haveyoumetmatt.org – 206-376-9993. Waxaa taageeray Dimuqraadiyiinta Degmada 1aad, Dimuqraadiyiinta Degmada King, Dimuqraadiyiinta Dhallinyarada Degmada King; liiska oo dhan ka eeg www.haveyoumetmatt.org

## Golaha Jagada Lr. 3

### Josh Rosenau



(425) 405-5536
joshforlfp@proton.me
joshforlfp.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Bayoolajiga, U. Chicago; Shahaadada ugu Sareysa Jaamacadda ee Deegaanka & Bayoolajiga Horumarka, U. Kansas

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha Siyaasadda, Hey'adda Mountain Lion; Guddiga Jardiinooyinka iyo Madadaalada ee LFP

**Bayaanka:** Sideed sanno ka hor, qoyskeygu wuxuu u guuray magaalada Lake Forest Park si ay u helaan xaafado caleen leh, oo lagu socon karo. Waxaan bilaabay inaan mutadawac ka noqdo oo aan uga adeego gudaha hoggaanka PTA ee dugsiyada carruurtayda. Waxaan ku biiray guddiga jardiinooyinka si aan ugu hadlo deriskayga iyo qiyaamkayga anigoo ah saynisyahan ilaalinta deegaanka. Hadda waxaan u tartamayaa inaan fuliyo ballanqaadka magaalada oo ku jirta isku dheelitirnaanta dabeecadda, kor u qaadista ganacsiga iyo kordhinta dakhliga magaalada, iyo in la adeegsado hal-abuurka bulshadeenna si aan u wajahno caqabadaha ugu waaweyn, oo ay ku jiraan awoodda wax iibsiga iyo isbeddelka cimilada.

Aan si wadajir ah u horumarinno tayada nolosha, deegaanka, iyo miisaaniyadda: Oggolaansho siinta kafateeriyo/dukaamo xaafadeed; dhisidda guryo la awoodi karo geedaha dhexdooda si carruurtu ugu soo laaban karaan, waayeelkuna ugu yaraadaan guryaha; ku daridda isku-xirnaansho aan baabuur lahayn oo gaadiidka dadweynaha ah; iyo ka-sameynta waddooyinka meel dadka, geedaha, gaari-gacmeedyada ilmaha, baaskiillada, kuraasta nasashada, iyo ciyaarta.

Taageereen: Dimuqraadiyiinta Degmada King iyo hoggaamiyeyaasha oo ay ku jiraan: Senatarrada Stanford, Salomon; Wakiillada Duerr, Kloba; Xubnaha Golaha iyo meeyarrada LFP, Shoreline, Kenmore, Bothell, Woodinville; Ururka Shaqaalaha Dab-damiyeyaasha Shoreline; Deriska LFP; Wax badan ka baro JoshForLFP.com.

### Jon Lebo



(206) 321-9690
info@lebo4lfp.com
www.lebo4lfp.com

**Waxbarashada:** University of Washington, Shahaado Jaamacadeedka Adabka (BA) ee Daraasadaha Naqshad-dhisme; Shahaado Jaamacadeedka Sayniska (BS) ee Dhismaha.

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasime Ku-xigeenka Mashruuca, Sound Transit; Hore u ahaa Agaasimaha Mashaariicda Dhismaha (Capital Projects), UW

**Bayaanka:** Sida Xubinta Golahaaga, waxaan mudnaanta siiyay adeegyada ammaanka dadweynaha, mas'uuliyadda maaliyadeed, iyo ilaalinta deegaanka. Waxaan maalgeliyay hagaajinnada ammaanka hareeraha waddooyinka oo aan taageeray dadaallada lagu hubinayo in booliiska ay haystaan kheyraadka ay u baahan yihiin si ay bulshadeenna u sugaan. Sida Guddoomiyaha Guddiga Miisaaniyadda ahaan, waxaan ka caawiyay keenista miisaaniyad daahfuran oo dheelitiran oo daboolaysa baahiyahaaga. Waxaan aaminsanahay inaan si xikmad leh u maamulno maalgelinta jirta ka hor inta aanan idinka codsan inaad bixisaan wax ka badan.

Waxaan ku soo barbaaray magaalada Lake Forest Park waxaanan dib ugu soo laabtay aniga iyo qoyskeyga yar sannadkii 2009. Khibrad ahaan naqshadeeye, Guddoomiyihii hore ee Guddiga Qorsheynta, iyo hadda Xubin Golaha, waxaan dhegaystay walaacyadiina waxaanan si wadajir ah uga shaqeynay inaan qaabeyno siyaasado taageera horumarinta sinnaanta iyo deegaanka oo aan ilaalinno dabeecadda gaarka ah ee LFP.

Waxaan Golaha u keenaa tamar, dhegaysi wax ku ool ah iyo go'aan qaadasho wadajir ah. Sida xubin nolosha oo dhan ka tirsan Xisbiga Dimuqraadiga, waxaa iga go'an dowlad u nugul, oo horrey u socota, oo ka tarjumaysa qiyaamka aan wadaagno. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

## Golaha Jagada Lr. 5

### Reid Olsen



reidforlfp@gmail.com
www.reidforlfp.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Cilmiga Injineernimada Farsamada, California Polytechnic State University, San Luis Obispo

**Shaqo iyo Xirfad:** Injineer Farsamada Tamarta Nadiifka ah

**Bayaanka:** Qoyskaygu wuxuu u so guuray Lake Forest Park 5 sanno ka hor, annagoo uu na soo jiitay bilicdeeda dabiiciga ah iyo ruuxa bulshada. Maanta, waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada si aan hoggaankeena ugu keeno aragti cusub iyo xirfado xallinta dhibaatooyinka oo la xaqiijiyay. Waxaan 15 sanno u huray dhisidda kala-guur ku jihaysan mustaqbal waara, waxaanan aaminsanahay in mustaqbalka Lake Forest Park uu ku xiran yahay in miisaaniyaddeenna la geliyo xakameyn. Waxaan u baahanahay iskaashi wax-ku-ool ah oo dheeraad ah oo aan la yeelanno gobolka iyo bulshooyinka deriska ah. Waxaan diiradda saari karnaa adeegsiga doolarka canshuur-bixiyeyaasha si xikmad leh, annagoo ilaalinayna adeegyada aan ugu qiimaha badan nahay. Waxaan ka shaqeyn doonaa in Lake Forest Park ay noqoto mid dhaqaale ahaan xooggan, si qoysaska maanta joogaa ay halkan ugu hanaqaadaan, jiilkana xiga uu awood ugu yeesho inuu halkan ku noolaado, ka shaqeeyo, isla markaana ay ku dhistan mustaqbalkooda.

### Tracy Furutani



(701) 335-6390
tracy4lfpcouncil@gmail.com

**Waxbarashada:** MS (Shahaadada Mastarka), Kimistariga, Stanford University; PhD, Cilmiga Dhulka, University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Macallinka Fiisigiska, North Seattle College

**Bayaanka:** Afar sanno ee la soo dhaafay, si wadajir ah ayaanu u gaarnay horumar dhab ah: *waddooyin ammaan* badan annagoo hoos u dhignay xawaaraha ugu badan oo adkaynay fulinta sharciga; *deegaan caafimaad* qaba anagoo dejinnay Qorshaha Ficilka Cimilada; *waddooyin cusub oo guryo la awoodi karo* annagoo hirgelinnay dib-u-habeynta guryaha dhexe (middle housing); iyo *xasillooni maaliyadeed oo la hagaajiyey* iyada oo loo marayo miisaaniyadeyn taxaddar leh. Guulahan waxay ka dhasheen in la dhageysto walaacyadiinna lana qaado tallaabo macno leh.

Laakiin shaqadeennu weli ma dhammeyn. Waa in aynu horumarinta waddooyinka ammaan ah gaarsiinnaa ilaa xuduudaha magaalada; u shaqaalaysiinnaa Maareeye Ficilka Cimilada si uu u xoojiyo adkaysiga bulshadeenna ee duufaannada aad u xooggan (bomb cyclones) iyo qiiqa dababka duurka; isla markaana dhammaystirnaa jardiinka harada dhinaceeda si uu ugu adeego dhammaan degganeyaasha.

Anigoo ah Guddoomiyaha Golaha iyo Ku-xigeenka Duqa Magaalada, waxaan hagay doodihii adkaa ee ku saabsanaa guryaha dhexe iyo maaliyadda magaalada si natiijooyin guul leh loo gaaray. Sidoo kale waxaan u adeegaa xidhiidhiyaha Golaha (liaison) ee Guddiga Ficilka Cimilada. Taageeradiinna, waxaan sii wadi doonaa inaan hoggaamiyo daah-furnaan, iskaashi, iyo ballanqaad xooggan oo ku aaddan adeegidda mudnaantiinna iyo mustaqbalka magaaladeenna.

## Golaha Jagada Lr. 7

### Larry Goldman



larryforlfp@gmail.com
www.larryforlfp.com

**Waxbarashada:** Rutgers University - BA ee Kimistariga; Cardiff University - PhD ee Kimistariga

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubinta Golaha ee LFP, Ku-xigeenka Barafasoor Waxbare - UW Chemistry

**Bayaanka:** Intii aan 4 sanno ku jiray Golaha Magaalada LFP, waxaan ka shaqeeyay inaan LFP ka dhigo magaalo soo dhawweyn leh oo deegaanka u wanaagsan. Waxaan aaminsanahay in LFP ay ku socoto jihada saxda ah, waxaana doonayaa inaan ka faa'iidaysto 4-tii sanno ee la soo dhaafay si aan u sii wado horumarka si taxaddar leh.

Waxaan rabaa in ay noqoto mid ammaan ah oo dadka ay ku lugeeyaan oo ku baaskiil wataan agagaarka LFP, gaar ahaan agagaarka dugsiyadeenna. Waxaan aaminsanahay in magaalada ay u baahan tahay inay shaqaaleysiiso maareeye cimilada si uu uga caawiyo hirgelinta Qorshaha Waxqabadka Cimilada ee aan dhawwaan hirgelinnay, kaas oo ka mid noqon doona ilaalinta kaynta muhiimka ah ee magaaledeena. Waxaan jeclaan lahaa inaan sahamiyo sida aan si taxadar leh ugu sahamin karno fursadaha dheeraadka ah ee guryaha dhexe ee ku habboon dabeecadda xaafadda, sida guryaha cottage-ka. Aniga waxaan taageeraa dadaallada lagu doonayo in miisaaniyadda magaalada laga dhigo mid waara muddo dheer.

Waxaa sharaf ii ah taageeradaada muddo kale oo aan ku sii jiro Golaha Magaalada LFP.



## Ma Guurtay? Magacaaga ma beddelay?

Cusboonaysii Diiwaan Gelintaada Codbixiyaha! Tag barta **VoteWA.gov** ugu dambeyn Oktoobar 27 si aad uga codeyso Doorashada Guud.

## Golaha Jagada Lr. 2

### Susan Jeanne West



(206) 818-6945
scwestnews@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Isgaarsiinta Ganacsiga, University of Washington; Shahaadada Mastarka ee Xiriirada Dadweynaha Istaraatiijiga ah, George Washington University.

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeyaha Sare ee Isgaarsiinta ee Degmada King.

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ah in aan u adeego sida Xubin Golaha Magaalada Normandy Park ahaan. Waxaan kusoo koray Normandy Park, waxaanan waxbarasho ka galay Marvista Elementary, Pacific Middle School, iyo Mount Rainier High School. Waxaan si qoto dheer uga danqanayaa caafimaadka maaliyadeed, dhaqaale, iyo deegaanka ee Normandy Park, ruuxa bulshadeeda, iyo mustaqbalkeeda. Waxaan sii wadi doonaa inaan qabto intii aan kari karo si aan u caawiyo magaalada Normandy Park inay qorshayso mustaqbal wanaagsan oo ilaaliya waxa aan jecel nahay ee ku saabsan bulshadeenna, anigoo raadinaya siyaabo hal-abuur leh oo wanaagsan si loo xoojiyo horumarkeeda—wadajir ahaan xubnaha bulshadeenna.

Waxaan rajeynayaa inaad igu biiri doonto hawl-mutadawacnimo munaasabadaha, barnaamijyada, iyo mashaariicda Normandy Park. Fursadaha waa kuwo aan dhammaad lahayn. Si wadajir ah, waxaan caawin karnaa bulshadeenna inay ahaato mid caafimaad qabta oo adag, anagoo madadaalo sameynayna, isku baraneyna deriskeenna, isla markaana bulshadeenna u soo bandhigeyna dadka kale ee gobolka.

Mahadsanid fursadda ay ii tahay inaan ka mid noqdo Golaha Magaalada. Waxaan isku arki doonaa hareeraha Jardiinka!

## Golaha Jagada Lr. 4

### Mike Bishoff

Sawir lama soo gudbin

mikebishoffnp@outlook.com

Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

## Golaha Jagada Lr. 6

### Eric Zimmerman



(206) 925-3449
ericfornp@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka, Gonzaga University. Shahaadada Jaamacadda, Seattle Pacific University.

**Shaqo iyo Xirfad:** Wakiil lasoo doortay

**Bayaanka:** Waad ku mahadsan tahay inaad igu aaminay inaan xubin ku ahaado golahaaga iyo duqaaga magaalada. Ma jiro qof ila tartamaaya laakiin waxaan idin ballanqaadayaa inaan hubiyo dowlad aan muran lahayn oo shaqeyneysa, oo qabata hawlaha maalinlaha ah ee ka dhigaya magaaladeenna meel weyn oo lagu noolaado lana booqdo.

Wax badan ayaa is beddelay Washington tan iyo markii aan markii ugu horreysay oo aan ku biiray dowladda. Waxaan rabaa inaad dareento wacan tahay inaad aaminto in la xisaabtanka ay lagama maarmaan tahay marka sharciyadeenna la jebiyo. Waxyaalaha ka dhigaaya xaafadeena kuwo ammaankooda yar yahay, waa caadi in la yiraahdo, "Tani caadi maaha!", aadna doonayso in dowladdaadu xalliso.

Daryeelka aan u fidinno kuwa dhibban wuxuu noqonayaa daryeel keliya marka uu caawiyo, iyo ka mid ahaanshaha bulshadeenna ma laha macno kuwa ku xayiran dibadda bulshada ayadoo dowladda ogolaatay darteed. Warqaddaada codbixinta maanta waa muhiim. Hoggaamiyeyaasha la doortay ee gobolka oo dhan ayaa iska kaashanaya sidii loo xallin lahaa dhibaatooyinkeenna ugu waaweyn, iyadoo naxariis iyo la xisaabtan ay wada jiraan. Waxaan si xushmad leh u weydiisanayaa codkaaga si ay tani u korto.

## Golaha Jagada Lr. 1

### James Alberson



(206) 300-0339
info@jamesalberson.com
www.jamesalberson.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Teknolojiyadda Kombuyuutarka - Purdue University; Shahaadada Mastarka oo leh Taqasus Suuqgeynta - Purdue University

**Shaqo iyo Xirfad:** Guddoomiyaha Hadda ee Golaha Magaalada Renton; Mulkiilaha Ganacsi, Sandler Training

**Bayaanka:** Ka Guddoomiyaha Golaha Magaalada ahaan, waxaa iga go'an fikir caqli-gal ah iyo go'aanno caddaalad ah, oo maskax leh oo hagaajinaya tayada nolosha ee Renton. Intii lagu jiray muddo xilleedkaygii ugu horreeyay, waxaan helay waayo-aragnimo qiimo leh iyo aragti ku saabsan wax ka qabashada arrimaha muhiimka ah, horumarinta hindisooyinka muhiimka ah, iyo la shaqeynta deganeyaasha si loo daboolo baahiyaha dhabta ah.

Mudnaantaydu waa isla xisaabtanka, amniga, iyo fursadda. Waa inaan soo celinaa mas'uuliyadda shakhsiga ah, diidnaa dhaqanka cudurdaar sameynta, oo aan si wax ku ool ah u xallinaa arrimaha halista ku ah badqabka dadweynaha. Waxaan sidoo kale diiradda saarayaa ballaarinta fursadaha iyada oo loo marayo kobaca dhaqaalaha ee loo dhan yahay, horumarinta shaqaalaha, iyo helitaanka waxbarasho iyo tababar xirfadeed oo la awoodi karo. Qof kasta oo ku nool Renton waa inuu helo fursad uu ku dhisto nolol u wanaagsan naftiisa iyo qoyskiisa. Codkaaga, waxaan ku dhisi doonaa Renton oo awood badan, oo firfircoon—mid u adeegta inay tusaale u noqoto gobolka.

Taageerooyinka: Meeyarrada Armondo Pavone iyo Denis Law, Xubnaha Golaha Renton Prince, Perez, iyo O'Halloran; Xubinta Golaha Degmada King Reagan Dunn, iyo qaar kale oo badan.

### Michael Westgaard



(206) 370-1987
mikeforrenton@gmail.com
mikeforrenton.com

**Waxbarashada:** Xarunta Waxbarashada Shaqada, iskuul farsamo oo ku yaal Anchorage, Alaska.

**Shaqo iyo Xirfad:** Hawl-wadeenka Biyaha Wasakhda ee Degmada King. Wakiilka Ururka Shaqaalaha iyo Xubin Guddiga.

**Bayaanka:** Renton waxay noqonaysaa mid aysan shaqaalaha awoodi karin. Waxaan haynaa kirada sare ee Seattle, balse shaqooyinka mushaharkooda sareeyo ma jiraan. Waxaan rabaa inaan keeno shaqooyin badan oo mushahar sare leh magaalada Renton. Waxaan ka caawiyay hoggaaminta hindisaha sharci jeedinta ee ugu yar ee magaalada Renton waxaana taageerayaa hirgelinta si ay dadka degan Renton u daboolaan baahidooda.

Waxaan bixinaa canshuuraha Sound Transit, laakiin lacagtaas waxaa lagu kharash gareeyaa Bellevue iyo meelo kale. Waxaan u dagaalami doonaa saamigeenna. Waxaan u baahanahay guryo la awoodi karo oo badan iyo inaan ka caawino waayeelka inay ku sii nagaadaan guryahooda. Aynu dhisno guryo bulsho oo ku yaal dhul dadweyne oo bannaan. Qof kasta oo si adag u shaqeeya wuxuu mudan yahay meel ammaan ah oo uu ku noolaado. Golaha sharci dejinta ee gobolka ayaa ansixiyay sharci ka hortagaya sicir-bararka kirada. Waxaan rabaa inaan ka dhabeeyo in la dhaqan geliyo. Waxaan ugu baahanahay in xaafadahayaga ay noqdaan kuwo ammaan ah.

Waxaan ku faanayaa in la ii taageero Xisbiga Dimuqraadiga ee Deegaanka, Mashiinisteyaasha Boeing, Shaqaalaha Daryeelka Guriga, Golaha Shaqaalaha ee Degmada King iyo hoggaamiyeyaasha la soo doortay. Si kastaba ha ahaatee, taageerada ugu muhiimsan waa adiga.

## Golaha Jagada Lr. 2

### Carmen Rivera



(425) 466-4143
riveraforrenton@gmail.com
RiveraforRenton.com

**Waxbarashada:** Tiffany Park, Nelsen MS, Lindbergh HS, Seattle University, University of Liverpool

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubinta Golaha Magaalada Renton, Kaaliyaha Madaxa Jaamacadda, Kaaliyaha Barafasoor Waxbare ah, Seattle University

**Bayaanka:** Anigoo ah degane nolosheeda oo dhan ku noolaa Renton, waxbarre, iyo maareeye hore ee kiiska, waxaan u tartamayaa dib u doorasha sababtoo ah qoysaskeena waxay mudan yihiin magaalo *ammaan ah, la awoodi karo,* oo *lala xisaabtami karo.*
Waxaan ahaa Xubinta Golaha ugu horreeyay ee taageera kordhinta mushaharka ugu yar ee Renton, si loo hubiyo in shaqaalahu ay helaan shaqooyin mushahar fiican leh. Waxaan hoggaamiyey dadaallo lagu maalgelinayo ka hortagga rabshadaha dhallinyarada, lagu ballaarinayo helitaanka taageerada caafimaadka maskaxda iyo dabeecadda, oo lagu dhisayo kalsoonida bulshada iyo fulinta sharciga iyada oo loo maraayo iskaashiga ka wada-jawaabista wadajirka ah. Anigoo ah Xubinta keliya ee Golaha oo leh khibrad toos ah oo adeeg bulsho, waxaan ogahay sida nidaamyada u guuldareystaan iyo halka ay tahay in laga xoojiyo. Waxaan u dagaalamaa qoysaska shaqeeya, ganacsiyada yaryar, iyo xaafadaha leh guryo ammaan ah oo loogu talagalay dhammaan.
Waxaan ahay musharaxa keliya ee tartankaan ee ay taageereen Dimuqraadiyiinta Degmada King iyo ururada shaqaalaha. Waxaan keenaa waayo-aragnimo nololeed, qiyaam horusocod, iyo diiwaan hawlgal ah. Renton waxay mudan tahay hoggaamiyeyaal soo muuqda, dhegaysta, oo wax qabta. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

### Mary Clymer



(425) 306-3596
Mary@Clymer4Renton.com
Clymer4Renton.com

**Waxbarashada:** Lakeridge Elementary, McKnight MS, Renton HS, Central Washington University, iyo American Musical and Dramatic Academy

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha ganacsi yar ee caafimaadka iyo fayo-qabka

**Bayaanka:** Renton waxay u qalantaa hoggaan wax-ku-ool ah oo bulshada xididdo ku leh, ee aan ku dhisnayn khadadka xisbiyada. Waxaan saddex ahay Mutadawaca Sannadka ee Renton, Guddoomiyihii hore ee Fanka Renton, iyo u-doodaha magaaladeena oo aan ku faano. Sannado adeeg dadweyne iyo adeeg macaamiil ah ayaan ka bartay awoodda dhegaysiga, xal-raadinta hal-abuurka, iyo caawinaadda dadka kale.

Taageeradaydu si toos ah bay uga timaadaa derisyada, hoggaamiyeyaasha deegaanka, iyo kuwa maalgashaday mustaqbalka Renton. Waan imaadaa, waan dhegaystaa, waanan fahmaa waxa ugu muhiimsan dadka halkan ku nool oo ka shaqeeya. Waxa iga go'an xoojinta xiriirrada bulshada, taageeridda korriin fikir-leh, iyo helidda xalal wax-ku-ool ah oo ka tarjumaya baahiyaha kala duwan ee Renton. Mudnaantaydu waxaa ka mid ah badbaadada dadweynaha, taageeridda ganacsiyada yaryar, madadaalo la heli karo, iyo go'aan-qaadasho bulsho-dhexe ah oo keenta codad badan miiska.

Waxa taageeray Duqa Magaalada Pavone, Duqii hore ee Magaalada Denis Law, xubno badan oo golaha hadda iyo kuwii hore ah, mulkiileyaal ganacsi oo yaryar, iyo tiro sii kordhaysa oo xubno bulshada ah. Sharaf bay ii noqon lahayd inaan kasbado codkaaga.

## Golaha Jagada Lr. 6

### Paul Dutton



paul.dutton@futurerenton.com
www.pauldduttonforafuturerenton.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Maamulka Ganacsiga, University of Utah; BS (Shahaadada Jaamacadda) Injineernimada Macdan Qodista, Michigan Technological University

**Shaqo iyo Xirfad:** Injineer Madani oo Xirfadle ah, Ka Shahaadaysan Siddeed Gobol oo ay ku jirto Washington

**Bayaanka:** Waxaan u kacayaa sababtoo ah waxaan fahamsanahay in xaaladda hadda jirta aysan shaqeynayn. Waxaan rabaa inaan dhiso Renton oo ammaan ah, la heli karo, oo loo dhan yahay halkaas oo dhammaan dadweynaha magaalada ay heli karaan kheyraadka ay u baahan yihiin si ay u horumaraan. Magaalada Renton ayaa si degdeg ah u koraysa, waxaana ka tagaynaa qoysas badan oo shaqeeya, ganacsiyo yaryar, waayeel, soogalooti, iyo deriskeena LGBTQIA+.

Qoyskayga ayaa magaalada Renton ku noolaa tan iyo 2006. Injineer Xirfadeed oo 25 sanno ah, waxaan ka shaqeeyay mashaariic waaweyn oo Discovery Channel ah laga bilaabo waddooyinka ilaa tareenka fudud ilaa tunnelada. Waxaan fahamsanahay waxa loo baahan yahay si loo xalliyo dhibaatooyinka loona wanaajiyo nolosha dadka. Markaan dhegaysto bulshadeenna, waxaan khibraddayda u adeegsan doonaa inaan wax ka qabto arrimaha amniga, qiimaha la awoodi karo, guryaha, iyo gaadiidka ee magaalada aan jeclahay.

Waxaan ahay aabbe PTA ah, hoggaamiye hore ee Scouts, Rotarian, waxaa i taageeray Dimuqraadiyiinta Degmada King, Transit Riders Union, Washington State Progressive Caucus (Kutlada Horusocodka ee Gobolka Washington), iyo kuwo kale oo badan. Si Wadajir ah, waxaan dhisi karnaa Renton-ta mustaqbalka oo aan dhammaanteen u qalanno.

### Ruth Pérez



(206) 335-8938
ruth@ruthperezforrenton.com
www.ruthperezforrenton.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Sare ee Hoggaaminta Dowladda Hoose, Shahaadada Mastarka ee Maamulka Ganacsiga, Shahaadada Jaamacadda ee Sayniska Isgaarsiinta

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubin Golaha Magaalada Renton, mulkiilaha ganacsi yar, iyo La-taliyihii hore ee Guddoomiyaha

**Bayaanka:** Renton waxay i soo dhawweysay anigoo ah haweeney Latina ah oo soo-galooti ah, waxaana nasiib ii ahayd inaan idinku adeegayo sidii Xubin Golaha tan iyo 2014. Khibraddayda sannado badan ee Dowladda iyo u-doodista bulshada ayaa iga caawisay inaan qabto shaqooyin wax ka tara arrimaha nolol-maalmeedka: badbaadada dadweynaha, gaadiidka, deegaanka, iyo adeegyada aadanaha. Badbaadadiinnu waa mudnaantayda koowaad. Waxaan taageeray ku daridda saraakiil boolis si wanaagsan u tababaran, kamaradaha jirka, iyo jawaab-bixiyeyaasha caafimaadka dhimirka si aynu ammaan u ahaanno. Waxaan hormuud ka noqday maalgelin goboleed oo loogu talagalay jardiinooyinka, dariiqyada, adeegyada waayeelka, iyo gaadiidka. Maaddaama Degmada King iyo Gobolka Washington ay farayaan korriin dheeraad ah, waxaan dhegaystay walaacyadiinna, waxaan riixay qorsheyn maxalli ah oo caqli-gal ah oo kharash-wax-ku-ool ah, waxaanan u dagaallamay saamiga caddaaladda ah ee kheyraadka Renton. Sharaf bay ii ahaan lahayd inaan sii wado u adeegidda Renton.

Taageerooyinka: Xildhibaan  Adam Smith, Wakiil. Steve Bergquist, Duqa Magaalada Armondo Pavone, Xubnaha Golaha Prince, O'Halloran, McIrvin, Alberson; Duqooydii Magaalada ee Hore Denis Law iyo Kathy Keolker; Ururka Shaqaalah MLK; Dimuqraadiyiinta Degmada King, iyo in ka badan.

**Codeyntaadu waa mid tirsanta. Waad hubin kartaa.**

**Ka raad-raac warqaddaada codbixinta barta kce.wiki/TrackMyBallot**




**Baraheena Bulshada!**

Ka taag-garee @kcelections goobaha bulshada halka kore ku xusan waxaana laga yaabaa inaan wadaagno sawirkaaga.

**Nala wadaag sawirkaaga codeynta #VotingSelfie!**

## Garsoore Maxkamadda Dowladda Hoose Jagada Lr. 1

# Jessica Giner



(425) 466-0619
judgeginer@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka (cum laude), Seattle University; Juris Doctorate (Shahaadada Sharciga), Seattle University School of Law

**Shaqo iyo Xirfad:** Garsooraha Maxkamadda Dowladda Hoose ee Magaalada Renton

**Bayaanka:** Garsoore Giner waxay u adeegtaa Magaalada Renton iyadoo ahayd Garsooraha Maxkamadda Dowladda Hoose tan iyo 2021. Iyadoo leh 20 sano oo waayo-aragnimo sharci oo dheelitiran, waxay tahay go'aan-qaade aqoon leh oo caddaalad ah waxaana lagu qiimeeyay *"Si Aad Ugu Wanaagsan U Qalanta"* Ururka Qareennada Degmada King waxayna heshay qiimeyn sare lix urur qareen oo laga tirada badan yahay.

Garsoore Giner oo asal ahaan ka soo jeeda Koonfurta Degmada King, ayaa abuurtay barnaamijyada Maxkamadda Dowladda Hoose ee Maxkamadda Gaadiidka Dhallinyarada iyo Kalandarka Caafimaadka Maskaxda. Waxay si firfircoon ugu tabarucdaa Barnaamijka Maxkamadda Tijaabada ee YMCA, Garsooreyaasha Fasalka, iyo barnaamijyada waxbarashada madaniga ee Maalinta Dastuurka. Waxay sidoo kale ka tirsan tahay guddi heer gobol ah oo kormeera helitaanka adeegyada lagu soo celinayo kartida caafimaadka maskaxda. Garsoore Giner waxaa loo doortay Madaxweyne Ku-xigeenka Ururka Garsooreyaasha Maxkamadaha Degmooyinka iyo Magaalooyinka ee gobolka oo dhan ay doorteen garsooreyaasheeda kale.

Waxaa taageeray: Guddiga Siyaasadda Haweenka Qaranka ee Washington; Ururka Caalamiga ah ee Mashiinisteyaasha & Shaqaalaha Hawada (IAM 751); Dimuqraadiyiinta Degmada King.

## Garsoore Maxkamadda Dowladda Hoose Jagada Lr. 2

# Kara Murphy Richards



(206) 947-3852
Karamurphy@live.com

**Waxbarashada:** Notre Dame Law School, JD 1995

**Shaqo iyo Xirfad:** Maxkamadda Dowladda Hoose ee Renton, Garsooraha Guddoominaya

**Bayaanka:** Garsoore Murphy Richards waxay rajeynaysaa inay sii waddo u adeeggida Renton. Waxaa 2019 magacaabay Mayor Law (Hawlgabay) si loo bilaabo Maxkamadda Bulshada (Community Court) ee ugu horreysay Renton, waxaana la doortay 2021. Kara waxay leedahay xirfad adeeg dadweyne oo ku dhawwaad 40 sanno ah. Waxay u soo shaqeysay sida Shaqaale Bulsho, Sarkaal Kormeere (Probation Officer), U-doodaha Dhibaneyaasha Rabshadaha Qoyska, Qareenka Xeer Ilaalinta, iyo Garsoore ku-meel gaar (Pro Tem) ahaan. Waxay si adag uga shaqeysay in maxkamadda loo geeyo fasallada iyo bulshada, isla markaana bulshada iyo fasalladaba lagu soo dhawweeyo qolka maxkamadda iyada oo loo marayo dhacdooyin sida Maalinta Dastuurka, Maalinta Sharciga, iyo tartamo maxkamadayn majaajillo ah oo kala duwan.

Kara iyo ninkeeda Craig waxay ku nool yihiin Renton Highlands. Waxay leeyihiin lix carruur ah, lix awoowe/ayeeyo u yihiin iyo afar ey oo la jecel yahay. Kara, oo hore uga mid ahayd guddiga Mary's Place iyo Athletes for Kids (Xarunta Mary iyo Ciyaartoyda Taageera Carruurta), waxay sidoo kale ku raaxaysataa inay ka hadasho mowduucyo kala duwan.

## Golaha Jagada Lr. 2

### Takele Gobena



(206) 532-9617
takele2015@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Siyaasadda, Falsafadda, Dhaqaalaha iyo Taqasus Yar Ganacsiga ee University Of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Wakiilka Ururka Shaqaalaha, Kooxlaha Ururka Shaqaalaha

**Bayaanka:** SeaTac waxay u qalantaa hoggaamiye u heellan oo si aan daal lahayn uga shaqeeya ilaalinta amniga bulshadeenna, ka dhigidda adeegyada magaalada kuwo si hufan uga jawaaba, iyo maalgelinta mustaqbalkeenna. Waxaan iga go'an ballaarinta adeegyada muhiimka u ah waayeelka, kordhinta doorashooyinka guryaha la awoodi karo, dejinta kirada, taageeridda barnaamijyada dugsiga ka dib ee carruurteena, iyo awood-siinta ganacsiyada yaryar si ay u koraan.

Afartii sano ee aan golaha ka tirsanaa, waxaan keenay waayo-aragnimo nolol-dhab ah iyo ballanqaad xooggan oo adeegga dadweynaha ah, waxaanan horumarinay magaaladeenna. Anigoo ah Guddoomiyaha Maamulka & Maaliyadda iyo xubin ka tirsan gudiyada Badbaadada Dadweynaha, Gaadiidka, iyo Marinnada Lugeeyayaasha (Sidewalks), waxaan ka shaqeeyay ballaarinta marinnada lugeeyayaasha, taageeridda ganacsiyada yaryar intii lagu jiray faafiddii COVID-19, ballaarinta barnaamijyada waayeelka, iyo isu-dheellitirka miisaaniyadda—iyada oo aan la kordhin canshuurta hantida.

Aniga oo ay degganeyaasha SeaTac, ururrada shaqaalaha, hoggaamiyeyaasha maxalliga ah, iyo milkiilayaasha ganacsiyada yaryar igu taageerayaan, waxaan diyaar u ahay inaan sii difaaco mustaqbalka ifaya ee SeaTac. Wadajir, waxa aynu dhisi karnaa bulsho ka ammaan badan, ka xoog badan, oo ka firfircoon. Si xushmad leh ayaan u codsanayaa codkaaga.

### Caitlin Konya



konyaforseatac@gmail.com
www.electkonya.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Cilmiga Adabka - University of Washington, Shahaadada Mastarka ee Daryeelka Bulshada - University of Denver

**Shaqo iyo Xirfad:** Shaqaalaha Bulshada ee Cilmi-nafsiga

**Bayaanka:** Waxaan ahay shaqaale bulsho oo gobolka ah waxaanan u soo shaqeeyay Guddiga La-talinta Adeegyada Bulshada ee SeaTac labadii sanno ee la soo dhaafay. Khibraddayda xirfadeed iyo tan tabarucaadda waxay si gaar ah iigu qalansiiyan inaan dadka isu keeno, xal u helo dhibaatooyinka adag, iyo inaan si mas'uuliyad leh u maamulo lacagta canshuur bixiyeyaasha. Waxaan u tartamayaa inaan magaalada SeaTac ka dhigo tusaale sida magaalooyinka yaryar ay ugu istaagi karaan deganeyaashooda. Deganeyaasha SeaTac waxay la kulmayaan sicir barar ku saabsan nolosha, kaabayaasha dadweynaha oo aan la maalgelin, badqabka gaadiidka/lugta, iyo dareenka in codkooda aan laga maqlin hoolka magaalada. Waxaan samayn karnaa si ka wanaagsan. SeaTac waa wax ka badan xarun gaadiid. 30% ee aagga SeaTac waa garoonka diyaaradaha, laakiin in ka badan 30,000 oo qof ayaa halkan ku nool. Waxaan u adeegsan doonaa wakhtigayga Golaha Magaalada si aan u hubiyo in codadka deganeyaashayada la maqlo marka hore oo aan diiradda saaro natiijooyinka. Taageerooyinka: Ururka Shaqaalaha MLK, Senatar Orwall, Wakiil Obras, Dimuqraadiyiinta Degmada 33aad, Kutlada Siyaasadda Haweenka WA, Golaha WFSE 28, AIM 751, Dab-damiyeyaasha Puget Sound L1747, iyo in ka badan.

## Golaha Jagada Lr. 4

### Isabelle Kerner



(206) 271-1560
isabelle@kernerforcouncil.com
www.kernerforcouncil.com

**Waxbarashada:** American University, Shahaadada Jaamacadda Sayniska Siyaasadda iyo Farshaxanka Istuudiyaha, EC-Council, Mastarka Anshaxa ee Jabsada Xogta oo Shahaadeysan (Master's of Certified Ethical Hacking)

**Shaqo iyo Xirfad:** Baaraha Gaarka ah, Mulkiilaha Ganacsiga Yar

**Bayaanka:** Magaalada SeaTac waa magaalo bulshooyin kala duwan leh oo firfircooni lagu yaqaan. Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada SeaTac si aan uga dhabeeyo in *koritaanka dhaqaalaha ee SeaTac uu si siman uga faa'iidaysto dhammaan deganeyaasha*. Hadafkaygu waa in aan *si dhab ah u matalo dadka magaalada SeaTac*.

Waxaan taageersanahay *in la maalgeliyo xalalka dhimmista buuxa* sida daaqadaha laba iyo saddex-lakab ah si loo *yareeyo saameynta garoonka diyaaradaha ku leeyahay deganeyaasha ku nool halka ama hareeraha waddada duulimaadka*. Waxaan la shaqeyn doonaa hoggaamiyeyaasha kale ee dowladda iyo dekedda Seattle si aan u horumarinno *qorsheyaal joogto ah oo lagu yaraynayo buuqa*.

Ka Xubinta Golahaaga ahaan, waxaan u ololayn doonaa hab *ku saleysan xogta, diiradda saaraya bulshada* oo *mudnaanta siinaya amniga dadweynaha, guryaha la awoodi karo*, iyo *qorsheynta magaalooyinka istaraatiijiga ah* iyadoo *la hubinaayo in qoysaska shaqaalaha iyo waayeelka ku nool dakhli go'an ay aan laga saarin bulshadeenna*. Haddii la i doorto, waxaan sii wadi doonaa dhaqanka Peter Kwon ee *habeennada pizza ee Ulysses kadib kulamada Golaha Magaalada*. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan helo codkaaga oo kuma niyad jebin doono.

### Mohamed Egal



(206) 566-8048
egalforseatac@gmail.com
www.egalforSeaTac.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Cilmiga ee Jaamacadda Lafole College

**Shaqo iyo Xirfad:** Duqa Magaalada SeaTac iyo Xubin ka tirsan Guddiga Maamulka Dab-damiska ee Puget Sound

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ah in aan u adeego sida duqaaga magaalada! Maalin kasta, waxaan ka shaqeeyaa sidii aan u horumarin lahaa magaaladeenna.

Si wadajir ah, waxaan shaqaaleysiinaynaa saraakiil booliis oo dheeraad ah oo waxaan maalgelin ku sameyneynaa barnaamijyo si ay u siiyaan qalab ka jawaabeyaasha ugu horreeya si ay uga caawiyaan dadka xaaladaha degdegga ah. Waxaan nahay mas'uuliyiin ka mas'uul ah maalgelinta magaalada anagoo ilaalinayna keyd caafimaad oo ka badan $30 milyan iyada oo aan la kordhin canshuuraha hantida ama adeegyada. Waxaan la shaqeynaynaa Dekedda si aan u sugo Jardiinka North SeaTac jiilalka mustaqbalka. Waxaan maalgelin ku sameyneynaa guryaha la awoodi karo, adeegyada waayeellada, horumarinta shaqaalaha, iyo daryeelka carruurta.

Waxaa si sharaf leh ii taageeray Guddoomiye Ferguson, Ku-xigeenka Guddoomiyaha Heck, Xildhibaan Smith, Duqa Magaalooyinka Tukwila, Normandy Park, iyo Des Moines, shan xubnood oo ka tirsan Golaha Magaalada SeaTac, iyo dhammaan ergada Degmada 33aad ee Golaha Sharci-dejinta. Waxaa i taageeray Dimuqraadiyiinta KC, Ururka Shaqaalaha MLK, Ururka Dab-damiyeyaasha Local 1747, WEA, Waalidnimada La Qorsheeyay, iyo kuwo kale oo badan. Waxaa jira waxyaabo badan oo kale oo aan wada gaari karno. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan helo codkaaga.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

## Golaha Jagada Lr. 6

### Bedria Abdullahi



(425) 470-2954
Bedriaforseatac@gmail.com

**Waxbarashada:** University of Washington, Shahaado Jaamacadeedka Isgaarsiinta iyo Cilmiga Siyaasadda

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha Fulinta, SeaTac Senior Support Systems (Nidaamyada Taageerada Waayeelka)

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa golaha magaalada sababtoo ah magaaladeenu waxay u baahan tahay inay noqoto mid maskax leh, loo dhan yahay, oo ku saleysan baahida bulsho kasta oo SeaTac ugu yeerta guri.

Waxaan gaarnay horumar macno leh oo ku aaddan himilooyinkeenna wadaagga ah; ku dhawwaad labanlaabidda awooddeena daryeelka carruurta, hirgelinta barnaamijyo muhiim ah oo horumarinta dhaqaalaha ah, dhisidda guryo nooc walba leh, muujinta ujeeddadeena xooggan ee ah inaan ka ilaalino North SeaTac Park horumarinta dekedda, iyo waxyaabo kale oo badan.

Waxaan taageeri doonaa siyaasado wax ku ool ah oo keenaaya natiijooyin muuqda oo ku aaddan dhammaan deganeyaasha: kordhinta tirada guryaha la awoodi karo iyo kuwa dhexe, abuurista amniga xaafadaheena gudahooda, diidmada in deganeyaasheena qaadaan culaysyo canshuur dheeraad ah, iyo ilaalinta adeegyadeena dabiiciga ah iyo jardiinooyinkeena. Waxaan ku faanayaa inay i taageeraan: Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci-dejinta ee 33aad, Duqa Magaalada Mohamed Egal, Xildhibaan Jake Simpson, Xildhibaan James Lovell, iyo tobanaan waalidiin, shaqaale, hoggaamiyeyaal bulshada, iyo in ka badan. Waxaan jeclaan lahaa inaan kasbado taageeradaada.

### Michael Sanford



(206) 290-5765
Mwsanford@live.com

**Waxbarashada:** Highline CC--Ururka Maamuuska, Tababar gaar ah oo Militari--19D, 11H, 11M BFV, 96R Raadaarka Kormeerka Dhulka

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha/Hawl Wade Hawlgabay ee ganacsiyo maxalli ah iyo kuwa caalami ah labadaba

**Bayaanka:** Nolosheyda waxaa lagu qeexay adeeg—dalkeyga, bulshadeyda, iyo deriskeyga. Waxaan u tartamayaa Golaha SeaTac si aan u sii wado ballanqaadkaas. Degane Degmada King ah oo ku faanaya tan iyo 1961, waxaan ku noolaa SeaTac in ka badan toban sanno waxaanan ka soo shaqeeyay doorar hoggaamineed inta nolosheyda ah, laga bilaabo Saajin Heerka Koowaad ee Ilaalada Qaranka ee Gobolka Washington ilaa Madaxweynaha Ururka Mulkiileyaasha Guryaha ee Bow Lake.

Ka mulkiile ganacsi yar iyo la-taliye amni ahaan, waxaan fahamsanahay muhiimadda ay leedahay nabadgelyada, kobaca dhaqaalaha, iyo awood-siinta maxalliga ah. Intii lagu jiray cudurka faafa, waxaan hoggaamiyey mashruuc qiimeyn ku saabsan la macaamilka dadka hoy la'aanta ah si aan ugu xiro shakhsiyaadka nugul adeegyo muhiim ah. Waxaan sidoo kale hoggaamiyey dadaallo lagu caawinayo ganacsiyada si ay u yareeyaan khasaaraha una kordhiyaan faa'iidada iyada oo loo maraayo xalal amni oo hal-abuur leh, oo ay ku jiraan teknolojiyada diyaaradaha aan duuliyaha lahayn.

Waxaan u adeegsan doonaa waayo-aragnimadayda xirfadeed iyo tan nolosha si aan SeaTac uga dhigo mid ka sii wanaagsan sidii ay ahayd maanta. Fadlan iga caawi inaan gaaro yoolkan. U codee Michael Sanford ee ku aaddan Golaha SeaTac.

# Seattle/Degmada King

## HAGAHA CODBIXIYEYAASHA OO FIDIYOOW AH

*Taageerayaasha iyo kuwa ka soo horjeeda ee degmada oo dhan iyo cabbirrada warqadda codbixinta ee Seattle iyo dhammaan degmada King oo dhan, Golaha Degmada King ee Magaalo Weynta, Dekedda Seattle, Magaalada Seattle, iyo musharaxiinta Guddiga Dugsiga Seattle waxaa lagu martiqaaday inay duubaan muuqaal laba daqiiqo ah oo sharaxaaya cidda ay yihiin iyo sababta ay u tartamayaan.*

- ☑ **Si toos ah uga dhegayso musharaxiinta!**
- ☑ **Bayaannadu waa ilaa iyo laba daqiiqo oo lama tafatirin**
- ☑ **Musharaxiinta waxay u kala horeeyaan sida ay ugu qoran yihiin warqadda codbixinta**

**seattlechannel.org/elections**




**Hagaha Codbixiyeyaasha ee Fiidiyowga ah ee aan xisbina raacsanayn waa wada shaqeynta Guddiga Anshaxa iyo Doorashooyinka ee Seattle, TV-ga Degmada King, iyo Janaalka Seattle.**

# Duqa Magaalada

## Katie Wilson



info@wilsonforseattle.com
wilsonforseattle.com

**Waxbarashada:** Baratay fiisigiska iyo falsafadda ee Balliol College, Oxford University

**Shaqo iyo Xirfad:** Aasaasaha iyo Agaasimaha Fulinta ee Ururka Rakaabka Gaadiidka (Transit Riders Union)

**Bayaanka:** Siyaasiyiinta xirfadleyaasha ah waxay rabaan inay ilaaliyaan xaaladda hadda jirta, laakiin way caddahay in xaaladda hadda jirta aysan shaqeynayn. Seattle waa magaalo weyn, laakiin waxay noqonaysaa mid aan lagu noolaan karin. Qoysaska shaqeeya way dhibban yihiin. Dad ka badan kuwii hore abid ayaa hoy la'aan ah. Waxaan u qalannaa duq magaalo oo aan ku mashquulin musuqmaasuq iyo fadeexado, mid diiradda saaraya wax ka qabashada caqabadaha waaweyn ee Seattle wajahayso: kharashka nolosha oo cirka isku shareeray, hoy la'aanta, amniga guud, iyo weerarrada naxariis darada ah iyo fowdada ah ee Trump.

*Tani waa magaaladiina —wax fiicanna waan ka samayn karnaa.*

Waxaan waayahayga shaqo ku qaatay inaan la dagaalamo dadka ka shaqeeya magaaladeena si aan ugu guuleysano guulo waaweyn oo loogu talagalay qoysaska shaqeeya: mushaharka ugu yar ee dalka ugu sareeya, ilaalin xooggan oo loogu talagalay kiraysteyaasha, qiimeyaal la awoodi karo oo loogu talagalay rakaabka gaadiidka, iyo canshuurta taariikhiga ah ee JumpStart ee shirkadaha hodanka ah, taas oo ka hortagtay gooymo wax burburin kara intii lagu jiray cudurka faafaha (pandemic).

Ka duqa magaalada ahaan, waxaan abuuri doonaa 4,000 oo unug oo guri degdeg ah si loo yareeyo hoy la'aanta. Waxaan maalgelin doonaa beddelka jawaabta booliiska ee wicitaannada aan rabshadaha lahayn si SPD ay diiradda u saarto dambiyada culus. Waxaan ballaarin doonaa daaweynta caafimaadka maskaxda iyo balwadda. Waxaan taageeri doonaa ganacsiyada yaryar oo abuuri doonaa shaqooyin wanaagsan oo cagaaran. Waxaan sii xoojin doonaa guulaha aan u keenay shaqaalaha magaaladeena, waxaanan kordhin doonaa dakhliga cusub ee horusocodka ah si aan u ilaalino bulshooyinka nugul ee ka hortagga gooymaha Trump. Codbixiyeyaasha waxay laba jeer si aqlabiyad leh u taageereen guryaha bulshada, si weyn; Seattle waxay u qalantaa duqa magaalada oo ka shaqeyn doona sidii ay u guuleysan lahayd, ee ma aha mid burburinaya.

Seattle waxay yeelan kartaa guryo badan oo la awoodi karo, meelaha dadweynaha oo wanaagsan, dugsiyo tayo sare leh, gaadiid dadweyne oo heer caalami ah, iyo xaafado firfircoon. Uma baahnid dakhli lix-lambare ah si aad halkan gurigaaga ugu dareento. Tani waa magaaladiina — magaalo aan wada dhisi karno.

Haddii aad i siiso codkaaga, waxaan heli karnaa halyeey dhab ah oo u taagan qoysaska shaqeeya iyo dhisaha isbahaysiga ee xafiiska duqa magaalada. *Waxaa taageeray Dimuqraadiyiinta Degmada King, UAW 4121, iyo kuwo kale oo badan oo ku qoran wilsonforseattle.com/endorse.*

## Bruce Harrell



(206) 569-8486
info@bruceforseattle.com
bruceforseattle.com

**Waxbarashada:** University of Washington, BA (Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka) iyo Dugsiga Sharciga; Seattle City University, MA (Shahaadada Mastarka); Garfield High School (Valedictorian [Heerka tacliineed ee ugu sareeya fasalkooda qalin-jebinta])

**Shaqo iyo Xirfad:** Duqa Magaalada Seattle; Xubin hore oo Golaha Magaalada; Qareen Xuquuqda Madaniga ah, Ganacsiga Yar

**Bayaanka:** Waxaan ku faanayaa inaan hoggaamiyo magaalada Seattle oo midaysan oo ka soo horjeeda arxan-darrada federaalka, waxaana maalgelinayaa helitaanka guryo la awoodi karo, amniga, iyo hoyga. Aynu sii dhisno horumarka aan gaarnay: 3,000 oo guri degdeg ah oo cusub oo dadka gudaha loogu keenaayo adeegyo, in ka badan 6,000 oo guri oo la awoodi karo, xalal cusub oo amniga dadweynaha ah, labanlaabidda daryeelka carruurta ee la awoodi karo, iyo dakhliga cusub ee horumarka ah si loo ilaaliyo maalgeshiyada guryaha.

Waxaan ku soo barbaaray magaalada Seattle anigoo ay i dhashay hooyo Jabaanees ah oo la xiray intii lagu jiray WWII iyo aabbe Madow ah oo kasoo baxsaday Koonfurta Jim Crow, ka hortagga naceybka Trump waxay ii tahay arrin shakhsi ah aniga. Waxaan difaacay xuquuqda haweenka, soo galootiga, iyo deriska LGBTQ+.

*Tallaabada Guriyeynta*: Sida Duqaaga Magaalada ahaan, waxaan keenay 33,000 oo guryo cusub ah, waxaan ku maalgeliyay in ka badan $1 bilyan guryo la awoodi karo oo taageero leh, waxaan hoos u dhigay teendhooyinka 80%, waxaanan saddex jibaaray kor-u-qaadista canshuurta guryaha. Si aan u sii wado horumarkaan– waxaan ka takhalusi doonaa caqabadaha dhismaha, waxaan awood siin doonaa horumarinta in ka badan 100,000 oo guryo qoysas cusub ah, waxaanan sii wadi doonaa wax ka qabashada hoy la'aanta anigoo adeegsanaya degdeg iyo naxariis.

*Amniga La Hagaajiyay:* Waxaan abuuray Waaxda CARE, waxaan shaqaaleysiiyay boqolaal saraakiil ah si aan dib ugu dhiso SPD, waxaana hoos u dhacay dambiyada iyo dhimashada xad-dhaafka ah ee daroogada. Waxaan sii wadi doonaa ballaarinta jawaabaha kale ee caafimaadka dabeecadda iyo adeegyada la xiriira balwadda, anaga oo soo xulaneyna saraakiil ka tarjumaya bulshadeenna kala duwan. Ma awoodno inaan dib uga laabanno ammaanka.

*Gargaarka Qoysaska*: Anigoo garab taagan shaqaalaha, waxaan ilaaliyay kordhinta mushaharka ugu yar ee aan si sharaf leh uga qayb qaatay wada xaajoodkooda. Canshuuraha Trump, sicir-bararka, iyo dhimmista federaalka ayaa kordhiyay qiimaha oo saameeyay shaqooyinka, laakiin waxaan qaadaynaa tallaabo: labanlaabidda daryeelka carruurta ee la awoodi karo - iyadoo ujeeddadu tahay helitaanka guud ee qoysaska dakhligoodu hooseeyo - iyo dhimmista canshuuraha ganacsiyada yaryar.

Rikoodhkayga iyo hoggaamintayda waxaa taageeray Xildhibaan Pramila Jayapal, Guddoomiye Ferguson, Xeer Ilaaliyaha Guud Brown, Ururka Shaqaalaha MLK, SEIU775, Shaqooyinka Dhismaha, Dab-damiyeyaasha Seattle, Seattle Times, Hoggaamiyeyaasha Dimuqraadiga, Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka, iyo in ka badan.. *Waxaan si qoto dheer u daneeyaa magaalada Seattle - waxaanan keenni doonaa wax awooditaanka aan u baahanahay iyo ilaalinta xuquuqda aan u baahanahay inaan ilaalinno.*

# Qareenka Magaalada

## Erika Evans



(206) 382-5552
info@electerikaevans.com
www.ElectErikaEvans.com

**Waxbarashada:** Kaaliyihii Hore ee Xeer Ilaaliyaha Guud ee Mareykanka, Kaaliyaha Qareenka Magaalada–Dambiga, Madaniga

**Shaqo iyo Xirfad:** JD (Shahaadada Sharciga), Seattle University; BA (Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka), University of Washington

**Bayaanka:** Magaalada Seattle waxay u qalantaa Qareen Magaalo oo la wadaagga qiyaamkeena, nagu hayn doona ammaan, oo *had iyo jeer* u istaaga xuquuqdeena. Waxaan u tartamayaa inaan keeno amniga dadweynaha ee dhabta ah—anigoo mas'uul ka ah dambiileyaasha rabshadaha wata iyo wax ka qabashada sababaha asaasiga ah ee sii wadaya dambiyada iyo waxyeellada. Waxaan xirfaddayda ku qaatay inaan u dagaalamo dhibaneyaasha rabshadaha, carruurta, iyo bulshooyinka aan matallaad ku filan helin. Waxaan maxkamadeeyay xatooyada mushaharka, dambiyada nacaybka, iyo waxaan la xisaabtamay kuwa ka ganacsada hubka iyo Fentanyl-ka.

Waxaan ahay musharaxa kaliya ee leh khibrad sida dacwad oogaha magaalada iyo federaalka ahaan, qareen difaaca madaniga ah ee Magaalada Seattle, iyo sida garsoore ku meel gaar ah. Waan ogahay in sharcigu uusan keliya ku saabsaneyn ciqaabta—waa ku saabsan caddaaladda, isku dheelitirka la xisaabtanka iyo naxariista.

Waxaan ku soo barbaaray qoys urur shaqaale ah oo ku saleysan xuquuqda madaniga ah iyo caddaaladda dhaqaale. Awoowgay, oo ahaa shaqaale beereed, ayaa markii dambe isticmaalay madashiisa Olombikada ee 1968 si uu ugu istaago xuquuqda madaniga ah iyo xuquuqul insaanka. Hooyaday waxay ahayd shaqaale dhisme iyo shaqaale bulsho. Aabbahay waa darawal gaadiidka dadweynaha oo ku faana. Waxay i tuseen qiimaha shaqada adag, caddaaladda, iyo geesinimada.

Haddii aan helo codkaaga, waxaan keenni doonaa isbeddel loo baahan yahay ee xafiiskan: waxaan soo celin doonaa Maxkamadda Bulshada ee ka caawisa dib-u-habeynta nolosha, waxaan soo afjari doonaa dib-u-dhacyada aan la aqbali karin ee dacwadaha rabshadaha guriga iyo kiisaska DUI, waxaanan ka hortagi doonaa rabshadaha hubka. Waxaan ka tagay shaqadaydii Kaaliyaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Mareykanka markii Trump xafiiska qabtay. Waxaan u baahanahay Qareen Magaalada ah oo si xamaasad leh iyo mabda' leh u difaaca xuquuqdeena iyo sharciga—ma aha ku habboonaanta siyaasadeed.

Si sharaf leh waxaa u taageeray: Xeer Ilaaliyaha Guud ee Gobolka Washington Nick Brown; Xildhibaan Pramila Jayapal, Xeer Ilaaliyaha Degmada King Leesa Manion; Xubnaha Golaha Mosqueda, Zahilay; Guddoomiyeyaasha Dekedda Cho, Calkins, Hasegawa; Xubnaha Golaha Magaalada Rinck, Hollingsworth, Juarez; Ururka Shaqaalaha MLK, ATU587, UFCW3000, SEIU775 & 1199; Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka; Dimuqraadiyiinta Degmada King & Degmada, Sharci-dejiyeyaasha; in ka badan 100 hoggaamiye sharci, xuquuqda madaniga, iyo in ka badan!

*Aan dhisno Seattle ammaan ah, oo caddaalad badan—si wadajir ah.*

## Ann Davison



(206) 257-2206
info@neighborsforann.com
www.neighborsforann.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Cilmi-nafsiga, Baylor University; J.D. (Shahaadada Sharciga), Willamette University College of Law

**Shaqo iyo Xirfad:** Qareenka Magaalada Seattle, macallin caalami hore, qareen labaatan-sanno ah, gar-qaade

**Bayaanka:** Waxaan ahay qof aan ku jirin deegaanka siyaasadeed ee magaalada Seattle, iyo tan iyo markii aan si lama filaan ah la iigu doortay 2021, waxaan hoggaaminayay dagaalka lagu hagaajinayo wixii ay gudaha magaalada ku burburiyeen. Waxaan Seattle ka dhigay mid ammaan ah waxaanan isticmaalayaa miisaanka buuxa ee xafiiskayga oo ka soo horjeeda hanjabaadaha Trump si loo ilaaliyo bulshooyinkayada.

Dadka siyaasadda u dhuun daloola ee jebiyay Magaaladeena waxay rabaan inay "xafiiska dib ugu celiyaan" wakhtigii ka horreeyay intaan la ii dooran, iyadoo dambiyada si xad dhaaf ah u socdaan iyo dambiileyaal soo noqnoqda oo la sii daayo. Shaqada ima aysan keennin dad wax u dhuun daloola. Waxaan u tartamay sababtoo ah ma aanan awoodin inaan fadhiisto oo daawado magaalada Seattle oo sii galeysa fowdo. Waxaan ku faanayaa inaan ahay haweeneydii ugu horreysay ee Seattle, iyo hooyo ah, ee u adeegta sidii Qareenka Magaalada.

Tan iyo markii aan xafiiska la wareegay, waxaan qaaday tallaabo geesinimo leh si aan u baabi'iyo shabakadaha ka ganacsiga dadka ee Aurora, carqaladaynta suuqyada daroogada hawada furan, oo aan bilaabay Beddelka Dacwad-qaadista Maandooriyaha, bixinta dariiqooyinka daaweynta.

Marka laga hadlayo la xisaabtanka shirkadaha, waxaan ka helay $160 milyan Monsanto sababtoo ah sunta ay ku daadiyeen Duwamish, waxaanan dacweeyay Kia/Hyundai sababtoo ah waxay fududeeyeen in la xado baabuurtooda ugu jaban. Xagga rabshadaha hubka, waxaan soo jeediyay sharci uu Goluhu si wadajir ah u ansixiyay. Abuuritaanka sida keliya shisheeye siyaasadeed uu samayn karo, waxaan u keenay daahfurnaanta xogta nidaamkayaga caddaaladda dambiyada, hadda tusaale u ah qaranka, waxaanan ku riixay gobolka si loo hagaajiyo dib u dhaca baaritaanka dhiiga ee DUI si loo ilaaliyo waddooyinkeena.

Guusha aan ku maamulay xafiiska ayaa keentay in aan helo taageero ka timid Guddoomiyeyaashii hore Gregoire iyo Locke, Xildhibaan Adam Smith, Xeer Ilaaliyeyaasha Degmooyinka King iyo Pierce, Rev. Harriett Walden, Baaderiga Aaron Williams, Dab-damiyeyaasha Seattle iyo Ururada Dhismaha, inta badan Golaha Magaalada, iyo garsooreyaal hawlgab ah.

Magaalada Seattle waxay ku socotaa jihada saxda ah, laakiin dib uguma noqon karto sidii hore markii aanan lahayn isla xisaabtanka aqalka magaalada ama waddooyinkeena. Is weydii: Seattle miyay ka wanaagsan tahay sidii ay ahayd afar sanno ka hor? Waxaan haynaa shaqo badan waxaanan rajeynayaa inaan sii wado wixii aan bilownay.

# Golaha Degmada Lr. 2

## Eddie Lin



hello@linforseattle.com
www.linforseattle.com

**Waxbarashada:** J.D. (Shahaadada Sharciga), Seattle University School of Law (Digsiga Sharciga ee Jaamacadda Seattle); B.A. (Shahaadada Jaamacadda) Barashada Bariga Aasiya, Macalester College.

**Shaqo iyo Xirfad:** Kaaliyaha Qareenka Magaalada, Xafiiska Guriyeynta ee Seattle.

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa inaan hubiyo in Chinatown International District (Degmada Caalamiga ah ee Chinatown) iyo Dhanka Koonfurta ay cod xooggan ku yeeshaan Golaha Magaalada. Bulshadeenna waxay u baahan tahay xalal wax ku ool ah oo ku saabsan awoodda wax iibsiga, ammaanka dadweynaha, dhimmista hoy la'aanta, iyo taageeridda dugsiyadeena dadweynaha. Waan ogahay in dadku ka niyad jabsan yihiin maqnaanshaha degdegga ee Magaalada, aniguna sidoo kale waan ahay.

Mudnaantayda ugu sareysa waa in la dhimmo kharashka guryaha iyo in la kordhiyo fursadaha guryaha. Sida qareen ka tirsan Xafiiska Guryaha ee Seattle ahaan, waxaan caawiyay maalgelinta kumanaan guryo la awoodi karo oo loogu talagalay dadka Seattle, laakiin hada ayaan bilaabay, sida wargeyska the Stranger ku sheegtay taageeradooda, "Marka ay timaado arrimaha guryaha, iyo dhismaha kuwo badan, Lin wuu yaqaan shaqadiisa."

Waxaan si sharaf leh u guursaday macallin dugsiga dadweynaha ah waxaana ku soo korinay carruurteena Beacon Hill. Sida wiil uu dhalay soo galooti Taiwanese ah, waxaan la kulmay takoorka waxaanan la dagaalami doonaa inaan difaaco bulshooyinka soo galootiga iyo LGBTQIA+. Markaan dhiganayay jaamacadda, waxaan ku tiirsanaa kaalmo dhaqaale waxaanan ka shaqeyn jiray ranjiyeynta guryaha iyo nadiifinta. Ka dib markii aan u guuray Seattle, waxaan ka shaqeeyay dukaan rooti, dukaanka buugaagta, iyo sida dadka wax ku qaada baaskiilka, waxaanan ogahay in loo baahan yahay in qofka hal shaqo ay tahay ay ku filnaato noloshiisa.

Iyadoo miisaaniyadda magaalada ay hoos u dhac ku soo fool leedahay iyo qalalaasaha heer federaal, waxaan u baahanahay hoggaamiyeyaal khibrad leh oo fikir badan si ay u keenaan horumar macno leh. Waxaan canshuur ku soo rogi doonaa shirkadaha hodanka ah iyo dadka aadka u taajirsan si aan u maalgeliyo baahiyahayaga muhiimka ah.

Waxaan aaminsanahay in la helo hab dhammaystiran oo lagu sugo ammaanka dadweynaha: maalgelinta guryaha, adeegyada bulshada, dugsiyada dadweynaha, iyo ururada ku saleysan bulshada ee si dhow ula shaqeeya dhallinyarada iyo qoysaska. Waxaan ballaarin doonaa barnaamijyada keena shaqaalaha bulshada iyo xirfadlayaasha caafimaadka maskaxda ee wicitaanada 911, waxaanan ku adkaysan doonaa in la kordhiyo isla xisaabtanka booliiska iyo in la shaqaaleysiiyo saraakiil badan oo ka soo jeeda, una adeegga, bulshadeenna kala duwan.

Taageerooyinka: Senatarrada Gobolka Rebecca Saldaña iyo Emily Alvarado, Wakiilka Gobolka Velma Veloria (hawlgab), Madaxweynaha Guddiga Dugsiga Gina Topp, The Stranger, The Urbanist, iyo qaar kale oo badan oo ku sugan LinforSeattle.com.

## Adonis Ducksworth



(206) 495-5597
info@adonisforseattle.com
www.adonisforseattle.com

**Waxbarashada:** B.A. (Shahaado Jaamacadeedka), Waxbarashada Magaalooyinka, University of Washington - Tacoma; M.P.A., University of Washington - Seattle

**Shaqo iyo Xirfad:** La-taliye Sare ee Siyaasadda, Magaalada Seattle

**Bayaanka:** Sida deris muddo dheer oo Koonfur-bari Seattle ahaan, xubin ka tirsan ururka shaqaalaha, khabiir gaadiidka dadweynaha, iyo hoggaamiyaha wacyigelinta bulshada - xididdadaydu waxay si qoto dheer ugu xiran yihiin Degmada 2. Waxaan u tartamayaa inaan Southeast Seattle ka dhigo mid la awoodi karo, ammaan ah, oo soo dhawweyn leh carruurteena iyo qoysaskeena, anigoo horumarinaya siyaasado ku saleysan qiyamka wadajirka ah ee ixtiraamka kala duwanaanshaha, rumeysnaanta sinnaanta, iyo ballanqaadka in la wada darso qof walba.

Si wadajir, waxaan awoodnaa: Inaan *Joojinno Rabshadaha Hubka* anagoo maalgelin ku samaynayna taageerada qoysaska, kobcinta ee dugsiga ka dib, barnaamijyada xallinta khilaafaadka iyo ka leexinta; Inaan Hoy siino kuwa *Hoy La'aanta* anagoo maalgelin ku samaynayna adeegyada ka hortagga hoy la'aanta oo dadka si degdeg ah gudaha loogu soo celiyo; *Dhisitaanka Guryo Dadku Awoodi Karaan* anagoo abuurayna oo maalgelin ku samaynayna fursadaha guryo buuxiya baahiyaha kiraysteyaasha, shaqaalaha, qoysaska, iyo waayeellada; *Inaan Joojinno Dadka Xawaaraha Ku Socda* Rainier Ave iyo MLK, oo aan mudnaanta siino gaadiidka dadweynaha, badbaadada dadka lugaynaya, iyo baaskiilada; *Inaan Ilaalino Xuquuqdeena* anagoo hor istaagayna Trump.

Waxaan ku soo koray Beacon Hill triplex (dhismo saddex qoys) anigoo ay hooyaday kaligeed igu korisay iyadoo qabatay laba shaqo. Waxaan ka shaqeeyay Jefferson Park Golf Course iyo kooxda SuperSonics anigoo ahaa wiil kubadda qaada. Waxaan si fiican u garanayaa muhiimadda ay leedahay hoy deggan oo la awoodi karo oo loogu talagalay qoysaska shaqeeya, waxaana ka dhigi doonaa hoyga mudnaantayda koowaad.

Waxaan ku soo laabtay jaamacadda anigoo 30 jir ah anigoo ka faa'iideystay Barnaamijka Tababarka Shaqaalaha, waxaana maanta ku noolahay Rainier Beach anigoo la jooga xaaskeyga, oo horey u ahayd qareen dadweyne, iyo labada gabdhood ee aan dhalay. Doorkayga Magaalada, waxaan dadka isugu keenaa maalgeshiyada siyaasadeed ee muhiimka ah oo ay ku jirto canshuurtii guuleystay ee gaadiidka sannadkii hore. Waxaan ahay u doodaha bulshada ee caafimaadka iyo badbaadada dhalinyarada.

Taageerooyinka: Dimuqraadiyiinta u ololeeya Kala-duwanaanshaha iyo Isdhexgalka, Dimuqraadiyiinta Dhallinyarada ee Degmada King; Haweenka Midabka leh ee Siyaasadda; ATU587 Hawl-wadeennada Gaadiidka; Farsamayaqaannada Alwaaxda, Tuubooyinka, Shaqaalaha iyo Shaqooyinka kale; Seattle Times; Xubnaha Golaha Solomon, Hollingsworth; Wakiillada hore ee Gobolka Dawn Mason; Xubintii hore ee Golaha Degmada Larry Gossett, ka badan!

Waxaan jeclaan lahaa inaan kasbado codkaaga oo aan matalo magaalada iyo degmada i soo barbaarisay!

# Golaha Jagada Lr. 8

## Alexis Mercedes Rinck



(206) 705-9305
info@alexisforseattle.com
www.alexisforseattle.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Maamulka Dadweynaha, UW Evans School; Shahaado Jaamacadeedka Adabka, Syracuse University

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubin Golaha Magaalada; xirfadyahan hore ee siyaasadda iyo qorsheynta, UW

**Bayaanka:** Tan iyo maalintii ugu horreysay ee aan ku biiray Golaha, waxaan ahaa cod u taagan isbeddel horusocod ah iyo dadka shaqeeya– anigoo hoggaaminaya dadaalka si loo maalgeliyo guryaha la awoodi karo ee ururka shaqaalaha uu dhisay, loo ilaaliyo mushaharka iyo faa'iidooyinka, loona hubiyo in nidaamka amniga dadweynaha uu yahay mid lala xisaabtami karo, si habboon u shaqaaleysan, oo ka jawaaba. Waxaan la shaqeeyay sharci-dejiyeyaasha si aan u xaqiijiyo maalgelinta barnaamijyada naga ilaalinaya oo ka caawiya dadka xaaladaha adag, waxaanan ansixiyay xirmo koronto-gelinta gaadiidka si aan u gaarno yoolalka cimilada.

Hoggaankayga hoostiisa, Guddiga Jawaabta Federaalka ee cusub ee Golaha ayaa tallaabo qaaday si ay u ilaaliso Seattle. Waxaan la shaqeyneynaa la-hawlgalayaasha deegaanka iyo kuwa gobolka si aan u ilaalino xuquuqda deriskeena. Si looga hortago dhimmista miisaaniyadda, waxaan isku keenay shaqaalaha, ganacsiyada yaryar, Duqa Magaalada, iyo Golaha si loo ansixiyo siyaasadda canshuurta horumarka leh ee ilaalisa adeegyada muhiimka ah.

Anigoo ay i dhaleen waalidiin dhallinyaro ah oo ku jiray dhibaatada iyo rabshadaha gaangiga, isticmaalka maandooriyaha, iyo hoy la'aanta, waxaan awooday inaan horumaro taas oo aan uga mahadnaqaayo waalidka waalidiintayda, macallimiin wanaagsan, iyo Naadiga Wiilasha & Gabdhaha. Tan ayaa horseed u ah ballanqaadkayga ah inaan dhiso Seattle oo uu qof walba ku guuleysan karo, ayadoon loo eegin asalkooda ama dakhliga reerka.

Waxaan keenayaa hab iskaashi ah oo talo ku saleysan oo ku saabsan dejinta siyaasadaha oo diiradda saaraya sinnaanta, naxariista, iyo saameynta dhabta ah ee nolosha. Waxaan taageeray tallaabooyinka cimilada anigoo maalgelin ku sameeyay jidadka lugeynta, gaadiidka, iyo kaabayaasha cagaaran, waxaanan ka shaqeynayaa sidii loo diyaarin lahaa miisaaniyadda magaalada oo dheelitiran, oo horusocod ah, taasoo ilaalinaysa adeegyada muhiimka ah.

Waxaan gaarnay horumar macno leh, laakiin waxaa jira waxyaabo dheeraad ah oo loo baahan yahay. Waxaan u tartamayaa inaan sii wado shaqadaan—horumarinta guryaha la awoodi karo, u istaagidda shaqaalaha, hagaajinta badqabka xaafadaha, iyo ilaalinta xuquuqda madaniga ah. Waxaan sii wadi doonaa inaan soo muuqdo, si dhow u dhegaysto, oo aan dhiso isbahaysiyo si aan ugula kulanno xilligaan si degdeg ah iyo daryeel. Waxaan jeclaan lahaa inaan kasbado taageeradiina sii socota.

*Taageerooyinka: Dhammaan Kooxaha Dimuqraadiga Seattle; Golaha Shaqaalaha MLK iyo Ururka Shaqaalaha Deegaanka; Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubk; U doodeyaasha Isbahaysiga Waalidnimada Qorsheysan; Codadka OneAmerica; Sanduuqa Guusha ee LGBTQ+ ; Xildhibaan Jayapal; Xubnaha Golaha Degmada iyo Sharci-dejiyeyaasha ee ka socda degmo kasta oo Seattle—iyo in ka badan!*

## Rachael Savage



(206) 619-5427
director@savageforseattle.com
www.savagecitizens.com

**Waxbarashada: Waxbarashada:** Asaasaha iyo Mulkiilaha Ganacsi 1993-2025

**Shaqo iyo Xirfad: Shaqo iyo Xirfad:** Ganacsade, Agaasimaha Ururka Soo-kabashada Balwadda ee Aan Faa'iido Doon Ahayn

**Bayaanka:** Tan iyo 2020, joogitaanka joogtada ah iyo dabeecadda aan la saadaalin karin ee dadka la tacaalaya balwadda iyo xanuunnada dhimirka ayaa khatar geliyay badbaadada oo dhaawacay karaamada qof kasta oo ku nool, ka shaqeeya, ama booqda Seattle. *Sida mulkiile ganacsi ahaan*, waxaan si toos ah u dareemay saameyntaas xun. Waxaan arkay sida xaaladaha waddooyinka ee laga hortegi karo ay u burburiyaan ganacsiyada, derisyada, iyo saldhigga canshuurta. *Anigoo deggane ah*, waxaan la tacaalayaa kirada iyo kharashaadka nololeed ee sii kordhaya.

*Sida qof balwad lahaan jiray oo leh tobannaan sano oo soo-kabasho ah*, waxaan ogahay in tayada nolosha magaalada si weyn loo hagaajin karo haddii aan beddelno sida aan ula dhaqanno dadka balwadda qaba iyo kuwa xanuunnada dhimirka qaba. *Sida xubintaada golaha magaalada*, waxaan wax ka beddeli oo meel marin doonaa sharciyo siinaya kuwa dembiyada gala doorasho cad: xabsi ama daaweyn, waxaana dhammeyn doonaa siyaasadda guryaha bilaashka ah ee dadka balwadda weli ku jira. Annagoo kaashanayna maalgelinta federaalka, si dhakhso ah ayaan ugu wareegi karnaa daaweyn iyo guryo ku dhisan ka-fogaanshaha (abstinence).

Waxaan ka shaqayn doonaa dib-u-dhiska booliska iyo maxkamadaha si ay ugu laabtaan doorarkooda ku habboon ee ah in si adag loogu jihayso dadka balwadda qaba isbeddel iyo dib-ugu-biirid bulsho. Waxaan dhisi doonaa nidaam casri ah oo daryeel hoyeed, kana fog derisyadeenna. Waxaan yareyn doonaa farqiga mushaharka vs. kirada annagoo si toos ah u kabaya shaqaalaha mushaharka ugu yar ee dadaalaya.

Waxaan taas ku gaari karnaa canshuuro cusub la'aan. Dowladda Federaalka ayaa magaalooyinka siinaysa sal-dhig sharci iyo maalgelin barnaamijyo iyo xarumo cusub. Maalgelintaan ayaa xarig badbaado u ah Seattle. Ma awoodno inaan lumino maalgelinta ama aan kordhino canshuuraha ganacsiga. Si aan u gaarno yoolalkan waa in aynu joojinnaa cabsi ku-noolaanshaha. Anigu waxaan matalayaa dhaqdhaqaaq muwaadiniin Seattle ah oo aan cabsi qabin. Kuwa garwaaqsan in cid kasta oo nala wadaagta yoolka magaalooyin ammaan ah oo barwaaqo ah ay yihiin asxaabteena dhabta ah. U codee Savage.

# Golaha Jagada Lr. 9

## Dionne Foster



(206) 651-5493
info@dionnefoster.com
dionnefoster.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Shaqada Bulshada, UW; BA (Shahaadada Jaamacadda), George Mason University, Cilmiga Bulshada, Daraasaadka Haweenka

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasime Hore ee Fulinta ee Urur Aan Faa'iido Doon Ahayn; Madaza Seattle Foundation, La-taliyaha Siyaasadda ee Seattle

**Bayaanka:** Seattle waxay u baahan tahay hoggaanka Golaha oo diiradda saaraya mudnaanta degdegga ah ee magaalada oo dhan, aan ahayn ajendayaal kala qaybsanaan, oo shakhsiyadeed. Waxaan keenni doonaa inaan diiradda saaro arrimaheena, wada shaqeyn, iyo khibrad lagu xallin karo guryaha qaaliga noqday. Inaan taageerno dadka dhibka heysto, kana dhigno magaalada mid ammaan ah oo soo dhawweyn leh.

Ballanqaadkayga ku aaddan natiijooyinka hagaajiya nolosha wuxuu salka ku hayaa xirfaddayda ah falanqeeyaha siyaasadeed ee Magaalada, madaxa fulinta ee urur aan faa'iido doon ahayn, iyo macallin shaqada bulshada. Waxaan la kulmay caqabadaha ay la tacaalayaan qoysas badan: shaqooyin badan oo aan qabtay intii aan dugsiga sare iyo jaamacadda ku jiray, iyo inaan ka faa'iiday barnaamijyada guryaha iyo daryeelka caafimaadka si aan ugu helo xasillooni qoyskeyga. Waxaan ka shaqeeyay guud ahaan magaalada si aan u horumariyo guriyeynta iyo tallaabooyinka cimilada iyo guud ahaan gobolka si aan u ansixiyo dakhliga horusocodka ah iyo maalgelinta daryeelka carruurta ee la awoodi karo. Marka aan ku biiro Golaha Magaalada, waxaan u dagaalami doonaa tallaabooyin geesinimo leh oo horusocod ah si aan u dhiso Seattle xooggan.

*Waxaan u baahanahay guryo dheeraad ah oo la awoodi karo oo ku yaalla Seattle.* Waxaan mudnaanta siin doonaa in dadka la helo guryo, daaweyn, iyo guri joogto ah. Waxaan soo afjari doonaa ficil la'aanta Golaha ee dib u dhigaysa dhismaha guryaha loo baahan yahay. Waxaan horumarin doonaa lahaanshaha guryaha, ka hortagi doonaa barakaca, oo horumarin doonaa guryaha bulshada ee codbixiyeyaasha ansixiyeen si dhammaan dadka Seattle ay u helaan guryo xasilloon oo la awoodi karo.

Waxaan 911 u wacay labada xaaladoodba kuwa degdeg ah iyo kuwa aan degdeg ahayn. *Waxaan rabaa inaan hubiyo in wicitaan kasta uu helo jawaabta saxda ah.* Waxaan taageeri doonaa booliis wax ku ool ah, oo isla xisaabtan leh, horumarin doonaa sinnaanta jinsiga ee fulinta sharciga, oo ballaarin doonaa Waaxda DARYEELKA (CARE Department). Waxaan maalgelin doonaa ka-qaybgalka dhallinyarada, caafimaadka dabeecadda, ka-hortagga rabshadaha hubka, iyo xalalka amniga ee bulshada ku saleysan.

Hadaad is siiso Codkaaga, waxaan ka hortagi doonaa dadaallada Trump ee ah in la yareeyo adeegyada muhiimka ah iyo weerarada xuquuqda deriskeenna. Waxaan u dagaalami doonaa shaqaalaha, yareyn doonaa culayska ganacsiyada yaryar, oo aan taageeri doonaa farshaxanka iyo dhaqanka. *Si wada jir ah, waxaan u dhisi karnaa Seattle oo caddaalad wanaagsan oo la awoodi karo.*

*Taageerooyinka Keliya: Dimuqraadiyiinta Degmada King iyo koox kasta oo Dimuqraadi ah Degmada Seattle; the Stranger; the Urbanist; U doodeyaasha Isbahaysiga Waalidnimada ee Qorsheysan; Ururka Shaqaalaha MLK; Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka; Fuse WA; Codadka OneAmerica; Xildhibaan Pramila Jayapal; Xildhibaannada Golaha Degmada Mosqueda & Barón; Sharci-dejiyeyaasha Dimuqraadiyiinta; ka badan!*

## Sara Nelson



(206) 910-8762
info@saraforcitycouncil.com
www.saraforcitycouncil.com

**Waxbarashada:** PhD, Dhaqanka Bulshooyinka Aadanaha (Anthropology), University of Washington.

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubinta Golaha Magaalada ee Seattle oo dhan; mulkiilaha ganacsiga yar (Fremont Brewing).

**Bayaanka:** Seattle, waan idin maqlayaa: waxaad rabtaan in tallaabo degdeg ah la qaado. Afartii sanno ee la soo dhaafay ayaan u tartamay sababtoo ah waxaan la wadaagay niyad-jabkaaga, anigoo daawanayna deriska oo ku dhibban waddooyinkeena. Magaalo leh kheyraad sida kuwa aan leenahay, ma jirto cudurdaar loogu talagalay gaabiska isbeddelka aan aragnay. Waxaan ku dadaalayaa inaan jebiyo caqabadaha nagu soo roganaya.

Sida qof aniga oo kale oo ka soo kabanaya, waxaan ballaarinayaa helitaanka daaweynta balwadda oo dhammaystiran, oo la heli karo marka loo baahdo. Waxaan ogahay caqabadaha ku xeeran in la noqdo miyir qaba, mana aanan sameyn karin la'aanteed daaweyn wax ku ool ah iyo taageero. Taasi waa sababta aan u hubinayo in maalgelinta cusub ee adeegyada ammaanka dadweynaha loo isticmaalo daaweynta daroogada - si qof walba uu u helo kheyraadkii aan helay. Amniga dadweynaha ma aha oo keliya in la shaqaaleysiiyo booliis badan, waa in la xalliyo waxa sababa dhibaatada waddooyinkeena.

Waxaan gaarnay horumar dhab ah: dib u soo celinta sannado badan oo khasaaraha saraakiisha booliiska ah, bilaabista kooxaha ka jawaabista xaaladaha degdegga ah, iyo ballaarinta hoyga si loo dedejiyo in dadka gudaha loo raro. Waxaan la dagaalamay danaha ganacsi ee ku xidhan si aan u keeno ilaa 1,000 unug oo guryo shaqaale ah oo ku yaal degmada Stadium ee bartamaha magaalada, waxaanan hoggaamiya dib-u-habeynta oggolaanshaha si loo dhiso guryo si degdeg ah oo qiimo jaban. Laakiin, $600 milyan oo maalgelinta guryaha magaalada ah ayaa weli aan la isticmaalin halka dadku ay ku seexdaan hareeraha waddooyinkeena. Taasi waa mid aan la aqbali karin. Waxaan dagaalamayaa si aan lacagtaas ugu shaqeeyo degdeg ah dadka dakhligoodu yar yahay. Tani waa xaalad degdeg ah, waana in sidaas loola dhaqmaa.


Seattle uma baahna ballanqaadyo madhan oo kale Trump. Waxaan u baahanahay degdeg. Haddii ay tahay helitaanka guryaha, ammaanka dadweynaha, ama taageeridda dadka shaqeeya, waxaan beddeli karnaa nolosha marka aan haysano hoggaamiyeyaal u istaaga ka hortagga xaaladda hadda jirta.

Codkaaga, waxaan sii wadi doonaa inaan horumariyo dhaqdhaqaaqa hore ee Seattle oo ammaan iyo sinnaan badan leh.

*Taageerooyinka: Seattle Times, Ururka Dabka Seattle, Ururka Gaadiidka Dadweynaha ee Amalgamated, ururada shaqaalaha Dhismaha Seattle; hoggaamiyeyaasha Dimuqraadiga Xildhibaan Adam Smith, Hoggaamiyaha Aqlabiyadda Senatka Jamie Pedersen, Guddoomiyeyaashii hore Chris Gregoire iyo Gary Locke; iyo qaar kale oo badan.*

# Ma isticmaashay Foojarradaada Dimuqraadiyadda?

## Weli waxaa jira wakhti lagu qoondeeyo foojarradaada!



### Waa maxay Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda?

Sannadka 2025, deganeyaasha Seattle waxay helayaan afar $25 Foojarrada Dimuqraadiyadda oo ay ku deeqi karaan musharaxiinta u tartamaaya xafiis Seattle ka mid ah. Deganeyaasha waxay foojarradooda u qoondeyn karaan musharax(iin) kasta oo ballanqaada inuu ka mid yahay barnaamijka.

Si aad u isticmaasho Foojarrada Dimuqraadiyadda, waa inaad tahay degane Seattle ku nool, ugu yaraan 18 jir, iyo muwaadin Mareykan ah, qaran Mareykan ah, ama degane sharcinimo ku jooga.

### Musharaxiintee ayaan siin karaa Foojarradayda Dimuqraadiyadda?

Musharaxiinta u tartamaaya Duqa Magaalada Seattle, Qareenka Magaalada, iyo Golaha Magaalada Jagooyinka 2, 8, iyo 9 ayaa u qalma maalgelinta Foojarka Dimuqraadiyadda. Iska hubi si aad u xaqiijiso in musharaxa aad jeceshahay uu isticmaalaayo Foojarrada Dimuqraadiyadda. Ka hel liiska musharaxiinta ka qayb qaadanaya halka seattle.gov/democracyvoucher ama wac (206) 727-8855.

### Goorma ayaan isticmaalaa Foojarradayda Dimuqraadiyadda?

Foojarrada Dimuqraadiyadda waxaad isticmaali kartaa laga bilaabo wakhtiga aad hesho ilaa Nofeembar 28, 2025. Hase ahaatee, musharaxiinta waxay heli karaan oo keliya tiro kooban oo ah Foojarrada Dimuqraadiyadda. Haddii aad wakhti dheer sugto si aad u isticmaasho foojarradaada, ayay aad ugu badan tahay in musharaxii dookhaaga ah uu gaaray xadadkooda foojarka.

### Waxaan lumiyay Foojarrayda Dimuqraadiyadda. Ma codsan karaa foojarro cusub?

Haa! Waxaad codsan kartaa Foojarro Dimuqraadiyad cusub adiga oo webseedka ka buuxinaaya foomka oonleenka, iimeel ugu dir halka democracyvoucher@seattle.gov, ama adigoo wacaya (206) 727-8855.

### Haddii aan isticmaalo Foojarradayda Dimuqraadiyadda, macluumaadkaas ma loo shaaciyaa dadweynaha?

Haa, ku tabarrucidda ololeyaasha, oo ay ku jiraan Foojarrada Dimuqraadiyadda, waa macluumaad dadweyne. Tani waxay ka dhigan tahay in magacaaga (iyo laga yaabo ciwaankaaga guriga), qofka aad wax ugu deeqday, iyo caddadka waxa lagu daabaci doonaa oonleenka.

**Su'aalo? Nala soo xiriir!**

seattle.gov/democracyvoucher | democracyvoucher@seattle.gov | (206) 727-8855

## Golaha Jagada Lr. 1

### Jack Malek



(206) 498-2189
jmalek1234@gmail.com
jackforcitycouncil.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka Quinnipiac University & Yale University, Shahaadada Jaamacadda University of Arizona

**Shaqo iyo Xirfad:** Dalaal Hantida Ma Guurtada muddo 20 sanno ah ee Shoreline

**Bayaanka:** Magaalada Shoreline waa gurigayga, waxaana 24-kii sanno ee la soo dhaafay, halkan ku soo koriyay qoyskayga, ka dhistay xirfaddayda sida Wakiilka Guryaha ee maxalliga ah, iyo si sharaf leh uga soo shaqeeyay doorka hoggaamineed ee Guddiga Farshaxanka ShoreLake, Guddiga Aasaaska Kulliyadda Shoreline, Rugta Ganacsiga, Rotary, iyo Guddiga Qorsheynta. Waxaan aqaan magaalada iyo waxaan diyaar u ahay inaan wax badan qabto.

Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada si aan u caawiyo horumarinta iyo maareynta koritaanka fikirka leh anigoo ilaalinaya dabeecadda magaalooyinka ee Magaalada Shoreline. Waxaan wajahnaa caqabado dhab ah oo ku saabsan canshuuraha hantida, dugsiyada, iyo jardiinooyinka. Soo jiidashada ganacsiyada iyo shaqooyinka waxay soo saari doonaan dakhliga canshuurta iibka, oggolaanshaha iyo khidmadaha saameynta, waxayna taageeri doonaan adeegyada muhiimka ah iyada oo aan loo baahnayn in la kordhiyo canshuurta hantida. Waxay sidoo kale abuuri doontaa dadweyne maalintii taageeraya ganacsiyada maxalliga ah oo u oggolaanaya xubnaha bulshada inay ku noolaadaan oo ka shaqeeyaan magaalada ay leeyihiin.

Si wadajir ah waxaan u qaabayn karnaa xalal ka tarjumaya codka bulshadeenna oo aan dhisno mustaqbal adag. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan helo codkaaga.

### Valerie Snider



(206) 883-4711
electvaleriesnider@gmail.com
www.electvaleriesnider.com

**Waxbarashada:** MBA, Seattle Pacific University; BA (Shahaadada Jaamacadda), Pacific Lutheran University

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeyaha Iibka IT, Degmada King; U doodaha Sharci-dejinta, Shorecrest PTSA

**Bayaanka:** Waxaan kasoo jeedaa Waqooyiga Galbeed ee Baasifigga (Pacific Northwest) waxaanan nolosheyda qaangaarka ah ku qaatay aagga Seattle anigoo ka shaqeynaya teknolojiyadda iyo adeegga dadweynaha. Waxaan koriyay wiil waxaanan marti geliyey 5 arday oo is-weydaarsi ah kuwaas oo dhammaantood dhiganayay dugsiga dadweynaha ee Shoreline.

Waxaan la wadaagaa derisyada, qorshe-yaqaannada magaalooyinka, mulkiileyaasha ganacsiyada, iyo dhallinyarada aragti Shoreline ka dhigaysa: meel cagaaran, ammaan ah, oo la awoodi karo oo lagu noolaado, lagu shaqeeyo, hawlgab lagu fariisto, laguna dhigan karo dugsiyo. Dugsiyada iyo adeegyada bulshada, oo heer federaal laga jaray, waa in la maalgeliyo.

Dhiirrigelinta canshuurta waa in laga jeediyaa horumariyeyaasha waaweyn loona wareejiyaa ganacsiyada maxalliga ah ee dib ugu maalgelinaya Shoreline. Deegaan nadiif ah waa inuu qayb ka noqdaa horumarinta magaalo. Waddooyinku waa inay ammaan u noqdaan baaskiil-wadayaasha iyo lugeeyayaasha, gaar ahaan agagaarka gaadiidka dadweynaha ballaaran iyo meelaha sida North City, Shoreline Place, jardiinooyinka, iyo xarumaha dhallinyarada iyo waayeelka. Waxaan diyaar u ahay inaan noqdo xubin golaha oo wax-ku-ool ah oo aan u adeego dhammaan dadka Shoreline. Waxaan kaa codsanayaa codkaaga.

## Golaha Jagada Lr. 3

### Laura Mork



(206) 546-5050
vote4lauramork@gmail.com
www.lauramork.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda, Injineernimada Kiimikada, University of Washington; Maareynta Mashruuca Xirfadle (PMP), (CEM)

**Shaqo iyo Xirfad:** Injineer, Maareeyaha Mashruuc, Xarumaha, iyo Tamarta (CEM)

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ahayd in aan u adeego Magaalada Shoreline ee Golaha Magaalada afartii sanno ee la soo dhaafay iyo in aan matalo magaaladeenna guddiyo badan oo ka tirsan Degmada King, oo ay ku jirto in aan ku xigeen u noqdo Guddiga Tayada Biyaha Goboleedka. Waxaan ka shaqeeyay inaan fidiyo doolarkaaga canshuurta anigoo helay maalgelin dheeraad ah oo deeq ah, waxaanan ku dadaalay isbeddelo si loo caawiyo dadka danyarta ah inay helaan kaalmo adeegyo. Waxaan u ololeeyay in la ballaariyo helitaanka jardiinooyinka ee xaafad kasta, isbeddelada xeerarka si loo kordhiyo sahayda guryaha la awoodi karo, iyo siyaasadaha lagu yareynayo saameynta cimilada ee magaalada Shoreline.

Waxaan leeyahay taariikh dheer oo ku saabsan adeegga dadweynaha ee magaalada Shoreline, oo ay ku jiraan guddiga Qorsheynta iyo guddiga degmada biyaha wasakhda ee Ronald. Waxaan u tartamayaa muddo kale sababtoo ah waxaa jira wax badan oo la qabanayo, oo ay ku jiraan hagaajinta adeegyada ammaanka dadweynaha iyo ka dhigista xaafadaha bulshadeenna kuwo lagu lugeyn karo oo soo dhawweyn leh. Waxaan jeclaan lahaa in aad codkaaga iyo taageeradaada i siisid si aan u dhiso bulsho ka jaban, sinnaan badan, oo waara oo qof walba u furan.

## Golaha Jagada Lr. 5

### Eben Pobee



(206) 393-8092
electebenpobee@gmail.com
electebenpobee.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Hal-abuurka Fanneed, University of Ghana; shahaadada mastarka ee maamulka ganacsiga, Concordia University, Portland Oregon

**Shaqo iyo Xirfad:** CEO, Deep Technologies LLC iyo EPOBS Solutions

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa xafiiska si aan u hubiyo in deris kasta uu helo fursadaha isla midka ah ee magaalada Shoreline ay i siisay — iyo inaan noqdo codka kuwa inta badan la iska indho tiro.

Shoreline waa meesha aan ku noolaa riyada Mareykanka. Waa halka qoyskaygu ku barwaaqoobay, iyo halka aan loogu yeeray inaan u adeego, anigoo ku hagaya daacadnimo iyo u heellan bulshadeenna.

Sida seeyga xaaskeyga, aabbaha afar gabdhood, iyo hoggaamiyaha bulshada, waxaan aaminsanahay in mas'uuliyaddeena ugu weyn ay tahay inaan u dhisno magaalada Shoreline oo wanaagsan ayna dhaxlaan jiilka soo socda. Taasi waxay la micno tahay in si taxaddar leh loo maareeyo kobaca, iyadoo la ilaalinayo deegaanka iyo wax ka qabashada baahiyaha dhabta ah ee deganeyaashayada. Waxaan rabaa inaan ka dhigo dowladda magaalada mid daah furan oo la heli karo, si qof walba uu fursad ugu helo in codkiisa la maqlo oo uu ka qayb qaato qaabeynta mustaqbalkeenna. Haddii la i doorto, waxaan ballanqaadayaa inaan dhegaysto, cilmi baaris ku sameeyo arrimaha, dadka isu keeno, oo aan sameeyo go'aanno si dhab ah ugu faa'iideeya dadka iyo ganacsiyada magaalada Shoreline.

## Golaha Jagada Lr. 7

### Christopher Roberts



(206) 552-9160
chris@chrisrobertswa.com
www.votechrisroberts.com

**Waxbarashada:** PhD, University of Washington; Shahaadada Jaamacadda, Willamette University

**Shaqo iyo Xirfad:** Macallin, North Seattle College; Xubin, Golaha Magaalada Shoreline

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ah in aan u adeego sida xubinta golahaaga, anigoo matalaya magaalo heellan oo u heellan horumarinta sinnaanta iyo hagaajinta nolosha dhammaan dadweynaha degan magaalada. Waxaan ku faanayaa inaan matalo magaaladeena guddiga Ururka Magaalooyinka Qaranka waxaanan ka ahay xubnihii aasaasay ururka degmada hoose ee dadka native ka ah.

Iyadoo aan la kulmeyno yoolalka cimilada, waa inaan taageernaa in la helo maciishad la awoodi karo oo dhan, gaar ahaan qoysaska da'da yar iyo waayeelka. Waxaan mudnaanta siin doonaa ballaarinta waddooyin ammaan ah oo loo maro dugsiga iyo hagaajinta isgoysyada halista ah. Waxaan sidoo kale u ololayn doonaa booliis xooggan oo ku saleysan bulshada iyo maxkamad bulsho si aan u hubinno in xaafadahayaga ay ammaan yihiin. Waxaan sii wadi doonaa dib-u-soo noolaynta jardiinooyinkeena, ilaalinta goobaha furan, iyo sahaminta dhismaha barkad dadweyne oo qof walba ku raaxaysto.

Dhegaysiga dadweynaha magaalada ayaa ah mudnaantayda ugu sareysa, waxaana sii wadi doonaa shaqada si aan magaalada uga dhigo mid laga heli karo dhammaan. Waxaan ka mahad celin lahaa inaan helo codkaaga.

## Golaha Jagada Lr. 1

### Peggy McCarthy



(206) 579-8237
peggy@mccarthy4tukwila.com
www.McCarthy4Tukwila.com

**Waxbarashada:** Dugsiga Sare ee Foster; B.A. (Shahaadada Jaamacadda) Washington State University, Summa Cum Laude, Xisaabiyaha Dadweynaha oo Sharciyeysan

**Shaqo iyo Xirfad:** Hawlgab Maamulahii hore ee Maaliyadda Tukwila, Maareeyaha Hay'adda Guryaha ee Degmada King

**Bayaanka:** Tukwila waxay u baahan tahay xubin golaha ah oo fahamsan maaliyadda iyo miisaaniyadeynta - hoggaamiye qiimeeya dabeecadda gaarka ah ee magaaladeenna oo ka go'an ilaalinta la-noolaanshaha Tukwila, kheyraadkeeda dabiici ah, iyo bilicdeeda. Anigaa hoggaamiyahaas ah.

Anigoo ahaa Agaasimihii hore ee Maaliyadda ee Tukwila iyo degane jiilka afraad, waxaan haystaa aqoon ballaaran oo ku saabsan hawlgallada magaalada iyo caqabadaha maaliyadeed ee aan wajahno. Khibraddayda la shaqeynta King County Housing Authority (Maamulka Guriyeynta Degmada King) waxay i siisay aragtiyo qiimo leh oo ku saabsan arrimaha guryaha iyo xalalkooda. Anigoo u-doodaha sii-haysashada Dab-damiska Tukwila iyo doorarkayga sida madaxweynihii Tukwila Historical Society, tababaraha T-ball, madaxweynihii PTA, iyo jagooyin kale oo taageera carruurta, waxaan si joogto ah u muujiyey ballanqaad xooggan oo ku aaddan badbaadada dadweynaha, ilaalinta taariikhiga ah, iyo dhallinyarada bulshadeenna.

Go'aannada ugu wanaagsan waxaa la gaaraa marka aragtiyo kala duwan ay wadaagaan daneeyayaal xog-ogaal ah oo daryeel leh oo si wadajir ah u shaqeeya. *Si wadajir ah,* waxaan u hubin karnaa in Tukwila ay ahaato Magaalo Fursad leh, Bulshada La Doorto. *Ii oggolow inaan ku matalo!*

### Verna Seal



(206) 293-3274
friendsofvernaseal@gmail.com
www.vernaseal.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga, Sayniska Siyaasadda - Maamulka Dadweynaha ee Jaamacadda Gobolka California.

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubinta Golaha Deegaanka ee Tukwila ee hadda; kalkaaliye qareenka socdaalka, Ryan Swanson & Cleveland

**Bayaanka:** Waxay ii ahayd sharaf inaan u adeego Tukwila anigoo ka tirsana Golaha Magaalada muddo 16 sano ah. Waxaan gaarsiiyay natiijooyin xooggan—yareynta dambiyada agagaarka International Boulevard, ilaalinta jardiinooyinka iyo dhulka cagaaran, ballaarinta guryaha la awoodi karo, iyo hagaajinta badbaadada derisyada. Hoggaan wax-ku-ool ahi waa muhiim—waxaan bulshada u fuliyaa hawlaha muhiimka u ah.

Waxaan aaminsanahay in Tukwila u baahan tahay hoggaan degan oo khibrad leh si wax looga qabto arrimaheenna degdegga ah—guryo la awoodi karo, miisaaniyad waarta, badbaadada dadweynaha, iyo horumar dhaqaale oo sinnaan leh. Go'aan kasta waxaan la imaanayaa garasho caadi ah iyo aqoon faahfaahsan oo ku saabsan magaaladeenna. Anigoo ah kaaliye qareen muddo dheer ah iyo u-doodaha bulshada, waxaan aaminsanahay Tukwila. Waxaan sii wadi doonaa inaan dowlad-deegaanka u keeno naxariis iyo faham qoto dheer marka aynu ka jawaabayno baahiyaha kala duwan ee Tukwila.

Waxaa si sharaf leh ii taageeray Duqa Magaalada Thomas McLeod, Xubnaha Golaha Jovita McConnell iyo Hannah Hedrick, Xubnihii hore ee Golaha De'Sean Quinn iyo Joe Duffie, Dab-damiyeyaasha Local 1747, Golaha Ururka Shaqaalaha MLK iyo hoggaamiyeyaasha gobolkayaga oo dhan sababtoo ah waxay aaminsan yihiin khibradayda la xaqiijiyay. Waxaan soo dhawwaynayaa taageeradaada mar labaad sidoo kale.

## Golaha Jagada Lr. 3

### Tosh Sharp



(206) 900-1212
tosh4tukwila@gmail.com
toshfortukwila.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee injineernimada CWU, Tikidhka Tababarka (Journeyman's Ticket) IBEW 77

**Shaqo iyo Xirfad:** Shaqaalaha Korontada Sare, Magaalada Seattle

**Bayaanka:** Sida nin xaas leh, aabaha laba carruur ah oo yaryar, shaqaale koronto, iyo Guddoomiyaha Golaha Magaalada, adeeggaygu waa waxa iga dhaqaajiya dhammaan doorarka aan ciyaaro. Waxaa sharaf ii ahayd inaan idiin adeego afartii sano ee la soo dhaafay waxaanan codsanayaa sharafta in la ii oggolaado inaan sii wado matalaaddiina.

Tukwila waa bulsho kala-duwan oo shaqo adag, waxayna u qalantaa hoggaan wax-ku-ool ah oo lala xisaabtami karo. Waxaan taageeraa canshuuro mas'uuliyad leh oo yareeya culayska qoysaska iyo ganacsiyada yaryar, iyadoo la ilaalinayo adeegyo magaalo oo adag oo hufan. Badbaadada dadweynuhu waa lama huraan. Waxaan sii hubin doonaa in booliiskeena si fiican u tababaran yihiin oo qalabaysan si ay u ilaaliyaan derisyadeenna. Sidoo kale waxaan taageerayaa ballaarinta guryaha iyadoo la dhimmayo caqabadaha horumarinta lana dhiirigelinaayo korriin caqli-gal ah oo waara. Waxaan hoggaamiyaa anigoo daah-furan, marka hore waan dhegaystaa, ka dibna waan ka falceliyaa waxa ugu muhiimsan. Waad ku mahadsan tahay codkaaga.

*Waxaa taageeray: Xubinta Golaha Degmada Teresa Mosqueda; hoggaamiyeyaasha la soo doortay ee Tukwila, SeaTac iyo Burien, iyo ururada shaqaalaha ee matalaya qoysaska shaqeeya. Laakiin waxa ugu muhiimsan, waxaa taageeray Deganeyaasha Tukwila. Wax dheeraad ah ka baro: ToshForTukwila.com*

### Hannah Hedrick



(206) 850-3477
Hannah4tukwila@gmail.com
www.hannah4tukwila.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Maamulka Ganacsiga, University of Arizona; daraasaadka kalkaalisanimada ka hor, Bellevue College

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubinta Golaha Magaalada ee Tukwila, Maareeyaha Mashruuca, Connections Health Solutions

**Bayaanka:** Inaan u adeego deganeyaasha golaha magaalada Tukwila waa sharaf. Intii aan ku jiray Golaha, Waxaan si adag uga shaqeeyay inaan dhegaysto bulshada, iska kaashano, isla markaana aan keeno natiijooyin dhab ah oo u adeegaya bulshada.

Haddii ay tahay ballaarinta guryaha la awoodi karo, hagaajinta badbaadada dadweynaha , ama ka dhigista Aqalka Magaaalada mid jawaab celin leh, dadka waxaan isugu keenaa si wax loo qabto. Iyadoo aan khibrad ballaaran u leeyahay waaxda gaarka loo leeyahay iyo maamulka deegaanka, waxaan ogahay in horumarka uu dhaco marka aan hoggaaminno daacadnimo, raadinno meel dhexe, oo aan diiradda saarno waxa ay deganeyaashu dhab ahaantii u baahan yihiin. Taasi waa farqiga tartankan.

Waxaan ku faanayaa inay i taageereen hoggaamiyeyaal lagu kalsoon yahay oo ka socda Tukwila iyo gobolkeena, oo ay ku jiraan Duqa Magaalada Thomas McLeod, Xubnaha Golaha Verna Seal, Jovita McConnell, iyo De'Sean Quinn; iyo sidoo kale Ururka Shaqaalaha Dab-damiyeyaasha ee 1747, Dimuqraadiyiinta Degmada King, iyo Golaha Ururka Shaqaalaha Degmada ee MLK Jr. Waxay ogyihiin inaan ahay qof mabda' leh oo wax ku ool ah, waxaanan sii wadi doonaa inaan u shaqeeyo Tukwila oo ka wanaagsan oo ammaan ah qof walba. Waxaan si naxariis leh ku weydiisanayaa codkaaga.

## Golaha Jagada Lr. 5

### Ziggy Samra



(253) 970-8318
1ziggy@gmail.com
voteziggy.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Maamulka Ganacsiga, Suuqgeynta ee ka socota University Of Washington. Taqasus yar Dhaqaalaha.

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha ganacsiga yar; Dalaalka Hantida Ma Guurtada ee Terry Wise & Associates

**Bayaanka:** Anigoo ah aabbe, mulkiile ganacsi yar iyo soo galooti, waxaan u tartamayaa inaan Golaha Magaalada keeno cod cusub oo firfircoon. Waxaan diiradda saarayaa waxa aadka muhiimka ugu ah deganeyaasha: badbaadada dadweynaha, guryo la awoodi karo, iyo ilaalinta ganacsiyada maxalliga ah iyo bulshooyinka soogalootiga ah.

Waxa si sharaf leh ii taageeray hoggaamiyeyaasha sida ugu wanaagsan Tukwila u yaqaan: Duqa Magaalada Thomas McLeod, Xubinta Golaha De'Sean Quinn, iyo Xubin hore ee Golaha Joe Duffie—waayo waxay igu kalsoon yihiin inaan joojiyo siyaasadda kala qaybinaysa oo aan keeno natiijooyin. Waxaan taageero ka helayaa ururada shaqaalaha sida Plumbers and Pipefitters Local 32, waxaana abuuri doonaa shaqooyin mushahar wanaagsan leh oo aan u istaagi doonaa qoysaska shaqeeya.

Markaan la kulmo codbixiyeyaasha magaaladayada oo dhan, waxaan maqlaa walaacyo isku mid ah: Canshuuraha guryaha oo sareeya iyo amniga. Waxaad u qalantaan xalal dhab ah, ma aha wax la mid ah kii hore. Waxaan u heellanahay inaan hubiyo miisaaniyad dheellitiran oo magaalada ah, anigoo taageeraya ganacsiyada yaryar. Waxaan u dagaalami doonaa Tukwila oo dhammaanteen u shaqeysa. Aan dhisno Tukwila xooggan oo midaysan.

### Kate Kruller



(206) 853-9330
kate@kate4tukwila.com
Kate4Tukwila.com

**Waxbarashada:** MBA - Maareynta Injineernimada/Teknolojiyada, BA (Shahaadada Jaamacadda) - Isgaarsiinta, Aqoonsiga Maareynta Mashruuca (PMP)

**Shaqo iyo Xirfad:** Maamulaha Teknolojiyadda Macluumaadka, Xarunta Isgaarsiinta Xaaladaha Degdegga ah ee 911-ka Degmada King

**Bayaanka:** Waad ku mahadsan tahay sharafta aad i siisay inaan kuugu adeego Golaha Magaalada Tukwila muddo 12 sanno ah iyo Guddiga Dugsiga Tukwila. Codkaaga, waxaan ku ballan qaadayaa inaan sii wado inaan kuu adeego anigoo daacad ah, shaqo adag, iyo caqli guud.

Mudnaanta: Dadka ka dhig mudnaanta koowaad; guryo la awoodi karo iyo derisyo ammaan ah; hagaajinta doorashooyinka gaadiidka ee magaaladeena; adeegyo badbaado dadweyne oo lagu kalsoonaan karo; iyo miisaaniyado magaalada oo mas'uul ah oo loo kala horumariyay si si wanaagsan laguugu adeego.

Waxaan aaminsanahay dowlad furan oo lala xisaabtami karo oo ixtiraamta canshuur-bixiye kasta, bixisana qiimo sare, oo gaarsiisa doolarka canshuurtaada meel dheer. Waxaan dhisaa bulsho anigoo si firfircoon ula shaqeeya kooxaha xaafadaha, waayeellada, ardayda, halyeeyadii hore, iyo ganacsiyada. Waxaan u doodayaa dadka shaqeeya, waxaanan xoogga siiyaa codadka si loo gaaro aragti wadaag ah. Waxaan qaataa go'aamo xog-ogaal ah oo ku salaysan jawaab-celinta bulshada, waxaana ka go'an inaan matalo waxa dadka ku nool Tukwila doonayaan iyo waxa macno no leh. Fadlan u codee in la doorto Kate Kruller ee Golaha Magaalada Tukwila, Jagada 5.

## Golaha Jagada Lr. 7

### Jane Ho



(253) 256-3275
Janefortukwila@gmail.com
Janefortukwila.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda, Maareynta Ganacsiga oo leh Taqasus Yar oo Xiriirka Caalamiga ah, St Martin's University

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeyaha Mashruuca

**Bayaanka:** Waxaan ahay jiilkii ugu horreeyay ee Fiyatnamiis Amerikaan ah oo qiimeeya shaqada adag, fursadaha, iyo bulshada. Waalidkay waxay u soo haajireen Mareykanka sannadkii 1990 si ay u dhisaan mustaqbal wanaagsan, oo adkaysigooda ayaa dhiirageliyay go'aankayga ah inaan u adeego Tukwila si la mid ah go'aan qaadashadaas.

Ballanqaadkayga ku aaddan taariikhda, hadda, iyo mustaqbalka magaalada Tukwila waxaa ka muuqda adeeggayga sida Guddoomiyaha Qorsheynta iyo xubin firfircoon oo ka tirsan Ururka Taariikhiga ah ee Tukwila. Mudnaantaydu waxaa ka mid ah xoojinta ammaanka dadweynaha, ballaarinta helitaanka daryeelka caafimaadka ee la awoodi karo, iyo hagaajinta guryo la iibsan karo. Waxaan sidoo kale taageeraa fursadaha gaadiidka ee la xoojiyay, ganacsiyada iyo kobaca dhaqaalaha, iyo ilaalinta miisaaniyadaha mas'uuliyadda leh ee magaalada.

Tukwila waxay u baahan tahay hoggaan dhegaysta, ka qaybqaata, oo ka tarjumaya qoysaska kala duwan ee magaaladeena. Waxaan noqon doonaa mid la heli karo, ka jawaabaya, oo ka go'an dhisidda bulshada, halkaas oo cod kasta la maqlo iyadoo qof kasta uu dareemayo qiimeyn. Waxay ii ahaan lahayd sharaf inaan ku matalo. Taageerayaasha waxaa ka mid ah: Duqa Magaalada Tukwila Tom McLeod, Xubinta Golaha Degmada Desean Quinn, iyo Xubintii hore ee Golaha Magaalada Kathy Hougardy.

### Gina Bernhardt Nielsen



(206) 854-4333
Gina4Tukwila@gmail.com
www.Gina4Tukwila.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Dhaqaalaha, University of Washington; AA (Shahaadada Jaamacada Labada Sanno)-Maamulka Ganacsiga, Highline College; Maareynta Mashruuca, Syracuse University

**Shaqo iyo Xirfad:** Guddoomiyaha Jardiinooyinka Tukwila; Falanqeeye Sare ee Hannaanka Ganacsiga-Magaalada Bellevue

**Bayaanka:** Ka jiilka saddexaad ahaan, degane noloshayda oo dhan iyo Guddoomiyaha Jardiinooyinka ee Tukwila, waxaan ku faanayaa inaan magaaladaan cajiibka ah ugu yeero guri. Waxaan arkay sannado badan oo isbeddel ah oo ka dhacay magaaladeena—koritaanka kala duwanaanshaha, ganacsiga, iyo fursada—iyadoo la maamuusayo taariikhdeeda. Waxaan dan ka leeyahay caafimaadka, barwaaqada, iyo sii socoshada koritaanka bulshadeena.

Sida u doodahaaga ahaan, diiraddayda waxaa ka mid ah mudnaanta kordhinta fursdaha guryaha la awoodi karo iyada oo loo maraayo hindisaha guryaha dhexe ee magaalada, cusboonaysiinta kaabayaasha, horumarinta jardiinooyinka iyo fursadaha caafimaadka iyo daryeelka, kordhinta fursadaha ganacsiga iyo shaqooyinka, balaarinta helitaanka gaadiidka, iyo badqabka dadweynaha.

In ka badan 20 sannadood oo aan ku jiray dowladda magaalada iyo maaraynta isbeddelka, waxaan keenayaa waayo-aragnimo iyo hoggaan diiradda saaraya go'aan qaadasho fikir leh, oo dheelitiran. Waxaan aaminsanahay xalalka bulshada oo dhan, oo loo dhan yahay—oo ku dheelitiraaya baahiyaha miisaaniyad la hagaajiyay iyo horumarinta horumarka si loo wanaajiyo dhammaan magaaladeena. Waxaa iga go'an inaan ka dhigo magaaladeena meel ay dhammaan ku dareemaan nabadgelyo, ku xirnaansho, in la matallo, iyo sharaf inay ku noolaadaan, ka shaqeeyaan, oo ay ku barwaaqoobaan halkan—si wadajir ah. Sharaf ayay ii tahay codeyntaada.

## Agaasimaha Degmada Lr. 2

### Sue-Ann Hohimer



(206) 268-0760
Hohimer4Highline@gmail.com
www.Hohimer4Highline.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda Waxbarashada, Shahaadada Mastarka Baridda Farshaxanka Luqadda- NeIU, Shahaadada Hoggaaminta Dowladda Hoose- Assoc. of Washington Cities (Guddiga Magaalooyinka Washington)

**Shaqo iyo Xirfad:** Macallin, Ku-xigeenka Duqa Magaalada, Mutadawac, Difaaca Carruurta/Dhallinyarada, Barte oo Nolosheeda oo dhan, Ayeeyo

**Bayaanka:** Anigoo horey macallin uga soo ahaa Dugsiyada Dadweynaha Chicago, isla markaana ah qalin-jebiyad dugsiyo dadweyne iyo gabadh ay waalidkeed ahaayeen macallimiin dadweyne, waxaan si qoto dheer uga go'an tahay in arday kasta uu helo waxbarasho dadweyne oo tayo leh. Hoggaan geesinimo leh oo hal-abuur leh ayaa dugsiyadeenna ka dhigi kara meelo uu ilmuhu ku dhiirrado oo loo habeeyo inuu horumar ku tallaabsado.

Labaatankii sano ee la soo dhaafay, waxaan deriska la garab istaagay si aynu u adkeyno bulshadeenna shanta magaalo ee Highline. Haddiiba aan u adeegayo Duqa Normandy Park, Ku-xigeenka Duqa, Guddoomiyihii Marvista PTSA, ama aan si wadajir ah ula hoggaaminayo qoyskayga ololaha ururinta lacagta ee Qolka Gurmadka Degdegga (ER) ee isbitaalka Highline, mar walba waxaan aaminsanaa in isbeddelka dhabta ahi ka dhasho iskaashi.

Highline waxyaabo badan oo wanaagsan ayey horay u samaynaysaa, barnaamijyo ku saabsan Badda, Duulista, barashada laba-luqadood, iyo waddooyin cusub oo Xirfadlayaasha Caafimaadka ah oo ka socda Tyee. Waxaannu qaban karnaa wax intaas ka badan. Ka soo qaad in aynu ku darno Akadeemiyaha Akhriska loogu talagalay ardayda leh dyslexia ama "Welcome Academy" lagu taageero soo-galootiga cusub ee u gudbaya nolosha Mareykanka. Aan sii dhisno barnaamijyo adag oo ka tarjumaya baahiyaha ardaydeenna.

Wadajir ahaan waxa aynu xoojin karnaa akhris-qoraal cilmi ku saleysan, kobcin karnaa wacyiga iyo ka-qaybgalka muwaadinnimo, isla markaana ballaarin karnaa waddooyinka xirfadeed. Waxa aynu dhisi karnaa degmad ka tarjumaysa rajooyinka, himilooyinka, iyo adeegga tayo-sare ee uu arday kasta iyo canshuur-bixiye kasta ee Highline mudan yahay. Waan ku sharfanaan lahaa inaan helo taageeradaada iyo codkaaga.

### Angelica M. Alvarez



(206) 660-7695
angelicaforschool@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Waxbarashada, Goddard College; Shahaadada Mastarka ee Hoggaaminta Waxbarashada, Eastern Washington University

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha, Hindisooyinka Horumarinneed ee Ku Salaysan Ardayga & Qoyska

**Bayaanka:** Anigoo ah inanta ay dhalleen dadka soogalootiga ah, waxaan ku soo koray ka shaqeynta beeraha iyada oo ay i weheliyaan waalidiintayda, kuwaas oo ku riyooday in maalin maalmaha ka mid ah carruurtoodu ay heli doonaan fursado ka badan kuwa ay heleen. Aaminaaddii ay ku qabeen awoodda waxbarashadu waxay igu dhiirigelisay inaan qaato shahaadada koowaad ee jaamacadda iyo shahaadada Mastarka ee hoggaanka waxbarashada.

In ka badan 20 sanno, waxaan u adeegay carruurta iyo qoysaska sida bare, u doode, iyo hoggaamiye sababtoo ah waxaan aaminsanahay in ilmo kastaa u qalmo fursad uu ku riyoon karo oo uu ku guuleysto.

Carruurtaydu waxay dhiganayeen dugsiyada Highline, waxaanan si qoto dheer ugu xidhanahay qoysaska ka yimid adduunka oo dhan. Anigoo ah waalid arday u dhigtaan dugsiyada Highline ah, awoowe iyo Agaasimaha Guddiga Dugsiyada ee hadda, waxaan ahay u doode dugsiyo dadweynaha oo xooggan oo u adeegga arday kasta.

Anigoo ah Agaasimaha Guddiga Dugsiga, waxaan sii wadi doonaa shaqada: in la Xaqiijiyo taageerada tacliimeed ee caqabad ku ah arday kasta, iyadoo lagu salaynayo awooddooda iyo baahidooda shakhsi; Xoojinta barashada hore ee dhammaan carruurta; In la dhiso iskaashi adag oo loo dhan yahay oo lala yeesho qoysaska iyo bulshada; Isticmaal hababka cilmi-baarista ku salaysan si aad si joogto ah u wanaajiso tayada waxbarashada dugsiyadeenu bixin. Waxaa iga go'an inaan kobciyo Highline halkaas oo dugsiyadu si fiican loo maalgeliyo, macallimiinta la taageero, iyo awoodda ilmo kasta la arko, lagu koriyo, loona dabaaldego.

# Agaasimaha Degmada Lr. 3

## Katie Kresly



(206) 493-8909
Katie4Highline@gmail.com
www.katiekresly.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Ookiyaalka Indhaha, SCCC; Shahaado Jaamacadeedka Cilmi-nafsiga, Beloit College.

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha Ganacsi Caafimaad Yar; 25-sanno ah Ookiyaalka Indhaha; Wariye Wararka Deegaanka

**Bayaanka:** Dugsiyadeena waa arrin qof walba khuseysa. Guusha ama guuldarrada ardaygu kuma eka fasalka; waxay saameyneysaa goobaha shaqadeenna, waddooyinkeena, iyo isku-xirnaanta bulshadeenna. Natiijadaas dhammaanteen ayaan la noolnahay. *Arday si wanaagsan wax loo baray waa laf-dhabarta bulsho kobcaysa*!

Waxaan daawaday oo aan ka warbixiyay Degmada Highline muddo ka badan saddex sanno. In kasta oo hoggaamiyeyaasha degmada ay ballanqaadayaan inay taageeraan ardayda oo ay u diyaariyaan mustaqbalka, natiijooyinka tacliimeed ee liita, walaacyada amniga, iyo diyaar garowga nolosha oo liita ayaa sheegaysa sheeko ka duwan. Highline waxay sii wadaysaa inay qarash badan ku bixiso oo ay wax yar ku guulaysato—hadda waxay miisaaniyad u qoondeysay $25,000 arday kasta, laakiin waxay ku jirtaa 23% ee ugu hooseeya degmooyinka gobolka oo dhan. Sida ay maahmaahdu leedahay: *isku dayga wax isku mid ah oo la filayo natiijooyin kala duwan waa waalli.*

Keliya 1 ka mid ah 3 arday ee Highline ayaa buuxiya heerarka akhriska—laakiin tani waxay ka badan tahay natiijooyinka tacliimeed. Aqoon la'aantu waxay si toos ah ugu xiran tahay khatarta ka-baxidda dugsiga, xasillooni la'aanta dhaqaale, iyo dambiyada. Fasallada aan amniga lahayn waxay waxyeeleeyaan ardayda iyo shaqaalaha, iyo heerka aqoonta oo hooseeya wuxuu saameeyaa bulshadeenna oo dhan. *Aqoon qorista waa shayga ugu sinnaanta badan ee aan bixin karno.*

Ka agaasimahaaga guddiga ahaan, waxaan mudnaan siin doonaa waxbarashada, jawi waxbarasho oo ammaan ah, iyo taageero macno leh oo loogu talagalay macallimiinta iyo qoysaska. Waxaan dalban doonaa daah-furnaan, kharash mas'uul ah, iyo siyaasado mudnaanta siinaya ardayda Highline. *Highline waa la hagaajin karaa*—codkaaga sii Katie Kresly.

## Joe Van



(206) 992-5996
electjoevan@outlook.com

**Waxbarashada:** Highline College- Caddaaladda Dambiyada

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeyaha Silsiladda Saadka / Maareeyaha Mashruuca

**Bayaanka:** Anigoo ah degane muddo dheer ku noolaa bulshada Highline, waxaan aad u daneynayaa dugsiyadeena iyo mustaqbalkooda.

Sida qoysas badan oo halkan jooga, waalidkay waxay yimaadeen Mareykanka iyagoo ka yimid Vietnam sannadkii 1975 iyagoo qaxooti ah. Aniga ayaa ahaa ilmahoodii ugu horreeyay ee ku dhashay Mareykanka. Waxaan ka soo qalin jebiyay dugsiyada Highline oo aan ka qalin jebiyay Tyee High School—sida xaaskayga iyo saddexda carruurteena.

Tan iyo markii la ii magacaabay, ka dibna la iigu doortay, Golaha Dugsiga ee Highline sannadkii 2015, waxaan diiradda saaray mas'uuliyadda maaliyadeed, sinnaanta, iyo horumarinta joogtada ah. Waxaan keenaa hab wax ku ool ah oo xal raadin ah oo ku saleysan asalka xirfadeed ee maamulka silsiladda sahayda.

Ka Guddoomiyaha Guddiga Dugsiga ahaan, waxaan hoggaamiyaa Ballanqaadka Highline: inaan aqoonsado arday kasta magaciisa, xooggiisa, iyo baahidiisa. Waxaan ka shaqeeyay inaan hubiyo in dhammaan ardayda—haddii ay yihiin kuwa waxbarashada ku horumarsan ama kuwa bilowga ah ee baranaya Ingiriisiga—ay helaan waxbarasho tayo sare leh oo ku jirta deegaan ammaan ah oo taageero leh. Sanadihii la soo dhaafay, waxaan helay fursad aan kula shaqeeyo dad badan oo ka soo jeeda asalo iyo waayo-aragnimo kala duwan. Iskaashiyadan waxay i tuseen qiimaha wada shaqeynta, ixtiraamka, iyo dhegaysiga—gaar ahaan marka la sameynayo go'aanno saameynaya ardaydeenna, qoysaskeena, iyo macallimiinteena. Waxaan gaarnay horumar macno leh, laakiin weli waxaa jira wax badan oo la qabto. Waxaan si xushmad leh kaaga codsanayaa codkaaga si aan u sii wadno shaqadan muhiimka ah—wadajir.



# Agaasimaha Degmada Lr. 4

## Damarys Espinoza



damarys4highlineschools@gmail.com
electdamarys.com

**Waxbarashada:** Shahaadada ugu sareysa Shahaadooyinka Jaamacadda iyo Shahaadada Mastarka ee Cilmi-nafsiga Dhaqanka Bulshada (Sociocultural Anthropology), University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Hoggaamiyaha Hey'ad Aan Faa'iido doon Ahayn; Bare; La-taliye

**Bayaanka:** Anigoo ah Agaasimaha Golaha Dugsiga Highline, waxaan u tartamayaa inaan sii hayo kursigayga sababtoo ah waxaan aaminsanahay awoodda waxbarashada inay furto awoodda buuxda ee arday kasta. Khibraddayda nololeed iyo tan xirfadeed ayaa si wanaagsan iigu diyaarisay inaan u adeego dugsiyadeenna.

Waxaan ahay qof ku faana inuu ka qalin jebiyay dugsiga dadweynaha, ahna qofkii ugu horreeyay ee qoyskeyga ka qalin jebiya jaamacad, iyo gabadh ay dhalleen soogalooti ka yimid Mexico. Waxaan ka shaqeeyay fasallada anigoo ah kaaliye waxbarasho. Waxaan kasbaday Ph.D oo hadda waxaan wax ka dhigaa University of Washington. Waxaan ogahay waxa ay tahay in la gudbo caqabadaha, waxaanan fahamsanahay in waxbarashada tayada sare leh oo ay weheliso taageero ay tahay sida ardaydu wax u bartaan. Aqoonta xooggan waa muhiim, laakiin kuma filna. Anigoo ah hooyada saddex arday oo hadda iyo mustaqbalka ah ee Highline ahaan, waxaan si buuxda ugu heellannahay dugsiyada halkaas oo macallimiinta la taageero si ay u bixiyaan waxbarasho macno leh oo ardayda ay fursado u helaan inay koraan oo guuleystaan.

Qoysaska iyo bulshooyinka ayaa ah udub dhexaadka shaqadayda. Waxaan ka shaqeeyaa urur aan faa'iido doon ahayn oo u adeegga qoysaska la kulma hoy la'aanta. Waxaan la shaqeeyay qoysaska si aan u kordhiyo helitaanka guryaha, waxbarashada, iyo kheyraadka kale ee muhiimka ah.

Waxaan haystaa taageerada macallimiinta Highline. *Waxaan ku weydiisanayaa codkaaga. Si wadajir ayaan isku xiri karnaa dugsiyada, qoysaska, iyo kheyraadka bulshada si aan u dhisno dugsiyo ka tarjumaya xoogga iyo riyada arday kasta.*

## Ken Kemp



(206) 609-9064
kenneth4highline@gmail.com
VoteKen.org

**Waxbarashada:** Ka Qalin Jebiyay Olympic College oo leh Shahaadada Jaamacadda Labada Sanno, Macallin Shahaadaysan ee Xisaabta iyo Sayniska.

**Shaqo iyo Xirfad:** Local (Ururka Shaqaalaha) 26 Steamfitter/Macallin, Local (Ururka Shaqaalaha) 589 Darawal Urur Shaqaale, Soo saaraha Muusikada, Farshaxan.

**Bayaanka:** Carruur walba waxay mudan yihiin deegaan dugsi oo kobcaya oo ku saleysan *heer sare oo waxbarasho*, halkaas oo xiisaha uu ku kobco oo arday walba loo diyaariyo berri. Waxaan u tartamayaa Guddiga Dugsiga Highline si aan u dhabeeyo in dhammaan ardayda—kuwayga iyo kuwiinaba—ay si fiican ugu diyaar garoobaan mustaqbalka.

Ka arday ka soo baxay waxbarashada xirfadda, waxaan dhistay xirfad guul leh anigoo adeegsanaya xirfadaha dhabta ah ee nolosha. Qoyskaygu wuxuu gaarayaa afar jiil oo ku nool Degmada Dugsiga Highline, waxaanan keenayaa in ka badan 20 sanno oo waayo-aragnimo ah oo aan ku isticmaalay waxbarashadaas nolosheyda. Haddii ardaydu doortaan jaamacad, xirfado, ama tababar farsamo, waxay mudan yihiin fursad kasta oo ay ku guuleystaan. Dugsiyo xooggan waxay u baahan yihiin bulshooyin xooggan. Taasi waa sababta aan ugu ololeeyo *ka-qaybgalka bulshada* ee waalidiinta, hoggaamiyeyaasha deegaanka, iyo macallimiinta.

Inta badan nolosheyda waxaan ku faanay inaan xubin ka noqdo ururka shaqaalaha, waxaan si toos ah u arkay sida ururadu u taageeraan kobaca iyo fursadaha. Arrinta dhabta ah waa hoggaan xumo iyo mudnaanta oo si khaldan loo dejiyey. Macallimiintu waa wadnaha dugsiyadeenna, waana inay cod ku yeeshaan go'aannada saameeya fasalladooda, iyagoo ka madax bannaan saameyn ama xayiraad.

Inta badan canshuurtaada hantida waxay u socotaa dugsiyada—si kastaba ha ahaatee 80% carruurta ayaa dib u dhac ku jira. Waxaan soo celin doonaa xasilloonida, waxaan kor u qaadi doonaa heerarka tacliinta, waxaanan taageeri doonaa macallimiinta iyo qoysaska labadaba. Fadlan i caawi si aan u caawiyo carruurteena. Hadda waa *wakhtigooda*. U codee Ken Kemp.

## Agaasimaha Degmada Lr. 5

### Blaine Holien



Blaineforhighline@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Siyaasadda, Shahaadada Mastarka ee Dhaqaalaha, University Of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Hoggaamiye Iibka

**Bayaanka:** Sida Agaasimahaaga Guddiga Dugsiga ee hadda, waxaan si qoto dheer u qiimeeyaa muhiimadda ay leeyihiin dugsiyada dadweynaha ee tayada sare leh ee bulshadeenna. Waxaa iga go'an mas'uuliyadda maaliyadeed, anigoo hubinaaya in doolar kasta si xikmad leh loo isticmaalo si loo kordhiyo kheyraadka fasalka. In la ilaaliyo heer sare ee waxbarashada iyo baridda akhriska oo la horumariyo go'aan kasta waa lama huraan si loo taageero guusha ardaydeena. Waxaan sii wadi doonaa inaan mudnaanta siiyo wada shaqeynta ardayda, qoysaska, xubnaha bulshada, macallimiinta iyo maamuleyaasha si loo sameeyo go'aanno xog ogaal ah.

Aniga oo ah sayga macallin ka tirsan Highline, waxaan si toos ah u arkaa dadaalka iyo caqabadaha macallimiinteennu la kulmaan, waxaana aragtidaas u keenaa shaqadayda guddiga. Aniga iyo qoyskeyga waxaan ku raaxeysanaa inaan ku noolaano magaalada Des Moines halkaas oo aan ku korinayno labadeena carruur. Waxaan rabaa in arday kasta oo ku sugan Highline uu helo fursad la mid ah sida kuwa aan u rajeynaayo carruurtayda: waxbarasho ammaan ah, taageero leh, oo tayo sare leh.

Waxaan sharaf u arki lahaa inaan sii wado u adeegidda degmadeena waxaanan ku weydiisanayaa codkaaga si aan u sii wadno dhisidda bulshadeenna oo xooggan si wadajir ah.

# CODBIXIYAHA
## ★ MUSTAQBALKA ★

**16 iyo 17 sanno jirka ayaa hore isku sii diiwaan gelin kara si ay u codeeyaan oo si toos ahna loo diiwaan gelinayo si ay u codeeyaan marka ay gaaraan 18 jir.**

**Si aad u noqoto codbixiyaha mustaqbalka, waa inaad tahay...**

| 16 | | |
|---|---|---|
| Ugu yaraan 16 jir | Muwaadin Mareykan ah | Degan Washington |

### Sideen isku diiwaan geliyaa?

Oonleenka hore isaga diiwaan geli si aad u codeyso barta **VoteWA.gov.**

Waxaad sidoo kale shakhsi ahaan hore isaga diiwaan gelin kartaa Xarunta Codbixinta, ama adigoo boostada ku soo diraaya foomka diiwaan gelinta xaashida ah.

### Maxaa dhacaya markaan is diiwaan geliyo ka dib?

Warqad codbixin ayaa boostada si toos ah laguugu soo diri doonaa doorashada ugu horeysa ee aad u qalanto.

Warqaddaada codbixinta waxaad ku soo celin kartaa boostada - istaambo looma baahna. Hubi inay lahaato shaabadda boostada oo ah ugu dambeyn Maalinta Doorashada.

Ama waxaad warqaddaada codbixinta ku ridi kartaa sanduuqa lagu rido ee sugan ilaa iyo 8 p.m. oo gaw ah Maalinta Doorashada.

**Naga soo dabagal @kcelections oo isticmaal hashtaagga #FutureVoter**

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

# Agaasimaha Degmada Lr. 1

## Carson Sanderson



(509) 906-1816
electCarsonSanderson@gmail.com
electCarsonSanderson.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Injineerinka ee Cilmi-baarista Hawlaha iyo Injineerinka Maaliyadda, Princeton University

**Shaqo iyo Xirfad:** Kormeeraha Imtixaanka Degmada Dugsiga Northshore; Madaxweynaha, Golaha Waalidiinta HiCap

**Bayaanka:** Anigoo ah hooyo leh laba jinsi ah oo leh afar arday oo leh baahiyo waxbarasho oo gaar ah, waxaan fahamsanahay caqabadaha waalidiinta. Waxaan sannado ku qaatay tabarucaadda dugsiyada, PTAs, iyo Guddiga Waalidiinta HiCap iyo waxbaridda Girl Scouts.

Northshore waa degmo dugsiyeed heer sare waana hoggaamiye goboleed hal-abuur waxbarasho leh, laakiin waxay la kulmaysaa caqabado dhowr ah. Iyadoo aan haysano kormeere guud oo cusub, waxaan u baahanahay guddi dugsi oo leh waayo-aragnimo qoto dheer iyo xiriir adag oo bulshada ah. Waa inaan si wadajir ah uga shaqeyno sidii aan miisaaniyaddeena u dheelitiri lahayn, ugu dagaalami lahayn maalgelinta gobolka dheeraad ah, u dhisi lahayn keydkeena, oo aan u ilaalin lahayn heerka sare ee waxbarashada anagoo taageerayna baahiyaha dhammaan ardayda.

Waxay qaadataa dhammaanteen oo wada shaqeynaya si carruurta iyo qoysaska ay ugu guuleystaan. Waxaan arkay waxa shaqeeya iyo waxa la horumarin karo. Waa inaan si wanaagsan u taageernaa kala-duwanaanshaha maskaxeed ee ardaydeenna, aqoonsiyada dhaqankooda, iyo qaab-dhismeedka qoysaskooda si aan u taageerno caafimaadkooda maskaxeed. Ardayda iyo qoysaska leh luqado kala duwan oo afkooda koowaad ah waa in si wanaagsan loogu caawiyo adeegyada tarjumaadda. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan helo codkaaga si aan u difaaco arrimahaan.

Taageerooyinka: Xirfadyahannada Xafiiska iyo Waxbarashada ee Northshore; Ururka Waxbarashada Washington; Degmada Sharci -dejinta 1aad iyo Dimuqraadiyiinta Degmada Snohomish; Senatarka Derek Stanford; Wakiillada Davina Duerr, April Berg, iyo Brandy Donaghy; Duqa Magaalada Mason Thompson; Agaasimaha Guddiga Dugsiga Dr. Jacqueline McGourty; waxaa lagu sii wadi doonaa webseedka.

## Arun Sharma



(425) 287-0067
elect@electarunsharma.com
electarunsharma.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Injineernimada Farsamada, UW Seattle; Shahaadada Jaamacadda ee Injineernimada Farsamada, Jaamacadda Delhi, India

**Shaqo iyo Xirfad:** Farsamo yaqaan Sare (Injineer Sharaf leh) - Boeing

**Bayaanka:** Waxaan ahay injineer, macallin, u doode bulshada, iyo waalid ku faanaya laba Northshore ka qalin-jebiyay—labaduba hadda ka shaqeeya xirfadaha caafimaadka. Waxaan u tartamayaa Guddiga Dugsiga Northshore si aan u taageero horumarinta canuga oo dhan, oo ay ku jiraan barnaamijyada waxbarashada gaarka ah iyo kuwa ardayda hibada sare leh.

Waxaan aaminsanahay in la xoojiyo dugsiyadeena dadweynaha iyada oo loo maraayo maalgelin loo siman yahay, mushaharka macallimiinta oo caddaalad ah, adeegyo caafimaadka maskaxda oo balaaran, tacliin adag, helitaan balaaran oo STEAM ah, iyo diyaarinta jaamacadda iyo xirfadaha. Waxaan u ololayn doonaa dugsiyo loo dhan yahay, ammaan ah, oo taageero leh, waxaan maalgelin doonaa macallimiin iyo shaqaale heer sare ah, waxaanan qaadan doonaa go'aanno xog ku saleysan oo ka tarjumaya qiyaamka bulshadeena.

Waxaan taageerayaa miisaaniyad mas'uul ah oo leh isla xisaabtan cad—hubinta in maalgelinta dadweynaha ay horseeddo natiijooyin arday oo la cabbirri karo, oo ay ku jiraan koriinka shucuurta iyo tacliinta, iyo diyaarinta nolosha. Waxaan sidoo kale la shaqeyn doonaa macallimiinta iyo sharci-dejiyeyaasha guud ahaan Washington si aan u dib-u-habeyno qaabka maalgelinta duugoobay ee hore ee asalka ah oo aan u balaarinno waxbarashada aasaasiga ah si ay u daboolaan baahiyaha arday kasta.

Anigoo ka faa'iideysanaayo khibraddayda hoggaamineed ee gaarka ah ee warshadaha gaarka loo leeyahay, waxbarashada sare, adeegga aan faa'iido doonka ahayn, iyo waayo-aragnimada nololeed, waxaan fulin doonaa ballanqaadkayga ah horumarinta canuga oo dhan.
Taageerooyinka: Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci-Dejinta 1aad; Senatarrada - Derek Stanford, Manka Dhingra iyo John Lovick; Wakiillada – Shelley Kloba, April Berg, iyo Bandy Donaghy; Xubnaha Golaha – Degmada King Rod Dembowski, iyo Degmada Snohomish Jared Mead

## Agaasimaha Degmada Lr. 4

### Sandy R Hayes



(425) 892-4080
sandyrhayesforschoolboard@gmail.com
sandyhayesforschoolboard.wordpress.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Siyaasadda, University of Washington 1991, JD (Shahaadada Sharciga), University of Washington, 1994

**Shaqo iyo Xirfad:** Qareen, hadda waxaan leeyahay shaqo caddaalad soo celin ah.

**Bayaanka:** Anigoo ah waalid saddex ka qalin-jebiyey dugsiyada Northshore, in aan u adeego Guddiga Dugsiga Northshore lix iyo tobankii sanno ee la soo dhaafay waxay ii ahayd sharaf weyn. Inkasta oo aanu mar walba isku dheelitiray miisaaniyaddeena, haddana weli shaqo baa taalla, oo ay ku jirto u doodista kheyraad maaliyadeed oo loo baahan yahay si arday kasta mid kasta uu ugu hirgalo dugsiga iyo mustaqbalka uu doorto. Waxaan sii wadi doonaa in aan isu keeno codadka waalidiinta, ardayda, iyo macallimiinta si loo bixiyo xirfadaha fikir muhiim ah, hal-abuur, iyo isgaarsiin ee ardaydeennu ay u baahan doonaan kala bar labaad ee qarniga 21-aad, xitaa qarniga 22-aad. Ardaydeennu waa in loo diyaariyaa shaqooyin laga yaabo in aanay weli jirin, adduun si weyn uga duwan kan aynu maanta leenahay.

Waxaan aaminsanahay in arday kasta uu ogaado inuu xubin wax-ku-biirisa uga yahay bulshadeenna, taasna waxay ka bilaabataa in dhammaantood looga hadlo naxariis iyo ixtiraam. Mar walba waxaan ardayda ka dhigay aanna ka dhigi doonaa bartamaha adeeggayga.

Taageerooyinka – Ururada Waxbarashada iyo Xirfadleyaasha Xafiisyada ee Northshore, Dimuqraadiyiinta Degmooyinka 1aad iyo 45aad, Dimuqraadiyiinta Degmooyinka King iyo Snohomish, Guddiga Siyaasadda Haweenka Qaranka, mas'uuliyiin badan oo la soo doortay oo maxalli ah, iyo xubno badan oo bulshada ka tirsan

### JoAnn Tolentino



(425) 485-7440
joforschoolboard@gmail.com
votejoann.com

**Waxbarashada:** Wenatchee Valley College, Seattle Pacific University, Taqasus Daaweynta Muusikada

**Shaqo iyo Xirfad:** Macallin muusig oo hawlgab ah, xirfadle iibinta softiweerka, oo xiiseeya horumarinta waxbarashada.

**Bayaanka:** Anigoo ah ayeeyo ka mid ah qoysaska NSD iyo degane muddo dheer, waxaan ku dadaalayaa in arday kasta uu gaaro kartidiisa nidaam dhaqaale ahaan caafimaad qaba. Ka dib markii aan la shaqeeyay baahiyaha gaarka ah iyo dhallinyarada xabsiga ku jirta, waxaan la imid naxariis iyo faham ballaaran oo ku saabsan baahiyaha kala duwan ee ardayda.

Khibraddayda ku saabsan Maamulka, Khatarta, iyo Waafaqsanaanta waa qaybta maqan ee guddiga NSD. Iyadoo ay jirto gaabis dhan $21 milyan, waxaan mudnaan siin doonaa isla xisaabtanka maaliyadeed iyo hantidhawrka si loo hubiyo in lacagaha xaddidan si wax ku ool ah loogu isticmaalo guusha ardayda.

Caddaaladda isboortiga waxay ka dhigan tahay in gabdhaha ay la tartamaan gabdhaha iyo wiilasha ay la tartamaan wiilasha—iyadoo la ilaalinayo daacadnimada tartanka iyo badbaadada ardaydeenna.

Waxaan taageeraa codkaaga, anigoo awood siinaya waalidiinta, macallimiinta, iyo canshuur-bixiyeyaasha si ay u sameeyaan siyaasado. Iyadoo la adeegsanayo go'aanno daah-furan oo bulshada ku saleysan, waxaan qaadan doonaa manhaj kor u qaadaya fikirka muhiimka ah iyo xirfadaha jilicsan. Waa inaan taageernaa macallimiinteena waaweyn oo kor u qaadnaa dhibcaha imtixaanka tijaabada. Iyadoo ku dhawwaad $21,000 arday kasta sannadkii, heer sare waa la gaari karaa. Waa inaan ilaalinaa xakamaynta maxalliga ah ee dugsiyadeena oo aan xasuusnaanaa saameynta dibadda ee laga yaabo inaysan la jaan qaadi karin qiimaha bulshadeenna. Kobaca talooyinka laga helo waajibaadka iyo kooxaha danaha gaarka ah ayaa iska indho-tiri kara baahiyaha maxalliga ah. Go'aamada ku saleysan bulshada waxay ka caawiyaan in siyaasadaha ay ka tarjumaan qoysaskeena. Waalidiinta ayaa si fiican u fahma carruurtooda. *Ku soo dhawoow dugsiyada. Ardayda barwaaqaysan. Wax walba waxay ka bilaabmaan codkaaga.*

# Agaasimaha Degmada Lr. 5

## Kimberlee Kelly



(425) 780-7203
votekellyforschoolboard@gmail.com
kellyforschoolboard.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee waxbarashada, Loyola Marymount University; Shahaadada Macallinnimada; BA (Shahaadada Jaamacadda) Cilmiga Siyaasadda UCLA

**Shaqo iyo Xirfad:** Macallin Shahaadaysan ee K–12 iyo macallin dugsiga goorta hore, khabiir manhajka, iyo tababarre macallin

**Bayaanka:** Sida macallin leh in ka badan 15 sannad oo waayo-aragnimo iyo waalid/u doodaha arday cusub oo soo galaaya Northshore ahaan, waxaan keenni doonaa faham qoto dheer oo ku saabsan caqabadaha iyo fursadaha ay ardayda iyo qoysasku kala kulmaan dugsiyada dadweynaha.

Waxaan u sameeyay *manhajyo loo dhan yahay, adag* oo ka caawiyay ardayda inay xiraan *farqiga waxbarasho ee sannado badan* oo ku saabsan maadooyin kala duwan. Marka laga tago wax baridda, waxaan hoggaamiyey abuurista waaxda cilmiga sayniska kombuyuutarka, hormuud ka noqday hindisaha caafimaadka maskaxda, tababaray macallimiinta guud ahaan dalka oo dhan ee ku aaddan *waxbarid saamayn sare leh oo ku saleysan sinnaanta*, waxaanan ka soo shaqeeyay doorar hoggaamineed heer dugsi iyo degmo.

Ka wakiilkaaga ahaan, waxaan u ololayn doonaa siyaasadaha, dhaqamada, iyo maalgelinta hubinaaya in ardayda iyo macallimiinta Northshore ay guuleystaan—laga bilaabo fasallo yaryar iyo taageerooyinka caafimaadka maskaxda ilaa abuurista jawi waxbarasho oo loo dhan yahay oo soo dhawweynaya *dhammaan ardayda*. Waxaan si aan daal lahayn uga shaqeyn doonaa dib-u-dhiska keydka maaliyadeed anagoo adeegsanayna maalgelin waarta, ee gudaha iyo heer gobol. Waxaan ka shaqeyn doonaa hubinta in ilmo walba uu helo kheyraadka iyo fursadaha gaarka ah ee uu u baahan yahay si uu ugu guuleysto, oo ay ku jiraan helitaanka waxbarashada gaarka ah, farshaxanka, teknolojiyada, iyo xirfadaha diyaarinta jaamacadda iyo shaqada. Waxaan si xushmad leh u codsanayaa codkaaga.

Taageerooyinka: Ururka Waxbarashada Washington (WEA), *ururada shaqaalaha macallimiinta Northshore* (NSEA iyo NEOPA), Dimuqraadiyiinta Degmada 45aad, Senatar Derek Stanford, Xubin Golaha Magaalada Woodinville Michelle Evans

## Lynda Schram



(206) 817-5394
Northshore@voteLynda.com
www.voteLynda.com

**Waxbarashada:** BS (Shahaadada Jaamacadda) ee Fisikiska Universite de Fribourg, Switzerland, Wheaton College,

**Shaqada:** hore: Hewlett Packard, Motorola, Texas Instruments, Macallin. Hadda: Xildhibaan

**Bayaanka:** Da'daydu waa 71, waxaanan deganaa degmadan 35 sano. Waalid firfircoon ayaan ahay oo 5 carruur ah, ayeeyo/awoowe 12, waxaana dhowr ka mid ah awlaaddayda ku jiraan dugsiyada Degmada Northshore. Xubin guddiga PTA ayaan soo ahaa, 25 sanno ayaan wax ka dhigay oo dib-u-eegis ku sameeyay manhajka, waxaanan bixiyay barid gaar ah oo aan ku raaxeystay dhammaan caqabadahaan.

Anigoo ka welwelsan hoos-u-dhaca weyn ee natiijooyinka akhriska iyo xisaabta ee dugsiyo badan, hadda waa lama huraan in si dhab ah diiradda loo saaro *tacliinta iyo manhajka*. Akhrisku waa albaabka waxbarashada. Waxaan la shaqeyn doonaa xubnaha guddiga si aan u helno xalal daboola baahiyaha kala duwan ee ardayda maanta.

Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha ee Gobolka wuxuu ka soo horjeedaa Xuquuqda Waalidiinta, balse wuxuu taageersan yahay in wiilal loo oggolaado musqulaha gabdhaha, qolalka labiska, iyo in wiilal lo oggolaado ciyaaraha gabdhaha. Dowladdeennu waxay khatar ugu jirtaa inay lumiso *balaayiin doolar oo deeqo federaal a*h iyadoo diiddan u hoggaansanaanta xuquuqda federaalka ee Title IX ee nus milyan oo gabdhood. Waalidiinta Degmada Dugsiga Northshore waxa ay haystaan cod xoog leh iyada oo loo marayo agaasimayaasha guddigooda; guddiyada maxalliga ahi waxay adkeyn karaan Title IX waxayna hubin karaan in xuquuqda gabdhaheenna la ixtiraamo.

Waxaan u doodi doonaa *qaybinta masuuliyadda leh* ee kheyraadka dadweynaha*, daah-furnaanta, iyo isla-xisaabtanka* ku aaddan sharciyada iyo siyaasadaha taageera waxbarasho tayo sare leh.

## Agaasimaha Degmada Lr. 2

### Avanti Bergquist



(425) 390-4527
avantibergquist@gmail.com
www.avantibergquist.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga ee Bayoolajiga, Jaamacadda Duke; M.S. Bayokemistari & Bayoolajiga Molikiyuulka, OHSU; M.D., Jaamacadda Louisville

**Shaqo iyo Xirfad:** Dhakhtar Cilmi-nafsiyeedka carruurta, Dhallinyarada, iyo Dadka Waaweyn

**Bayaanka:** Aniga oo ah qof ku faana inuu ka qalin jebiyay Degmada Dugsiga Renton, waalid u ah carruur ku jirta degmada, iyo xaas macallin ka tirsan degmada, waxaa sharaf ii ahayd inaan matalo ardayda iyo bulshada Degmada Dugsiga Renton. Dhab ahaantii ma aysan ahayn dhowr sanno oo fudud, laakiin degmadayada iyo bulshadayadu waxay si wadajir ah isugu soo baxeen si aan ugu dadaalno ardayda iyo shaqaalaha. Waxaan sii wadi doonaa inaan si adag u shaqeeyo si aan u noqdo lammaane iyo xulafo u ah bulshadeenna anagoo ilaalinayna mudnaanta Degmada Dugsiga Renton ee Adeegga, Heer Sare, iyo Sinnaanta. Mid ka mid ah mudnaanta ugu weyn ee aan leeyahay, ka agaasimaha guddiga iyo dhakhtar cilmi-nafsi carruurta ahaan, waa shaqada joogtada ah ee lagu horumarinayo caafimaadka maskaxda iyo waxbarashada bulshada iyo dareenka ee ardaydeenna. Waxaan aad ugu faanayaa iskaashiga bulshada ee gudaha degmadeena ee ardayda Dugsiyada Renton u oggolaanaya inay helaan daryeelka caafimaadka maskaxda. Waxaan si daacad ah u qadarin lahaa taageeradaada si aan u sii wado shaqadaan anigoo ah halyeey heellan oo u taagan arday kasta oo ku sugan Degmada Dugsiga Renton.

## Sugidda Doorashooyinkeena Si Codeyn Kasta Loo Tiriyo

**Halkan Doorashooyinka Degmada King, hadafkeenu waa inaan qabanno doorashooyin sax ah, sugan, oo la heli karo.**

### Ammaanka Goobta

- Xarunteena waxaa kormeera in ka badan ku dhawwaad 80 kaamirooyinka amniga ah.
- Dadweynaha ayaa naga daawan kara in ka badan 15 kaamiryoonka tooska ah anagoo shaqeynayna inta lagu jiro habeynta warqadda codbixinta.
- Shaqaalaha iyo goobjoogeyaasha waa inay aqoonsi ku soo galaan ugana baxaan goobta looga shaqeeyo warqadaha codbixinta.
- Aagga lagu keydiyo iyo xisaabinta warqadda codbixinta ayaa u baahan aqoonsi iyo mashiinka suulka la saaro labadaba.

### Ammaanka Oonleenka

- Khubaro ku taqasusay amniga internetka oo shahaadeysan ayaa shaqaale ka ah waaxda doorashooyinka iyo IT-ga Degmada King.
- Dhammaan shaqaaluhu waxay qaataan tababarka sannadlaha ah ee ammaanka oonleenka.
- Nidaamyada diiwaan gelinta codbixiyaha iyo xisaabinta codeynta ayaa la kala soocaa si loogu ilaaliyo ammaanka ugu sareeya.
- Nidaamka xisaabinta codeynta waa nidaam gebi ahaanba ah shabakad xiran, kumana xirna internetka.

# Agaasimaha Degmada Lr. 5

## Meagan Powell



(425) 524-7514
friendsofmeaganpowell@gmail.com
www.meaganpowell.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Sayniska Bulshada iyo Shahaadada Macallinnimada ee Gobolka Washington, Central Washington University

**Shaqo iyo Xirfad:** Qaxwo Sameeye

**Bayaanka:** Waxaan ku soo barbaaray halkan, waxaanan ahay arday ka qalin jebiyay degmada dugsiga Renton. Khibraddayda ardaynimo ayaa igu dhiirigelisay inaan sahmiyo xirfad macallinnimo, iyo khibraddayda ku noolaanshaha magaalada Renton ayaa igu dhiirigelisay inaan u tartamo golaha degmada dugsiga.

Tilmaame muhiim ah oo muujinaya caafimaadka bulshada waa wanaagga dhallinyaradeeda. Marka ardaygu (iyo qoyskooda) si firfircoon uga qayb qaataan nidaamka waxbarashada, natiijooyinka ayaa ka wanaagsan — ma'aha oo keliya ardayda iyo qoysaskooda, balse sidoo kale bulshadeenna inteeda kale.

Waxaan ogahay in guddiga degmada dugsiga ay ku hawlan yihiin xallinta caqabado adag oo sii kordhaaya, laakiin walaacayga, iyo sababta aan ugu tartamayo xilka Agaasimaha Degmada Dugsiga Renton, Jagada 5, waa maqnaanshaha daah-furnaanta, burburka isgaarsiinta, iyo xiriirka sii xumaanaya ee u dhexeeya guddiga dugsiga iyo bulshadeenna. Ma'aha inay sidan ahaato.

Marka la i doorto, diiraddaydu waxay noqon doontaa taageeridda tallaabooyinka saameynta ugu weyn ku leh guusha ardayda, ka dhabeynta in shaqaalaha degmada ay haystaan kheyraadka ay u baahan yihiin, iyo in bulshadeennu ay cod ku leedahay kulanka kasta, saameyn ku leedahay dood kasta, iyo faham cad oo ku saabsan go'aan kasta oo la gaaro.

## Lindsay Jensen



(206) 657-6422
LindsayJensen100@gmail.com
www.JensenForEducation.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga ee Injineernimada Kiimikada iyo Kimistariga, University of Wisconsin – Madison; Shahaadada Sharciga (J.D.), Seattle University

**Shaqo iyo Xirfad:** Maamulaha Kaaliyaha Xeer Ilaaliyaha Guud, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Gobolka Washington

**Bayaanka:** Waxaan si xoog leh u aaminsanahay qiimaha dugsiyada dadweynaha. Carruur walba waa in ay helaan waxbarasho tayo sare leh oo ballaarisa maskaxdooda, u diyaarinaysa xirfadda ay doorteen, kuna xoojinaysa xubnaha bulshadeenna ee dimuqraadiyaddeenna. Ilmo walba wuxuu xaq u leeyahay fursad uu ku guuleysto, ujeeddadaynu waa inaan hubiyo in carruurteenu ay helaan fursadaha ay u baahan yihiin si ay u koraan.

Waxaan la shaqeeyay waalidiinta iyo shaqaalaha dugsiga ee dugsiga hoose ee carruurtayda si aan u horumariyo hindiseyaal kor u qaadaya waayo-aragnimada waxbarasho ee dhammaan ardayda. Waxaan ka tirsanahay Golaha PTA ee magaalada Renton, anigoo la falgalaya bulshada ballaaran, wax ka qabashada arrimaha degmada oo dhan, iyo u doodista siyaasadaha taageera guusha iyo wanaagga ardayda. Waxaan si toos ah u arkay saameynta ay leedahay ka-qaybgalka waalidka iyo bulshada ee hubinta guusha waxbarasho ee carruurteena.

Waxaan ku jirnaa wakhtiyo aan la hubin oo waxaan wajahaynaa caqabado aan horrey loo arag. Waxaan aaminsanahay inaan la kulmi karno caqabadahaan anaga oo aan u hurin qiyamka bulshadeenna. Wada shaqeyn ahaan, waxaan abuuri doonaa deegaan taageero leh oo adkeysi leh oo u oggolaanaya carruurteena inay ku koraan. Waxaan ahay badeeco ku faan leh oo ka soo baxay dugsiyada dadweynaha iyo qof waalid u ah arday dhigata dugsiyada degmada Renton.

*Taageerooyinka: Wakiillada Gobolka Steve Bergquist, My-Linh Thai; Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci Dejinta 11aad & 41aad, Dimuqraadiyiinta Degmada King, Dhallinyarada Dimuqraadiyiinta Degmada King*

# Agaasimaha Degmada Lr. 2

## Kathleen Smith



kathleensmithforschoolboard@gmail.com
www.smith-for-schools.com

**Waxbarashada:** PhD ee Xisaabta University of Colorado, Boulder, BS (Shahaadada Jaamacadda) ee Xisaabta iyo Kimistariga Norwich University

**Shaqo iyo Xirfad:** Saynisyahanka Xogta, Microsoft Corporation; Macallin hore, University of Colorado, Boulder

**Bayaanka:** Anigoo ah waalid leh ilmo yar iyo arday ka tirsan fasalka xannaanada ee SPS, waxaan si shakhsi ah ugu heellanahay barnaamijyo waara oo taageera dhammaan ardaydeenna. Aniga oo ka soo jeeda qoys macallimiin ah, oo leh khibrad waxbarid oo aan leeyahay, waxaan keenayaa aasaas wax ku ool ah oo ku saabsan waxbarashada, oo ay weheliso khibrad ku saabsan cilmiga xogta si aan u kaxeeyo go'aannada guddiga degmada dugsiga ee xogta ku saleysan.

Magaalada Seattle waxay la kulantaa dhibaato dhab ah oo ku saabsan sinnaanta. Qorshaha xiritaanka iyo siyaasadda liiska sugitaanka waxay ahaayeen isku dayo lagu xallinayo sinnaanta, laakiin ma'ahan xalka aan u baahanahay. Waxaan u baahanahay inaan maalgelino dugsiyada xaafadaha aan haysan kheyraad ku filan oo aan kordhino helitaanka dugsiyada fursadaha. Qoys walba wuxuu mudan yahay dugsi maxalli ah oo soo jiidasho leh, waana inaan ilaalinaa deegaannada waxbarasho ee gaarka ah ee laga bixiyo degmada oo dhan. Si aan u taageerno barnaamijyadaan iyo macallimiinta ka shaqeeya, waa inaan u ololeynaa dakhliga horumarsan.

Waa inaan maalgelin ku sameynaa nidaam ammaan oo loogu talagalay ardaydeenna. Ardaydu waxay u dagaalameen maalgelinta magaalada ee caafimaadka maskaxda, waxaana loo baahan yahay inaan la kaashanno magaalada bixinta la-taliyeyaasha caafimaadka maskaxda, kaabayaasha amniga iyo gaadiidka, iyo guryaha la awoodi karo. Dugsiyadeena waa inay noqdaan tiirarka bulshada marka lagu daro inay yihiin goobaha waxbarashada. In kasta oo teknolojiyadda ay kor u qaadi karto barashada, waxaan qiimeeyaa xiriirka aadanaha oo ah udub dhexaadka waxbarashada.

Qorshaha xiritaanka ee sannadkii hore wuxuu si cad u muujiyay baahida loo qabo daah-furnaan iyo la xisaabtan gudaha degmada, taas oo aan leeyahay xirfadaha aan ku gaarsiin karo. Waa inaan la falgalno oo aan dhegaysano bulshooyinka kala duwan ee magaalada Seattle iyo codadka ardayda ee si cad u muujinaya baahidooda. Dhammaan xogta waxay wadataa eex; waa inaan go'aamadeenna ku saleynaa waayo-aragnimada nolosha oo aan isticmaalnaa xog dhab ah si aan u horumarinno sinnaanta dhabta ah ee SPS.

Bayaannada aan bixiyo waxay matalaan aragtidayda shakhsiyadeed. Waxaan u hadlayaa naftayda mana matalaayo magaca loo-shaqeeyahayga, Microsoft Corporation.

*Taageerooyinka: The Stranger, Dimuqraadiyiinta Degmada King , Ururka Waxbarashada Seattle, Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka, Tech4Housing, Agaasimaha Guddiga Dugsiga Michelle Sarju*

## Sarah Clark



(847) 828-4057
hello@sarah4schoolboard.org
www.sarah4schoolboard.org

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Fikradaha Taariikhda Isbarbardhigga, University of Washington Shahaadada Mastarka ee Siyaasadda Waxbarashada, University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha Siyaasadda, Seattle Metro Chamber (Rugta Magaalo Weynta Seattle)

**Bayaanka:** Ardaydu waxay u qalmaan hoggaamiyeyaal wax dhegaysta oo firfircoon marka ay go'aan qaadanayaan. Aniga ayaa ah hoggaamiyahaas. Sida arday ka qalin jabiyay Dugsiyada Dadweynaha Seattle (Ka Qalin Jebiyay Garfield), horrey u ahaan jiray ilmo la korsaday, haweeney midab leh, iyo gabadh waalid shaqaale ah, waan ogahay caqabadaha ardaydu kala kulmaan SPS. Waxaa iga go'an inaan u dagaallamo guusha iyo badbaadada dhammaan ardaydeena.

Khibraddayda nololeed, dhaqanka Budhiisamka, waxbarashada, oo ay ku jiraan cunsuriyadda nidaamsan iyo dhaawacyada aan ka gudbay, ayaa hagaya habkayga guddiga. Waxaan nolosheyda u huray dagaalka loogu jiro sinnaanta dhabta ah ee ardayda iyo macallimiinta. Anigu *waxaan aaminsanahay iskaashiga* oo waxaan la shaqeeyay bulshooyin kala duwan, oo ay ku jiraan ururada fikirka horumarka, ururada u doodista, shaqaalaha, iyo bulshada ganacsiga.

Ka dib sannado badan oo aan daawanaayay hoos u dhaca SPS, waan ogaa inaan u baahanahay inaan wax ka qabto. Laga bilaabo maalintii aan ku biiray Golaha Abriil 2024, waxaa iga go'an inaan dhegaysto bulshadeenna. Waxaan ahaa *xubin ka tirsan Guddiga ugu horreeyay* ee ka hadlay qorshaha khaldan ee degmada ee xiritaanka dugsiyada, waxaana hoggaaminayay soo celinta kormeerka maaliyadeed si aan u hagaajino miisaaniyadda oo aan u hubinno in kheyraadka ay gaaraan ardayda fasalka.

SPS ma joogto meel wanaagsan. *Anigu waxaan ahay musharaxa degmada 2aad ee sida ugu wanaagsan u keenni kara isbeddelada ardayda iyo waalidiintu rabaan oo ay u baahan yihiin*. Waxaan haystaa shahaadada mastarka ee siyaasadda waxbarashada iyo khibrad aan ku ogahay waxa loo baahan yahay si loo beddelo SPS. Xaaladda hadda jirta waxay abuurtay dhibaato miisaaniyadeed oo $100M ah, hoos u dhac ku yimid diiwaan gelinta iyo heerka tacliinta, kororka sinnaan la'aanta, iyo dugsiyo aan ammaan ahayn. *Tani waa mid aan la aqbali karin*. Waxaan la shaqeyn doonaa bulshada, soo celin doonaa kalsoonida dadweynaha iyo kormeerka maaliyadeed, waxaanan u dagaalami doonaa dugsiyo ammaan ah. Waxaan si xushmad leh u codsanayaa codkaaga, aan wada shaqeyno si aan u wanaajinno mustaqbalka carruurteena.

Taageerooyinka:

Shaqooyinka Dhismaha ee Seattle, Seattle Times, Dimuqraadiyiinta Degmada 32aad, Dimuqraadiyiinta Degmada 36aad, Dimuqraadiyiinta Degmada 46aad, Dimuqraadiyiinta Degmada King, iyo 10 xubnood ee guddiga dugsiga ee hadda iyo kuwii hore

# Agaasimaha Degmada Lr. 4

## Joe Mizrahi



(206) 745-2010
joe@joe4schools.com
www.joe4schools.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Sharciga, University of San Diego School of Law; BA (Shahaadada Jaamacadda), Brandeis University

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha Guddiga Dugsiga; Xoghaye-Khasnajiga, UFCW 3000 oo matalaya shaqaalaha safka hore

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ah inaan u adeego sidii wakiilkaaga Degmada 4aad ee Guddiga Dugsiga Seattle. Anoo ah Mareykan ah iyo waalidka saddex arday oo dhigta SPS (Dugsiyada Dadweynaha Seattle), iyo hoggaamiye shaqaale muddo dheer ah, waxaan keenayaa ballanqaad qoto dheer oo ku saabsan sinnaanta waxbarashada, mas'uuliyadda maaliyadeed, iyo hoggaaminta bulshada ku saleysan.

Markii la ii magacaabay wakhti ay jireen caqabado miisaaniyadeed oo waaweyn, waxaan ka faa'iideystay sannado khibrad ah oo aan ku maamulaayey miisaaniyado malaayiin doolar ah si aan ugu ololeeyo istiraatiijiyado maaliyadeed oo mas'uuliyad leh oo mudnaanta siinaya barashada ardayda iyo xasilloonida. Markii la soo jeediyay xiritaanno si weyn u saamaynaya iskuulada, waxaan la shaqeeyay asxaabtayda, qoysaska, iyo shaqaalaha si aan uga hortago carqaladaynta xun ee kumanaan qoys.

Waayo-aragnimada waalidiintayda oo ahaa macallimiin waxbarashada gaarka ah, waxay i bartay qiimaha waxbarashada loo dhan yahay iyo muhiimadda ah in loo dagaallamo xuquuqda carruurta oo dhan inay guuleystaan. Waxaan fahamsanahay cawaaqibka dhabta ah ee dugsiyada aan si wanaagsan loo maalgelin, waxaana iga go’an inaan ballaariyo helitaanka barnaamijyo waxbarasho iyo taageero oo tayo sare leh oo loo dhan yahay guud ahaan Seattle.

Bilowgii bilaha aan ku jiray guddiga, waxaan ka shaqeeyay xoojinta hufnaanta iyo dib u dhiska kalsoonida. Waxaan mudnaanta siiyay isgaarsiinta furan ee lala yeesho qoysaska, macallimiinta, iyo bulshooyinka dugsiyada, waxaanan si qoto dheer u dhegaystay waxa ardaydeennu u baahan yihiin si ay u barwaaqoobaan.

Waxaa iga go'an inaan sii wado shaqadaas— anigoo wax ka qabanaya dhibaatada miisaaniyadda anagoo adeegsanayna xalal sinnaanta diiradda saaraya, dhisaya iskaashi xooggan oo u dhexeeya dugsiyada iyo qoysaska, ballaarinta waxbarashada loo dhan yahay, iyo u doodista maalgelinta ardaydeennu mudan yihiin. Waxaan si xushmad leh u waydiisanayaa codkaaga si aan u dhisno degmo uu ilmo kastaa haysto agabka uu wax ku barran karo, ku kori karo, oo ay ku gaari karaan awooddooda buuxda, si wadajir ah.

*Waxaa taageeray: The Seattle Times; the Stranger; Hagaha Codbixiyaha ee Progressive; 32aad, 36aad, 43aad, 46aad, Degmada King, iyo Dhallinyarada Dimuqraadiyiinta; Ururka Waxbarashada Seattle; Ururka Waxbarashada WA; Dhammaan Wadajir u ah Dugsiyada Seattle; U Doodeyaasha Isbahaysiga Waalidnimada ee Qorsheysan; Isbahaysiga Mas’uuliyadda Hubka; Tech 4 Housing; Ururka Shaqaalaha MLK; Xildhibaan Jayapal; Guddoomiyaha Ferguson; Wakiillada Gobolka Reed, Berry, Scott, Macri; Senatarka Saldaña; Agaasimeyaasha Guddiga SPS Topp, Clark, Hersey; iyo waalidiinta, macallimiinta, iyo ardayda guud ahaan Seattle*

## Laura Marie Rivera



(425) 835-2805
drlauramarie@gmail.com
votelauramarie.com

**Waxbarashada:** Shahaadada ugu Sareysa Jaamacadda ee Waxbarashada (Doctor of Education), Seattle University; MS Ed (Shahaadada Mastarka ee Waxbarashada) Maaraynta Aan Faa'iido Doonka Ahayn, Bank Street College NYC; BA (Shahaadada Jaamacadda) UCLA

**Shaqo iyo Xirfad:** Hooyo, Macallin leh in ka badan 20 sano oo waayo-aragnimo ah, Aasaasaha Urur aan faa'iido doon ahayn, Seattle SpecEdu PTSA

**Bayaanka:** Waxaan fasalladayada maanta ku haynaa mustaqbalka bulshada! Qoysaska Seattle waxay u qalmaan hoggaan dhegaysta oo ardayda ka dhigaaya udub dhexaadka go'aan kasta. Marar badan, siyaasado waaweyn waxaa sameeya guddi aan la socon waxa ka dhacaya fasalladayada iyo guryahayaga. Kala duwanaanshahaas wuxuu abuuray jahwareer, kalsooni darro, iyo xalal aan sax ahayn. Waxaan u tartamayaa Golaha Dugsiga si aan u beddelo taas oo aan dib ugu soo celiyo daah-furnaanta, la xisaabtanka, iyo fikirka ardayga ku saleysan ee safka hore.

Waxaan ahay Hooyo afar carruur leh, macallin, farshaxan, iyo u ololeeya noloshayda oo dhan ardayda ka fog caddaaladda waxbarasho. Waxaan wax ka dhigay fasallo buux dhaaf ah, taageeray barnaamijyada waxbarashada gaarka ah iyo kuwa luqadaha badan, waxaanan la shaqeeyay qoysaska la tacaalaya caqabadaha nidaamka. Waxaan si joogto ah u aqoonsadaa oo uga jawaabaa baahiyaha shakhsiyadeed, anigoo hubinaya in ardayda—gaar ahaan kuwa ugu nugul—ay helaan fursadaha ay mudan yihiin: farshaxanka, isboortiga, waxbarashada sare, tababarka farsamada, iyo in ka badan. Waxaan si toos ah u ogahay sida siyaasadaha khaldan ay ardayda uga tagaan gadaal, waxaana aaminsanahay in xalalka dhabta ah ay ka bilaabmaan dhegaysiga, ma aha male awaalka.

Aniga ayaa ah macallinka keliya ee tartankan ku jira. Waxaan fahamsanahay fasalka iyo bulshada, waxaanan adeegsan doonaa fahamkaas si aan u weydiiyo su'aalo wanaagsan, u dalbado jawaabo fikir leh, oo aan ku riixo siyaasado wax ku ool ah oo ardayda u adeegaya.

Tallaabooyinkii ugu dambeeyay ee guddiga ayaa ka tagay bulshooyinka iyagoo dareemaya amni darro, aan la maqal, iyo aan la soo dhawweyn. Waxaan u baahanahay hoggaan u qorsheynaya si mas’uuliyad leh, si cad u wada xiriira, oo mudnaanta siiya wanaagga ardayda ka hor inta aan la tixgelin danaha siyaasadeed. Waxaan joogayaa, waxaan la yeelan doonaa wada hadallo adag, waxaanan hubin doonaa in ardayda iyo qoysasku ay cod dhab ah ku yeeshaan go'aannada qaabeeya noloshooda.

Waxaa si sharaf leh u taageeray hoggaamiyeyaasha bulshada ee la aamini karo, Ururka Shaqaalaha Macallimiinta SEA, Kormeeraha Guud ee Gobolka Chris Reykdal, NWPC, LD36/LD11/LD32, KCDems/KCYD, VoteMama iyo kuwo kale. Waxay og yihiin inaan keeno hab dhaqameed loo dhan yahay iyo rikoor muujinaya inaan soo muuqdo marka ay ugu muhiimsan tahay.

Waxaan diyaar u ahay inaan hoggaamiyo anigoo leh daacadnimo, diiradda saaraya, iyo daryeel—waxaanan jeclaan lahaa inaan kasbado codkaaga.



# Agaasimaha Degmada Lr. 5

## Vivian Song



(206) 821-0168
vivian@songforseattleschools.com
www.songforseattleschools.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Maamulka Ganacsiga, Harvard Business School; B.A.(Shahaadada Jaamacadda) Dhaqaalaha, Harvard University

**Shaqo iyo Xirfad:** Xirfadyahan maaliyadda, Waalid Dugsiyada Dadweynaha Seattle, agaasimihii hore ee guddiga dugsiga

**Bayaanka:** Waxbarashada dadweynaha ayaa noloshayda wax ka beddeshay. Waxaan waxbarashada ku bilaabay anigoo ah arday Ingiriiska u ahaa sida Luqad Labaad ahaan oo leh naafanimo maqalka ah. Mahad waxaa leh macallimiin heellan, waxaan ahay haweeneydii ugu horreysay ee qoyskayga ka mid ah ee qaata shahaado jaamacadeed. Anigoo ah waalid arday ka dhigato Dugsiyada Dadweynaha Seattle, xirfadyahan maaliyadda, iyo Agaasimihii hore ee Guddiga Dugsiga, waxaan kor ugu kacayaa si aan u adeego wakhti ay degmadu wajahayso go'aanno waaweyn oo ku saabsan Kormeeraha cusub, hoos u dhac miisaaniyadeed oo dhan $100M, iyo jihadeeda mustaqbalka.

Waxaan la imaanayaa hoggaan degan, oo khibrad leh, xirfad miisaaniyadeed iyo maaliyadeed, iyo xidid qoto dheer oo bulshooyinka dugsiyada dhexdiisa ah si aan caqabadaha uga gudubno anagoo ilaalinayna isla-xisaabtan iyo diirad saaridda natiijooyinka ardayda. Waa in aan ilaalinaa oo aan maalgelinaa barnaamijyada ka dhigaaya ardayda kuwa wax baranaaya oo mudnaanta siinaa qorsheynta mustaqbalka fog, ee ma aha jarista wakhtiga gaaban.

Waa tan waxa aan samayn doono: *Keenista caddeyn iyo kormeer ku aaddan miisaaniyaddeena* si loo xaqiijiyo sinnaanta, isla xisaabtanka, iyo deganaanshaha*. Ilaalinta dugsiyada* laga bilaabo gooyn aan sabab lahayn iyo qorsheyaasha xiritaanka. *Raadinta heerka sare xagga tacliinta dhammaan carruurta*, waxbarasho gaar ah oo loo dhan yahay, barasho heer sare leh, dariiqooyinka xirfadeed*. Maalgelinta caafimaadka dhimirka*, ka hortagga rabshadaha hubka, iyo badbaadada dugsiyada. *Ka hortagga weerarrada Trump* ee ka dhanka ah dugsiyadeena, ardayda LGBTQ+, iyo qoysaska aniga oo kale ah oo dalkaan u yimid inay waxbarasho iyo fursado raadsadaan.

Waxaan mudan nahay dugsiyo diyaariya ilmo kasta si uu u gaaro awooddiisa. Anigoo leh waayo-aragnimo, xidhiidhka bulshada, iyo aaminsanaanta qoto dheer ee awoodda waxbarashada dadweynaha, waxaan diyaar u ahay inaan u shaqeeyo adiga-iyo dhammaan 49,000 arday ee Seattle.

Sharaf bay ii ahaan lahayd inaan kasbado taageeradaada iyo codkaaga.

Taageerooyinka: Dimuqraadiyiinta Degmada King iyo Degmada; ururada matalaya bareyaasha iyo shaqaalaha ka shaqeeya dugsiyadeena (WEA, BADA, Ganacsiga Dhismaha); The Stranger; Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka; Codadka Hal Ameerika; Xildhibaan Pramila Jayapal, Duqa Magaalada Bruce Harrell; Guddoomiyaha Golaha SPS Topp iyo Agaasimeyaasha Clark, Mizrah; Sharci-dejiyeyaasha gobolka, xubnaha golaha, ardayda, waalidiinta, iyo hoggaamiyeyaasha bulshada!

## Janis White



(206) 601-2448
hi@janisforseattleschools.com
www.janisforseattleschools.com

**Waxbarashada:** J.D. (Shahaadada Sharciga), Boston University Law School; Shahaadada Jaamacadda Taariikhda, Oberlin College.

**Shaqo iyo Xirfad:** U Doodaha iyo Aasaasaha Naafada, All Youth Belong; Qareen Maxkamadeed, Fidelity

**Bayaanka:** Dugsiyada Seattle waxay ku jiraan xaalad dhaqaale oo adag. Waxaan u tartamayaa inaan loolan ku sameeyo xaaladda hadda jirta, inaan mas'uuliyiinta la xisaabtamo, oo aan dadka isu keeno si aan xalal u helno. Waxaan u dagaalami doonaa miisaaniyad hufan, anigoo xooga saaraya in bulshooyinka ay saameyntu gaarto lala yeesho wadatashi hore, mid macno leh, isla markaana joogto ah.

Go'aanno miisaaniyadeed oo adag waa in la sameeyaa. Hase ahaatee, xiritaanka dugsiyada iyo joojinta barnaamijyada waxbarashada gaarka ah waxay keliya ka qayb qaadan doonaan hoos u dhaca diiwaan gelinta waxayna sii xumeyn doonaan, ma xallin doonaan, arrimaha miisaaniyaddeena. Waxaan ka shaqeyn doonaa inaan ilaalino dugsiyadeena iyo barnaamijyada muhiimka ah ee sida ugu badan carruurta ugu sii haya nidaamka dugsiyada dadweynaha.

Anigoo ah waalid leh arday naafo ah, waxaan si toos ah u arkay sida Dugsiyada Dadweynaha ee Seattle ay u guuldareysteen inay daboolaan baahiyaha dhammaan ardayda, ayadoon loo eegin asalkooda ama awoodahooda. Macallimiinta, shaqaalaha, iyo maamuleyaasha waxay rabaan inay sameeyaan waxa saxda ah–laakiin waxay u baahan yihiin hagitaan iyo taageero xooggan.

Arday badan, gaar ahaan kuwa ka soo jeeda dadka la faquuqay sida carruurta LGBTQ iyo BIPOC, waxay la kulmayaan heerar sare oo walaac, niyad-jab, iyo caqabado caafimaad maskaxeed oo halis ah. Waxaan ka shaqeyn doonaa inaan u hoggaansamo ballanqaadyadeenna oo aan si buuxda u maalgeliyo la-taliyeyaasha dugsiga intaan sidoo kale wax ka qabanayo saameynta xun ee isticmaalka baraha bulshada ee fasallada.

Wargeyska The Seattle Times ayaa taageeray ololahayaga isagoo tilmaamaya aqoontayda qoto dheer ee waxbarashada gaarka ah iyo sharciga—meelo khibrad ah oo ay si weyn ugu baahan tahay guddiga dugsiga. Haddii ay ahaan lahayd sida Guddoomiyaha Guddiga Waxbarashada Gaarka ah ee Seattle PTSA ama aasaasidda urur aan faa'iido doon ahayn si loo kordhiyo ka mid noqoshada iyo lahaanshaha dhallinyarada naafada ah, waxaan u dagaalamay ardayda iyo qoysaska Seattle in ka badan labaatan sano. Wadajir, waxaan ku qaadan karnaa go'aanno adag oo diiradda saaraya talooyinka bulshada iyo taageeridda dhammaan ardayda si ay u gaaraan guul.

Taageerooyinka: Madaxweynaha Guddiga Dugsiga Gina Topp, The Seattle Times, Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka, ATU Local 587, iyo kuwo kale oo badan halka janisforseattleschools.com.



# Agaasimaha Degmada Lr. 7

## Carol Rava



info@electcarolrava.com
electcarolrava.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka-Siyaasadda Waxbarashada, Stanford; Shahaadada-K-12 Maaliyadda, Georgetown; Shahaadada Jaamacadda-Taariikhda iyo Diinta, Harvard

**Shaqo iyo Xirfad:** Madaxweyne Ku-xigeenka Deeq-bixinta Waxbarashada, Ascendium Philanthropy.

**Bayaanka:** Shaqadayda nolosha waxay ahayd sinnaanta waxbarashada iyo helitaanka fursadaha. Waxaan iskaa wax u qabso ka ahaa waxbarashada tan iyo dugsiga sare, waxaanna bartay siyaasadda waxbarashada ee jaamacadda shahaadada mastarka. Waxaan u heellana inaan hagaajiyo fursadaha waxbarasho muddo 25 sano ah oo aan ku jiray xirfaddayda shaqo - anigoo ah deeq-bixiye, maamulaha urur aan faa'iido doon ahayn, iyo hoggaamiyaha degmada dugsiga. Waxaan sidoo kale ahay waalid carruur 18-kii sano ee la soo dhaafay dhiganayay Dugsiyada Dadweynaha ee Seattle.

Doorka aasaasiga ah ee degmada dugsiga waa in ay bixiso waxbarasho heer sare ah arday kasta iyo in ay hubiso badqabka ardayga. Magaalada Seattle waxay ku guuldareysatay labada dhinacba - waxqabadka tacliimeed wuxuu weli ka hooseeyaa heerarkii ka horreeyay cudurka faafa, arday badanina ma dareemaan inay ku sugan yihiin ammaan dugsiga. Kuwaas waa inay noqdaan mudnaanta koowaad.

Waxaan u tartamayaa golaha degmada dugsiga sababtoo ah *waxaan ogahay in degmada ay si ka wanaagsan oo caqli badan ugu shaqeyn karto carruurteena* aniguna waxaan ka caawin karaa hoggaaminta isbeddelkaan. Iyadoo waxbarashada weerar lagu hayo, waxaan u baahanahay hoggaamiyeyaal soo maray ururo adag, ku xeel dheer siyaasadda waxbarashada, oo maamulay miisaaniyado waaweyn. Tani waa waxa aan keeno. Waxaan u baahanahay guddi dugsiyo oo u istaagi doona xuquuqda dhammaan ardayda. Tani waa ballanqaadkayga.

Anigoo ah xubin ka tirsan guddiga SPS, *waxaan mudnaan siin doonaa waxbarasho tayo sare leh oo loogu talagalay arday kasta,* anigoo la xisaabtamaya hoggaanka degmada si loo hubiyo horumarka ardayda; *hubiyo in badqabku ay tahay mas'uuliyad wadajir ah*, anigoo isku keenaya Magaalada, Degmada, iyo kooxaha bulshada; *soo celinta xasilloonida maaliyadeed*, anigoo dhisaya barnaamijyo kor u qaadi kara diiwaan gelinta iyo u qoondeynta kheyraadka mudnaanta; iyo *ka qaybgalka bulshadeenna* si aan u fahmo mudnaantooda iyo *ballanqaad daah-furnaan* si aan kalsoonida u soo celiyo.

Seattle waxay u baahan tahay xubno golaha dugsiga oo leh go'aan shakhsiyeed iyo khibrad xirfadeed si ay u maareeyaan kakanaanta iyo dib u soo celinta kalsoonida dugsiyadeenna dadweynaha. Waxaan arkaa mustaqbal ifaya waxaana ku kalsoonahay inaan ka mid noqon karo hubinta heer sare oo loo helo arday kasta.

*Waxaa i taageeray*: Senatar Noel Frame, Agaasimeyaashii Hore ee Guddiga Dugsiga Leslie Harris, Michael DeBell, Peter Maier, Sherry Carr, Steve Sundquist, iyo qaar kale oo badan.

## Jen LaVallee



(253) 271-9129
VoteLaVallee@gmail.com
VoteLaVallee.com

**Waxbarashada:** BFA, Machadka Farsamada ee Rochester, University of Washington Shahaadada Qalin-jebinta

**Shaqo iyo Xirfad:** Naqshadeeye Alaab, TEK Systems; Aasaase-Wadaag, Billion Dollar Bake Sale

**Bayaanka:** Waxaan u qalannaa degmada dugsiga oo qoysaska ay ku kalsoonaan karaan. Waxaan u tartamayaa inaan hoggaanka la xisaabtamo, ilaaliyo barnaamijyada guuleysiga sare ee loo siman yahay, ka dhabeeyo ka-qaybgalka fasalka, oo aan taageero baahiyaha gaarka ah ee arday kasta.

Waxaan si toos ah u arkay gacantii ugu horreysay sida xasillooni darro iyo hoggaan la'aanta ay u dhaawacdo carruurteena. Markii degmadu soo jeedisay in la xiro daraasiin dugsi, oo ay ku jiraan meelaha ay carruurtaydu wax ka bartaan, waxaan abaabulay boqolaal qoys si aan dib ugu riixo. Waxaan ka mid ahaa aasaasay Billion Doolar Bake Sale, oo ah hey'ad heellan inay si buuxda u maalgeliso dugsi kasta oo gobolka oo dhan ah, waxaanan sameeyay falanqeyn xogeed oo faahfaahsan si aan si wanaagsan ugu wargeliyo sharci-dejiyeyaasha iyo saraakiisha maxalliga ah sida wax-is-daba-marinta diiwaan gelinta ay uga sii dartay xiisadda shaqaale-yaridayada.

Waxaa na horyaalla caqabado dhab ah; laga bilaabo hoos u dhaca diiwaan gelinta iyo dhimmista miisaaniyadda ilaa la'aanta jawaabo cad kuwaas oo dhammaantood meesha ka saaraya kalsoonida ah in degmadu ay u adeegayso carruurteena. Waxaan u baahanahay daah-furnaan dhab ah oo ku saabsan dhammaan miisaaniyadda degmada, ma'aha oo keliya heerka dugsiga gaarka ah. Degmadeenu waa inay kobcisaa iskaashi bulsho oo dhab ah oo ay sameyso go'aanno si fiican uga tarjumaya baahiyaha ardayda oo dhan, iyadoon loo eegayn awoodda dhaqaale iyo karti.

Anigoo ah waalid dugsi dadweynaha oo si qoto dheer ugu lug lahaa arrimaha bulshada in ka badan toban sanno, waxaan diyaar u ahay inaan horumar sameeyo maalinta koowaad. Waxaan u dagaalami doonaa si loo ballaariyo adeegyada caafimaadka dhimirka, ka ilaaliyo hubka dugsiyadeena, dib u soo celinta barasho horumarsan oo siman, ballaarinta helitaanka barnaamijyada ardayda udub dhexaad u ah, oo aan u toosiyo kheyraadka fasallada halkii aan ka bixin lahaa kharashaadka xafiiska degmada.

Waxaan si qoto dheer ugu lug leeyahay Rainier Beach iyo bulshada Koonfurta Seattle. Haddii ay tahay iskaa wax u qabso ee Seattle Children's, lacag u ururinta Bangiga Rainier Valley Food, ama abaabullida dharka carruurta ee xaafadaha, waxaan sii wadi doonaa inaan riixo si aan uga dhabeeyo in la maqlo lana taageero dareenka beeshayda.

*Waxaan ku faanayaa in ay i taageereen Ururka Waxbarashada Seattle, Dimuqraadiyiinta Sharci Dejinta ee 37aad, 43aad iyo 32aad, Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka, iyo in ka badan.*

## Agaasimaha Degmada Lr. 2

### Emily Williams



(503) 395-4332
emily4shorelineschools@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Waxbarashada Arrimaha Ardayda Kulliyadda, University of West Florida; B.A. (Shahaadada Jaamacadda) Cilmi-bulsho, Central Washington University

**Shaqo iyo Xirfad:** Waalid, u doode sinnaanta jinsiyadda, macallin, mulkiilaha ganacsi yar

**Bayaanka:** Inaan ka adeego guddiga dugsiga waxay ahayd fursad aan kula shaqeeyo qoysaska, macallimiinta, ardayda, iyo xubnaha kale ee guddiga si aan u dhisno nidaam dugsi oo xooggan oo loo wada dhan yahay. Afartii sanno ee la soo dhaafay, waxaan gaarnay horumar macno leh—anagoo shaqadeena ku saleynayna qorshe istiraatijiyadeed oo wadaag ah, hagaajinta daah-furnaanta miisaaniyadda, iyo xoojinta iskaashiga bulshada iyo waalidiinta. Wadajir, waxaan ballaarinay codka ardayda heerka guddiga, taageernay agabyada waxbarashada ee dhaqanka ku habboon, waxaana ka shaqeynay inaan hubinno in dugsiyada oo dhan ay yihiin meel ammaan ah oo soo dhaweyn leh dhammaan ardayda. Waxaan taageernay cusbooneysiinta siyaasadda oo ku martiqaadaya in bulshada ay wax ku darsato, isticmaalka xogta oo la hagaajiyay si go'aanno looga gaaro, iyo u doodista siyaasadda waxbarashada ee gobolka oo ku salaysan sinnaanta. Waxaa weli jira wax badan oo soo socda. Waxaan wax badan ka bartay dhegaysiga si dhow—booqashada dugsiyada, maqalka shaqaalaha, ardayda, iyo qoysaska, iyo fahamka waxa bulsho kasta u baahan tahay si ay u horumariso. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga oo aan sii wadno inaan si wadajir ah uga shaqeyno tan muddo labaad.

## Agaasimaha Degmada Lr. 3

### Lama Chikh



(206) 409-2650
voteforlamachikh@gmail.com
sites.google.com/view/lamachikh/home

**Waxbarashada:** Shahaadada Cilmiga Adabka, Suugaanta Ingiriisiga, Jaamacadda Damascus

**Shaqo iyo Xirfad:** Ku-xigeenka Ururka Waxbarashada Washington

**Bayaanka:** Waxaan ahay xaas, gabar, walaal, iyo hooyo sharaf leh oo laba wiil oo cajiib ah—AJ (20) iyo Yousef (18), oo labaduba ka soo baxay dugsiyada dadweynaha ee Shoreline. AJ hadda waa arday sannadkii labaad ka ah University of Washington, iyo Yousef, fasalka 2025, ayaa sidoo kale lagu soo qaatay UW.

Asal ahaan ka soo jeeda Suuriya, waxaan u soo guuray Mareykanka 2012 aniga iyo wiilashayda, markaas oo ay jireen 5 iyo 7 sanno. Magaalada Shoreline si degdeg ah ayay u noqotay gurigeenna, mahadda waxaa leh bulsho soo dhawweyn leh oo naxariis badan. Waxaan bilaabay inaan iskaa wax u qabso ka sameeyo fasallada, anigoo baranaya nidaamka waxbarashada isla markaana taageeraya ardayda iyo qoysaska. Laga bilaabo 2013 ilaa 2019, waxaan ka shaqeynayay Maareeyaha Xafiiska ee Echo Lake Elementary. Maanta, waxaan ka shaqeeyaa Washington Education Association, anigoo ballaarinaya barashada xirfadeed ee macallimiinta guud ahaan gobolka.

Hadda waxaan u tartamayaa Golaha Dugsiga ee Magaalada Shoreline. Waxaan leeyahay khibrad ku saabsan waxbarashada, hoggaaminta, iyo adeegga bulshada—iyo aaminsanaan qoto dheer oo ku saabsan dugsiyada yihiin meelo laga helo wadajir, iskaashiga, iyo wax walba inay yihiin suurtagal.

## Agaasimaha Degmada Lr. 1

### Mitch Forhan



(206) 914-9563
mitchellforhan@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Labada Sanno; Barashada Ranjiyeynta

**Shaqo iyo Xirfad:** Shaqaalaha Ranjiyeynta Ganacsiga

**Bayaanka:** Maadaama aan ku soo barbaaray Degmada Dugsiga Tukwila waxaan ogahay inaan leenahay bulsho aad u kala duwan oo firfircoon, waxaana ku faanayaa inaan sii wado ka mid ahaanshaha bulshadeenna anigoo isku dheelitiraaya waxbarashadayda iyo waddooyinka shaqadayda gaarka ah. Ka qayb qaadashada tabarucaadda tababarka kubadda koleyga ee Foster ilaa caawinta macallimiinta si ay u diyaariyaan fasallada ama caawinta culayska koorsadooda, waxaan ogahay muhiimadda bulshada iyo dabaaldegga kala duwanaanshaheena, laakiin sidoo kale waxaan ogahay meelaha qaarkood ay ku liitaan. Inta aan hayo xilka agaasimaha degmada dugsiga, waxaan isku hayn doonaa heerka Kala-duwanaanshaha, Sinnaanta, Ka-mid-noqoshada iyo Helitaanka. Tani waa sida aan u maamuli jiray fasalladayda markii aan ahaa macallin (5 sanno) iyo isku-duwaha tababarka (2 sanno) ee Finishing Trades Institute Northwest waxayna hagaajisay barnaamijka guud ahaan.

## Agaasimaha Degmada Lr. 2

### Greg Sherlock

Sawir lama soo gudbin

Greg4Tukwila@yahoo.com

**Waxbarashada:** Central Washington University, Shahaadada Jaamacadda ee Cilmiga Duulista. GRCC, AAA Xakamaynta Gaadiidka Hawada. HCC, AA Daraasaadka Guud

**Shaqo iyo Xirfad:** Maaliyadda, Caymiska Magdhowga iyo Maareynta Mashruuca

**Bayaanka:** Dugsiyo wanaagsan ayaa bulshooyin wanaagsan sameeya. Odhaahdan waxaa loo aqoonsaday inay tahay aasaasi, waxayna weli tahay mid run ah maanta sida ay ahayd waagii hore. Si aan u aqoonsado tan, waxaan si buuxda u taageerayaa dadaallada magaalada Tukwila ee abuurista dugsiyo heer sare ah oo loogu talagalay ardaydeeda.

Sida xubin ka tirsan Guddiga Dugsiga ee Tukwila, waxaan ku sii socon doonaa inaan hubiyo in Degmada ay diiradda saarto daah-furnaanta. Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta dhammaan waxay u baahan yihiin inay helaan marin buuxa oo ku saabsan guulaha Degmada, manhajka fasalka iyo qorsheyaasha lagu saxayo khaladaadka.

Isla markaana aniga iyo shaqaalaha waxbaridda ee heellan iyo maamulka, waxaan ku dadaalli doonaa inaan waxbarashada Tukwila ka dhigno mid mudnaanta koowaad leh iyo ujeeddada ugu weyn ee dugsiyada Tukwila. Tartanka adag ee shaqooyinka mustaqbalka, diyaarinta ardayda magaalada Tukwila si ay ula tartamaan heer caalami ah ayaa noqotay mid aad muhiim u ah. Si loo sii dhiirigeliyo guusha ardayda, la xisaabtanka degmada waa muhiim. La xisaabtanka wuxuu ka bilaabmaa Guddiga Dugsiga oo aqbalaya caqabadaha si ay si wax ku ool ah u hoggaamiyaan. Waxaan rajeynayaa tartankan iyo horumarinta bulshadeenna.

## Agaasimaha Degmada Lr. 3

### Ara Papyan



(206) 941-0958
Email.Araik@gmail.com
Papyan.Carrd.Co

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Maamulka Ganacsiga, University of Washington, Tacoma; Shahaadada Mastarka ee Maamulka Ganacsiga, Seattle University

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha Miisaaniyadda iyo Hawlgallada, Seattle University

**Bayaanka:** Waxaan ku soo barbaaray, waxna ku bartay Tukwila, welina magaaladaan ayaan ugu yeeraa gurigayga. Laga soo bilaabo dugsiga hoose ilaa Foster High, dugsiyadeenu waxay gacan ka geysteen qaabaynta qofka aan ahay. Waxaan u tartamayaa Guddiga Dugsiga si aan u dhabeeyo in arday kasta uu helo fursad uu ku najaxo kuna dhex jiro jawi waxbarasho oo ammaan ah, taageero leh, oo u diyaarsan mustaqbalka, anigoo samaynaya go'aanno kharash-ku-ool ah oo xoojinaaya dugsiyadeena iyada oo aan tayada la dhimmayn.

In ka badan toban sanno, waxaan hoggaaminayay istiraatijiyadda maaliyadeed iyo hawlgalka ee waxbarashada sare. Hadda waxaan maamulaa miisaaniyado malaayiin doolar ah oo ka socda Seattle University. Iyadoo dugsiyada Tukwila ay wajahayaan dhibaato weyn oo miisaaniyadeed, waxaan u baahanahay ma'aha hoggaan leh khibrad xisaabeed oo keliya laakiin sidoo kale si qoto dheer u daneeya dadka ka dambeeya.

Degmadeenu waxay wajahaysaa dhibaato dhaqaale oo halis ah. Waxaan u baahanahay hoggaan xog-ogaal ah si loo soo celiyo xasilloonida, loo qaato hal-abuurka, loona dhiso waddooyin guul. Ardayda heer sare ah waxay mudan yihiin inay helaan koorsooyin adag, teknolojiyadda casriga ah, iyo barnaamijyo u diyaariya jaamacadda iyo suuqa shaqada. Webseedka: Papyan.Carrd.Co

### Charles Simpson



**Waxbarashada:** Wax Ku Bartay Dugsiga Tukwila

**Shaqo iyo Xirfad:** Furaha Gawaarida

**Bayaanka:** Magacaygu waa Charles Simpson, waxaana sharaf ii ah inaan u adeego anigoo ah Madaxweyne Ku-xigeenka Guddiga Degmada Dugsiga Tukwila. Anigoo leh ballan qaad qoto dheer oo ku aaddan bulshadeena diiraddana saarayo mas'uuliyadda maaliyadeed, waxaan u heellannahay in aan hubiyo in arday kasta uu helo waxbarasho tayo sare leh oo ku jirta deegaan ammaan ah oo taageero leh.

Doorkayga, waxaan mudnaanta siiyay:

Miisaaniyad Isku Dheelitiran: Hoggaaminta degmadeena iyada oo loo maraayo caqabado dhaqaale iyadoo diiradda la saarayo joogtaynta iyo qaybinta kheyraadka oo si toos ah ugu faa'iideeya ardayda iyo macallimiinta. Hufnaan iyo Isla Xisaabtan: Kobcinta isgaarsiinta furan ee lala yeesho qoysaska, shaqaalaha, iyo bulshada si loo dhiso kalsooni loona hubiyo in go'aannada ay ka tarjumayaan qiyaamka aan wadaagno. Si wadajir, waxaan sii wadi karnaa inaan dhisno degmo dhaqaale ahaan xasilloon oo guusha u diyaariya dhammaan ardayda. Waxaan si xushmad leh kaaga codsanayaa taageeradaada joogtada ah inta aan u shaqeynayno mustaqbal ifaaya oo u wanaagsan ardaydeena iyo bulshadeena. Si daacadnimo leh, Charles Simpson Madaxweyne Ku-xigeenka, Guddiga Degmada Dugsiga Tukwila

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Bob Lawson



(206) 550-0435
ffblawson24@gmail.com


**Waxbarashada:** South Seattle College-Washington State Fire Academy (Akadeemiyaha Dab-damiska Gobolka Washington)-EMT

**Shaqo iyo Xirfad:** Dab-damiye Hawlgab ah-Degmada Ilaalinta Dabka ee Degmada King 2-Degmada Dab-damiska ee North Highline

**Bayaanka:** Iyadoo aan leeyahay 38 sano oo waayo-aragnimo ah oo ku saabsan adeegga dab-damiska, waxaan aqaan oo fahamsanahay dhibaatooyinka horyaalla waaxdeena dab-damiska. Waxaan hubin doonaa in dab-damiyeyaasheena ay helaan shaqaale ku filan, tababar, qalabka iyo kheyraadka ay u baahan yihiin si ay shaqadooda ugu qabtaan si nabadgelyo iyo waxtar leh.

Aniga iyo xaaskayga waxaan magaalada Burien ka dhiganay gurigeena 40-kii sano ee la soo dhaafay. Aniga oo ah degane, waxaan dan gaar ah ka leeyahay in Degmada Dab-damiska ee Degmada King 2 ay sii waddo bixinta adeeg tayo sare leh oo bulshada loo hayo. Waxaan sidoo kale hubin doonaa in doolarka canshuur bixiyeyaasha si xikmad leh oo mas'uuliyad leh loo isticmaalo.

Waxaan si xushmad leh ku weydiisanayaa codkaaga. Waxaa i taageeray Dab-damiyeyaasha Burien Local 1461



# Degmooyinka Ujeeddada Gaarka ah ayaa si **Dheeraad Khaas** u ah

Doorasho kasta, codbixiyeyaasha ayaa awooda inay codkooda ka dhigaan mid la maqlo oo ku aaddan cidda ay jecel yihiin inay ku matalaan heerarka kala duwan ee dowladda. Doorashooyinka maxalliga ah ayaa siiya codbixiyeyaasha fursad ay ku doortaan cidda ku matali lahayd dowladda hoose, ka bilaabato degmada iyo xubnaha golaha magaalada, ilaa iyo duqa magaalooyinka.

Degmooyinka Ujeeddada Gaarka ah waa qaybo khaas ah oo ka tirsan dowladdeena hoose. Degmooyinkani waxay bulshooyinkeena u qabtaan hawlo gaar ah, ka bilaabato jardiinooyinka ilaa iyo korontada. Marka ay codbixiyeyaashu doortaan wakiillada Degmooyinkooda Ujeeddada Gaarka ah, waxay saamayn muhiim oo lagama maarmaan ah ku yeelanayaan bulshadooda.

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Josh Pratt



Prattfd16@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Waxbarashada Seattle Pacific University

**Shaqo iyo Xirfad:** Kabtanka EMS (Adeegga Gurmadka Caafimaadka), Waaxda Dab-damiska ee Kirkland

**Bayaanka:** Muwaadiniinta Kenmore iyo Lake Forest Park, waxaan idinka codsanayaa taageeradiina. Waxaan ahay degane 22 sanno ah oo Kenmore, halkaas oo aniga iyo xaaskayga aan ku korinayno saddexdeena carruur ah. Waxaan ku qaatay dhammaan noloshayda shaqo ee qaangaarka ah sidii adeegaha dadweynaha. 20-kii sanno ee la soo dhaafay waxaan u shaqeynayay sida dab-damiye Magaalada Kirkland, siddeed sanno intaa ka horna sida macallin Degmada Dugsiga Northshore ee Dugsiga Sare ee Inglemoor.

Sida dab-damiye ahaan, waxaan si gaar ah ugu habboonnahay inaan aqoonsado baahiyaha waaxda kobcaysa ee ku jirta kala guurka, iyo inaan ka caawiyo hoggaaminta Dab-damiska Shoreline RFA inta lagu jiro muddadan kobaca. Sida Guddoomiyaha ahaan, waxaan rajeynayaa inaan sii wado heerka adeeg ee aad ka filan karto shaqaale heellan oo xirfadleyaal ah, anigoo ballaarinaya adeegyada la bixiyo si loo hagaajiyo amniga bulshadeenna.

Waad ku mahadsan tahay kalsoonidaada iyo codkaaga.

## Guddoomiye Jagada Lr. 4

### Rick Webster



(206) 300-9379

rwebster1000@icloud.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Maamulka Dhismaha, University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Xirfadyahan Dhismaha oo Hawlgabay

**Bayaanka:** Hadda waxaan u adeegayaa sida Guddoomiyaha Degmada Ilaalinta Dabka ee Degmada King 16 tan iyo 2019.

Waxaan ahaa degane ku nool Kenmore 40 sanno. Waxaan hawlgabay ka dib 45 sanno oo aan ka shaqeynayay dhismooyinka ganacsiga ee aagga Puget Sound. Waxaan u shaqeeyay tababarre mutadawac ah ee labadaba kubadda softball-ka iyo kubadda kolleyga muddo sannado badan ah. Waxaan ka qayb qaadanayay mashaariic badan oo bixiya guryo dakhligoodu hooseeyo. Waxaan aaminsanahay in aan bulshadeenna dib wax ugu siiyo.

Asalka aan ku leeyahay warshadda dhismaha ayaa i siiyay tababar ballaaran oo ku saabsan xiriirka aadanaha iyo xallinta dhibaatooyinka hal-abuurka leh, anigoo indhaha ku haya kharashka ugu dambeeya. Waxaan adeegsan doonaa sannado khibrad ah oo aan ku shaqeynayay si aan u dhiirigeliyo mas'uuliyadda maaliyadeed anigoo raadinayaa in aan kor u qaado heerka adeegga ee degmadeena

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Gloria Hatcher-Mays



**Waxbarashada:** Ka Qalin Jebiyay University Of Washington, Shahaadada Maareynta Mashruuca - University of Denver

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha Fulinta

**Bayaanka:** Sida wakiilkaaga la soo doortay ee Degmada Ilaalinta Dabka 20 ahaan, waxaan keenni doonaa aqoonta, xirfadaha, iyo kartida aan ka helay muddadii aan ahaa Guddoomiyaha Degmada Ilaalinta Dabka 10, iyo xiisaha aan u qabo adeegga dab-damiska ee doorkan. Waxaan guddoomiyey Guddiga Guddoomiyeyaasha ee Degmada 10 waxaana sidoo kale la i doortay inaan noqdo Agaasimaha ee adeegga dab-damis goboleedka - Dab-damiska iyo Badbaadinta ee Eastside. Waxaan aqoon u leeyahay waxa loo baahan yahay si aan ugu guuleysto doorkan, sidoo kale waxaan ahay wakiil isbeddel wacan. Intii aan ahaa Guddoomiyaha, waxaan door muhiim ah ka qaatay bilaabista barnaamij ay dadweynaha degmada la shaqeeyaan EF&R si ay uga hortagaan dabka duurjoogta ah iyagoo codsanaya deeqo xaafadeed si ay u jaraan coowska iyo qodxanta agagaarka guryahooda. Waxaan rajeynayaa inaad codkaaga igu taageeri doonto.



## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Julie Hiatt



(206) 920-4144
julietwhiatt@gmail.com

**Waxbarashada:** Kulliyadaha Bulshada ee South Seattle iyo Bellevue, Dugsiyada Ganacsiga ee UW iyo UC, fasallada waxbarashada sii socota

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha Ganacsi Yar ee Hawlgabay/CEO (Global Fulfillment, Inc.)

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ah inaan awooday inaan u adeego sidii Guddoomiyaha Dabka ee Degmada Dab-damiska ee North Highline in ka badan 10 sanno. Sida bulshadeenna, degmadeenu waxay sii wadaan inay koraan oo isbeddelaan marka aan wajahno caqabado iyo fursado cusub. Waxaa iga go'an inaan kobciyo xiriirkeena la leh degmooyinka deriska ah; iyadoo la badbaadinayo lacagta iyo kheyraadka canshuur bixiyeyaasha, isla markaana la hagaajinayo adeegyada iyo wakhtiyada jawaabta.

Anigoo ka mid ah Guddoomiyeyaashiina Dab-damiska, waxaan sii wadi doonaa helidda xalal lagu casriyeeyo xarumahayaga iyo qalabkayaga, anagoo kordhinayna adeegyada bulshadeenna iyo taageerada dab-damiyeyaasha. Hadafkaygu waa in aan tan sii wadno anigoon culayska maaliyadeed oo dhan saarin bulshadeenna nugul.

Waxaan rajeynayaa inaan sii wado inaan idiinku adeego sida Guddoomiyaha Dab-damiska oo aan codkiinna mar kale idin weydiisto. Waad mahadsan tahay.

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Kimberly Fischer



SFCposition2@gmail.com

**Waxbarashada:** North Seattle & Shoreline Community College

**Shaqo iyo Xirfad:** Dab-damiska Shoreline/Guddoomiyaha & Madaxweynaha Guddiga ee RFA

**Bayaanka:** Sida Guddoomiyahaaga Dab-damiska ee heellan tan iyo 2014, iyo degane noloshiisa oo dhan, waxaan sii wadi doonaa inaan si istiraatiijiyad leh u horumariyo qorshayaal fog si aan uga jawaabo kororka degdegga ah iyo baahiyaha sii kordhaya ee adeegyada dabka iyo gurmadka, anigoo hubinaya in waaxdeennu ay haystaan kheyraadka lagama maarmaanka ah si ay si buuxda u ilaaliyaan oo si degdeg ah uga jawaabaan, anigoo ku dadaalaya inaan siino adeegyada gurmadka tayada ugu sareysa ee muwaadiniinteena.

Sii wadida sahaminta fursadaha suurtagalka ah si aan ugu adeegno bulshadeenna si ka wanaagsan, had iyo jeer waxay ahayd yoolkeyga inaan bixiyo adeegyada ugu wanaagsan ee qiimaha jaban ee deganeyaashayada anigoo hubinaya in lacagaha laga soo qaatay canshuurihiinna loo isticmaalo si masuuliyad leh si loo ilaaliyo, haddii aan la kordhin adeegyada.

Xubinnimadayda hadda jirta waxaa ka mid ah: Xubin ka tirsan guddiga fulinta ee Ururka Guddoomiyeyaasha Dab-damiska ee Degmada King, Ururka Guddoomiyeyaasha Dab-damiska ee Washington iyo Ururka Qaranka ee Mas'uuliyiinta Gurmadka iyo Dab-damiska. Waxaa sharaf ii ah inay i taageereen Dab-Damiyeyaasha Magaalada Shoreline Local 1760 waxaana si wadajir ah iigu garab taagan saaxiibadayda kooxda guddoomiyeyaasha.

## Guddoomiye Jagada Lr. 5

### Rick Nye



(206) 276-5146
nyeraak@comcast.net

**Waxbarashada:** Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

**Shaqo iyo Xirfad:** Wax macluumaad ah lama soo gudbin.


**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ah inaan u adeego sida Guddoomiyaha Dab-damiska Shoreline, aniga oo la ii magacaabay 12 Juun, 2025. Waxaan keenayaa in ka badan 20 sanno oo waayo-aragnimo adeeg dab-damis ah, waxaana bilaabay xirfaddayda 2003 anigoo dab-damiye ka ahaa Magaalada Bellevue. Waayo-aragnimadaas waxay igu beertay ballanqaad qoto dheer oo ku aaddan badbaadada dadweynaha iyo ka jawaabista xaaladaha degdegga ah.

26-kii sanno ee la soo dhaafay, Shoreline waxay ahayd gurigayga. Xaaskayga, Annalise, iyo aniga waxaan halkan ku korinay saddexdeena carruur; dhammaantoodna waxay wax ka barteen Dugsiyada Dadweynaha ee Shoreline. Xididdadayda qotada dheer ee bulshada ayaa quudinaysa rabitaankayga adeegga dadweynaha iyo u heellanaanta wanaagga magaalada.

Sida Guddoomiyahaaga Dab-damiska, waxaa iga go’an ilaalinta sumcadda muddada dheer ee Waaxda Dab-damiska Shoreline ee heer-sarreynta, xirfadnimada, iyo adeegga lagu kalsoonaan karo. Waxaan rajaynayaa inaan taageero sii-koritaanka waaxda iyo inaan hubiyo inay sii ahaan doonto waax ay bulshadeennu mar walba ku tiirsanaan karto.

## Guddoomiye Jagada Lr. 1

### Martese Monroe



(360) 358-5464
friendsformartesemonroe@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Cilmiga Ee Isgaarsiinta; Old Dominion University

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha Maaliyadda

**Bayaanka:** Magacaygu waa Martese Monroe, waxaanan u tartamayaa Guddoomiyaha Dab-damiska ee South King sababtoo ah waxaan aaminsanahay hoggaan bulshada mudnaanta koowaad siiya iyo adeeg dadweyne oo mas'uuliyad leh. Waxaan Federal Way ku noolahay tan iyo 2020, waxaanan ka shaqeynaya maaliyadda, diiradda saaraya qorsheynta istaraatiijiga ah, falanqeynta maaliyadeed, iyo hubinta adeegsiga mas'uuliyadda leh ee kheyraadka. Waxaan la imaanayaa faham adag oo ku saabsan mas'uuliyadda maaliyadeed iyo kormeer daah-furan, oo lagu kalsoonaan karo xirfado si toos ah ugu khuseeya shaqada guddoomiyaha dab-damiska.

Xirfaddaydii hore, waxaan aasaasay urur aan faa'iido-doon ahayn oo dhiirrigeliya tabarucaadka dhallinyarada iyo ka-qaybgalka bulshada, taas oo ka tarjumaysa ballanqaadkayga qotada dheer ee barashada adeegga iyo u-celinta bulshada. Anigoo ah hooyo iyo lamaanaha dab-damiye, waxaa iga go'an taageeridda qoysaska, waxaanan fahansanahay muhiimadda badbaado, hoggaan adag, iyo adeegyo degdeg oo si wanaagsan uga jawaaba.

Haddii la i doorto, waxaan mudnaan siin doonaa daah-furnaanta maaliyadeed ee sii socota, go'aan-qaadasho dadka u jihaysan, iyo hubinta in Dab-damiska South King ay sii ahaato mid si buuxda u qalabaysan si ay ula kulanto baahiyaha sii kordhaaya ee bulshada. Waxaa iga go'an dhegaysiga, weydiinta su'aalaha saxda ah, iyo qaadashada go'aanno feker-leh oo u adeega dhammaan deganeyaasha degmada.

Degmadayada dab-damisku waa qayb lagama maarmaan ah oo ka mid ah nidaamkeenna badbaadada dadweynaha, sharafna way ii noqon lahayd inaan ka caawiyo hagidda mustaqbalkeeda anigoo ku shaqeynaya daacadnimo iyo isla-xisaabtan.

# Su'aalaha Soo Noqnoqda ee Codeynta

## ○ Sidee baan u codeeyaa?



Buuxi goobaabinta ku dhinac taal dookhaaga ee tartan walba.


## ○ Ma waxaan isticmaalaa qalin?

Waxaad isticmaali kartaa qalin, qalin qori, qalinka kalarka, ama wax kasta oo si cad u buuxiya goobaabinta ku dhinac taal dookhaaga.

## ○ Ma inaan ka codeeyaa tartan kasta?

Adiga ayay ku xiran tahay tartannada aad ka codeynayso. Waxaad ka codeyn kartaa hal tartan, laba tartan, ama dhammaan tartannada. Waxaanu xisaabin doonaa codeyn kasta oo aad samayso.

## ○ Maxaa dhacaaya haddii aan fikradayda beddelo ama aan khalad sameeyo?



Xariiq dul mari dookha aadan doonaynin. Markaa ka dib buuxi goobaabinta ku dhinac taal dookhaaga saxda ah.

## ○ Ma inaan warqaddayda codbixinta saxiixaa?

Waa in aad saxiixdo xagga dambe ee bakhshadda soo celinta si warqaddaada codbixinta loo tiriyo. Saxiixaagu uma baahna inuu noqdo mid nidaamsan ama la akhrin karo, laakiin waa inuu u dhigmo saxiixyada aan ku hayno faylkaaga diiwaan gelinta codbixiyaha.

## ○ Sidee baan u soo celiyaa warqaddayda codbixinta?

Waxaad warqaddaada codbixinta ku ridi kartaa sanduuq kasta oo boostada (USPS) waxaa loo baahan yahay inay lahaato shaabadda boostada oo ah Maalinta Doorashada. Waxaad kale oo warqaddaada codbixinta ku soo celin kartaa mid ka mid ah in ka badan 80 sanduuqyada lagu rido warqadda codbixinta ee yaala agagaarka degmada King. Waxaan kugula talinaynaa inaad warqaddaada codbixinta ku soo dirto boostada Jimcaha ka horeeya Maalinta Doorashada ama aad isticmaasho sanduuqa lagu rido inta lagu guda jiro maalmaha ugu dambeeya ee doorashada.

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Dan Johnson



(206) 914-3104
danjohnson131@gmail.com

**Waxbarashada:** State University of New York

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha Ganacsi Yar oo Hawlgabay

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ah in aan u adeego sida Guddoomiyehaaga Degmada Biyaha ee Highline.  Waxaan ku faanayaa inaan ka mid ahay hoggaanka degmada bixisa biyo ammaan ah oo la awoodi karo siisana bulshadeenna maalin kasta.

Degmada Biyaha ee Highline waxay ilaalisaa caafimaadka maaliyadeed ee xooggan waxayna si mas'uuliyad leh u isticmaashaa lacagaha dadweynaha, iyadoo hubinaysa adeeg heer sare ah iyada oo aan kordhin qiimaha aan loo baahnayn. Mar kale, Degmada waxay heshay qiimeynta ugu sareysa ee Xafiiska Hantidhawrka Gobolka Washington ee ku saabsan Hantidhawrka Sannadlaha ah ee Bayaanka Maaliyadeed iyo Mas'uuliyadda.

Kaabayaasha degmada waa in si firfircoon loo dayactiraa oo si joogto ah loo casriyeeyaa si ay ula kulmaan baahiyaha bulshada sii kordhaysa.  Waxaan mudnaanta siinnaa qorsheynta muddada dheer iyo maalgashiga caqliga leh ee nidaamyadeena si aan uga fogaanno yaabab qaali ah mustaqbalka. Waxaan aaminsanahay in hantideena ugu weyn ay tahay shaqaalaheena. Degmada waxay xoogga saartaa tababarka iyo waxbarashada joogtada ah ee shaqaalaha si loo hubiyo hawlgallo tayo sare leh iyo adeegga macaamiisha oo jawaab celin leh. Waxaa iga go'an inaan hubiyo nidaam biyo oo nadiif ah, la awoodi karo, lagu kalsoonaan karo, oo sugan, waxaanan codsanayaa codkaaga. Waad mahadsan tahay.

## Guddoomiye Jagada Lr. 4

### Tim Berge



(206) 854-1187
berge4highlinewater@gmail.com

**Waxbarashada:** Dugsiga Sare ee Mount Rainier, Green River Community College

**Shaqo iyo Xirfad:** Degmada Bullaacadda ee Southwest Suburban (SWSSD) - 35 sano. Khabiirka Xeerarka / Waafaqsanaanta

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa Guddoomiyaha Biyaha ee Highline si aan u caawiyo ilaalinta kheyraadkeena ugu muhiimsan: biyo nadiif ah, la isku halleyn karo, oo la awoodi karo. Aniga iyo xaaskeyga waxaan ku dhalanay kuna soo korey bulshada Highline. Waxaan sii ahaaday mid firfircoon anigoo ka shaqeeyay Guddiga Kubadda Cagta ee Highline, tababaray kubadda cagta dhallinyarada, garsoore ka noqday, isla markaana si iskaa wax u qabso ah ula shaqeeya Ururka Guide Dogs for the Blind.

Si xirfadaysan, waxaan keenaa khibrad ka timid shaqadayda SWSSD, oo ay weheliso ka qaybgalka *Ururka Deegaanka Biyaha, Ururka Biyaha Nadiifka ah ee Waqooyiga Baasifigga, Ururka Degmooyinka Bullaacadaha iyo Biyaha ee Washington, iyo Golaha Gargaarka Maaliyadeed ee Tayada Biyaha.*

Sida qiimaha nolosha uu kor ugu sii kacayo, ilaalinta mid ka mid ah qiimaha biyaha ugu hooseeya ee gobolka ayaa ka muhiimsan sidii hore. Biyo ammaan ah oo la awoodi karo waa baahi. Waxaa iga go'an inaan hubiyo in Highline ay sii waddo bixinta adeeg tayo sare leh iyada oo aan culays dheeraad ah la saarin qoysaska. Waxaan si xushmad leh kaaga codsanayaa codkaaga si aan u ilaalino adeeggan muhiimka ah ee jiilkan iyo kuwa mustaqbalka.

### Polly M Daigle



(253) 651-7164
pollydaigle@gmail.com

**Waxbarashada:** Highline College, Koorsada Waxbarashada Sii Socota iyada oo loo marayo AWWA, WASWD, EPA

**Shaqo iyo Xirfad:** Guddoomiyaha Degmada Biyaha ee Highline - Jagada #4

**Bayaanka:** Waxaan raadinayaa dib-u-doorasho si aan u sii wado u adeegidda macaamiisha Degmada Biyaha ee Highline (Highline Water District) anigoo leh daacadnimo, isla-xisaabtan, iyo diirad adag oo adeegga dadweynaha ah. Anigoo leh 34 sano oo aan ka shaqaynayay warshadda biyaha, waxaan keenaa khibrad qoto dheer iyo ballanqaad ku aaddan ilaalinta kheyraadkeenna ugu muhiimsan ee bulshada.

Intii aan xilka hayay, waxaan ka caawiyay in kororkii ugu dambeeyay ee qiimuhu noqdo keliya 1%, iyadoo la ilaalinayo sahay biyo oo ammaan ah oo lagu kalsoonaan karo. Waxaan ka shaqaynayaa xoojinta ammaanka dijitaalka ah, taageerida tababarka shaqaalaha, iyo xaqiijinta in aan buuxinno baahiyaha macaamiisheena ee hadda iyo kuwa mustaqbalka. Diiraddaydu mar kasta waxay ahayd bixinta adeeg tayo sare leh, dhageysiga welwelka macaamiisha, iyo qaadashada go'aanno masuul ah oo mustaqbal-u-jeedda ah. Waxaan qiimeeyaa kalsoonidaada, waxaana iga go'an daah-furnaan iyo qorshayn muddada-dheer oo faa'iido u leh qof walba oo degmadayada degan.

Waad ku mahadsan tahay fursadda inaan ku adeego. Si xushmad leh waxaan kaa codsanayaa codkaaga si aan u sii wado u-doodistaada iyo mustaqbalka biyaha ee bulshadeenna.

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Gary Coy



**Waxbarashada:** Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

**Shaqo iyo Xirfad:** Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

**Bayaanka:** Gary Coy wuxuu hadda u adeegaa sidii guddoomiyaha Degmada Biyaha ee Lr. 20 wuxuuna horrey u hayay isla jagada Degmada Biyaha ee Lr. 85 muddo siddeed sanno ah. Labada doorba, wuxuu dhisay sumcad xooggan oo ah hoggaamiye ganacsi oo khibrad leh oo la heli karo, aqoon leh, oo ka jawaabaya baahiyaha bulshadeenna.

Gary wuxuu doonayaa in kharash bixiyeyaasha Degmada ay ogaadaan in uu yahay: Waa mid aan dhinac xisbi u janjeerin oo ka go'an inuu si caddaalad iyo daah furnaan ah u matalo xubnaha degmada oo dhan; Mudnaanta siiya ilaalinta nidaam biyo oo tayo sare leh oo hufan, iyadoo la ilaalinayo lacagaha bixiyeyaasha qiimaha iyada oo loo marayo maamul maaliyadeed oo mas'uul ah; Wuxuu keenaa khibrad casri ah oo ku saabsan amniga nidaamka biyaha wuxuuna ka go'an yahay inuu ilaaliyo sahayda biyaha ee degmada ka dhanka ah burburinta iyo khataraha suurtagalka ah.

Gary oo muddo dheer deganaa magaalada Burien, ayaa ku soo laabtay magaaladiisii kadib markii uu ka soo baxay adeegga militariga wuxuuna si firfircoon uga qaybqaataa bulshada. Waxaa ixtiraamaa madaxda gobolka ee ku aaddan kartidiisa la xaqiijiyay ee ku aaddan u doodista wax ku oolka ah ee kuwa uu u adeego

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Laura C Gallez



(206) 949-8784
lcgallez@comcast.net

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Maareynta Mashruuca, University of Washington; Shahaado Jaamacadeedka Maamulka Ganacsiga, City University

**Shaqo iyo Xirfad:** Caafimaadka iyo Ammaanka, Maareynta Mashaariicda Dhismaha, U Diyaargarowga Degdegga ah iyo Horumarinta

**Bayaanka:** Lixdii sanno ee la soo dhaafay, waxaan si guul leh ugu adeegay mid ka mid ah guddoomiyeyaasha Degmada Biyaha ee #49. Waxaan mas'uuliyadda u wajahaa anigoo danaha ugu wanaagsan ee bixiyeyaasha adeegga biyaha maskaxda ku haya iyo dhammaan ficilada.

Anoo ahaan jiray xubin ka mid ah ciidamada Mariiniska waxaan si xoog leh u aaminsanahay adeegga dadweynaha ee anshaxa iyo heellanaanta leh. Muddo ka badan 30 sanno, waxaan muujiyay qiyamkaas anigoo ka shaqeynayay jagooyin dowladeed oo gobol iyo maxalli ah, oo ay ku jiraan jagooyin hoggaamineed oo gaaraya 15 sanno oo loogu talagalay degmooyinka biyaha iyo bulaacadaha maxalliga ah.

Qoyskaygu waxay ahaayeen mulkiileyaasha guryaha ee magaalada Burien iyo dad degan magaalada oo firfircoon muddo ka badan labaatan sanno. Haddii la i doorto, sida guddoomiyaha degmada biyaha, waxaan aaminsanahay in ay tahay waajibkayga la isku raacay inaan ka caawiyo hubinta in nidaamka biyaha ee bulshadeenna uu yahay mid nadiif ah, adkaysi leh *oo la awoodi karo* bulshadeenna-*hadda iyo mustaqbalka*. Waxaan ka codsanayaa codkaaga waxaanan ballan qaadayaa inaan sii wado inaan u adeego *daacadnimo* iyo *firfircooni* sida Guddoomiyaha Degmada Biyaha #49.

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Leebue Maidesil



**Waxbarashada:** Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

**Shaqo iyo Xirfad:** Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

**Bayaanka:** Waxaa sharaf iyo mudnaan weyn ii ahayd inaan u adeego sidii Guddoomiyaha Degmada Biyaha ee Degmada King Lr. 125. Waxaan sii wadi doonaa dadaalkeenna si aan u hubinno in degmada ay u hesho adeeg tayo sare leh oo loogu talagalay macaamiisha bixiya kharashka adeegga biyaha, iyo inaan adkeyno ballanqaadkeenna ah inaan ilaalino caafimaadka dadweynaha iyo deegaanka.

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Eli Zehner

Sawir lama soo gudbin

(425) 870-7054

**Waxbarashada:** Gonzaga University, Shahaadada Injineernimada Madaniga

**Shaqo iyo Xirfad:** Injineer Xirfadle

**Bayaanka:** Degmadeena Biyaha waa mid gaar ah oo qaali ah. Feejignaan joogto ah ayaa loo baahan yahay si loo ilaaliyo tayada biyaha ee aan dhammaanteen filayno.

Sida injineer ka shaqeeya warshadaha biyaha, waxaan la socdaa arrimaha farsamada, shuruudaha xeerarka iyo caqabadaha horyaalla bixiyeyaasha biyaha. Khibraddaan iyo aqoontaan waxay faa'iido u yeelan doonaan Degmadeena iyagoo ka caawinaaya in go'aanno xog ogaal ah la qaato iyo in siyaasado la dejiyo.

Sida wakiilkaaga ahaan, waxaan la shaqeyn doonaa Guddoomiyeyaasha kale, shaqaalaha Degmada, dadka bixiya kharashka, iyo hey’adaha kale si loo hubiyo in tayada biyaha la ilaaliyo, maalgashiga kaabayaasha uu yahay mid ku habboon oo mas'uul ah, iyo in Degmadu ay ka jawaabto xeerarka isbeddelaya iyo koritaanka bulshadeenna.

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Patty Hale



(206) 365-8596
ElectPattyHale@msn.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka ee Waxbarashada, Eastern Washington University

**Shaqo iyo Xirfad:** Macallin K-12 oo hawlgab ah, Iibka Tafaariiqda

**Bayaanka:** Sida Guddoomiyehaaga ahaan, waxaan ku dhaqaaqay kharash mas'uul ah iyo kordhinta daah-furnaanta hawlgalka.

Waxaan ku dadaalayaa inaan ilaalino miisaaniyaddeena, anigoo hubinaya in tallaabooyinka lagama maarmaanka ah la qaado si loo ilaaliyo kaabayaasha dadweynaha oo aan si istiraatijiyadda leh u hagno qorsheynta fog si aan uga jawaabno sida aan ula kulanno baahiyaha sii kordhaya ee adeegyada marka koboc ka dhaco degmada dugsigeenna. Degmada Biyaha ee North City waa hoggaamiye qaran dhinaca ka hortagga iyo dayactirka nidaamkaaga biyaha iyo casriyaynta kaabayaasha sida loogu baahan yahay si loo bixiyo adeeg aan kala go' lahayn.

Sida xubin ka tirsan Ururka Shaqaalaha Biyaha Mareykanka iyo Ururka Degmooyinka Bullaacadaha iyo Biyaha ee Washington, waxaan sii wadaa inaan ballaariyo aqoontayda si aan ugu dadaallo sidii ugu wanaagsan ee aan ku hubin lahaa inaan ku gaarsiiyo biyo cabitaan oo nadiif ah. Biyo nadiif ah, badan oo jaban oo loogu talagalay macaamiisheena ayaa ah oo sii ahaan doonta mudnaantayda koowaad.  Waxaan si xushmad leh kaaga codsanayaa codkaaga si aan u sii wado u adeeggida Degmada Biyaha ee North City sida Guddoomiyehaaga.



## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Karl D’Ambrosio

Sawir lama soo gudbin

Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Dave Hornung



**Waxbarashada:** South Seattle College, Universal Technical Institute

**Shaqo iyo Xirfad:** Degmada Biyaha iyo Bullaacadda ee Lakehaven, Hawl-wadeenka Sare ee Warshadda Daaweynta Biyaha Wasakhda

**Bayaanka:** Waxaan leeyahay in ka badan 20 sanno oo khibrad toos ah oo ku saabsan bullaacadaha anigoo ah Hawl-wadeenka Hoggaamiyaha, waxaan fahamsanahay waxa ay qaadanayso si loo ilaaliyo nidaamyada bullaacadaha si ammaan ah, wax ku ool ah, oo mas'uul ka ah deegaanka. Waxaan u tartamayaa guddoomiyaha degmada bullaacadda si aan u keeno aqoon dhab ah iyo la xisaabtan guddiga.

Bulshadeennu waxay u qalantaa hoggaan garanaya nidaamka laga soo bilaabo heerka hoose. Waxaan ka shaqeeyay goobta, waxaan xalliyay dhibaatooyinka dhabta ah ee adduunka, waxaanan fahamsanahay sida loo kala horumariyo dayactirka, loo qorsheeyo koritaanka mustaqbalka, iyo in hawlgallada lagu sii wado si kharash-ku-ool ah iyada oo aan tayada la dhimmayn.

Waxaan u ololayn doonaa maalgashiga kaabayaasha caqliga leh, heerarka deegaanka ee adag, iyo ka taxaddarka sida miisaaniyadda degmada loo isticmaalo. Sida guddoomiyehaaga, waxaan keenni doonaa waayo-aragnimo wax ku ool ah, anshax shaqo oo adag, iyo ballanqaad ah in la ilaaliyo caafimaadka dadweynaha iyo deegaanka. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

### Nicholas Fannin



nick@nicholasfannin.com
nicholasfannin.com

**Waxbarashada:** Pierce College, AS Bayoolajiga iyo Fiisigiska

**Shaqo iyo Xirfad:** Dallaaka Hantida Ma Guurtada, Maareeyaha Mashruuca, Qandaraasle

**Bayaanka:** U adeegida Degmada Bullaacadda ee Midway waxay ahayd sharaf, waxaanan uga mahad celin lahaa fursadda aan ku sii wado adeegiddaada. Sannadihii la soo dhaafay, waxaan ka barbar shaqeeyay guddoomiyeyaasha kale ee saaxiibada ah si aan u yareeyo qiimeyaasha iyada oo la hubinayo in caafimaadka iyo badbaadada dadweynaha ay sii ahaanayaan mudnaantayada koowaad.

Waxaan ku hanweynahay inaan ka qayb qaatay mashaariicda muhiimka ah sida horumarinta haanta sifaynta cusub ee warshadeena daaweynta iyo hirgelinta nidaamka casriga ah ee UV si loo ilaaliyo heerarka ugu sarreeya ee deegaanka.

Haddaan ahay degane Des Moines wakhti dheer, waxaan fahamsanahay muhiimadda ay leedahay isku dheellitirnaanta kobaca kaabayaasha ilaalinta deegaankayaga. Sida Guddoomiye ahaan, waxaan sidoo kale u ololeeyay hagaajinta qiimaha-nololeed ee caddaalad ah ee shaqaalahayaga heellan. Intaa waxaa dheer, waxaan si firfircoon ula shaqeeyaa Ururka Washington ee Bullaacadaha iyo Degmooyinka Biyaha (WASWD) si aan ugu doodo bulshadeena gudaha shabakada ballaadhan ee degmooyinka biyaha iyo bullaacadaha. Waxaan si xushmad leh u weydiisanayaa codkaaga si aan u sii wado shaqada aan bilownay.

## Guddoomiye Jagada Lr. 4

### Jim Bailey

Sawir lama soo gudbin

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Bayoolajiga

**Shaqo iyo Xirfad:** Hawl-wadeenka WWTP 30 sanno

**Bayaanka:** Hadafkeena waa inaan bixino adeeg heer sare ah si aan u ilaalino caafimaadka dadweynaha iyo deegaanka iyadoo aan ku bixinayno kharash macquul ah. Waxaan wax ka qaban doonaa welwelka macaamiisheena.

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Dick Swaab



(206) 244-9575

**Waxbarashada:** Ka Qalin Jebiyay Dugsiga Sare ee Highline, Shahaadooyinka Maareeyayaasha Qaybinta Biyaha, shahaadooyin kale ee Green River Community College

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeye Guud oo Hawlgab ah ee Degmada Biyaha ee Degmada King #20

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii noqon doonta inaan sii wado inaan u adeego sida Guddoomiyahaaga. Waxaan ahaa degane muddo dheer oo ka tirsan bulshada iyo kharash bixiyaha SWSSD in ka badan 40 sano. Waxaan u shaqeynayay Degmada Biyaha #20 ku dhawwaad 40 sano waxaanan hawlgab ka noqday Maareeye Guud. Iyadoo aan wato taariikhdayda iyo khibraddayda waxaan aaminsanahay inaan noqon karo hanti qiimo leh oo u adeega dadka bixiya kharashaadka degmada bulaacada. Waxaa taageeray Ururka Shaqaalaha Degmada Bullaacadda ee Southwest Suburban, AFSCME, Local 21-S. Waxaan kaaga mahadinayaa codkaaga.

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Mike West



(206) 242-5556
mikew@isomedia.com

**Waxbarashada:** Ka Qalin Jebiyay Dugsiga Sare/ Dugsiga Farsamada

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha Ganacsi oo Hawlgabay iyo Macallinka Alxanka

**Bayaanka:** Waxaan ahaa Guddoomiye degmada bullaacadda ee Valley View muddo sannado badan ah. Muddadaas, welwelkeyga ugu weyn wuxuu ahaa inaan hoos u dhigo heerarka degmada iyadoo aan siinayo adeeg tayo leh, oo ay bixiyaan shaqaalaheena, iyo inaan ilaalino xaaladda nidaamkeena oo ka kooban in ka badan 60 mayl oo tuubo ah.

Degmada waxaa iska leh dadka canshuurta bixiya waxaana si buuxda loogu maalgeliyo canshuuraha laga soo ururiyo adeegyada. Si ka duwan noocyada kale ee dowladda, lacag kasta oo la ururiyo waxay u socotaa hawlaha la xiriira bullaacadaha oo keliya. Waxaan ka shaqeynayay ganacsi adeegyo la xiriira gudaha xuduudaha degmada in ka badan 40 sano waxaanan fahamsanahay waxa ay u baahan tahay in lagu guuleysto, iyadoo la siinayo adeeg tayo leh si hufan oo qiimaha hooseeya lagu hayo.

Waxaan jeclaan lahaa taageeradaada joogtada ah adigoo mar kale ii codeynaya. Waad mahadsan tahay.

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Pat Sutherland



(425) 205-0497
voteforpatsutherland@gmail.com

**Waxbarashada:** Dhammeeyay Dugsiga Sare ee Inglemoor 1977,

**Shaqo iyo Xirfad:** Degmada Adeegyada Tamarta ee Northshore - 07/01/1993 - 07/01/2025

**Bayaanka:** Waxaan u heellanahay inaan horumariyo adeegyada muhiimka ah ee bulshadeenna, anigoo leh 32 sano oo waayo-aragnimo ah oo aan ka helay degmada adeegyada tamarta ee Northshore. Waxaan habaynta hawlaha si fiican u habeeyey si aan u kordhiyo waxtarka iyo isgaarsiinta. Injineernimada, waxaan casriyeeyay hannaanka oggolaanshaha, taas oo badbaadisay lacagta degmada iyo hagaajisay bixinta adeegyada. Waxaan ka qayb qaatay casriyeynta kaabayaasha server-ka iyo dib-u-habaynta nidaamyada shabakadda, taas oo kor u qaadday waxqabadka iyo amniga.

Waxaa iga go'an inaan ilaaliyo qiimeyaal caddaalad ah, kor u qaaddo daah-furnaanta, oo aan sameeyo go'aanno maskax leh oo horrey u sii socda oo anfacaya dhammaanteen. Khibraddayda gacanta ku haynta ayaa i siisay aragtiyo ku saabsan waxa si fiican u shaqeynaya iyo sida aan u xoojin karno nidaamyadeenna mustaqbalka. Waxaan diyaar u ahay inaan keeno aragti wax ku ool ah, xog ogaal ah, oo bulshadeenna u horreysa oo ku wajahan guddiga.

Si wadajir ah, waxaan ku dhisi karnaa aasaaska adag ee Northshore si aan u hubinno mustaqbal lagu kalsoonaan karo oo gaara jiilasha soo socda. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan helo codkaaga.

## Guddoomiye Jagada Lr. 5

### Brent Smith



(206) 200-2826
smithdawg85@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Dhaqaalaha, BA, University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Wakiilka Guryaha oo Shahaadaysan iyo Qiimeeyaha Guryaha oo Shahaadaysan

**Bayaanka:** Sida Guddoomiyehaaga Degmada Adeegyada Tamarta ee Northshore ahaan, mudnaantaydu waxay noqon doontaa in aan diiradda saaro biyo nadiif ah oo qiimo jaban iyo nidaamyo bullaacad oo ammaan ah, maamul maaliyadeed oo xooggan oo ku saabsan lacagaha dadka bixiya, iyo ilaalin mas'uul ah oo ku saabsan xarumaha degmada.

Waxaan diyaar u ahay inaan sii wado guulaha degmada anigoo sii wanaajinaya hufnaanta maaliyadeed iyo tan urureed iyo sidoo kale u diyaargarowga masiibooyinka ee degmada oo dhan. Muddo siddeed sanno ah aan ahaa xubin la doortay ee golaha magaalada Kenmore, in ka badan 25 sanno oo aan ahaa mulkiilaha ganacsi, iyo 30 sanno oo aan ku jiray ballanqaadyada adeegga bulshada, waxaan muujiyay kartidayda ah inaan si wax ku ool ah ula shaqeeyo kuwa miisaaniyadda iyo siyaasadda sameeya ee bulshadeenna.

Waxaa iga go'an inaan si adag ugu shaqeeyo dadka bixiya qiimaha adeegyada ee Degmada Adeegyada Tamarta ee Northshore, waxaana jeclaan lahaa inaan helo codkaaga. Aniga iyo xaaskeyga waxaan ku noolayn degmada muddo 38 sanno ah.


## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Donald L. Henry

Sawir lama soo gudbin

(206) 909-5246
dhenrykids@comcast.net

Wax macluumaad ah lama soo gudbin.




## Ku codee afka Shiinaha, Kuuriyaanka, Ruushka, Soomaaliga, Isbaanishka, ama Fiyatnamiiska!

**Waxaad isku qori kartaa inaad hesho warqaddaada codbixinta iyo dhammaan agabka codeynta oo ku qoran luqadda dookhaaga ah.**

Hal mar isku qor oo dhammaan doorashooyinka mustaqbalka waxaad heli doontaa:

- warqadaha codbixinta,
- buug-yaraha codbixiyeyaasha,
- warqadaha iyo isgaarsiinta,
- adeegga macaamiisha (taleefan/iimeel), iyo
- agabyada diiwaan gelinta codbixiyaha iyo waxbarashada

Booqo **kce.wiki/languages** si aad isku qorto maanta!

## Guddoomiyaha Degmada Lr. 3

### Rita J. Miller

Sawir lama soo gudbin

(253) 347-8589
ritamiller23@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka Ee Kalkaalinta; PhD ee Waxbarashada

**Shaqo iyo Xirfad:** Maktabadlaha Caafimaad; Macallin Kalkaaliye (hawlgab)

**Bayaanka:** Magacaygu waa Rita J. Miller waxaanan raadinayaa dib-u-doorasho booska Guddoomiyaha, Degmada Lr. 3 ee Degmada Isbitaalka Dadweynaha Lr. 1. Xilkaas waxa la iigu doortay laba sano ka hor si aan u buuxiyo boos bannaan. Khibraddayda nololeed ayaa i diyaarisay, maadaama aan leeyahay asal caafimaad oo aad u xooggan anigoo sannado badan ahaa kalkaaliye caafimaad iyo bare kalkaalinta. Markaan helay shahaadada Mastarka ee kalkaalinta, waxaan kalkaalinta ka dhigay laba Iskuul Kalkaalin oo kala duwan. Intii aan xilkaas hayay ayaan qaatay Ph.D. ee Waxbarashada, anigoo sii ahaanaya bare kalkaalinta. In badan oo aan ku sugnaa goob isbitaal ayaa i bartay faahfaahinta adag ee sida isbitaal loo maamulo iyo noocyada khilaafaadka ay la tacaalaan isbitaalladu. Wakhtigan, Degmada Isbitaalka Dadweynaha Lr. 1 waxay wajahaysaa jaris miisaaniyadeed oo dowladdu samaysay, taas oo adkaynaysa bixinta adeegyo ay hore u bixin jirtay. Aniga oo ah Guddoomiyaha hadda jooga, waxa aan ku jiraa doodaha iyo qorsheynta wax ka qabashada khasaaraha maaliyadeed ee lama filaanka ah.

Hadafkaygu marka dib la i doorto waa in aan sii wado shaqada aan hadda wadno si aan bulshada ugu helno daryeel caafimaad oo ugu fiican. Waxaan aaminsanahay in qof kasta oo bulshada ka tirsan uu u qalmo daryeelka uu u baahan yahay oo uu xaq u leeyahay. Ujeeddadayda waa in aan ka qayb-qaato caafimaadka iyo fayo-qabka bulshadeenna ay dhammaantood u qalmaan. Si xushmad leh, waxaan weydiisanayaa codkaaga.

## Guddoomiye Jagada Lr. 4

### Rick Polintan



rick.polintan@gmail.com

**Waxbarashada:** University of the Philippines, AB Dhaqaalaha

**Shaqo iyo Xirfad:** Guddoomiyaha, Degmada Isbitaalka Lr. 1; Ku-Xigeenka Guddoomiyaha, Jaaliyadda Filibiin ee Seattle

**Bayaanka:** Bulshadeenu waxay u qalantaa daryeel caafimaad oo gaar ah, Valley Medical Centre waa inay ahaato meel uu qof kastaa ka helo daryeel tayo leh iyadoon loo eegin dakhli ama asal. Maadaama aan wajahno dhimista la filayo ee Medicaid-ka federaalka iyo caqabadaha sii socda ee caymiska gaarka ah, waa lama huraan in aan helno hoggaan adag si aan u ilaalino oo loo xoojiyo isbitaalkeena.

Anigoo ah Guddoomiyahaaga hadda, waxaan si adag uga shaqeeyay in Valley Medical Center ay dhaqaale ahaan xoog u ahaato, isla markaana shaqaalaha lagu ixtiraamo, lagu taageero, lana siiyo daryeel caddaalad ah. Anigoo leh khibrad urur shaqaale iyo hoggaamiye bulsho ahaan, waxaan keenaa ballanqaad ku saleysan caddaalad, isla xisaabtan, iyo in dadka la hormariyo.

Qoyskaygu wuxuu deganaa degmadaan tan iyo 1992, waxaana si toos ah ugu tiirsanayn Valley Medical Center marka ay timaado daryeelka caafimaad ee degdegga ah. Waan ogahay sida uu isbitaalkani muhiim ugu yahay bulshadeena.

Haddii mar kale la i doorto, waxaan: Taageeri doonaa daryeel bukaan-ku-saleysan iyo helitaan daryeel oo loo siman yahay, gaar ahaan deriskeenna nugul; Ilaalin doonaa daahfurnaan iyo masuuliyad maaliyadeed si loo helo xasillooni waarta; U istaagi doonaa daryeel caddaalad ah iyo taageero shaqaalaha isbitaalka-waayo daryeelka tayada leh wuxuu ka bilaabmaa kuwa bixiya.

Waxaan sharaf u arkaa inaan kasbaday kalsoonida iyo taageerada hay'adaha la ixtiraamo sida, oo ay ku jiraan Dimuqraadiyiinta Degmada King, AP ACE PAC, iyo SEIU 1199NW.

Si wada jir ah, waxaan u dhisi karnaa isbitaal jawaab celin leh, adkeysi leh, diyaarna u ah inuu daboolo baahiyaha qof kasta oo bulshadeena ah. Waxaan si xushmad leh u waydiisanayaa codkaaga ku aaddan Guddoomiyaha Jagada Lr. 4- si aan u sii wadno shaqadan muhiimka ah, wadajir.

## Guddoomiye Jagada Lr. 5

### Carol Barber

Sawir lama soo gudbin

runanddance@aol.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka ee ka socota CWU, Shahaadada Mastarka ee Cilmi-Nafsiga CWU

**Shaqo iyo Xirfad:** La-taliyaha Guurka iyo Qoyska oo hawlgab noqday

**Bayaanka:** Waxay ii ahayd farxad inaan u adeego sidii guddoomiye ee Valley Medical Center (Xarunta Caafimaadka ee Valley) 6-dii sanno ee la soo dhaafay. Waxaa jiray caqabado badan. Waxaan la kulannay cudur faafa iyo xiritaan. Markii aan ka soo baxnay taas waxay ahayd inaan qiimeyno isbahaysigeenna istiraatiijiyadeed ee ku aaddan University of Washington. Nasiib darro, waxay ahayd go'aankeenna in tani aysan noo shaqeynayn. Marka aan eegno lixda sanno ee soo socota, waxaan gebi ahaanba uga bixi doonnaa UW. Waxaan raadin doonaa isbahaysi kale oo suurtagal ah. Waxaan la tacaali doonaa arrimaha cusub ee soo baxa. Anigoo ah guddoomiyaha ugu muddada dheer, waxaan rajaynayaa inan wajaho caqabadahan

Waad mahadsan tahay.

## Guddoomiyaha Degmada Lr. 1

# Nancy J Stewart



(425) 949-5484
njstewart.hu@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Hoggaaminta Ururada, Gonzaga University; Shahaadada Jaamacadda Maamulka Isbitaalka, Eastern Washington University

**Shaqo iyo Xirfad:** Madaxa Fulinta Caafimaadka ee Hore, U Doodaha Bukaanka, iyo Mutadawac Bulsho

**Bayaanka:** Caafimaadka wanaagsan waa qayb muhiim ah oo ka mid ah nolosha firfircoon ee hodanka ah ee aan ku noolaan karno.  In bulshadeena laga helo daryeel tayo leh oo naxariis ku dhisan waa shuraakada ugu fiican ee lagu gaari karo caafimaadka ugu wanaagsan. Maadaama ay tahay isbitaal ay shan-xiddigood ku qiimeeyeen Medicare/Medicaid, qiimeynta A ee Leapfrog, iyo 50ka isbitaal ee ugu sareeya Mareykanka, waxaan aaminsanahay in EvergreenHealth uu yahay lammaaneheena aan caadiga ahayn.  Markii ugu horreysay waxaan ogaaday daryeelkan gaarka ah anigoo ah bukaan.

Maadaama aan daryeel noloshayda beddelay ka helay EvergreenHealth, waxaan si firfircoon uga mid ahaa ururka anigoo ah shaqaale, ka dibna hoggaamiye tan iyo 2012.  Waxaan ka shaqeeyay sidii aan u gaari lahaa jagada Agaasimaha Fulinta ee Isbitaalka iyo Daaweynta Gaarka ah halkaas oo aan la shaqeeyay dhakhaatiirta, hoggaamiyeyaasha, kalkaaliyeyaasha, iyo shaqaalaha taageerada si aan u ballaariyo una hagaajiyo bixinta daryeelka bukaanka gudaha iyo dibadda.    Ka dib markii aan ka tagay EvergreenHealth bishii Juun ee 2023, waxaa sharaf ii ahayd in la ii magacaabo Guddiga Guddoomiyeyaasha bishii Agoosto ee 2023.  Waa sharaf inaan la shaqeeyo guddoomiyeyaasha kale si aan u matalno bulshadeenna aan u adeegno.

Waxaan ku salaysanahay maskaxda bukaanka marka hore; fahamka qiimaha daryeelka naxariista leh, tayada leh ee ay bixiyaan kooxo aan ku kalsoonaan karno.  Ka hoggaamiye daryeelka caafimaadka ahaan, waxaan fahamsanahay caqabadaha ay wajahayaan maamuleyaasha isbitaalka iyo kooxaha si ay u bixiyaan daryeelkaas.  Iyadoo ay jirto isbeddel joogto ah oo ku yimaada adeegyada caafimaadka, waa inaan had iyo jeer noqonaa daryeel caafimaad oo tayo leh, bukaanka ugu horreeya oo leh ballanqaad korriin iyo mas'uuliyad dhaqaale, annagoo la qabsanayna si aan u daboolno baahiyaha bulshadeenna.  Wadajir ayaan ugu dadaaleynaa inaan gaarno go'aanno istiraatijiyadeed si aan u sii wanaajino tayada daryeelka aan bixino.

Waxaan idinka codsanayaa codkiina si aan u sii wado inaan u adeego xilkan, mar walba anigoo ka go'an in daryeelkiina uu ahaado udub dhexaadka go'aan kasta oo aan qaadano.

## Guddoomiyaha Degmada Lr. 2

# Suzanne Greathouse



(206) 465-8833
suzanne_greathouse@yahoo.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Waxbarashada, University of WA; Shahaadada Mastarka ee Isgaarsiinta Farsamada, Western WA University

**Shaqo iyo Xirfad:** Aasaase-Wadaag/Mulkiilaha REPS VR - Softiweerka Tababarka Xaqiiqada Muuqaalka

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ah inaan hadda ka mid ahay Guddiga Guddoomiyeyaasha EvergreenHealth, anigoo la i magacaabay Sebtembar 17, 2024. Waxaan u tartamayaa inaan sii wado bixinta hoggaamin joogto ah oo khibrad leh oo loo baahan yahay hey'addan muhiimka ah ee u adeegta baahiyaha caafimaad ee bulshadeenna sii kordheysa.

Taariikhdaydu waxay ka kooban tahay ku dhawwaad 20 sanno oo aan ka shaqeynayay qaybta gaarka ah anigoo hoggaaminayay kooxo waaweyn iyo mashaariic adag, iyo sidoo kale sannado badan oo aan ka shaqeynayay adeegga dadweynaha ee maxalliga ah. Waxaan ka mid ahaa Guddiga Qorsheynta ee Kenmore, Guddiga Guddoomiyeyaasha ee Degmada Adeegyada Tamarta ee Northshore, iyo Guddiga Agaasimeyaasha ee Xarunta Waayeelka ee Northshore. Waxaan hadda ahay aasaasaha iyo madaxa fulinta ee shirkad tababar software-ka ah xaqiiqada dhabta ah, waxaanan keenaa aragtida mulkiilaha ganacsi yar, oo ka go'an la xisaabtanka, hal-abuurka, iyo adeegga.

EvergreenHealth gudaheeda, waxaan sii wadi doonaa inaan hubiyo daryeel tayo sare leh, ballaarinta helitaanka, iyo in la qaato go'aanno caqli-gal ah oo waara. Waxaan aaminsanahay in aan qaadanno hal-abuurnimada si aan ugu sii jirno hormuudka daryeelka caafimaadka—annagoo ka faa'iidaysanayna teknolojiyadda iyo hab-raacyada ku saleysan caddeynta si loo wanaajiyo natiijooyinka bukaanada loona sii hayo daryeel la awoodi karo.

Taageeridda shaqaalaha isbitaalkayaga waa mudnaanta koowaad - iyagu waa laf-dhabarta EvergreenHealth. Waxaan u doodi doonaa maalgelin lagu xoojinayo tababarka, shaqaaleynta, iyo taageerada goobta shaqada si ay u kobcaan oo ay u sii bixiyaan daryeel heer sare ah.

Joogtaynta maaliyadeed sidoo kale waa lama huraan. Maadaama bulshadeennu korto, waa in EvergreenHealth sii ahaataa mid xooggan, hufan, oo si firfircoon uga jawaabta baahiyaha isbeddelaya. Waxaan ka shaqayn doonaa hubinta maamul-ilaalin feejigan oo mas'uul ah oo kheyraadka dadweynaha ah.

Ugu dambeyn, waxaan aaminsanahay in nidaamkeena daryeelka caafimaad uu ka tarjumayo dadka uu u adeegayo. Waxaan ahaan doonaa dhegayste firfircoon, waxaanan la falgeli doonaa degganayaasha iyo hoggaamiyeyaasha, anigoo ka shaqaynaya in EvergreenHealth sii ahaato lamaane caafimaad oo lagu kalsoonaan karo, bulshaduna hormuud u tahay. Si xushmad leh ayaan kaa codsanayaa codkaaga si aan ugu sii adeego si dedaal leh, khibrad leh, iyo aragti cad oo ku wajahan mustaqbalka EvergreenHealth.

## Guddoomiye Jagada Lr. 5

# Gary Harris



(425) 877-1502
Gcharris3@comcast.net

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Farmashiyaha iyo Shahaadada Jaamacadda ee Cilmi-nafsiga, University Of Washington; Shahaadada Hoggaaminta Dowladda Hoose, Gobolka Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Farmashiiste (hawlgab), Mulkiilaha/Maamulaha Hideaway Lodge B&B

**Bayaanka:** Waxaan ku noolaa aagga adeegga EvergreenHealth Kirkland muddo 50 sanno ah waxaanan ahay mulkiilaha ganacsi ee magaalada Woodinville. Waxaan ahaa Guddoomiyaha PTA iyo qof la siiyay Abaalmarinta Golden Acorn. Waxaan leeyahay 30 sanno oo waayo-aragnimo farmashiyaha ah oo ku saabsan goobaha isbitaalka iyo caafimaadka. Maadaama aan ahay Macallin Shahaado Sare leh oo ku takhasusay Sonkorowga, waxaan ka caawiyay horumarinta barnaamijkii ugu horreeyay ee waxbarashada bukaanka ee iskuduwidda cilmiga kala duwan ee gobolka Washington, waxaana ka caawiyay habaynta habraacyada daawooyinka sonkorowga. Waxaan u shaqeeyay Guddiga Farmashiyaha ee gobolka muddo koow iyo toban sanno ah, waxaanan ahaa qoraaga ugu weyn ee shuruucda xaqiijinaya xuquuqda haweenka ee doorashada, iyo sharciga u baahan in la diiwaangeliyo dhammaan daawooyinka la xakameeyo ee gobolka. Sharaf ayay ii ahayd inaan helo Abaalmarinta Heerka Sare ee Ku Dhaqanka Farmashiyaha oo ay bixisay School of Pharmacy.

Waxaan u shaqeeyay sidii guddoomiye-wadaag ololaha horumarinta maalgelinta ee UW's Be Boundless, anigoo ka caawiyay in la keeno $50 milyan oo loogu talagalay School of Pharmacy (Dugsiga Farmashiyaha). Waxaan u shaqeeyay Golaha Magaalada Woodinville afar sanno waxaana ahay duqii hore ee magaalada. Waxaan ka shaqeynayay anoo la taliye ah EvergreenHealth Community tan iyo 2021 waxaana ku raaxaystay ka qayb qaadashada hantidan weyn ee bulshadeenna.

Khibraddayda sannado badan ee daryeelka tooska ah ee bukaanka, maamulka barnaamijka, kormeerka maaliyadeed, iyo adeegga bulshada ayaa iga dhigaya mid si gaar ah ugu qalma inaan u adeego sida Guddoomiyaha EvergreenHealth. Waxaan kuu shaqeyn doonaa si aan mar walba u bixiyo khibradda ugu wanaagsan ee bukaanka. Waxaan hubin doonaa in doolarka canshuurtaada ee ku soo gala EvergreenHealth si wax ku ool ah loo isticmaalo si loo helo loona sii hayo shaqaalaha ugu fiican, si loo taageero baaritaannada iyo hababka daaweynta ee ugu hal-abuurka badan, iyo in daryeelka caafimaadka ahaado mid la awoodi karo. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan helo codkaaga.

# Robin Campbell



(425) 224-7639
robin4evergreenhealth@gmail.com
www.Robin4EvergreenHealth.com

**Waxbarashada:** BA (Shahaadada Jaamacadda) Zoology (Goobaha Barbaarinta Xayawaanka), UNC Chapel Hill; PhD Microbiology & Immunology (Makrobe-nololeedka & Ilaalinta jidhka), Wake Forest University School of Medicine

**Shaqo iyo Xirfad:** Guddoomiyaha hadda xilka haya, EvergreenHealth; Maamulaha Bioteknoolajiyada (hawlgab)

**Bayaanka:** Waxaan aaminsanahay in qof walba uu u qalmo helitaanka daryeel caafimaad oo heer-sare ah. 2024, waxa sharaf ii ahayd in la i magacaabo Guddiga Guddoomiyeyaasha ee Degmada Isbitaalka Dadweynaha ee Degmada King #2 (EvergreenHealth), oo u adeegta Bothell, Duvall, Kenmore, Kirkland, Redmond, Sammamish, iyo Woodinville. Hadda waxaan raadinayaa in la i doorto muddo buuxda.

Anigoo hore u ahaa EvergreenHealth Community Advisor, isla markaana leh xirfad nololeed oo daryeelka caafimaadka iyo culuunta nolosha, waxaa iga go'an ballaarinta helitaanka, hagaajinta natiijooyinka, iyo xoojinta isbitaalka bulshadeenna. Intii aan xilka hayay, waxaan diiradda saaray mas'uuliyadda maaliyadeed iyo ballaarinta adeegyada aasaaska u ah. Mudnaantayda koowaad waxa ka mid ah ballaarinta helitaanka daryeelka aasaasiga ah iyo adeegyada caafimaadka dabeecadda, iyadoo la hubinayo in kheyraadka isbitaalka si wax-ku-ool ah loo adeegsado. Waxaan la imaanayaa 25 sano oo waayo-aragnimo ah oo goleyaal dadweyne iyo gaar ah, waxaana haatan ka tirsanahay Guddiyada Maaliyadda, Maamul-wanaagga (Governance), Tayada & Badbaadada, iyo Levy. Sidoo kale, waxaan kasbaday Health Care Governance Certification oo ka timid Washington State Hospital Association.

Waxaan ku faani karnaa in EvergreenHealth ay ka mid tahay 50-ka isbitaal ee ugu sareeya dalka, taasoo caddeyn u ah shaqaalaheenna heellan iyo bulshada na taageerta. Waxaan sii taageeri doonaa siyaasad dhiirrigelisa dhaqan naxariis, hal-abuurnimo, iyo adeeg, iyadoo la ilaalinayo heer-sareynta bixinta daryeelka.

Waxa i taageeray: Duqooyda Magaalada Kelli Curtis (Kirkland), Nigel Herbig (Kenmore), Mike Millman (Woodinville); Wakiillada Gobolka Amy Walen (LD 48) iyo Davina Duerr (LD 1); iyo dhammaan Guddoomiyeyaasha hadda xilka haya ee EvergreenHealth.

Sharaf bay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga. Wadajir, waxa aynu ilaalin karnaa oo xoojin karnaa daryeel tayo sare leh oo bulshadeennu filayso oo ay u qalanto.

## Guddoomiye Jagada Lr. 3

### Shane Young



(206) 427-4649
commishshane@yahoo.com

**Waxbarashada:** MBA, Washington State University - Taqasus Maaliyadda

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeyaha Guud, Adeegga Biyaha

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ahayd inaan ka mid noqdo Guddiga Guddoomiyeyaasha tan iyo Janaayo 2018. Sannadihii la soo dhaafay, waxaan la shaqeeyay guddoomiyeyaashayda, shaqaalaha, iyo xubnaha bulshadeenna si aan u hubiyo in biyaha lagu dabaasho ay sii ahaadaan qayb muhiim ah oo la heli karo oo ka mid ah nolosha bulshadeenna.

Mahadsanid taageeradaada joogtada ah, waxaan awoodnay inaan sii wadno oo horumarinno barnaamijyada biyaha, aan dayactirno xarumahayaga, oo aan ballaarino fursadaha da' kasta si ay wax u bartaan, dabaashaan, oo ay u kobcaan. Ka-qaybgalkaaga ayaa muhiim u ahaa in barkaddeena ay noqoto ilo ammaan ah, soo dhawweyn leh, oo la awoodi karo oo loogu talagalay qof walba.

Sida aan u tartamayo anigoo aan cidna la tartamin si aan dib ugu soo laabto Jagada Lr. 3, waxaan rabaa inaan u mahad celiyo bulshada si kal iyo laab ah kalsoonida aad igu qabteen. Waxaan sii wadi doonaa dadaalkeyga mas'uuliyadda maaliyadeed, hagaajinta xarumaha, iyo barnaamijyada u adeegga dhammaan xubnaha bulshadeenna. Si wadajir, waxaan hubin karnaa mustaqbal xooggan oo loogu talagalay ciyaaraha iyo isticmaalka dadka ee biyaha Des Moines.

## Guddoomiye Jagada Lr. 4

### Holly Campbell



holly.desmoines.wa@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Siyaasadda Dadweynaha

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeyaha Xogta

**Bayaanka:** Barkadda Mt. Rainier waa mid ka mid ah hantida ugu weyn ee magaalada Des Moines: waa goob sannadka oo dhan ah oo carruurtu ku bartaan dabaasha, waayeelku ku sii firfircoonaan karaan, qoysaskuna ku kulmaan. Ka Guddoomiyaha afartii sanno ee la soo dhaafay ahaan, waxaan bartay inta dadaal iyo maalgelin ah ee loo baahan yahay si xaruntan duugoowday ay u sii shaqeyso. Ka dib 50 sanno oo adeeg ah, hadda waxay u baahan tahay dib-u-habeyn weyn ama xitaa beddelid buuxda. Haddii la i doorto, mudnaanta ugu sareysa ee xilligayga soo socda waxay noqon doontaa inaan ka dhabeeyo in magaalada Des Moines ay sii wado inay leedahay barkad bulsho. Waxaan rajeynayaa inaad igu soo biirto dhisidda mustaqbal waara oo loogu talagalay ciyaaraha biyaha magaalada.

## Guddoomiye Jagada Lr. 5

### Ben Fortine



bfortine2@gmail.com

**Waxbarashada:** Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

**Shaqo iyo Xirfad:** Farsamo Yaqaanka Goobta, Degmada Biyaha ee Degmada King # 125

**Bayaanka:** Maadaama aan ahay qof ku dhashay Washington, xididadayda halkan way dheer yihiin. Aniga iyo xaaskayga waxaan ku noolayn Des Moines 10+ sanno, anagoo korinayna labo hablood ee quruxda badan ee *jecel* dabaasha. Haddii ay tahay Barkadda Mount Rainieer, ama Sisu Hus, dabaasha waa qayb ka mid ah nolosha qoyskayaga.

Waxaan jecel nahay Des Moines; waa Jardiinooyinka, Madadaalada, & barkadaha, oo waxaan rabnaa inaan aragno iyaga oo sii koraya oo na hayo jiilkan iyo kuwa badan oo soo socda.

Waxaan si firfircoon ugu tabarucnay kana qayb qaadanay barnaamijyada Jardiinooyinka Des Moines in ka badan 5 sanno. Waxaan ku qaatay saddex sanno oo tabaruc ah sidii tababarre kubadda cagta da'yarta oo aan u ahay curadkayda oo aan lu qaban jirnay Field House. Waxaan ku raaxaysnnaa inaan wakhti ku qaadano Marinada, lugeyna Waddada Des Moines Creek, oo aan joogno Quarterdeck fiidkii xagaaga oo qorraxda leh. Haddii la i doorto, waxaan ballanqaadayaa inaan dadaalkeyga ugu fiican sameeyo si aan u ilaaliyo, u xafido, oo aan u horumariyo Degmada Barkadda Des Moines #5.

### John Piontkowski



(206) 940-7998
johnpiont@gmail.com

**Waxbarashada:** Ka Qalin Jebiyay, Dugsiga Sare ee Mount Rainier, 2007. Daraasaad ku aaddan Teknolojiyada Biyaha Wasakhda ee AAS (Shahaadada Jaamacadda Labada Sanno).

**Shaqo iyo Xirfad:** Hawl-wadeenka biyaha wasakhda


**Bayaanka:** Magacaygu waa John Piontkowski, waxaana u tartamayaa Guddoomiyaha Barkadda. Waxaan ahay qof ka qalin jabiyay Dugsiga Sare ee Mount Rainier waxaana haystaa deyn qiimo leh oo ku saabsan shahaadada jaamacadeedka labada sanno ee Teknolojiyada Biyaha Wasakhda (Wastewater Technology), taas oo i siinaysa faham farsamo oo xooggan oo ku saabsan tayada biyaha iyo maaraynta xarumaha. Hadafkaygu waa mid fudud: inaan hubiyo in barkaddeennu ay ahaato mid ammaan ah, si wanaagsan loo ilaaliyo, oo mas'uuliyad dhaqaale leh dhammaan bulshadeenna. Waxaan si dadaal leh uga shaqeyn doonaa inaan xarunteenna ka dhigno meel weyn oo qof walba ku raaxaysto.

# Ma Ogtahay?

Sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta ee Degmada King ayaa ah habka ugu wanaagsan ee aad si toos ah warqaddaada codbixinta ugu soo celin karto Xarunta Doorashada. Sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta waa ammaan, ku habboon, oo furan ilaa daqiiqadda ugu dambeysa! Warqadaha codbixinta ee lagu soo celiyo sanduuqa lagu rido Maalinta Doorashada ayaa loo dammaanad qaadaa in loo tixgeliyo inay ku yimaadeen wakhtigii loogu talagalay haddii lagu rido sanduuqa 8:00 p.m. ka hor.

- ✓ aan la faragelin karin
- ✓ midkiiba 1000 rodol
- ✓ boolal kula xiran shubka
- ✓ dab-damiye ayaa ku dhex jira
- ✓ habab qufullo oo badan
- ✓ shaabado muujinaya faragelinta




Mar ayaa iskuul bas ku dhacay mid ka mid ah sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta!

Sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta waxba ma gaarin, laakiin Agaasimaheena Doorashooyinka, Julie Wise, waxay sheegtay, “***baska iskuulka, ma ahayn mid xaalad wanaagsan ku sugnaa***.”



## Guddoomiye Jagada Lr. 3

### Debbie Russ



(714) 469-4963
debfortravel@gmail.com

**Waxbarashada:** Central Washington University Shahaadada Cilmiga Adabka

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha Ganacsi Yar iyo Ayeeyo

**Bayaanka:** Waxaan muddo badan ku lug lahaa jimicsiga biyaha ee Tukwila Pool. Ka shaqeynta Soo-kabashada Xirfadaha, waxaan awooday inaan soo jeediyo talooyin sida helitaanka barkadda oo ka wanaagsan kuwa naafada ah (taas oo aan ku faraxsanahay in la ansixiyay oo la hirgeliyay). Sida ayeeyo u ah 20, waxaan saacado ku qaataa barkadaha deegaanka si aan u raaco casharada dabaasha iyo tartamada. Qaar ka mid ah barkadaha waxaa loo habeeyay si cajiib ah oo ku habboon dabaasha iyo waalidiinta, halka kuwa kale ay yihiin kuwo xun sida riyo xun. Intii aan ku jiray sannado badan oo aan ku sugnaa agagaarka barkado kala duwan, waxaan hayaa fikrado badan oo ku saabsan dhismaha barkadda cusub, oo ku saleysan baahida bulshadeenna. Waxaan hayaa aragti ah in aan suuro gelino barkad buuxisa dhammaan baahida bulshada kuna fulisa ayadoo la dhiso hal xarun oo keliya. Haddii ay yihiin carruurta yar yar ee dabaalanaya barkadda, ama nasashada dadka gala jacuzzi-ga. Cod bixintiina waa codka loogu hiilinayo dadka codkooda yar yahay ama la maqlin sida carruurta, dadka naafada ah, iyo dadka waayeelka ah.

### Andrew Stahl



**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Xisaabaadka, Western Governors University

**Shaqo iyo Xirfad:** Qoraha Khidmada Xirfadaysan

**Bayaanka:** Anoo ah Guddoomiyaha Barkadda ee Tukwila , waxaan xiiseynayaa xaaladda seey tahay hadda iyo mustaqbalka barkaddeena. Markii hore waxaan xilka ugu tartamay sababtoo ah wiilkaygu wuxuu jeclaa dabaasha waxaanan doonayay inaan ka mid noqdo waxa uu jeclaa.

Hadda oo aan xafiiska joogay oo aan ku lug lahaa bulshada barkadda 6-dii sanno ee la soo dhaafay, waxaan ogaaday in ay tahay bulsho wanaagsan, aanan jeclaan lahaa inaan sii ahaado qayb ka mid ah oo aan u sii adeego. Waxaan ku mahadinayaa fursadaha ii furnaa, oo ay ku jiraan ka mid noqoshada guddiyada kala duwan ee barkadda iyo dhacdooyinka dadweynaha, waxaanan horumariyay xiisaha badqabka biyaha iyo caafimaadka dadweynaha. Barkadda Tukwila waxay noo tahay meel ammaan ah oo xiiso leh oo dadka waaweyn ay ku jimicsadaan, carruurtana ay ku qaataan xagaagooda, waxaana ku faraxsanahay inaan ka mid ahay kheyraad qiimo leh oo bulshada isku keena.

## Guddoomiye Jagada Lr. 4

### Jeri Frangello-Anderson



(206) 552-1620
jerber40@hotmail.com

**Waxbarashada:** Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

**Shaqo iyo Xirfad:** Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

**Bayaanka:** Sharaf bay ahayd inaan u adeego Guddoomiye ahaan Degmada Jardiinka Magaalo Weynta ee Barkadda Tukwila ilaa iyo 2015. Waan ku faraxsanahay inaan sii wado shaqadan lixda sanno ee soo socota, anigoo gacan ka geysanaya hubinta in Barkadda Tukwila ay sii ahaato mid waara, mas'uul maaliyadeed, iyo kheyraad qiimo leh oo bulshadeenna ah.

Ku noolaanshaha gobol ay ku hareeraysan yihiin biyuhu, waa muhiim in qof kastaa barto sida loo dabaasho oo uu ammaan ugu ahaado gudaha iyo hareeraha biyaha.

Sababtoo ah dabaasha waa xirfad nolosha oo dhan ah—muhiim u ah carruurta iyo dadka waaweynba—waxaana iga go'an inaan hubiyo in bulshadeenna oo dhan ay helaan waxbarashadan muhiimka ah.

# Safarka Warqaddaada Codbixinta





Qiyaas ahaan saddex asbuuc ka hor Maalinta Doorashada, Doorashooyinka Degmada King waxay dhammaan codbixiyeyaasha diiwaan gashan boostada ugu diraan warqadaha codbixinta iyo buug-yaraha codbixiyeyaasha. Codbixiyeyaashu waxay awoodaan inay buuxiyaan, saxiixaan, oo ay ku soo celiyaan warqaddooda codbixinta wakhti kasta ka hor wakhtiga kama dambeysta ah ee Maalinta Doorashada.

### *Ka hor 8 p.m. Maalinta Doorashada*

Saxiix oo warqaddaada codbixinta ku soo celi boostada ama sanduuqa lagu rido ugu dambeyn 8 p.m. Maalinta Doorashada!

Warqadaha codbixinta ee lagu soo celiyo boostada waa inay lahaadaan shaabadda boostada oo ah ugu dambeyn Maalinta Doorashada.





*Safarka wuu bilaabmay!*

## 1

### Waxaan helnaa oo iskaan-gareynaa bakhshaddaada warqadda codbixinta.

Mashiinkeena kala soocidda warqadaha boostada ayaa iskaan-gareeya bakhshaddaada warqadda codbixinta oo sawirka saxiixaaga u dira kooxda xaqiijinta saxiixa.



## 2

### Waxaan xaqiijinaa saxiixaaga.

Saxiixa ku qoran bakhshaddaada soo celinta ayaa waxaa la barbar dhigaa kan ku jira faylka diiwaan gelintaada codbixiyaha.


Haddii **saxiixyadaada ay isku dhigmaan**, warqadda codbixinta waa la ansixiyaa oo loo gudbiyaa furitaanka.

Haddii **saxiixaaga uu maqan yahay** ama **uusan u dhigmin** diiwaankaaga diiwaan gelinta, warqadda codbixinta waa la xujeeyaa. Waxaan kula soo xiriiri doonaa si aan u xallino arrinta ka hor inta aan warqadda codbixinta la furin.

## 3

### Waxaan furnaa oo si muuqaal ah u baarnaa warqaddaada codbixinta.


Shaqaale tababaran ayaa warqaddaada codbixinta ka soo dhex saara bakhshadda iyo galka amniga. Halkan ayaa ah barta codeyntaada looga sooco aqoonsigaaga. Warqadda codbixinta ayaa markaas si muuqaal ah loo baaraa si loo hubiyo in la iskaan-gareyn karo.



## 4

### Waxaan iskaan-gareynaa warqaddaada codbixinta si loo tiriyo codeynta.


Warqaddaada codbixinta ayaa la iskaan-gareeyaa waxaana sawirka lagu keydiyaa hab sugan oo xiran ilaa iyo 8 p.m. Habeenka Doorashada.



## 5

### Waxaan tirinaa warqaddaada codbixinta.

Isla markii 8 p.m. ka dib Habeenka Doorashada, waxaan isku darnaa natiijooyinka oo aan ku soo dhejinnaa webseedkeena si ay dhammaan u arkaan. Natiijooyinka ayaa la cusboonaysiiyaa maalin kasta oo ah maalmaha shaqada saacaddu markay tahay 4 p.m. ilaa iyo inta laga shahaadaynaayo doorashada.




## Raad-raac warqaddaada codbixinta tallaabo kasta oo ay kaga jirto hannaanka!

Iska qor barta **kce.wiki/BallotAlerts** si aad u hesho qoraallo taleefan ama iimeel inta warqaddaada codbixinta la sii habeynaayo oo la tiriyo.



# Qaraarka Wadajirka ah ee Senatka Lr. 8201

Sharci-dejinta ayaa soo jeediyay wax-ka-beddelka dastuurka ee oggolaanaya in lacagta ku jirta sanduuqa daryeelka muddada dheer ee Washington la maalgashado. Wax-ka-beddelkaan wuxuu oggolaanayaa in sanduuqa gobolka ee loogu talagalay bixinta dheefta daryeelka muddada dheer ee waayeellada iyo dadka naafada ah ee u qalma loo maalgashado sida sharcigu uu u oggol yahay.

Ma tahay in wax-ka-beddelkaan dastuurka la:

Ansixiyo

Diido

## Bayaanka sharaxaadda

**Sharciga Sida uu Hadda u Jiro**

Dastuurka Gobolka Washington wuxuu guud ahaan mamnuucayaa in lacagta dadweynaha lagu maalgeliyo saamiyada shirkadaha gaarka loo leeyahay. Tani waxay ka dhigan tahay in lacagta gobolka lagu maalgelin karo oo keliya noocyada dammaanad dakhli go'an, sida curaarta dowladda iyo shirkadaha iyo shahaadooyinka debaajiga.

Dastuurku wuxuu hadda ka dhaafitaan xaddidaaddaan ugu sameeyaa dhowr maalgelino. Ka dhaafitaankan waxay khusaysaa lacagta hawlgabka dadweynaha ama sanduuqa hawlgabka, sanduuqyada magdhowga shaqaalaha, iyo lacagta lagu hayo sanduuq aaminaad ee ku aaddan faa'iidada dadka naafada koriinka ah leh, taas oo u oggolaanaysa sanduuqyada in loo maalgashado sida sharcigu u oggolaanayo, oo ay ku jiraan saamiyada shirkadaha gaarka loo leeyahay. Guddiga Maalgashiga Gobolka Washington ayaa maalgeliya oo maamula sanduuqyadaas.

Sannadkii 2019, sharci-dejiyeyaasha waxay abuureen barnaamijka caymiska daryeelka muddada-dheer. Barnaamijku wuxuu bixiyaa lacag lagu bixiyo qaar ka mid ah adeegyada daryeelka muddada-dheer, sida daryeelka xarumaha waayeellada, oo ku socota ka-faa'iidaystayaasha barnaamijka ee u baahan in nolol maalmeedka laga caawiyo. Sida uu dhigayo sharcigaas, shaqaaluhu waxay bixiyaan khidmadaha ku aaddan caymiska daryeelka muddada-dheer ayagoo laga jarayo mushaharka, oo khidmadahaas waxaa lagu shubaa Koontada Aaminaadda Adeegyada Muddada-Dheer iyo Taageerooyinka. Sida ku cad qodobka hadda ee Dastuurka, lacagta lagu hayo Koontada Aaminaadda laguma maalgelin karo saamiyada shirkadaha gaarka loo leeyahay.

**Saameynta Wax-Ka-Beddelka La Soo Jeediyay Haddii La Ansixiyo**

Wax-Ka-Beddelkaan wuxuu u oggolaanayaa lacagta ku jirta Koontada Aaminaadda Adeegyada Muddada-Dheer iyo Taageerooyinka in lagu maalgashado saamiyada shirkadaha gaarka loo leeyahay, haddii sharcigu oggolaado. Dakhliga maalgashiga ee Koontada Aaminaadda waxaa keliya oo loo isticmaali karaa adeegyada daryeelka muddada-dheer iyo taageerooyinka ee loogu talagalay ka-faa'iidaystayaasha barnaamijka, oo ay ku jiraan waayeellada iyo dadka naafada ah.

## Bayaanka lagu taageerayo

**Ansixi 8201 si loo hubiyo in maalgelinta daryeelka muddada dheer ay u jiraan marka aan u baahannahay**

8201 waxay u baahan tahay in 100% dakhliga maalgashiga uu kasbado Sanduuqa Aaminaadda Daryeelka Mudada Dheer ee gobolka loo isticmaalo adeegyada daryeelka muddada dheer ee waayeellada iyo dadka naafada ah ee nugul. Dadka Washington waxay doonayaan inay ku noolaadaan sharaf marka ay duqoobaan. 8201 waxay taageertaa himiladaan wadaagga ah, iyadoo xoojinaysa faa'iidada Sanduuqa Aaminaadda si ay u caawiso waayeellada iyo dadka naafada ah ee Washington iyada oo ilaalinaysa canshuur bixiyeyaasha.

**8201 waa cabbirka sharciga ee caqli-gal ah kaas oo hubinaaya in doolarka canshuurta uu meel dheer gaaro**

Sharciga hadda jira wuxuu maalgelinta Sanduuqa Aaminaadda ku xaddidaayaa xulashooyinka soo celinta hooseeya oo keliya, sida curaarta dowladda iyo shahaadooyinka keydka. 8201 wuxuu u oggolaanayaa Sanduuqa Aaminaadda in la maalgashado si loo soo saaro faa'iidooyin sare. Habkaan la xaqiijiyay waxaa maamuli doona Guddiga Maalgashiga ee Gobolka Washington ee madax-bannaan oo aan dhinacna u janjeerin, kaas oo ku xiran heerarka ugu sareeya ee mas'uuliyadda maaliyadeed.

**Ansixi 8201 si loo kordhiyo maalgelinta iyada oo aan saamayn ku yeelan canshuur bixiyeyaasha**

8201 waxaa la filayaa inay kobciso Sanduuqa Aaminaadda ilaa iyo $67 bilyan 50-ka sanno ee soo socda, lacagtaas oo loo isticmaali karo in lagu kordhiyo faa'iidooyinka dadka naafada ah iyo waayeellada iyada oo aan waxba ku kacayn canshuur bixiyeyaasha. Dakhliga sare wuxuu la micno yahay lacag badan oo daryeel ah – oo u wanaagsan waayeellada, dadka naafada ah ee Washingtoni, qoysaskooda, iyo canshuur bixiyeyaasha!

**8201 waxay leedahay taageero xoog leh ee labada xisbi oo ka socota dhinac walba oo siyaasadeed**

Waa dhiiragelin marka hoggaamiyeyaasha labada xisbi ay ku heshiiyaan wax - waxaana habkaan caqliga leh ansixiyay tiro aad u badan oo ka tirsan sharci-dejiyeyaasha xisbiga Dimuqraadiga iyo Jamhuuriga. 8201 waxaa taageera kalkaaliyeyaasha, ururada, ganacsiyada, iyo kooxaha matalaya malaayiin waayeellada Washingtonian iyo dadka qaba xaaladaha horey u jiray. *U Codee Ansixinta!*

## Bayaanka looga soo horjeedo

**Diid beddelkaan dastuurka,** mar kale.

Codbixiyeyaasha gobolka Washington horey ayay u diideen soo jeedintaan oo ah in lacagta canshuur bixiyeyaasha lagu maalgeliyo saamiyada gaarka loo leeyahay iyo shirkadaha (2020, SJR8212). Aasaaseyaashii gobolka waxay ka ilaaliyeen lacagaha dadweynaha maalgeshiyada halista leh ayagoo dejiyay tallaabooyin ilaalin ah oo ku jira Dastuurka gobolka oo mamnuucaya maalgeshiyada suuqa saamiyada ee shirkadaha ee lacagaha canshuurtaada.

**Diid beddelaadyada dastuurka ee ku khamaarra lacagtaada ayagoo adeegsanaya suuqa aan xasilloonayn.**

SJR 8201 waxay baabi'ineysaa ilaalinta sanduuqa Adeegyada Muddada Dheer iyo Taageerada (Long Term Services and Support (LTSS)), barnaamij bilyanno doolar ah oo la aasaasay 2020. Dadka Washington weli xaq uma laha inay helaan faa'iidooyinka barnaamijka laakiin taageerayaasha ayaa *mar kale* ku weydiisanayaa inaad ka saarto ilaalinta muhiimka ah ee Dastuurka. Hadda, waxaa lagu ilaaliyaa maalgeshiyo *sugan* sida bonds-ka federaalka, gobolka iyo degmada, kuwaas oo taageera bulshadeena -- *isticmaalka wanaagsan ee doolarka canshuurta*. Suuqyada saamiyada iyo maalgeshiyada gaarka ah ayaa si weyn u kala duwan, *iyadoo aan wax dammaanad ah lahayn*, iyo baahiyaha faa'iidada lama oga barnaamijkan aan la tijaabin. Sanduuqa LTSS wuxuu u jiraa inuu ka caawiyo dadka Washington inay helaan daryeelka muddada dheer marka aan duqoowno ama aan wajahno naafanimo. *Marka mala-awaalka suuqa uu guuldareysto, canshuur bixiyeyaasha iyo ka-faa'iideystayaasha ayaa la kulmi doona cawaaqibta taasoo loo maraayo dhimmista ku timaadda dheefta ama kordhinta canshuuraha.*

**Diidmada beddelaadyada dastuurka waxay bixisaa xasillooni iyo hubanti dheeraad ah.**

Inaan sii wadno maalgelinta lacagteena dadweynaha ee curaarrada federaalka, gobolka iyo dowladda hoose waxay taageertaa kaabayaasha dadweynaha ee aan dhammaanteen ku tiirsannahay. Diidmada SJR 8201 waxay bixisaa qorsheyn iyo xasillooni wanaagsan.

**Diid SJR 8201**

Gobolkeena iyo LTSS waxay u baahan yihiin mas'uuliyad maaliyadeed, uma baahna khamaarka maaliyadeed. Diid SJR 8201 si loo ilaaliyo maalgelinta oo sugan, xasilloon, oo diiradda saaraya u adeeggida dadka ku tiirsannaan doona.

## Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Xaqiiqada: Tan iyo 1981, Guddiga Maalgashiga Gobolka Washington ee madax-bannaan ayaa si amni oo wax ku ool ah u maamulay in ka badan $200 bilyan oo loogu talagalay hawlgabyada, sanduuqa keydka waxbarashada jaamacadda, iyo waxyaabo kale, iyadoo celcelis ahaan heerka koritaanka uu yahay 8% sannadkii. Waa inaan hubinnaa in Sanduuqa Aaminaadda ee Daryeelka Muddada Dheer uu koro si uu ula socdo *kororka kharashaadka iyadoo la ilaalinayo canshuur bixiyeyaasha*. Tiro aad badan oo sharci-dejiyeyaal labada xisbi ah ayaa ansixiyay cabbirkan. *Ansixi 8201* si Sanduuqa Aaminaadda ee WA si uu *ugu adeego waayeellada da'da ah iyo dadka naafada ah.*

## Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Taageerayaasha waxay tilmaamayaan soo celinta lacagta oo la hubo oo ah $$bilyanno in ka badan muddo 50 sanno ah laakiin dabcan, taas lama hubo. Sannadkii 2008, Guddiga Maalgashiga Gobolka waxaa ka lumay -26.2% iyo 2022 waxaa ka lumay -12.9%. Waa sida suuqa saamiyada uu u shaqeeyo. Hoos u dhacyada mustaqbalka ama burburyada suuqa, marka lacag soo-celinta ay yaraato, dheefta waa in la jaraa ama waa in sicirka canshuurtu kor u kaco. Marka la barbar dhigo soo celinta *la hubo* ee curaarta dowladda hoose oo ah 3-5%, doorashada waa caddahay. Aan maalgelin nafteena ku samayno, ma ahan Wall Street. *Diid SJR 8201*.

## Dooda Waxaa Diyaariyay:

**Justin Gill,** APRN, RN, Guddoomiyaha Ururka Kalkaaliyeyaasha Gobolka Washington; **Bob Ferguson,** Guddoomiyaha, Dimuqraadi; **John Braun**, Senatarka Gobolka, Hoggaamiyaha laga tirada badan yahay, Jamhuuri; **Carma Matti-Jackson**, Maamulaha Guud, Ururka Daryeelka Caafimaadka Washington; **Cathy Knight**, Agaasimaha Gobolka, Wakaalada Deegaanka Ururka WA ee Gabownimada; **Dani Rice**, Daryeelaha dadka qaba Ootiisamka iyo Down Syndrome

**Xiriirka:** 206-451-7139; Ana@approve8201.org; Approve8201.org

## Dooda Waxaa Diyaariyay:

**Bob Hasegawa**, Senatarka Gobolka, Dimuqraadi, Degmada 11aad; **Peter Abbarno**, Wakiilka Gobolka, Jamhuuri, Degmada 20aad; **Mark Schoesler**, Senatarka Gobolka, Jamhuuri, Degmada 9aad; **Joe Schmick**, Wakiilka Gobolka, Jamhuuri, Degmada 9aad

**Xiriirka:** (360)786-7616; bob.hasegawa@leg.wa.gov

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Wadajirka ah ee Senatka Lr. 8201

HA NOQOTO MID AY XALLIYAAN, SENATKA IYO GOLAHA WAKIILLADA EE GOBOLKA WASHINGTON, GUDAHA KULANKA SHARCI-DEJINTA EE LA ISUGU YIMID:

IN, doorashada guud ee soo socota ee gobolkaan lagu qabanayo xoghayaha gobolka waa inuu u gudbiyaa codbixiyeyaasha u qalma ee gobolka ee ku aaddan ansixintooda iyo hirgelintooda, ama ay u diidaan, wax-ka-beddelka Qodobka XXIX, qaybta 1 ee Dastuurka gobolka Washington si uu u akhriyo sidaan soo socota:

Qodobka XXIX, qaybta 1. Iyadoo aan loo eegin qodobbada qaybaha 5, iyo 7 ee Qodobka VIII iyo qaybta 9 ee Qodobka XII ama qayb kale ama qodob kale oo ka mid ah Dastuurka gobolka Washington, lacagaha kasta ee lacagta hawlgabka dadweynaha ama sanduuqa hawlgabka, sanduuqa aaminaadda caymiska warshadaha, ((~~ama~~)) lacag lagu hayo aaminaad loogu talagalay dadka naafada koriinka leh, ama lacag lagu bixinaayo adeegyada daryeelka muddada dheer iyo taageerada waayeellada iyo dadka naafada ah ee u qalma waxaa lagu maalgashan karaa sida sharcigu uu oggol yahay. Dakhliga maalgashiga ee ka yimaada sanduuq si loo bixiyo adeegyada daryeelka muddada dheer iyo taageerooyinka waayeellada u qalma iyo dadka naafada ah waxaa loo qoondeeyay adeegyada iyo taageerooyinka muddada dheer ee ka faa'iideystayaasha barnaamijka.

HA NOQOTO MID DHEERAAD AH OO LA GO'AAMIYEY, In wax-ka-beddelkaan uu yahay hal wax-ka-beddel oo keliya oo ku dhex jira macnaha Qodobka XXIII, qaybta 1 ee Dastuurka gobolka.

Sharci-dejinta waxay ogaatay in isbeddelka ku dhex jira wax-ka-beddelka ay ka kooban yihiin hal qorshe oo isku dhafan oo loogu talagalay maalgelin si loo bixiyo adeegyada daryeelka muddada dheer iyo taageerada waayeellada iyo dadka naafada ah ee u qalma. Haddii wax-ka-beddelkaan loo arko in uu yahay wax-ka-beddelo gaar ah, qaraarka wadajirka ah gabi ahaanba waa buray oo ma laha awood iyo saamayn dheeraad ah.

HA NOQOTO MID DHEERAAD AH OO LA GO'AAMIYEY, In sharci dejinta, iyadoo la raacayo awooddeeda hoos timaadda RCW 29A.36.020(3), ay qeexdo ciwaanka warqadda codbixinta iyo sharaxaad kooban waa inay akhriso "Sharci dejinta ayaa soo jeedisay wax-ka-beddelka dastuurka ee oggolaanaya in lacagta ku jirta sanduuqa daryeelka muddada dheer ee Washington la maalgashado. Wax-ka-beddelkaan wuxuu oggolaanayaa in maaliyadda gobolka ee loogu talagalay bixinta dheefta daryeelka muddada-dheer ee waayeellada iyo dadka naafada ah ee u qalma la maalgashado sida sharcigu uu u idmay.

Ma tahay in wax-ka-beddelkaan dastuurka la:

Ansixiyo..........

Diido .........."

HA NOQOTO MID DHEERAAD AH OO LA GO'AAMIYEY, In xoghayaha gobolka uu sababo in ogeysiiska wax-ka-beddelkaan dastuurka lagu daabaco ugu yaraan afar jeer inta lagu jiro afarta toddobaad ee ka horreeya doorashada wargeys kasta oo sharci ah ee gudaha gobolka oo dhan.

**--- DHAMMAAD ---**

**Soo Jeedinta Lr. 1**

## Medic One – Beddelaadda Canshuurta Jirta ee Adeegyada Caafimaadka Degdegga ah

Golaha Degmada King ayaa hirgeliyay Xeerka Lr. 19950 ee khuseeya maalgelinta nidaamka adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One ee guud ahaan degmada oo dhan. Ma tahay in Degmada King loo oggolaado inay beddesho canshuurta wakhtigeedu dhammaanayso iyadoo soo rogaysa canshuuraha hantida ee caadiga oo ah $0.25 ama ka yar oo ka mid ah kunkii doolar ee qiimaha la qiimeeyay mid kasta oo ah lix sanno oo isku xigta, oo ururinta bilaabanayso 2026, sida ku cad Xeerka Lr. 19950 ee Degmada King, si loo sii wado maalgelinta adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One:

Haa

Maya

*Qoraalka cabbirkan oo dhammeystiran ayaa laga heli karaa laga bilaabo bogga 110.*

Waxaad u codeynaysaa
**Haa ama Maya**
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1

*Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 84.55.069)*

## Bayaanka sharaxaadda

Haddii ay ansixiyaan codbixiyeyaasha, Soo Jeedinta Lr. 1 waxay Degmada King u oggolaan doontaa inay soo rogto canshuurta hantida caadiga ah heer aan ka badnayn $0.25 halkii $1,000 ee qiimaha la qiimeeyay ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada King. Hanti leh qiime la qiimeeyay oo ah $844,000, canshuurta ugu badan waxay noqon doontaa qiyaastii $211 sannadkii ugu horreeya. Dakhliga ka soo baxa canshuurta waxaa loo isticmaali doonaa in lagu maalgeliyo adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One ee guud ahaan Degmada oo dhan iyo daryeelka caafimaadka degdegga ah sida lagu sharxay Xeerka Lr. 19950 iyo RCW 84.52.069. Canshuurta waxaa la oggolaan doonaa muddo lix sanno ah iyadoo ururinta bilaaban doonto 2026. Canshuurta waxay ka dhaafitaan ku sameyn doontaa xaddidaadaha heerka ee ku xusan RCW 84.52.043 laakiin waxay ku xirnaan doontaa xaddidaadaha cutubka 84.55 ee kordhinta canshuurta sannadaha labaad ilaa lixaad. Waayeellada, halyeeyada hore, iyo dadka naafada ah ee u qalma ayaa xaq u yeelan doona ka dhaafitaan canshuur sida ku cad RCW 84.36.381.

**Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Helen Chatalas**
Agaasime Ku-xigeenka
(206) 263-8560
helen.chatalas@kingcounty.gov

# Bayaanka lagu taageerayo

Reagan Dunn, Greg Markley, Tom Rea
YesonMedicOne.com

Medic One waxay badbaadisaa nolosha. Sannadkii hore, dab-damiyeyaasha iyo shaqaalaha gurmadka degdegga ah ayaa ka jawaabay in ka badan 255,000 oo wicitaanno caafimaad oo 9-1-1 ah (mid kasta qiyaastii 2 daqiiqo kasta). Nidaamka Medic One waxaa loo aqoonsaday inuu yahay mid ka mid ah nidaamyada adeegyada caafimaadka degdegga ah ee ugu wanaagsan adduunka. Heerka badbaadada wadno-istaagga halkan ayaa ka mid ah kuwa ugu sareeya ee la soo sheegay meel kasta—dhibaneyaasha wadno-istaagga halkan waxay 2 ilaa 3 jeer uga badan yihiin inay ka badbaadaan marka loo eego magaalooyinka kale. Daryeelka caafimaadka ee heer sare ah waxaa heli kara qof kasta adigoo si fudud u garaacaya 9-1-1, iyadoon loo eegin xaaladda caafimaad, goobta, duruufaha, ama wakhtiga maalinta.

Canshuurta Medic One ma aha canshuur cusub. Waxay sii wadaysaa maalgelinta barnaamijka bixiya adeegyada degdegga ah ee muhiimka ah ee qof walba oo ku nool Degmada King. Codbixiyeyaasha Degmada King waxay ku taageereen Medic One in ay ansixiyaan canshuuraha la soo rogo in ka badan 45 sanno. Dib-u-cusboonaysiintan waxay *hoos* u dhigaysaa heerka ugu badan ee canshuurta hanti-dhaqaale ah $0.015, taasoo ka dhigaysa $0.25 halkii $1,000 ee qiimaha la qiimeeyay. Iyadoo la adeegsanayo heerka canshuurta la soo jeediyay, mulkiileyaasha guri qiimihiisu yahay $850,000 waxay sannadkii bixin doonaan $212 si ay u helaan daryeel caafimaad oo heer caalami ah oo degdeg ah oo lagu helo daqiiqado gudahood.

Waxaan ku tiirsanahay Medic One inay joogto marka aan u baahanahay, 24 saacadood maalintii, maalin kasta. Hadda waa markeena inaan u garab istaagno Medic One. Ku biir dab-damiyeyaasha iyo shaqaalaha gurmadka si aad dib ugu cusboonaysiiso ballanqaadkaaga. Dhaha Haa ee ku aaddan Medic One oo u codee Haa Soo Jeedinta 1 ee Degmada King.

# Bayaanka looga soo horjeedo

Ma jiro wax bayaan ah oo ka soo horjeeda cabbirkan. Ma jiro qof ka tirsan gudaha maamulka oo la soo xiriiray Doorashooyinka Degmada King si uu uga mid noqdo guddiga qoraaya bayaanka ka soo horjeeda cabbirka sharciga.

Maamulada cabbirrada ku soo bandhigga warqadda codbixinta waxay sidoo kale magacaabaan xubno ka tirsan dadweynaha si ay uga mid noqdaan guddiyada "taageeridda" iyo "ka soo horjeedidda". Guddiyadan waxay diyaariyaan bayaanno taageeraya ama ka soo horjeeda cabbirka sharciga ee warqadda codbixinta. Bayaannadan waxaa lagu daabacaa buug-yaraha codbixiyeyaasha deegaanka si ay uga caawiyaan codbixiyeyaasha inay go'aanno xog-ogaal ah gaaraan.

Haddii maamulka uusan awoodin inuu magacaabo guddi, Doorashooyinka Degmada King waxay magacaabi karaan mid walba oo ka mid ah xubnaha guddiga ee u qalma ee hore isa soo taaga. Si aad mustaqbalka ugu biirto guddi, fadlan la xiriir maamulka.

**Soo Jeedinta Lr. 1**

## Kor-U-Qaadista Canshuurta ee Ammaanka Dadweynaha

Si loo maalgeliyo adeegyada ammaanka dadweynaha, oo ay ku jiraan shaqaaleynta booliiska, barnaamijyada ka jawaabista wadajirka ah, iyo waddooyinka iyo hareeraha waddooyinka oo ammaan ah, Golaha Magaalada Burien ayaa ansixiyay Xeerka 874. Cabbirkan wuxuu kordhinayaa soo rogitaanka canshuurta hantida caadiga ah ee Magaalada oo aan ka badnayn $0.95/$1,000 ilaa iyo heerka ugu badan oo aan ka badnayn $1.90/$1,000 ee sannadka 2026; wuxuuna dejinayaa qodobka xaddidaadda ee soo rogitaanka canshuurta hantida caadiga ah ee Magaalada sannadaha 2027-2031 oo ah 6%. Ka dhaafitaannada waxay khuseeyaan waayeellada, halyeeyada hore, iyo kuwo kale sida lagu sharxay RCW 84.36.381.

Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo:

Haa

Maya

*Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.*

!

Waxaad u codeynaysaa **Haa ama Maya** ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1

*Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 84.55.050)*

## Bayaanka sharaxaadda

Haddii la ansixiyo, soo jeedintaan waxay u oggolaanaysaa Magaalada Burien ("Magaalada") inay kordhiso canshuurta hantida caadiga ah ee adeegyada iyo hawlaha ammaanka dadweynaha, taas oo ka badan xaddidaadda lagu dejiyay RCW 84.55.010, laga bilaabo 2026. Maalgelin kasta oo laga soo ururiyo kor-u-qaadista canshuurta waxaa lagu hayn doonaa Magaalada gudaha sanduuqa gaarka ah ee dakhliga gaarka ah. Magaalada ayaa soo jeedinaysaa kor-u-qaadista canshuurta si wax looga qabto kharashaadka adeegyada ammaanka dadweynaha ee sii kordhaaya oo celcelis ahaan ah 5 ilaa 8 boqolkiiba sannadkii, halka dakhliga canshuurta hantida uu kordho hal boqolkiiba sannadkii oo keliya. Haddii aan la helin maalgelin dheeraad ah, Magaalada ma awoodi doonto inay sii waddo heerarka adeegga hadda jira ama wax ka qabato baahiyaha sii kordhaaya ee ammaanka dadweynaha.

Maalgelinta canshuurta waxay taageeri doontaa ilaalinta iyo ballaarinta qaabka jawaabta wadajirka ah ee booliiska si wax looga qabto hoy la'aanta, dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda, iyo isticmaalka daroogada ee dadweynaha; ilaalinta heerka hadda ee shaqaalaha booliiska iyo shaqaaleysiinta saraakiil booliis oo dheeraad ah si ay u taageeraan kooxaha jawaabta wadajirka ah, kordhinta roondada magaalada oo dhan, iyo taageeridda barnaamijyada ka hortagga dambiyada bulshada; abuurista waddooyin iyo hareeraha waddooyinka oo ammaan ah iyada oo loo marayo hagaajinta kaabayaasha iyo iftiin dheeraad oo waddooyinka ah.

Kordhinta heerka canshuurta ee bilowga ah waxaa lagu qiyaasay inay noqon doonto qiyaastii $0.79519/$1,000 qiimaha hantida la qiimeeyay ama, guri leh qiime la qiimeeyay oo ah $596,000, qiyaastii $39.50 bishii (ama $473.90 sannadkii). Mulkiileyaasha guryaha ee jira 62 sanno ama ka weyn, ama naafada ah oo buuxiya shuruudaha dakhli yar, waxay u qalmi karaan ka dhaafitaan canshuurta hantida sida lagu sharxay RCW 84.36.381.

**Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Heather McCoy**
Karaaniga Magaalada
(206) 507-2419
heatherm@burienwa.gov

## Bayaanka lagu taageerayo

Jamie Jo Skeen, Tiffany Crosby
yesforburienpublicsafety.com

Canshuurta Ammaanka Dadweynaha ee Burien waa maalgashi caqli-gal ah oo dheelitiran oo ku saabsan wanaagga bulshadeenna. Tallaabadan waxay xaqiijin doontaa sii socoshada iyo ballaarinta qaabka wada-jawaabka guuleysta ee isku xira fulinta sharciga iyo xirfadleyaasha caafimaadka maskaxda si loo hubiyo taageero wax ku ool ah 24/7 ee shakhsiyaadka ku jira xaaladaha degdegga ah sida rabshadaha guriga, caafimaadka maskaxda, murugada, iyo isticmaalka daroogada. Habka wada shaqeynta ee tani waxay wanaajisaa natiijooyinka kuwa ku jira xaalad degdeg ah waxayna yareysaa ku tiirsanaanta ku tiirsanaanta ciidanka booliiska ee dhaqameed. Barnaamijkan ayaa la baabi'inayaa sababo la xiriira luminta maalgelinta federaalka, laakiin wuxuu caddeeyay inuu waxtar leeyahay isagoo hagaya shakhsiyaadka kheyraadka lagama maarmaanka ah, wuxuuna yahay qayb muhiim ah oo ka mid ah amnigeena.

Intaa waxaa dheer, kor-u-qaadista canshuurta waxay ka caawisaa ilaalinta heerarka shaqaalaha booliiska waxayna u oggolaanaysaa shaqaaleysiinta saraakiil dheeraad ah si ay u taageeraan roondada kordhay iyo horumarinta barnaamijyada ka hortagga dambiyada. Joogitaanka muuqda iyo shaqaale ku filan ee booliiska ayaa muhiim u ah ka hortagga dambiyada iyo jawaab celinta degdegga ah.

Kor-u-qaadista canshuurta waxay sidoo kale diiradda saaraysaa waddooyin iyo hareeraha waddooyinka oo ammaan ah iyada oo loo marayo hagaajinnada kaabayaasha iyo iftiin dheeraad ah, taas oo kordhisa ammaanka lugeeyeyaasha isla markaana ka hortagta falalka dambiyada.

Canshuurta Ammaanka Dadweynaha waa maalgelin lagama maarmaan ah oo ku saabsan qaab-dhismeed ilaalinaya Burien oo ammaan ah oo kobcaysa. Faa'iidooyinkeeda ku aaddan bulshadeenna ayaa aad uga weyn kharashka. Waxaa taageeray Ururka Shariifka ee Degmada King.

## Bayaanka looga soo horjeedo

Daniel Martin, Omaha Sternberg, Stephen Lamphear
noburientax@gmail.com

Amniga dadweynaha waa muhiim. Sidoo kale iyaduna daah-furnaanta. Canshuuraha hantida waxay saameeyaan dhammaanteen: mulkiileyaasha guryaha, ganacsiyada, mulkiileyaasha guryaha la kireeyo, iyo kiraysteyaasha. Ganacsiyada waxay canshuurtooda u gudbiyaan macaamiisha; mulkiileyaasha guryaha waxay canshuurtooda u gudbiyaan kiraysteyaasha. Markaa, maxaa qorshe ah?

Mas'uuliyiinta magaalada ayaa la weydiistay inay bixiyaan qorshahooda, oo ay ku jiraan qaddarka lacagta loo baahan yahay iyo xogta iyo cilmi-baarista taageeraya tan. Si kastaba ha ahaatee, Golaha ayaa ansixiyay cabbirka sharciga ee warqadda codbixinta iyaga oo aan soo bandhigin hal xaqiiqo, iyaga oo raadinaaya in ka badan $52 milyan muddo lix sanno ah.

Hoggaamiyeyaasha magaalada waa inay si cad ugu sheegaan codbixiyeyaasha sida ay u qorshaynayaan inay u isticmaalaan doolarka canshuurta ee bulshadeenna. Xaqiiqdu waxay tahay, goluhu wuxuu ahaa mid aan caddeyn ugu yaraan. Luqadda warqadda codbixinta waa jahawareer, marin-habaabin, oo khaldan. Wax qorshe ah looma soo bandhigin muwaadiniinta. Bandhigga dadweynaha wuxuu ku jiray ballanqaadyo si guud loo dhigay oo ku saabsan ammaanka dadweynaha, "oo ay ku jiraan... kharashyada la xiriira... waddooyin ammaan ah, hareeraha waddooyinka, iyo nalalka waddooyinka oo dheeraad ah."

Cabbirka sharciga ee warqadda codbixinta ayaa si liidata loo qoray waana mid loo fasiri karo siyaabo kala duwan. Golaheena ayaa qarinaya xaqiiqooyinka, iyagoo diidaya in ay si maaliyadeed u caddeeyaan mowqifkooda. Waa inaanan u codeynin kororka canshuurta oo u muuqda sidii sanduuq lacag ah oo aan lala xisaabtamin oo loogu talagalay magaalada. Ku biir mulkiileyaasha guryaha, kiraysteyaasha, kuwa jamhuuriga, kuwa dimuqraadiga, iyo kuwa madax-bannaan, oo k*u codee maya* canshuurtaan aan lala xisaabtamin, oo si liidata loo qorsheeyay.

## Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Maalgelintaan waxaa bixisay Burien oo loogu talagalay Burien. Haddii aanan helin maalgelintaan, waxaan lumin doonaa ka hortagga dhibaatooyinka 24/7 waxaana awoodi doono inaan kordhino ciidanka booliiska. Mucaaradku waxay rabaan in si cad loo ogaado halka maalgelintu ay aadi doonto, laakiin waa muhiim in la helo dabacsanaan si loo daboolo baahiyaha soo baxaya ee ugu muhiimsan loona isticmaalo maalgelinta si loo buuxiyo meelaha bannaan. Golaha Magaalada ayaa dejinaaya mudnaanta kor-u-qaadista canshuurta. Codeynta xubnaha golaha ee ku matala waxay sidoo kale xaqiijinaysaa in mudnaantaada la muujiyo.

## Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Goluhu weligood ma sheegin in qaabka wada-jawaabku uu halis ugu jiro luminta maalgelinta federaalka. Xafiiska Shariifka ayaa shaqaale yari ka jirtaa guud ahaan degmada oo dhan; canshuur cusub ma awoodi doonto magaalada inay shaqaaleysiiso saraakiil booliis oo cusub. Gunaanad: wax qorshe ah ma jiro.

Iyo $52 milyan oo doolar lixda sanno ee soo socota ayaa aad uga badan inta loo baahan yahay si loo maalgeliyo qaabka wada-jawaabka ah iyo baahiyaha kale ee adeegyada ammaanka dadweynaha. Ilaa *qorshe dhab ah* laga soo bandhigo, Ku *Codee Maya*!

**Soo Jeedinta Lr. 1**

# Kor-U-Qaadista Canshuurta ee Adeegyada Ammaanka Dadweynaha

Golaha Magaalada ee Magaalada Lake Forest Park ayaa hirgeliyay Qaraarka Lr. 25-2021 si loo maalgeliyo Adeegyada Ammaanka Dadweynaha.

Soo jeedintaan waxay maalgelin doonaa Adeegyada Ammaanka Dadweynaha sida ku cad Qaraarka oo ay ku jiraan adeegyada booliiska, qalabka ammaanka, wicitaanka 911, adeegyada maaraynta xaaladaha degdegga ah, adeegyada xabsiga, iyo ka jawaab celinta xaaladaha caafimaadka maskaxda iyadoo si ku meel gaar ah loo dejinaayo heerka ugu badan ee wadarta canshuurta caadiga oo ah $0.95367/$1000 oo la ururinayo sannadka 2026, oo ay la socoto kordhino sannadle ah oo shan sanno ah oo lagu saleeyay heerka sicir bararka ee Gobolka Seattle CPI-U oo aan ka badnaan karin 5%. Waayeellada dakhligoodu hooseeyo, halyeeyada hore ee naafada ah, iyo kuwa kale ee naafada ah ee u qalma ayaa laga dhaafayaa canshuurta sida hoos timaadda RCW 84.36.381.

Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

Haa

Maya

*Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.*

Waxaad u codeynaysaa
**Haa ama Maya**
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1

*Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 84.55.050)*

## Bayaanka sharaxaadda

Magaalada Lake Forest Park waxay soo jeedinaysaa Soo Jeedinta 1 si ay u bixiso maalgelin waara oo loogu talagalay Adeegyada Ammaanka Dadweynaha oo ay ku jiraan: shaqaaleynta booliiska, tababarka, iyo qalabka amniga; adeegyada wicitaanka 911; adeegyada xabsiga; kharashaadka dacwad-oogista iyo difaaca dadweynaha; iyo barnaamijyada faragelinta dhibaatooyinka iyo jawaabta caafimaadka maskaxda.

Soo Jeedinta 1 waxay si ku meel gaar ah u oggolaan lahayd kordhin sannadle ah oo qiyaastii $1.2 milyan ah ee canshuurta hantida caadiga ah ee Magaalada iyada oo loo marayo kor-u-qaadista canshuurta. Iyadoo aan la helin oggolaanshaha codbixiyeyaasha ee kor-u-qaadista canshuurta, Magaalada waxaa lagu xaddiday inay kordhiso canshuurta hantida boqolkiiba 1% oo keliya. Dakhliga canshuurta dheeraadka ah ee ka yimaada Soo Jeedinta 1 waxaa si gaar ah loo raadin doonaa waxaana loo isticmaali karaa oo keliya in lagu bixiyo kharashka Adeegyada Ammaanka Dadweynaha.

Soo Jeedinta 1 waxay ku kici doontaa mulkiileyaasha hantida $0.24 halkii $1,000 ee qiimaha la qiimeeyay ($24 halkii $100,000). Sannadka 2026, guri leh qiime celcelis ah oo ah $914,000 waxay noqon doontaa qiyaastii $219.36 ama $18.28 bishii. Sannad kasta oo ka mid ah shanta sanno ee soo socota (2027–2031), dakhliga ka soo xaroonaya kor-u-qaadista canshuurta waxaa la kordhin karaa ilaa 5% si waafaqsan sicir-bararka. Kordhinta sannadlaha ah ee sicir-bararka waxay u baahan doontaa hab furan oo dadweyne iyo codbixin golaha si loo ansixiyo.

Soo Jeedinta 1 waxay kor-u-qaadista canshuurta ka dhaafaysaa waayeellada, halyeeyada hore ee naafada ah iyo dadka kale ee naafada ah ee u qalma. Marka Soo Jeedinta 1 ay wakhtigeedu dhammaato, canshuurta ayaa hoos ugu noqon doonta heerkii ay ahaan lahayd haddii aan la ansixin oo Magaalada ay qaadan lahayd oo keliya kordhinta 1% ee uu oggolaaday sharciga gobolka.

**Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Matt McLean**
Karaaniga Magaalada
(206) 368-5440
mmclean@cityoflfp.gov

## Bayaanka lagu taageerayo

Peter Eglick, Fiaz Mir, David Hammond
www.yesonlfpprop1.com

Ku Codee *haa* Soo Jeedinta 1!

LFP ma aha mid ka badbaaday sicir-bararka. In kasta oo shaqaalaha, hawlaha, iyo adeegyada la dhimmay, haddana waxaan la kulannaa farqi miisaaniyadeed oo sii kordhaaya. Muddo laba sanno ah, kharashaadka magaalada ee adeegyada asaasiga ah ee ammaanka dadweynaha iyo adeegyada kale ayaa kordhay in ka badan $700,000. Sharcigu wuxuu xaddidayaa LFP inay kordhiso dakhliga canshuurta hantida 1% sannadkii, taasoo sannadka 2025 ku daraysa keliya $34,500 oo dakhli dheeraad ah. *Haa* ee Soo Jeedinta 1 waxay ka caawin doontaa in la xiro farqiga si loo maalgeliyo adeegyada ammaanka dadweynaha ee muhiimka ah.

In ka badan 90% canshuurta hantida waxay aaddaa Gobolka, Degmada, iyo Degmada Dugsiga. Maanta, LFP waxay heshaa qiyaastii 8 senti halkii doolar ee canshuurta hanti kasta. Soo Jeedinta 1 waxay ka dhigi lahayd qiyaastii 10 senti, taasoo ku kacaysa mulkiilaha guriga celceliska ah ee Magaalada Lake Forest Park qiyaastii $18 bishii. Dakhliga waxaa si toos ah loogu taageeri doonaa baahiyaha amniga: booliiska, 911, maxkamadda magaalada, xabsiga, maamulka degdegga ah, iyo kuwo kale. Kor-u-qaadista canshuurta waxay dhacaysaa kadib 6 sanno. Waayeellada, halyeeyada hore, iyo dadka kale ee naafada ah ee u qalma waa laga dhaafi doonaa.

Ikhtiyaarka kale waa dhimmista weyn ee adeegyada ilaalinaya bulshadeenna ammaan iyo adkaysi leh. Magaalooyinka kale ee dib u dhigay xiritaanka farqiga miisaaniyadda waxay la kulmeen dhimmista qoto dheer mustaqbalka. Hadda, waa wakhtigii la dhaqaaqi lahaa—ku codeynta *haa* waxay maalgelinaysaa bulshadeenna, iyadoo la ilaalinayo heer wax ku ool ah oo adeegyada muhiimka ah ee booliiska iyo ammaanka dadweynaha.

## Bayaanka looga soo horjeedo

Jack Tonkin, Hannah Blackbourn, Beth Chapple

Ku Codee Maya! Booliiska iyo Adeegyada Ammaanka Dadweynaha waxaa si buuxda loo maalgelinayaa ilaa 2028 iyada oo loo marayo Sanduuqa Guud. Maalgelinta canshuurtaan waxay geli doontaa Sanduuqa Guud, taasoo u oggolaanaysa in loo wareejiyo lacagaha Booliiska iyo Adeegyada Ammaanka Dadweynaha meel ka baxsan Sanduuqa Guud. Tani waxay kordhisaa Sanduuqa Guud iyadoo la adeegsanayo caddadka ka soo baxa canshuurtaan, taas oo diyaar u ah nooc kasta oo kharashka mustaqbalka magaalada ah.

Magaalada Lake Forest Park waxay leedahay lacag ku filan si ay u maalgeliso adeegyada muhiimka ah ee deganeyaasha. Golaha magaalada oo walaac qaba ayaa ku codeeyay 3-4 ka soo horjeedka canshuurtaan. Ha lagu marin habaabin. Codka Maya ma goyn doono adeegyada ammaanka dadweynaha ama faa'iidooyinka kale ee muwaadiniinta. Magaalada waxay u baahan kartaa canshuur kor loo qaado mustaqbalka, laakiin ma aha wakhtigan.

Xitaa iyadoo kharashaadka la kordhiyay, hadhaaga Sanduuqa Guud waxaa la filayaa inuu noqdo $8.9 milyan dhammaadka 2026—kaas oo ka badan afar jeer keydka loo baahan yahay ee $2.1 milyan. Qiyaasaha magaalada waxay muujinayaan in keydka uu korayo laga bilaabo $8.9 milyan ilaa ku dhawwaad $10 milyan iyadoo la kordhiyo canshuurtaan.

Codbixiyeyaashu si xikmad leh ayay horrey u diideen canshuuro. Ka hor inta aan la kordhin canshuuraha, magaalada waa inay si mas'uuliyad leh u isticmaashaa lacagaha jira, yareysaa kharashaadka aan loo baahnayn, tixgelisaa ilo dakhli oo aan si xun u saameyn bulshada, oo ay ku martiqaaddaa talooyinka bulshada iyada oo loo marayo Guddiga Joogtaynta Maaliyadeed ee Muwaadiniinta. Yaan lagu marin habaabin. Ku codee Maya!

## Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Ku codee *Haa*. Maalgelinta laga helo Soo Jeedinta waxaa si sharci ah loogu heellan doonaa Adeegyada Ammaanka Dadweynaha, iyadoon loo eegin xaaladda dakhliga guud. Aragtida ka soo horjeeda Soo Jeedinta 1 waa mid male-awaal ah: ma jiro sicir-barar, ma jiraan kharashyo lama filaan ah ilaa 2028. Keydka magaalada wuxuu dhawwaan noqon doonaa mid dhammaada haddii aan la helin dakhli cusub. Kuwa ka soo horjeeda Soo Jeedinta 1 waxay yiraahdaan aan halista qaadano. Si ka duwan, Soo Jeedinta 1 waxay ilaalinaysaa kayd caafimaad leh oo hubinaaya adeegyo muhiim ah oo degan, wax kasta ha yimaadeene. Ku codee *Haa* si aad u taageerto booliiska LFP iyo adeegyada ammaanka dadweynaha!

## Beeninta bayaanka lagu taageerayo

In kasta oo dhammaan ay ku heshiiyeen in kharashaadka ammaanka dadweynaha ay kordheen, taageerayaasha canshuurtaan ma aqoonsanayaan in magaalada ay leedahay ku dhawwaad $7 milyan oo aan loo qoondeynin—ku filan in lagu taageero adeegyada muhiimka ah iyada oo aan la kordhin canshuuraha. Soo Jeedinta 1 waxay ku kici doontaa mulkiilaha guri qiimahiisu caadi yahay lacag dheeraad ah oo dhan $1,300 lix sanno gudahood, marka laga reebo canshuuraha kale ee la bixiyo. Ma rabtaa inaad doolarkaaga aad si adag ku soo shaqeysay inuu abuurro keyd weyn oo loogu talagalay magaalada? Aynu ku maamulno maalgelinta jirta si mas'uuliyad leh. Ku codee *Maya.*

**Soo Jeedinta Lr. 1**

## Canshuurta Qoysaska, Waxbarashada, Dugsiga Hore, iyo Ballanqaadka

Golaha Magaalada Seattle ayaa hirgeliyay Xeerka Lr. 127238 ee khuseeya beddelaadda canshuur wakhtigeedu dhammaanayso si loo maalgeliyo adeegyada taageerada waxbarashada.

Soo jeedinta 1 ee Magaalada Seattle waxay beddeli doontaa canshuur wakhtigeedu dhammaanayso, iyadoo maalgelinaysa daryeelka carruurta iyo dugsiga barbaarinta; taageerooyinka aqooneed, caafimaadka, iyo ammaanka ee ku aaddan ardayda K-12; u diyaargarowga jaamacadda iyo shaqada; iyo taageerooyin kale, sida ku xusan Xeerka 127238.

Waxay oggolaanaysaa canshuur lix-sanno ah oo ururinta laga bilaabi doono 2026 oo ah $0.72/$1,000 dheeraad ah ee qiimaha la qiimeeyay, oo noqonaysa ugu badnaan heerka wadarta guud ee canshuurta oo ah $3.02. Caddadka canshuurta ee 2026 ayaa noqon doona aasaaska canshuuraha ku xiga ee ilaa iyo 2031. Ka dhaafitaanka RCW 84.36.381 ee muwaadiniinta waayeelka iyo dadka naafada ah ayaa khuseeya.

Ma tahay in canshuurtaan la ansixiyo?

Haa

Maya

*Qoraalka cabbirkan oo dhammeystiran ayaa laga heli karaa laga bilaabo bogga 112.*

!

Waxaad u codeynaysaa
**Haa ama Maya**
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1

*Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 84.55.050)*

## Bayaanka sharaxaadda

Soo jeedinta Seattle 1, oo loo yaqaan Canshuurta Qoysaska, Waxbarashada, Dugsiga Hore ee Barbaarinta, iyo Ballanqaadka, waxay beddelaysaa canshuur waxbarasho oo wakhtigeedu dhammaanayso, taasoo soo xaraynaysa ugu badnaan $1,258,300,000 muddo lix sanno gudahood si loo kordhiyo helitaanka iyo bixinta adeegyada taageerada waxbarashada ee afar aag: A) barnaamijyada carruurnimada hore si loo kordhiyo helitaanka daryeelka carruurta iyo dugsiga barbaarinta goorta hore ee la awoodi karo; B) taageerada ardayda K-12 si loo kordhiyo u diyaarinta ardayda ee jaamacadda iyo xirfadaha; C) barnaamijyada caafimaadka iyo badqabka ee K-12 si loo kordhiyo caafimaadka jireed iyo maskaxeed ee ardayda; iyo D) taageerooyinka jaamacadda iyo xirfadaha si loo kordhiyo inay ardaydu dhammeeyaan shahaadada waxbarashada sare ee ka dambeysa dugsiga sare ama waddooyinka kale ee fursadaha xirfadeed. Xeerka 127238, Qaybta 6, ayaa si faahfaahsan uga hadlaya aagaggan. Kharashgaraynta caddadka iyo mudnaanta gudaha afarta aag waxaa si dheeraad ah u go'aamin doona iyadoo la raacayo bayaanka siyaasadda ee Qaybta 2, miisaaniyadaha sannadlaha ah, iyo Qorshaha Hirgelinta iyo Qiimeynta ee lagu ansixiyo xeerka, oo ay hagayaan Guddiga Kormeerka.

Heerka canshuurta dheeraadka ah ee la xiriira kororka soo jeedintaan ee mulkiilaha guri kasta waxa uu noqonayaa ku dhawwaad $0.72 ee ka mid ah $1,000 ee qiimaha la qiimeeyay, iyo heerka ugu badan ee wadarta canshuurta waa $3.02/$1,000. Canshuurta waxaa marka hore la ururin doonaa sannadka 2026. Ka dhaafitaanka RCW 84.36.381 ee muwaadiniinta waayeelka iyo dadka naafada ah ayaa khuseeya.

Canshuuraha uu codbixiyuhu ansixiyo la’aantood, Magaaladu guud ahaan waxaa sharciga gobolka ku xaddidan inay kordhiso canshuuraha hantida ee sannadlaha ah oo aan ka badnayn boqolkiiba hal ka sareeya caddadka ay Magaaladu heshay sannadkii ka horreeyay. Ka dib marka soo jeedintaan ay dhammayso canshuur qaadista sannadka 2031, ugu badnaanta kororka boqolkiiba hal ayaa waxaa loo xisaabin doonaa sida in soo jeedintaan aan la ansixin.

**Wixii su’aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Polly Grow**
Guddiga Anshaxa iyo Doorashooyinka ee Seattle
206-615-1248
polly.grow@seattle.gov

## Bayaanka lagu taageerayo

Bruce Harrell, Maritza Rivera, Tricia Schroeder
everychildreadyseattle.com

Ubad kasta oo Seattle ah wuxuu mudan yahay barashada hore oo tayo leh, ammaan iyo caafimaad inta lagu jiro waxbarashadooda K-12, iyo helitaanka jaamacad ama tababar xirfadeed. Ubad Kasta Diyaar (Every Child Ready)– cusbooneysiinta Canshuurta Qoysaska, Waxbarashada, Dugsiga Hore ee Barbaarinta iyo Ballanqaadka – wuxuu ballaarinayaa oo cusbooneysiinayaa barnaamijyada ka caawiya carruurta heer kasta oo waxbarasho, iyadoon loo eegin dakhliga ama koodka boostada.

*Laba Jibaarista Daryeelka Carruurta ee La Awoodi Karo*: Canshuurta soo jeedintaan waxay labanlaabeysaa taageerada qoysaska la daallaa dhacaya kharashaadka daryeelka carruurta — iyadoo adeegsanaysa 1,400 qoys iyo xasillinta shaqaalaha daryeelka carruurta. Canshuurta waxay taageertaa barnaamijyada barashada hore ee yareeya sinnaan la'aanta waxayna caawiyaan carruurta inay galaan fasalka koowaad ee dugsiga hoose iyagoo diyaar u ah inay wax bartaan.

*Ku Heynta Carruurta Caafimaad Qab*: Codkaaga wuxuu ku darayaa rugaha caafimaadka ee dugsiga; taasoo xaqiijinaysa in ardayda ku jirta 34 Dugsiyada Dadweynaha ee Seattle ay heli karaan talo caafimaad oo sax ah iyo daryeel, oo ay ku jiraan la-talin caafimaad maskaxeed oo diyaar ah. Canshuurta waxay maalgelisaa barnaamijyada xagaaga iyo kuwa dugsiga kadib kuwaas oo bixiya meelaha ammaan ah oo lagu barran karo.

*U Diyaargarowga Jaamacadda iyo Shaqada*: Soo Jeedinta 1 waxay sii haysaa Seattle Promise — lacag la'aan laba sanno oo waxbarasho ah oo loogu talagalay arday kasta oo ka qalin jebiyay dugsiga sare ee Seattle ee halka Jaamacadaha Seattle, iyadoo la siinayo waddooyin shahaadooyinka afar sanno ah. Canshuurta waxay ku dartaa wacyigelin si ay uga caawiso carruurta xiiseynaysa xirfadaha farsamada iyo shaqooyinka kale ee qoysaska mushaharka leh. *Ku soo biir Duqa Magaalada Bruce Harrell, Golaha Magaalada oo dhan, ururada ay ku jiraan SEIU 925 oo matalaya shaqaalaha daryeelka carruurta, ganacsiyada, taageerayaasha caafimaadka carruurta ee waxbarashada, iyo in ka badan si ay u taageeraan Soo Jeedinta 1.*

## Bayaanka looga soo horjeedo

Ari Hoffman

Inkasta oo yoolalka la sheegay ee canshuurta FEPP, darajooyinka iyo waxqabadka tacliimeed ma aysan hagaagin sidii loogu talagalay; way sii xumaadeen. Qoysaska Seattle waxaa lagu culaysay canshuur kale oo dheeraad ah magaalada aan la awoodi karin iyadoo aan la gaarsiin faa'iidooyinkii codbixiyeyaasha loo sheegay inay filayaan. Cabbirkan wuxuu u dhigantaa qiyaastii $654 sannadkii guri qiime dhexe leh.

Sannadba sannadka ka dambeeya, inkasta oo ay canshuurtaan jirto, ardaydu waxay arkeen natiijooyin waxbarasho oo aan isbeddelin ama hoos u dhacaya. Intii lagu jiray cudurka faafa, heerka guud ee aqoonta xisaabta iyo ELA ayaa hoos u dhacay dhammaan Dugsiyada Dadweynaha ee Seattle, xitaa ardayda ay FEPP taageerto, welina waxa uu ka hooseeyaa heerarkii ka horreeyay cudurka faafa.

Intaa waxaa dheer, caafimaadka maskaxda ardayda ayaa sii xumaanaya. Heerarka niyad-jabka, walbahaarka, iyo maqnaanshaha ayaa kordhay, xitaa iyadoo lacagaha canshuurta loo qoondeeyay barnaamijyada taageerada shucuurta bulshada iyo caafimaadka. Isbeddelka ayaa muujinaya in lacag badan aysan soo saarin natiijooyinkii la ballanqaaday, taasoo dhalisay su'aalo ku saabsan kormeerka iyo la xisaabtanka.

Dhanka kale, qiimaha nolosha ee magaalada Seattle ayaa sii kordhaya. Soo jeedinta canshuur kale waxay keliya ku kordhisaa culayska dhaqaale, iyadoo aan wax faa'iido ah laga helin. Canshuurta FEPP ayaa ku guuldareysatay inay keento isbeddel waxbarasho oo la ballanqaaday. Cusboonaysiinteedu waxay saari lahayd culays aan la aqbali karin deganeyaasha magaalada oo hore ula tacaalaya dhibaatooyinka awood la'aanta. Waxaan u qalannaa natiijooyin wanaagsan, ma ahan canshuuraha sare si loo taageero barnaamijyo guuldareystay. Ku Codee Maya.

### Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Cusbooneysiintan waxay in ka badan labanlaabeysaa daryeelka carruurta ee la awoodi karo, oo ah walaac weyn oo qoysaska kharash-u-nugul, waxayna sii haysaa barnaamijyada diyaarinta kulliyadda iyo xirfadaha ee ka caawiyay kumanaan dhallinyaro ah inay guulaystaan. Maalgelinta K-12 waxay bixisaa adeegyo caafimaad oo muhiim ah iyo adeegyo taageero oo dhammaystiran, waxaana lagu cusbooneysiiyay inay ku jiraan daryeelka caafimaadka maskaxda iyo taageero bulsho oo kordhay.

Canshuurtaan waxay leedahay kormeer madax-bannaan waxayna ku guuleysatay aqoonsi qaran – fadlan Ku Codee Haa carruurteena iyo qoysaskeena.

### Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Kordhinta canshuuraha ma fududeyso daryeelka carruurta ama waxbarashada inay noqdaan kuwo la awoodi karo—waxay keliya culayska saaraysaa qoysaska dhibaataysan iyo ganacsiyada yaryar. Canshuurtaan waxay jirtay sannado badan, haddana laba-meelood saddex meel ardayda Washington weli ma gaarin heerka fasalka akhriska ama xisaabta. In kasta oo dakhliga rikoorka ah, natiijooyinka way sii xumaanayaan. Barnaamijyadaan natiijo ma keenayaan. Halkii laga qaadi lahaa canshuur dheeraad ah, Magaalada Seattle waa inay dib u habeyso kharashaadka, jarto kharashaadka aan loo baahnayn, oo ay dalbato isla xisaabtan ka hor inta aysan qaadan doolar kale oo ka yimaada canshuur bixiyeyaasha.

**Soo Jeedinta Lr. 2**

## Beddelaadyada Ku Aaddan Canshuurta Ganacsiga iyo Shaqada

Golaha Magaalada Seattle ayaa hirgeliyay Xeerka Lr. 127259 ee khuseeya beddelaadyada ku aaddan canshuurta ganacsiga iyo shaqada.

Soo Jeedinta 2 ee Magaalada Seattle waxay kordhin doontaa heerarka canshuurta ganacsiga iyo shaqada oo hadda ah .00222 iyo .00427 oo loo kordhinayo .00342 iyo .00658, siday u kala horreeyaan, ilaa iyo 2033, markaas oo heerarka ay noqon doonaan .00273 iyo .00526. Kordhinta waxay taageeri doontaa Sanduuqa Guud ee Magaalada Seattle ee loogu talagalay barnaamijyada iyo adeegyada lagu sharaxay Qaybta 7 ee Xeerka 127259. Soo Jeedinta waxay sidoo kale kor u qaadi doontaa heerka bixinta canshuurta laga bilaabo $100,000 ee rasiidhada dakhliga guud ilaa iyo $2,000,000; abuuri doontaa $2,000,000 cusub oo dhimmis caadi ah; oo bixin doontaa canshuur dhimmisyo gaar ah oo la isku waafajinayo.

Ma tahay in Soo Jeedintaan la ansixiyo?

Haa

Maya

*Qoraalka cabbirkan oo dhammeystiran ayaa laga heli karaa laga bilaabo bogga 117.*

!

Waxaad u codeynaysaa **Haa ama Maya** ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 2

*Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 35.21.711)*

## Bayaanka sharaxaadda

Soo Jeedinta 2 ee Seattle waxay sameynaysaa afar isbeddel oo ku saabsan canshuurta ganacsiga iyo shaqada ee Magaalada Seattle. Marka hore, ganacsiyada hadda lagu canshuuro caddadka u dhigma dakhliga guud ee ganacsiga oo lagu dhufto heerka .00222 waxaa lagu canshuuri doonaa heerka .00342 ilaa 2032, ka dibna .00273 laga bilaabo 2033. Ganacsiyada hadda lagu canshuuro heerka .00427 waxaa lagu canshuuri doonaa .00658 ilaa 2032, ka dibna .00526 laga bilaabo 2033. Labaad, xadka hoose ee ganacsi aan canshuur ku lahayn ayaa kordhi doona, laga bilaabo $100,000 oo ah dakhli guud oo sannadle ah ilaa $2,000,000. Saddexaad, canshuur-dhimmis heer cusub oo ah $2,000,000 oo ku saabsan dakhliga guud ee sannadlaha ah ayaa lagu dabaqi doonaa dhammaan ganacsiyada. Afaraad, ka-dhimmis canshuureed oo magdhow u noqonaysa kordhinta canshuurta waxaa heli kara xarumaha kansarka ee dhammaystiran iyo isbitaalada carruurta ee aan faa'iido-doonka ahayn.

Dakhliga ka soo xarooda kordhinta heerka canshuurta, oo taageeri doona Sanduuqa Guud ee Magaalada, ayaa magdhow u noqon doona hoos-u-dhaca dakhliga ee ka dhasha tirada ganacsiyada bixiya canshuurta oo yaraata. Dakhliga waxaa lagu maalgelin doonaa maalgeshiyada jira ee wax ka qabta helitaanka cuntada, rabshadaha ku salaysan jinsiga, taageerada ganacsiyada yaryar, hoyga degdegga ah, ka hortagga hoy-la'aanta, taageerada xuquuqda iyo ilaalinta shaqaalaha, caafimaadka dadweynaha, horumarinta shaqaalaha iyo tababarka diyaarinta shaqada, farshaxanka iyo dhaqanka, iyo adeegyada halyeeyada hore iyo qaxootiga. Ilaa $30 milyan ayaa sidoo kale loo isticmaali karaa in lagu hirgeliyo oo lagu maamulo canshuurta, iyo in la yareeyo saameynta dhimmista maalgelinta federaalka ama isbeddelada siyaasadda federaalka ee khuseeya xasilloonida guryaha ee kiraysteyaasha dakhligoodu yar yahay, amniga cuntada, xasilloonida maaliyadeed ee bixiyeyaasha guryaha la awoodi karo iyo hantida, hoyga degdegga ah iyo hoy-la'aanta, daaweynta ciladda ku xiran maandooriyaha, iyo mashaariicda gaadiidka.

**Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Polly Grow**
Guddiga Anshaxa iyo Doorashooyinka ee Seattle
206-615-1248
polly.grow@seattle.gov

## Bayaanka lagu taageerayo

Bruce Harrell, Alexis Mercedes Rinck, Tanya Nguyen
yesseattleprop2.com

Cabbirkan wuxuu ka dhigi doonaa xeerka canshuuraha ee Magaalada Seattle mid caddaalad badan, wuxuu yarayn doonaa canshuuraha ganacsiyada yaryar iyo kuwa xaafadaha, wuxuuna ka ilaalin doonaa maalgeshiyada guryaha, ammaanka dadweynaha, iyo adeegyada bulshada goynta ba'an ee Trump.

Iyadoo isbeddel yar lagu sameynayo Canshuurta Ganacsiga & Shaqada ee Seattle (B&O) ee shirkadaha ugu waaweyn magaalada, Soo Jeedinta 2 waxay yaraynaysaa culayska 90% loo-shaqeeyeyaasha Seattle, waxayna meesha ka saaraysaa canshuuraha magaalada ee B&O ee in ka badan 75% ganacsiyada ugu yaryar. Gargaarkan wuxuu caawin doonaa dukaamada iyo maqaayadaha ku dhibaataysan magaalada oo dhan, wuxuu xasilliyaa qiimaha macaamiisha, wuxuuna ilaaliyaa shaqooyinka maxalliga ah. In kasta oo dhimmista canshuuraha ee ganacsiyada yaryar ay tahay mid joogto ah, qodobbada kale waxay dhammaanayaan sannadka 2033, taasoo xaqiijinaysa in aan ku hagaajin karno siyaasadaha si ay ula jaan qaadaan baahiyaha dhaqaale ee magaalada. Dhammaan maalgelinta waxaa lagu sameeyaa hantidhawr si loo hubiyo isla xisaabtanka.

Soo Jeedinta 2 waxay ka caawin doontaa ilaalinta magaaladeena goynta Trump iyadoo la ilaalinayo barnaamijyada ay ku tiirsan yihiin qoysaska shaqeeya iyo iyadoo la ilaalinayo dadka nugul ee guryaha leh iyo kuwa la quudiyo. Iyadoo aan la helin barnaamijyadaan, dhibaatada xad-dhaafka ah iyo xaaladda degdegga ah ee hoy-la'aanta ayaa sii xumaan doonta.

Soo jeedintaan cusub waxaa taageeray loo-shaqeeyeyaasha – oo ay ku jiraan codadka haweenka iyo ganacsiyada ay leeyihiin dadka laga tirada badan yahay – iyo sidoo kale ururada shaqaalaha, Duqa Magaalada Bruce Harrell, Xubinta Golaha Alexis Mercedes Rinck, iyo hoggaamiyeyaasha dagaalka ugu jiro sinnaanta canshuuraha. Fadlan ku codee *Haa* ee Soo Jeedinta 2.

## Bayaanka looga soo horjeedo

Eugene Wasserman
eugene@ecwassociates.com

Nidaamka canshuuraha ee Seattle wuxuu ka duwan yahay kan magaalooyin badan oo kale oo Mareykanka ah. Ganacsiyada Seattle waxay ku biiriyaan boqolkiiba aad uga sareeya kharashaadka Dowladda Magaalada Seattle marka loo eego ganacsiyada magaalooyinka kale. Dowladda Magaalada Seattle waxay u soo bandhigtaa heshiis canshuur ah inta badan deganeyaasha magaalada. Si loo sii wado heshiiskaan deganeyaasha magaalada, ganacsiyada jira ee Seattle waa inay koraan, shirkado cusubna waa inay soo guuraan.

Ganacsiyo badan oo ku yaalla magaalada Seattle ayaa la daallaa dhacaya. Qaar kale ayaa go'aansaday inay ka tagaan magaalada. Fiiri keliya meelaha bannaan ee dukaamada tafaariiqda ee maxalliga ama qaranka ee hore ee bartamaha magaalada iyo heerka 31 boqolkiiba ee bannaan ee xafiisyada bartamaha magaalada.

Koritaanka ganacsi ee caafimaadka qaba ee ganacsiyada yaryar, kuwa dhexe, iyo kuwa waaweyn waa muhiim. In kasta oo Soo Jeedinta 2 ay bixiso dhimmista canshuurta shirkadaha yaryar, waxay in ka badan labanlaabeysaa culayska canshuurta shirkadaha dhex dhexaadka ah iyo kuwa waaweyn.

Sannado ka hor, canshuurta bilowga degdegga ah ee Magaalada waxaa lagu soo rogay ganacsiyada waaweyn ee Seattle, gaar ahaan kuwa ku jira qaybta teknolojiyadda. Tan iyo markaas, Microsoft waxay ka saartay dhammaan ganacsigeeda magaalada Seattle. Amazon waxay shaqada ka joojisay 10,000 oo shaqaale, waxayna shaqaale u wareejisay Bellevue, iyadoo sidoo kale aasaastay unugyo ganacsi oo cusub qaybo kale oo ka mid ah Mareykanka. Canshuurta keliya ee ganacsiyada laguma xallin karo dhibaatooyinka muddada dheer ee Dowladda Magaalada Seattle. Ku Codee Maya Soo Jeedinta 2 ee Seattle.

### Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Ganacsiyada yaryar ee Seattle waxay nolosha ku hayaan xaafadaha waxayna bixiyaan shaqooyin maxalli ah. Soo Jeedinta 2 waxay keentaa nafis dhab ah iyadoo meesha ka saaraysa canshuuraha B&O ee shirkadaha ka hooseeya $2 milyan — qiyaastii 3 ka mid ah 4 — si ay u bixiyaan shaqaalaha, u daboolaan kirada, oo ay u sii furnaadaan.

10% ee ugu waaweyn shirkadaha ayaa wax badan ku biirin doona, iyagoo sannad walba soo saari doona $80–90 milyan si loo helo waddooyin ammaan ah, gaadiid, guryo, iyo adeegyo bani'aadannimo. Isku dheelitirkaas caddaaladda wuxuu taageeraa dukaamada yaryar iyo adeegyada muhiimka ah. Ku Codee Haa si loo ilaaliyo shaqooyinka loona adkeeyo Seattle.

### Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Nidaamka canshuurta B&O ee Seattle ma aha canshuur dakhli ganacsi; waa canshuur ku salaysan dakhliga guud. Qof sameeya hal milyan oo doolar sannadkii ayaa heli doona dhimmista canshuurta, halka ganacsiyada faa'iidada yar leh la ciqaabi doono. Kordhinta canshuurta ma aha isbeddel yar, balse waa labanlaab ka badan canshuurta B&O.

Haddii Magaalada Seattle ay hesho sumcad ah inay tahay deegaan ganacsi oo xun, dad badan oo degan Seattle ayaa noqon doona kuwo shaqo la'aan iyo hoy la'aan ah.

**Soo Jeedinta Lr. 1**

# Dib U Cusbooneysiinta Canshuurta Wakhtigeedu Dhammaanayso ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgalka

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Highline Lr. 401 ayaa hirgeliyay Qaraarka Lr. 06-25, ee khuseeya soo jeedin dib u cusbooneysiin canshuur oo loogu talagalay waxbarashada. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay ku soo rogto canshuuraha xad dhaafka ah ee soo socda, oo dib u cusbooneysiinaysa canshuur wakhtigeeda dhammaanayso, dhammaan hantida la canshuuri ee gudaha Degmada, ee loogu talagalay barnaamijyada waxbarashada iyo kharashyada hawlgelinta ee uusan Gobolku maalgelin (oo ay ku jiraan u diyaar garoowga jaamacadda/shaqada; caafimaadka maskaxda; agabyada iyo sahayda; teknolojiyada fasalka; amniga internetka; gaadiidka; ammaanka/amniga):

| Sannadka Ururinta | Canshuurta La Qiyaasay/$1,000 Qiimaha La Qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $2.07 | $74,512,984 |
| 2028 | $2.09 | $80,373,913 |
| 2029 | $2.10 | $86,173,696 |
| 2030 | $2.11 | $92,840,100 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 06-25. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

Haa

Maya

*Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.*

!

Waxaad u codeynaysaa
**Haa ama Maya**
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1

*Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(a))*

## Bayaanka sharaxaadda

Ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1 waxay Degmada Dugsiga Highline u oggolaanaysaa inay cusboonaysiiso canshuurta barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgalka ee hadda jirta taasoo ku eg dhammaadka sannadka 2026. Canshuuraha laga soo ururiyo dib-u-cusboonaysiinta canshuurtaan waxaa loo isticmaali doonaa in lagu maalgeliyo barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgalka aan si buuxda loogu maalgelin gobolka Washington, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn: shaqaalaha iyo barnaamijyada diyaarinta kulliyadda iyo xirfadaha; la-taliyeyaasha caafimaadka maskaxda iyo shaqaalaha; agabka, sahayda, iyo kharashyada hawlgalka sida adeegyada iyo caymiska; teknolojiyadda fasalka iyo amniga internetka; gaadiidka; shaqaalaha amniga iyo badbaadada; barnaamijyada isboortiska iyo kuwa dheeraadka ah; iyo barnaamijyada taageerada fasalka oo hubinaaya in dhammaan ardayda, iyadoon loo eegin awooddooda iyo baahidooda, si buuxda loogu daro oo lagu soo dhawweeyo fasalka. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa highlineschools.org/levy.

Canshuurta dib loo cusboonaysiinayo ee afarta sanno ah ee la soo jeediyay waxay oggolaan doontaa ururinta canshuuraha si loo bixiyo ilaa $74,512,984 sannadka 2027, $80,373,913 sannadka 2028, $86,173,696 sannadka 2029, iyo $92,840,100 sannadka 2030. Qiimaha canshuurta ee la saaro $1,000 ee qiimaha la qiimeeyay ee loo baahan yahay si loo soo saaro caddadka waxaa lagu qiyaasayaa inuu noqon doono $2.07 sannadka 2027, $2.09 sannadka 2028, $2.10 sannadka 2029, iyo $2.11 sannadka 2030. Heerarka iyo caddadka canshuurta waxaa laga yaabaa in la beddelo iyadoo lagu salaynayo qiimaha dhabta ah ee la qiimeeyay iyo xaddidaadaha sharciga ah ee lagu soo rogay xeerarka Gobolka wakhtiga canshuurta la soo rogo.

Ka dhaafitaannada canshuuraha ayaa laga yaabaa inay heli karaan qaar ka mid ah mulkiileyaasha guryaha. Wixii macluumaad oo dheeraad ah, wac Waaxda Qiimeynta Degmada King, 206-296-3920.

**Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Andrew Burgess**
Xakameeye
(206) 631-3201
Andrew.burgess@highlineschools.org

## Bayaanka lagu taageerayo

Trisha Arias, Jeb Binns, Tina Orwall
www.yesforHighline.org

Ku codee *Haa* si loo cusboonaysiiyo canshuurta hawlaha dugsiga ee muhiimka ah taas oo sii wadaysa maalgelinta ardayda Degmada Dugsiga Highline. Wakhti ay dowladaha Gobolka iyo Federaalka aysan si buuxda u maalgelin dugsiyadeena, waa inaan hubinnaa inaan ilaalino maalgelinta canshuurta maxalliga ah si loo xaqiijiyo in dhammaan ardaydu ay helaan kheyraadka aasaasiga ah iyo shaqaalaha si ay wax u bartaan oo u koraan.

Canshuurtaan waxay ka dhigan tahay qiyaastii 15% miisaaniyadda guud. Haddii aan ku guuldareysano inaan cusboonaysiinno, Highline waxay wajihi doontaa jaritaan qoto dheer oo ku saabsan barnaamijyada aasaasiga ah iyo shaqaalaha ka caawiya ardayda inay ku guuleystaan fasalka iyo wixii ka dambeeya. Ardaydeennu way nagu tiirsan yihiin.

Canshuurtaan waxay dugsiyada ku sii haysaa iftiinka shidan. Waxay maalgelisaa hawlaha maalinlaha ah, iyo sidoo kale ilaalinta la-taliyeyaasha dugsiyadeena, kaaliye-bareyaasha fasallada, iyo xirfadleyaasha caafimaadka maskaxda ee taageera wanaagga ardayda. Waa sida aan u maalgelino barnaamijyada diyaarinta kulliyadda iyo xirfadaha, u hubinno mushahar tartan leh oo shaqaalaha ah, iyo daboolidda waxyaabaha aasaasiga ah sida teknolojiyadda, agabka, iyo dayactirka xarumaha.

Adigoo ku codeynaya *Haa*, waxaad hubinaysaa in dugsiyadu ay ammaan noqdaan, shaqaale yeeshaan, oo diyaar u noqdaan in dhammaan ardaydu ay wax bartaan oo koraan. Bulshada Highline waxay leedahay taariikh dheer oo taageeridda carruurta, waxaana rajeynaynaa inaad sii waddo maalgelinta ardaydeenna. Waxay ku tiirsan yihiin codkaaga haa.

## Bayaanka looga soo horjeedo

Patricia Bailey, Judy Counley, Melissa Petrini
www.FixHighlineFirst.org

Diid Canshuurta Buuran ee Highline. Waxqabadka Ardaydeennu Maaha Mudnaantooda!

Canshuurtaan $334 milyan ah waa tii ugu weynayd uguna aan la sii wadi karin taariikhda Highline—kororka 38% ee afartii sanno ee la soo dhaafay ma aha cusbooneysiin fudud. Marka la eego dokumentiyada is khilaafsan, way adag tahay in codbixiyeyaashu ay kala saaraan runta. Waxay mar kale kordhin doontaa canshuuraha hantida, oo ay weheliso xisaabinta cusub ee canshuuraha hantida ee gobolka, taasoo ka dhigaysa in nolosha halkan ay noqoto mid aan la awoodi karin oo aan soo jiidasho lahayn. Tani waxay culayska ugu weyn saaraysaa qoysaska dakhligoodu yar yahay, qoysaska shaqeeya, iyo kiraysteyaasha lagu qasbo inay maalgelin ku sameeyaan mushaharyo buuran iyo maamul xumo dhaqaale oo ay sameeyeen maamulka degmada.

Highline waxay qorshaynaysaa inay ku bixiso ku dhawwaad $25,000 arday kasta (taas oo ka badan inta badan dugsiyada gaarka ah ee ku jira xuduudaheenna), haddana dhibcaha imtixaanka ayaa sii dhacaya. Iyadoo diiwaan gelintu hoos u dhacday, joogitaanka dugsigu uu yahay keliya 63%, iyo laba-meelood meel ardayda ah ay ku guuldareysteen heerarka aasaasiga ah ee Ingiriisiga, Xisaabta, iyo Sayniska, lacagtu ma lahan isbarbardhig maalgashiga. Ma jiro xiriir cad oo u dhexeeya kharashkooda aan lala xisaabtamin iyo natiijooyin waxbarasho oo la hagaajiyay. Carruurteenu looma diyaarinayo mustaqbalka ay doortaan oo ay mudan yihiin!

Canshuur bixiyeyaashu waa inay joojiyaan ansixinta jeegag maran, miisaaniyado buuran, iyo ballanqaadyo la jebiyay. Diid canshuurtaan. Natiijooyin dalbo! U sheeg Highline inay ku soo noqoto doorashada gaarka ah ee guga iyadoo leh qorshe la aamini karo, macquul ah, oo daah furan.

### Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Guddiga ka soo horjeeda dugsiyada dadweynaha ayaa si khaldan u fahmaya – ama si khaldan u matalaya – canshuuraha. Dhab ahaantii, canshuurtaan cusboonaysiinta ahi *waa hoos u dhac 17% ah oo heerka* halkii $1,000 marka loo eego *wixii codbixiyeyaashu hore u ansixiyeen* 4 sanno ka hor.

Ku codeynta "Haa" hadda waxay cusboonaysiinaysaa canshuurta jirta iyadoo lagu ilaalinayo heer canshuur oo degan, taasoo u oggolaanaysa dugsiyadeena inay sii wadaan maalgelinta taageerada muhiimka ah ee ardayda. Ka qaadista roogga carruurteena hoostooda *ma* hagaajinayso dhibcaha imtixaanka! Fadlan ku codee "haa" si aad u taageerto guusha ardayda.

### Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Gobolku marnaba si buuxda uma maalgelin karo degmo leh kharash aan xad lahayn. Waa caddahay waalidiinta iyo codbixiyeyaasha in waxqabadka tacliimeed iyo xirfadda aysan ahayn mudnaanta koowaad ee Highline.

Highline waxay hore u leedahay jadwal mushahar oo ka mid ah kuwa ugu tartanka badan gobolka, iyadoo kormeeraha iyo golahiisu ay ka mid yihiin kuwa ugu mushaharka badan. Kordhinta miisaaniyadda waa in lala socodsiiyaa jarista macno leh ee barnaamijyada aan waxtarka lahayn, jagooyinka, iyo qandaraasyada. Waxaan dalbanaynaa mas'uuliyad maaliyadeed iyo isla xisaabtan ku xiran natiijooyinka ardayda.

**Soo Jeedinta Lr. 1**

# Beddelaadda Canshuurta ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Renton Lr. 403 ayaa hirgeliyay Qaraarka Lr. 20-24/25 ee khuseeya canshuur beddelaad ah oo loogu talagalay waxbarashada. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay soo rogto canshuuraha xad dhaafka ee soo socda, oo beddelaaya canshuurta wakhtigeedu dhammaanayso, ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada, looguna talagalay kharashaadka barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada ee uusan Gobolku maalgelin:

| Sannadka Ururinta | Canshuurta La Qiyaasay/$1,000 Qiimaha La Qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $1.33 | $58,217,253 |
| 2028 | $1.34 | $61,514,773 |
| 2029 | $1.33 | $64,320,460 |
| 2030 | $1.32 | $66,735,516 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 20-24/25 lana raacayo xaddidaadaha sharciga ee heerarka canshuurta iyo caddadka wakhtiga canshuurta la soo rogo. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

Haa

Maya

*Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.*

!

Waxaad u codeynaysaa
**Haa ama Maya**
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1

*Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(a))*

## Bayaanka sharaxaadda

Ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1 waxay Degmada Dugsiga Renton u oggolaanaysaa inay beddesho canshuurta barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada ee hadda jirta taas oo dhici doonta dhammaadka sannadka 2026. Canshuuraha laga soo ururiyo canshuurta beddelka ah waxaa loo isticmaali doonaa in lagu bixiyo kharashaadka barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada aan si buuxda loogu maalgelin Gobolka Washington, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, dhimmista tirada fasallada, teknolojiyadda, manhajka, dayactirka iyo hawlgallada, adeegyada nafaqada, amniga, la-talinta, taageerada shucuurta bulshada, ciyaaraha iyo hawlaha dugsiga dhexe iyo sare, iskuulka xagaaga iyo kobcinta iskuulka kadib, barnaamijyada muusigga iyo farshaxanka ee dugsiga hoose, macallimiinta beddelka ah, kalkaaliyeyaasha, cilmi-nafsiga, la-taliyeyaasha, adeegyada ardayda waxbarashada gaarka ah, iyo barnaamijyada kale ee taageerada ilmaha oo dhan. Horumarinta la codsaday waxaa loogu talagalay in lagu fuliyo waajibaadka sharciga ama filashada bulshada ee barnaamijyada dugsiga. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa bogga degmada www.rentonschools.us.

Canshuurta beddelaadda ah ee barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada ee afarta sanno ah ee la soo jeediyay ayaa oggolaanaysa ururinta canshuuraha si loo bixiyo ilaa $58,217,253 sannadka 2027, $61,514,773 sannadka 2028, $64,320,460 sannadka 2029, iyo $66,735,516 sannadka 2030. Heerka canshuurta ee halkii $1,000 ee qiimaha la qiimeeyay ee loo baahan yahay si loo soo saaro caddadyadaan waxaa lagu qiyaasayaa inuu noqon doono $1.33 sannadka 2027, $1.34 sannadka 2028, $1.33 sannadka 2029, iyo $1.32 sannadka 2030. Heerka canshuurta saxda ah iyo qaddarka la ururinayo waxaa laga yaabaa in la hagaajiyo iyadoo lagu salaynayo qiimaha dhabta ah ee qiimeynta la qiimeeyay ee hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada iyo xaddidaadaha uu soo rogay sharciga Gobolka wakhtiga canshuurta. Waxaa laga yaabaa in ka dhaafitaannada canshuuraha la helo, wac Waaxda Qiimeynta ee Degmada King, 206-296-3920.

**Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Randy Matheson**
Agaasimaha Fulinta ee Xiriirada Bulshada
(425) 204-2345
randy.matheson@rentonschools.us

## Bayaanka lagu taageerayo

Ray Kusumi, Jacqueline Connell, Joshua Sieck

Codkaaga ee ku aaddan cusbooneysiinta canshuurta wuxuu u oggolaanayaa Dugsiyada Renton inay sii wadaan ballanqaadkooda waxbarasho tayo sare leh fasal kasta. Canshuurta Barnaamijyada Waxbarashada & Hawlgallada waxay bixisaa in ka badan 14% miisaaniyadda hawlgalka dugsiyada. Doolarka canshuurta ee maxalliga ah waa muhiim si loo maalgeliyo barnaamijyada muhiimka ah ee aan si buuxda loogu maalgelin Gobolka Washington, sida shaqaalaha amniga/ammaanka, waxbarashada gaarka ah, macallimiinta beddelka ah, shaqaalaha nadaafadda, barashada goorta hore ee ka hor-K, la-taliyeyaasha caafimaadka maskaxda, kalkaaliyeyaasha, iyo in ka badan.

Kani maaha canshuur cusub. Sannado badan, codbixiyeyaasha Degmada Dugsiga Renton waxay sii wadeen inay taageeraan canshuurtaan si ay u maalgeliso barnaamijyada ardayda iyo shaqaalaha muhiimka ah ee dugsiga. Dugsiyada Renton waxay qiimeeyaan taageeradaada, waxayna si xikmad leh u isticmaalaan lacagtaada, iyagoo leh rikoor tusaale ah oo ku saabsan maaraynta maaliyadeed, taas oo ka tarjumaysa maamul maaliyadeed oo xooggan.

Cabbirkan wuxuu faa'iido u leeyahay qof walba. Dugsiyada wanaagsan waxay si togan u saameeyaan xaafadaha, waxayna dhisaan bulshooyin xooggan, iyagoo ilaalinaya qiimaha hantideena. Iyada oo heerka canshuurta isku dhafan ee degmada uu hoos ugu dhacay $3.39, haa ku codeynta waa guul qof walba u ah. Ku soo biir kumanaanka deriskaaga ah ee sii wada taageerada maalgashigaan muhiimka ah ee carruurteena iyo dugsiyadeena adigoo u codeynaya haa Cabbirka 1.

## Bayaanka looga soo horjeedo

Ma jiro wax bayaan ah oo ka soo horjeeda cabbirkan. Ma jiro qof ka tirsan gudaha maamulka oo la soo xiriiray Doorashooyinka Degmada King si uu uga mid noqdo guddiga qoraaya bayaanka ka soo horjeeda cabbirka sharciga.

Maamulada cabbirrada ku soo bandhigga warqadda codbixinta waxay sidoo kale magacaabaan xubno ka tirsan dadweynaha si ay uga mid noqdaan guddiyada "taageeridda" iyo "ka soo horjeedidda". Guddiyadan waxay diyaariyaan bayaanno taageeraya ama ka soo horjeeda cabbirka sharciga ee warqadda codbixinta. Bayaannadan waxaa lagu daabacaa buug-yaraha codbixiyeyaasha deegaanka si ay uga caawiyaan codbixiyeyaasha inay go'aanno xog-ogaal ah gaaraan.

Haddii maamulka uusan awoodin inuu magacaabo guddi, Doorashooyinka Degmada King waxay magacaabi karaan mid walba oo ka mid ah xubnaha guddiga ee u qalma ee hore isa soo taaga. Si aad mustaqbalka ugu biirto guddi, fadlan la xiriir maamulka.

**Soo Jeedinta Lr. 2**

# Beddelaadda Canshuurta ee Teknolojiyada iyo Mashaariicda Raasumaalka

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Renton Lr. 403 ayaa hirgeliyay Qaraarka Lr. 23-24/25, ee khuseeya canshuur raasumaal si loo maalgeliyo teknolojiyada waxbarashada iyo hagaajinnada dugsiga. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay soo rogto canshuuraha xad dhaafka ee soo socda, oo beddelaaya canshuurta wakhtigeedu dhammaanayso, ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada, si loo sii wado maalgelinta qalabka teknolojiyada waxbarashada, kaabayaasha iyo hagaajinnada iyo dib-u-habeynta, casriyaynta iyo hagaajinta xarumaha dugsiga ee hore u jira:

| Sannadka Ururinta | Canshuurta La Qiyaasay/$1,000 Qiimaha La Qiimeeyay | Caddadka Canshuurta |
|---|---|---|
| 2027 | $0.72 | $30,000,000 |
| 2028 | $0.69 | $30,000,000 |
| 2029 | $0.65 | $30,000,000 |
| 2030 | $0.62 | $30,000,000 |

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 23-24/25. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

Haa

Maya

*Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.*

!

Waxaad u codeynaysaa
**Haa ama Maya**
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 2

*Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(a))*

## Bayaanka sharaxaadda

Ansixinta Soo Jeedinta Lr. 2 waxay Degmada Dugsiga Renton u oggolaanaysaa inay beddesho canshuur hore oo loogu talagalay dib-u-hagaajinta xarumaha dugsiga taas oo dhici doonta dhammaadka sannadka 2026. Canshuurta beddelaadda ah ee hagaajinta waaweyn ee dhismeyaasha ee la soo jeediyay waxay sii wadi doontaa maalgelinta qalabka teknolojiyadda waxbarashada, kaabayaasha iyo hagaajinta, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn: (1) helidda, rakibidda, hirgelinta iyo casriyaynta teknolojiyadda degmada oo dhan, teknolojiyadda ardayga, manhajka dhijitaalka ah ee isku dhafan, nidaamyada iyo xarumaha waxbarashada STEM, tababarka teknolojiyadda ee macallimiinta si ay u taageeraan waxbarashada fasalka, iyo qalabka kale ee teknolojiyadda waxbarashada, kaabayaasha, nidaamyada iyo xarumaha; iyo (2) sameynta hagaajino iyo casriyayn kale oo ku saabsan nidaamyada iyo xarumaha teknolojiyadda ee Degmada.

Canshuurta beddelaadda ah ee hagaajinta waaweyn ee dhismeyaasha ee la soo jeediyay waxay sidoo kale sii wadi doontaa maalgelinta kharashaadka lagu dayactirayo, casriyaynayo, hagaajinaayo iyo kor loogu qaadayo xarumaha dugsiyada ee jira, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn: (1) sameynta hagaajinta caafimaadka, badbaadada, amniga, waxtarka tamarta, waxbarashada, ciyaaraha, xarumaha iyo kaabayaasha; (2) wax ka qabashada heerarka waxqabadka dhismaha nadiifka ah, oo ay ku jiraan Xeerka Dhismeyaasha Nadiifka ah ee Washington; iyo (3) helitaanka dhul iyo xuquuqaha dhul ahaan goobaha xarumaha cusub iyo kuwa la ballaariyay ee Degmada.

Canshuurta hagaajinta waaweyn ee dhismeyaasha ee afarta sanno ah ee la soo jeediyay waxay oggolaanaysaa ururinta canshuuraha si loo bixiyo $30,000,000 sannad kasta laga bilaabo 2027 ilaa iyo 2030. Heerka canshuurta ee halkii $1,000 ee qiimaha la qiimeeyay ee loo baahan yahay si loo soo saaro caddadyadaan waxaa lagu qiyaasayaa inuu noqon doono $0.72 sannadka 2027, $0.69 sannadka 2028, $0.65 sannadka 2029, iyo $0.62 sannadka 2030. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa bogga Degmada www.rentonschools.us. Waxaa laga yaabaa in ka dhaafitaannada canshuuraha la helo, wac Waaxda Qiimeynta ee Degmada King, 206-296-3920.

**Wixii su’aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Randy Matheson**
Agaasimaha Fulinta ee Xiriirada Bulshada
(425) 204-2345
randy.matheson@rentonschools.us

# Bayaanka lagu taageerayo

Ray Kusumi, Jacqueline Connell, Joshua Sieck

Canshuurta beddelaadda ah ee hagaajinta waaweyn ee dhismeyaasha/teknolojiyadda waa muhiim u ah ardaydeenna iyo macallimiinteena, iyadoo dib loo cusbooneysiinayo maalgelinta muhiimka ah ee la ansixiyay 2022-ka afarta sanno ee soo socota, ilaa 2030-ka. Maadaama maalgelinta aasaasiga ah ee waxbarashada gobolka ay ku filnaan weyday teknolojiyadda fasalka iyo dayactirka dugsiga, canshuurtaan waxay hubinaysaa in dugsiyadeenu ay sii ahaadaan kuwo u qalma guul. Adigoo u codeynaya tallaabadan, waxaad taageeraysaa baahiyaha muhiimka ah sida qalabka casriga ah ee ardayda iyo shaqaalaha, helitaanka internetka oo la hagaajiyay guriga iyo dugsiga, iyo amniga internetka oo la xoojiyay. Maalgelintaan waxay sidoo kale siin doontaa teknolojiyadda caawinaadda ardayda leh baahiyaha waxbarashada gaarka ah iyo farsamayaqaannada loo baahan yahay si loo ilaaliyo qalabkeena. Muhiim ahaan, canshuurtaan ma soo kordhinayso canshuur cusub; waxay keliya cusbooneysiinaysaa hindise dhammaanaya oo muujiyay qiimaheeda. Tan iyo 2016, heerka canshuurta deegaanka ayaa hoos u dhacay 36%, taasoo muujinaysa sida aan uga go’an tahay maaraynta maaliyadeed ee mas’uulka ah iyadoo weli mudnaanta la siinayo waxbarashada. Codkaaga ee canshuurta beddelaadda ah ee hagaajinta waaweyn ee dhismeyaasha/teknolojiyadda waa cod u ah mustaqbalka carruurteena — hubinta inay haystaan agabyada iyo taageerada ay u baahan yihiin si ay ugu koraan adduunka dhijitaalka ah. Aan isugu imaanno inaan maalgelino waxbarashada ardaydeennu ay mudan yihiin!

# Bayaanka looga soo horjeedo

Ma jiro wax bayaan ah oo ka soo horjeeda cabbirkan. Ma jiro qof ka tirsan gudaha maamulka oo la soo xiriiray Doorashooyinka Degmada King si uu uga mid noqdo guddiga qoraaya bayaanka ka soo horjeeda cabbirka sharciga.

Maamulada cabbirrada ku soo bandhigga warqadda codbixinta waxay sidoo kale magacaabaan xubno ka tirsan dadweynaha si ay uga mid noqdaan guddiyada "taageeridda" iyo "ka soo horjeedidda". Guddiyadan waxay diyaariyaan bayaanno taageeraya ama ka soo horjeeda cabbirka sharciga ee warqadda codbixinta. Bayaannadan waxaa lagu daabacaa buug-yaraha codbixiyeyaasha deegaanka si ay uga caawiyaan codbixiyeyaasha inay go'aanno xog-ogaal ah gaaraan.

Haddii maamulka uusan awoodin inuu magacaabo guddi, Doorashooyinka Degmada King waxay magacaabi karaan mid walba oo ka mid ah xubnaha guddiga ee u qalma ee hore isa soo taaga. Si aad mustaqbalka ugu biirto guddi, fadlan la xiriir maamulka.

**Soo Jeedinta Lr. 1**

## Kor-U-Qaadista Canshuurta ee Adeegyada Daryeelka Caafimaadka

Guddiga Degmada Isbitaalka Dadweynaha ee Degmada King Lr. 1, Degmada King, Washington (Valley Medical Center) ayaa hirgeliyay Qaraarka Lr. 1066 ee khuseeya ku soo rogista canshuurta hantida caadiga ah ee degmada. Haddii la ansixiyo, soo jeedintaan waxay bixin doontaa maalgelin dheeraad ah oo hawlgal iyo raasumaal ah oo loogu talagalay Valley Medical Center si ay u bixiso adeegyada isbitaalka iyo daryeelka kale ee caafimaadka ee deganeyaasheeda iyo dadka kale ee ay u adeegto Valley Medical Center. Waxay oggolaanaysaa ugu badnaan heerka canshuurta hantida caadiga ah oo ururinta ay bilaabanayso 2026 oo ah 75 senti ka mid ah $1,000 ee qiimaha la qiimeeyay. Caddadka canshuurta 2026 ayaa loo isticmaali doonaa ujeeddada la xiriirta xisaabinta xaddidaadaha canshuuraha ee sannadaha ku xiga. Ma tahay in soo jeedintaan la:

Ansixiyo

Diido

*Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.*

!

Waxaad u codeynaysaa inaad **Ansixiso ama Diido** Soo Jeedinta Lr. 1

*Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 84.55.050)*

## Bayaanka sharaxaadda

Degmada Isbitaalka Dadweynaha ee Degmada King Lr. 1 waxay maamushaa Xarunta Caafimaadka ee Valley Medical Center. Waxay bixisaa adeegyo caafimaad oo isbitaal ah, adeegyo caafimaad oo aan isbitaal ahayn, iyo adeegyo kale oo caafimaad oo loogu talagalay dadka degan degmada isbitaalka dadweynaha iyo dadka kale ee ay u adeegto degmada.

Sida ku cad sharciga Gobolka, degmooyinka isbitaalka dadweynaha waxaa loo oggol yahay inay soo rogaan canshuurta hantida caadiga ah heer dhan ugu badnaan 75 senti halkii $1,000 ee qiimaha la qiimeeyay, ujeeddaduna tahay hawlgalka iyo dayactirka isbitaalka iyo xarumaha kale ee caafimaadka iyo adeegyada. Sababtoo ah sharciga Gobolka wuxuu xaddidayaa inta ay canshuuraha kordhin karaan iyada oo aan oggolaanshaha codbixiyeyaasha la helin, heerka canshuurta ee Valley Medical Center ayaa sannadihii la soo dhaafay hoos ugu dhacay qiyaastii 29 senti sannadkii 2025.

Guddiga Guddoomiyeyaasha ee Valley Medical Center oo si dadweyne loo doortay ayaa go'aamiyay in ay lagama maarmaan tahay oo ay dan ugu jirto dadka degan ee ay adeegto Valley Medical Center in la codsado oggolaansho si loo kordhiyo heerkeeda canshuurta hantida caadiga ah ilaa 75 senti halkii $1,000 ee qiimaha la qiimeeyay laga bilaabo 2026, taas oo noqonaysa koror qiyaastii 46 senti ah marka loo eego heerka hadda jira. Canshuurtaan waxay siin doontaa maalgelin dheeraad oo hawlgal iyo hagaajinta waaweyn ee dhismayaasha ah si loo taageero bixinta adeegyada isbitaalka iyo adeegyada kale ee daryeelka caafimaadka, oo ay ku jiraan maalgelin lagu sii wado adeegyada degdegga ah ee badbaadinta nolosha, daryeelka ka hortagga, iyo adeegyo kale oo caafimaad oo loogu talagalay bulshada ay u adeegto Valley Medical Center.

Caddadka canshuurta ee 2026 ayaa loo isticmaali doonaa ujeeddooyinka xisaabinta xaddidaadaha canshuuraha ee Degmada sannadaha ku xiga.

**Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Elizabeth Nolan**
Madaxa Sarkaalka Isgaarsiinta iyo Suuqgeynta
(425) 690-3112
liz_nolan@valleymed.org

## Bayaanka lagu taageerayo

Carol Barber, Anthony Berkley, Dustin Lambro
LevyOutreach@gmail.com

Degmada Isbitaalka Dadweynaha Lr. 1 ee Degmada King, oo loo yaqaan Valley Medical Center, waxay u adeegaysay bulshadaan ku dhawwaad 80 sanno. Anagoo ah xubno ka tirsan bulshada, waxaan aragnay baahiyaha daryeelka caafimaadka oo sii kordhaaya oo isbeddelaya, waxaana Valley ay si adag ugu shaqeynaysaa inay la jaan qaaddo baahiyahaas.

Marka kuwa aan jecel nahay ay u baahan yihiin caawinaad caafimaad – xaalad degdeg ah, baaritaanno joogto ah, ama daryeel gaar ah – helitaanka daryeel caafimaad oo tayo sare leh waa inuu ahaadaa mid u dhow guriga.

*Ku codee Haa Soo Jeedinta Lr. 1 ee Isbitaalka si loo sugo mustaqbalka daryeelka deegaanka*. Valley waxay bixisaa adeegyo isbitaal oo muhiim ah 24 saacadood maalintii, oo ay ku jiraan dhalmada, dhaawacyada iyo daryeelka degdegga ah, iyo daryeelka daran ee isbitaalka.

*Ku codee Haa si daryeelka caafimaadku uu ugu dhawwaado gurigaaga*. Hel daryeelka aad u baahan tahay halka aad ku nooshahay. Helitaanka daryeel heer sare ah oo dhowr daqiiqo u jira waxay ka dhigan tahay walaac yar, safarro gaagaaban, iyo wakhti badan oo lala qaato kuwa aad jeceshahay.

*Ku codee Haa si xirfado looga dhiso gudaha Koonfurta Degmada King*. Shaqaalaha Valley waxaa ka go’an inay u adeegaan bulshadeenna sidii qoys. Waxay u baahan yihiin xasillooni, mushahar tartan leh, iyo fursado ay ku bartaan oo ay kula koraan bulshadeenna.

Nagu soo biir ee ku codeynta *Haa* si aan u wajahno caqabadahaan oo aan dib ugu cusbooneysiino taageerada Valley Medical Center - isbitaalkeena madax-bannaan ee bulshada iska leh.

## Bayaanka looga soo horjeedo

Ma jiro wax bayaan ah oo ka soo horjeeda cabbirkan. Ma jiro qof ka tirsan gudaha maamulka oo la soo xiriiray Doorashooyinka Degmada King si uu uga mid noqdo guddiga qoraaya bayaanka ka soo horjeeda cabbirka sharciga.

Maamulada cabbirrada ku soo bandhigga warqadda codbixinta waxay sidoo kale magacaabaan xubno ka tirsan dadweynaha si ay uga mid noqdaan guddiyada "taageeridda" iyo "ka soo horjeedidda". Guddiyadan waxay diyaariyaan bayaanno taageeraya ama ka soo horjeeda cabbirka sharciga ee warqadda codbixinta. Bayaannadan waxaa lagu daabacaa buug-yaraha codbixiyeyaasha deegaanka si ay uga caawiyaan codbixiyeyaasha inay go'aanno xog-ogaal ah gaaraan.

Haddii maamulka uusan awoodin inuu magacaabo guddi, Doorashooyinka Degmada King waxay magacaabi karaan mid walba oo ka mid ah xubnaha guddiga ee u qalma ee hore isa soo taaga. Si aad mustaqbalka ugu biirto guddi, fadlan la xiriir maamulka.

**Soo Jeedinta Lr. 1**

# Beddelaadda Canshuurta ee Dayactirka, Hagaajinta iyo Hawlgalka

Ma tahay in Jardiinka iyo Aagga Adeegga Madadaalada ee Northshore loo oggolaado inay soo rogaan canshuuraha hantida caadiga oo ah shan senti ($.05) ama ka yar oo ka mid ah kunkii doolar ee qiimeynta la qiimeeyay muddo lix (6) sanno oo isku xigta ah?

Haa

Maya

*Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.*

!

Waxaad u codeynaysaa
**Haa ama Maya**
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1

*Shuruudaha ansixinta: 60% codeyn haa ah iyo midkood (1) soo bixitaanka ugu yaraan 40% ee tirada codbixiyeyaasha ka dhiibtay warqadaha codbixinta gudaha degmada canshuurta doorashadii guud ee ugu dambeysay ama (2) haddii soo bixitaanku ka yar yahay 40% ee tirada codbixiyeyaasha ka dhiibtay warqadaha codbixinta gudaha degmada canshuurta doorashadii guud ee ugu dambeysay ka dib tirada codadka haa waa inay noqotaa 60% ka mid ah 40% ee tirada codbixiyeyaasha ka dhiibtay warqadaha codbixinta gudaha degmada canshuurta doorashadii guud ee ugu dambeysay (RCW 36.69.145)*

## Bayaanka sharaxaadda

Haddii la ansixiyo, Soo Jeedinta 1 waxay cusbooneysiin doontaa soo rogitaan canshuur hanti oo lix sanno ah oo loogu talagalay Aagga Adeegga Jardiinka iyo Madadaalada ee Northshore (NPRSA), laga bilaabo 2026. NPRSA waa degmada ujeeddada gaarka ah ee dayactirta laba xarumood oo dadweyne: Xarunta Waayeelka ee Northshore iyo Xarunta Caafimaadka & Daryeelka iyo Caafimaadka Dadka Waaweyn, oo u adeegta deganeyaasha magaalada Bothell, Kenmore, Woodinville, waqooyiga degmada King iyo koonfurta degmada Snohomish.

Maalgelinta canshuurta waxaa loo isticmaali doonaa dayactirka dhismeyaasha loo baahan yahay, beddelka kaabayaasha duugoobay, casriyaynta si loo hubiyo badbaadada iyo helitaanka, hagaajinta waxtarka tamarta, iyo horumarinta kale ee xarumaha loo baahan yahay. Canshuurta ayaa sidoo kale maalgelin doonta dayactirka joogtada ah si loo ilaaliyo xaaladda iyo isticmaalka xarumaha.

Cabbirku wuxuu u oggolaanayaa NPRSA inay ururiso canshuurta hantida heerka aan ka badnayn $.05 halkii $1,000 ee qiimaha canshuurta lagu qiimeeyay; ama qiyaastii $50 sannadkii ($4.17 bishii) guri leh qiime canshuur lagu qiimeeyay oo ah hal milyan oo doolar. Canshuurtii hore ee bixinaysay maalgelin la mid ah ayaa la filayaa inay dhacdo dhammaadka 2025.

Adeegyada iyo barnaamijyada ku dhex jira dhismeyaasha NPRSA waxaa bixiya Xarunta Waayeelka ee Northshore, oo ah urur aan faa'iido doon ahayn oo gooni ah. Barnaamijyadaan waxay ka mid yihiin adeegyada caafimaadka, hawlaha jimicsiga iyo daryeelka, cuntada bulshada, iyo adeegyo kale oo loogu talagalay dadka waayeelka ah iyo dadka naafada ah.

Haddii cabbirka la ansixiyo, NPRSA waxaa loo oggolaan doonaa inay canshuurta hantida soo rogto sannad walba muddo lix sanno ah si ay u maalgeliso hagaajinta dhismeyaasha iyo hawlaha dayactirka. Haddii cabbirkan aan la ansixin, canshuurta hadda jirta ayaa dhacaysa oo maalgelintaan lama cusbooneysiin doono.

**Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Christine Scotton**
Maamulaha Barnaamijka
(425) 219-6941
nprsa@bothellwa.gov

## Bayaanka lagu taageerayo

Patricia Gustafson, Vincent Keane, David Baker
vote.yes.on.NPRSA.prop1@gmail.com

Aagga Adeegga Jardiinooyinka iyo Madadaalada ee Northshore (NPRSA) ayaa leh oo dayactira dhismeyaasha ay isticmaalaan Xarunta Waayeelka ee Northshore (NSC), oo ah urur aan faa'iido doon ahayn oo muhiim ah oo sannad walba u adeega in ka badan 5,000 oo waayeel ah, shakhsiyaad naafada ah, iyo daryeeleyaashooda. Barnaamijyada NSC waxay la dagaalamaan amni darada cuntada, kor u qaadaan caafimaadka, taageeraan dhallinyarada baahiyaha gaarka ah leh, waxayna yareeyaan go'doonka bulshadeenna.

NSC waa xarunta keliya ee waayeelka ee gobolkeena oo awood u leh inay bixiso barnaamijka caafimaadka maalinta dadka waaweyn. Tusaale ahaan, markii barnaamijka caafimaadka maalinta dadka waaweyn ee u dhow uu xirmay horraantii sannadkan, NSC waxay awooday inay bixiso adeegyo loogu talagalay waayeellada ay saameysay. Dhammaan ka qaybgaleyaasha waxay ka caawiyaan sii wadidda iyo ballaarinta barnaamijyada qiimaha leh, maadaama lacagaha canshuurta ay si sharci ah ugu xaddidan yihiin isticmaalka dayactirka, ilaalinta, iyo hawlgalka dhismeyaasha iyo xarumaha, ee aan loogu talagalin kharashaadka barnaamijyada shakhsiyeed.

Mahadsanid kor-u-qaadista canshuurta ee 2019 oo ay ansixiyeen codbixiyeyaasha, guddiga NPRSA, oo leh maamul daah-furan oo heellan, waxay beddeleen saqafyada duugoobay, nidaamyada HVAC, waxayna hagaajiyeen ammaanka. Rikoorada kharashka canshuurta oo dhammaystiran, daqiiqadaha, iyo fiidiyowyada kulamada ayaa laga heli karaa nprsawa.org.

Kor-u-qaadista canshuurta lixda sanno ah waxay celcelis ahaan ku kacaysaa qiyaastii $4.17 bishii (guri qiimihiisu yahay $1 milyan) si ay u sii furnaato, ammaan u ahaato, oo soo dhawweyn u ahaato jiilalka hadda iyo mustaqbalka ee NSC. Ku codee "haa" si loo taageero caafimaadka, wanaagga, iyo adkeysiga bulshadeenna oo dhan.

## Bayaanka looga soo horjeedo

Ma jiro wax bayaan ah oo ka soo horjeeda cabbirkan. Ma jiro qof ka tirsan gudaha maamulka oo la soo xiriiray Doorashooyinka Degmada King si uu uga mid noqdo guddiga qoraaya bayaanka ka soo horjeeda cabbirka sharciga.

Maamulada cabbirrada ku soo bandhigga warqadda codbixinta waxay sidoo kale magacaabaan xubno ka tirsan dadweynaha si ay uga mid noqdaan guddiyada "taageeridda" iyo "ka soo horjeedidda". Guddiyadan waxay diyaariyaan bayaanno taageeraya ama ka soo horjeeda cabbirka sharciga ee warqadda codbixinta. Bayaannadan waxaa lagu daabacaa buug-yaraha codbixiyeyaasha deegaanka si ay uga caawiyaan codbixiyeyaasha inay go'aanno xog-ogaal ah gaaraan.

Haddii maamulka uusan awoodin inuu magacaabo guddi, Doorashooyinka Degmada King waxay magacaabi karaan mid walba oo ka mid ah xubnaha guddiga ee u qalma ee hore isa soo taaga. Si aad mustaqbalka ugu biirto guddi, fadlan la xiriir maamulka.

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Lr. 19950

XEER la xiriira maalgelinta iyo bixinta adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One; oo bixinaaya u soo gudbinta codbixiyeyaasha u qalma ee Degmada King, doorashada khaaska ah ee Nofeembar 4, 2025, ee ah soo jeedin lagu maalgelinayo adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One ee guud ahaan degmada oo dhan iyadoo la oggolaanayo sii wadidda canshuurta hantida caadiga ah muddo lix sanno oo isku xigta, oo ururinta bilaabanayso 2026, heer ah $0.25 ama ka yar oo ka mid ah $1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay, si loo bixiyo adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One.

HORDHAC:

Nidaamka Adeegyada Caafimaadka Degdegga ah ee Medic One ("EMS") ee Degmada King, oo si guud loogu yaqaan Medic One, waa iskaashi isku dhafan oo ay maalgeliso dadweynaha oo ka dhexeeya degmada, magaalooyinka, degmooyinka dab-damiska, maamul goboleedyada dab-damiska, isbitaalada, iyo Jaamacadda Washington (University of Washington).

Medic One/EMS waa nidaam jawaab celin heerar kala duwan leh oo ku saleysan qaabka caafimaad goboleedka iyo iskaashiga wadajirka ah. Adeegyada ay bixiyaan shaqaalaha EMS waxaa laga soo qaatay heerarka ugu sareeya ee tababarka caafimaadka, dhaqamada iyo daryeelka, caddeynta sayniska, iyo kormeer dhow oo ay sameeyaan dhakhaatiir khibrad u leh daryeelka EMS. Waxaa ku jira taageerada nolosha aasaasiga ah ee ay bixiyaan magaalada, degmada dab-damiska, iyo maamulka dab-damiska ee goboleedka ee farsamayaqaannada caafimaadka degdegga ah, taageerada nolosha sare ee ay bixiyaan dhakhaatiirta caafimaadka tababaran ee Jaamacadda Washington / Harborview Medical Center, iyo barnaamijyada taageerada goboleedka ee bixiya tababarka deganeyaasha iyo shaqaalaha EMS, xakamaynta caafimaadka goboleedka, iyo horumarinta tayada. Nidaamka Medic One/EMS ee Degmada King waxaa loo aqoonsaday inuu yahay mid ka mid ah barnaamijyada adeegyada caafimaadka degdegga ah ee ugu wanaagsan dalka. Waxay badbaadisaa kumanaan naf sannad kasta, iyadoo bixisa adeegyo badbaadin naf ah celcelis ahaan labadii daqiiqo kasta. Marka la barbar dhigo bulshooyinka kale, dhibaneyaasha wadno-istaagga ayaa laba ilaa saddex jeer u badan inay ku badbaadaan gudaha Degmada King. Sannadka 2023, Degmada King waxay gaartay heer badbaadin boqolkiiba koow iyo konton ee xanuunka wadno-istaagga, taas oo ka mid ah heerarka ugu sareeya ee laga soo sheegay dalka.

Bixinta adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One ee guud ahaan degmada oo dhan waa ujeeddada dadweynaha ee Degmada King. Degmada King waxay taageertaa adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One iyada oo adeeg goboleed ah oo u baahan doorka hoggaamineed ee joogtada ah ee degmada. Degmada waa inay sii waddaa inay hoggaamiso oo ay qaadato mas'uuliyadda hubinta horumarinta nidaamsan iyo dhammaystiran iyo bixinta adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One guud ahaan degmada oo dhan.

Walaaca ku saabsan hubinta sii wadidda barnaamijka Medic One/EMS ee guud ahaan degmada oo dhan waxaa wadaagga magaalooyinka Degmada King, degmooyinka ilaalinta dabka, iyo maamul goboleedyada dab-damiska kuwaas oo ka qayb qaata barnaamijyada adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One.

Maalgelin joogto ah oo loogu talagalay nidaamka Medic One/EMS ee goboleedka ayaa loo baahan yahay si loo sii wado adeeggan muhiimka ah ee deganeyaasha degmada King.

HA NOQOTO MID AY AMARTAY GOLAHA DEGMADA KING:

<u>QAYBTA 1.</u> **Ansixinta magaalooyinka ka badan 50,000 oo dadweyne ah.** Ayada oo la raacayo RCW 84.52.069, ka hor inta aan loo gudbin codbixiyeyaasha Degmada King ee halka doorashada gaarka ah ee Nofeembar 4, 2025, oggolaanshaha in soo jeedintaan canshuurta ee degmada oo dhan lagu daro warqadda codbixinta waxaa laga heli doonaa awoodda sharci-dejinta ee aqlabiyadda ugu yaraan boqolkiiba shan iyo toddobaatan ee dhammaan magaalooyinka degmada ee ah in ka badan 50,000 oo dadweyne.

<u>QAYBTA 2.</u> **Qeexitaannada.** Qeexitaannada qaybtaan ku jira ayaa khuseeya dhammaan xeerkan ilaa in mawduuca si gaar ah qaab kale loogu qeexo mooyaane.

A. "Degmo" waxaa loola jeedaa Degmada King.

B. "Canshuurta" waxaa loola jeedaa canshuurta caadiga ah laga qaado canshuurta hantida, oo loogu talagalay ujeeddo gaar ah iyo

muddada lagu bixiyay xeerkan oo ay oggolaadeen codbixiyeyaasha si waafaqsan sharciga gobolka.

C. "Lacagta Canshuurta" waxaa loola jeedaa caddadka lacagta lafaha ah ee ay soo gelisay canshuurta, dakhli kasta oo dulsaar ah oo ka soo gala lacagta iyo dakhliga ka soo baxa maalgelin kasta oo ku meel gaar ah ka dib oggolaanshaha canshuurta.

<u>QAYBTA 3.</u> **Magdhowga Magaalada Seattle.** Waxaa la aqoonsaday in magaalada Seattle ay maamusho oo ay maalgeliso barnaamijka adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One kaas oo ka madax bannaan barnaamijka degmada laakiin qayb ka ah nidaam

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Lr. 19950

goboleedka gaarsiinta.  Dhammaan dakhliga canshuurta ee lasoo ururiyay iyadoo la raacayo canshuurta la oggolaaday ee xeerkan laga soo ururiyay hantida la canshuuri karo ee ku taal xuduudaha sharciga ah ee magaalada Seattle waa in dib loo celiyo oo loo wareejiyo magaalada Seattle oo loo isticmaalo keliya barnaamijka adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Seattle Medic One iyadoo la raacayo RCW 84.52.069.

QAYBTA 4.  **U soo gudbinta canshuurta ee codbixiyeyaasha.**  Si loo bixiyo maalgelinta lagama maarmaanka ah ee nidaamka Medic One/EMS iyadoo la raacayo awoodda RCW 84.52.069, golaha degmada wuxuu u soo bandhigi doonaa codbixiyeyaasha degmada soo jeedin oggolaanaysa soo rogitaan canshuur hanti oo caadi ah muddo lix sanno oo isku xiga, iyadoo ururinta ay bilaabanayso 2026, heer aan ka badnayn $0.25 halkii kun oo doolar ee qiimaha la qiimeeyay.  Sida ku cad sharciga gobolka, canshuurtaan waxaa laga dhaafayaa xaddidaadaha heerka sida uu dhigaayo RCW 84.52.043, laakiin waxay ku xiran tahay xaddidaadaha sannadaha labaad ilaa lixaad ee lagu soo rogay cutubka 84.55 RCW.

QAYBTA 5.  **Dabaajiga dakhliga canshuurta.**  Marka laga reebo dakhliga canshuurta ee loo wareejiyay magaalada Seattle sida ku cad qaybta 3 ee xeerkan, dhammaan dakhliga canshuurta waa in lagu shubaa sanduuqa adeegyada caafimaadka degdegga ah ee degmada.

QAYBTA 6.  **Kharashyada u qalma.**  Haddii ay ansixiyaan codbixiyeyaasha u qalma ee degmada, dhammaan dakhliga laga helo canshuurta ee xeerkan waxaa loo isticmaali doonaa si waafaqsan RCW 84.52.069.

QAYBTA 7.  **Ku baaq doorasho gaar ah.**  Si waafaqsan RCW 29A.04.321, doorasho gaar ah ayaa loogu baaqayaa Nofeembar 4, 2025, si loo tixgeliyo soo jeedin oggolaanaysa canshuurta hantida caadiga ah oo dheeraad ah oo loogu talagalay ujeeddooyinka lagu sharxay xeerkan.  Agaasimaha doorashooyinka waa inuu sababo ogeysiis in la siiyo xeerkan sida waafaqsan dastuurka gobolka iyo sharciga guud iyo in uu u gudbiyo codbixiyeyaasha degmada ee u qalma, ee doorashada gaarka ah ee la sheegay, soo jeedinta hadda ka dib hore loo wado.  Karaaniga golaha waa inuu u shahaadeeyo soo jeedintaas agaasimaha doorashooyinka, isagoo u qoran qaab ahaan sida soo socota:

SOO JEEDINTA KOOWAAD:  Golaha Degmada King ayaa hirgeliyay Xeerka _____ ee khuseeya sii wadidda maalgelinta nidaamka adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One ee guud ahaan degmada oo dhan. Haddii Degmada King loo oggolaado inay beddesho canshuurta dhacaysa iyadoo soo rogaysa canshuur hanti oo joogto ah oo ah $0.25 ama ka yar oo ka mid ah kunkii dollar ee qiimeynta la qiimeeyay mid kasta oo ka mid ah lix sanno oo isku xigta, iyadoo la ururinayo laga bilaabo 2026, sida ku cad Xeerka Degmada King ___, si loo sii wado bixinta adeegyada caafimaadka degdegga ah ee Medic One:

Haa _____

Maya _____

QAYBTA 8.  **Heshiiska isku dhafka deegaanka**.  Maamulaha degmada waxa loo idmaday oo la farayaa in uu heshiis isku dhaf ah la galo magaalada Seattle ee la xiriira barnaamijka Medic One, si loo fuliyo qodobbada qaybta 3 ee xeerkan.

QAYBTA 9.  **Buug-yaraha codbixiyeyaasha deegaanka.**  Agaasimaha doorashooyinka waxaa halkan lagu siiyay oggolaansho oo laga codsanayaa in uu diyaariyo oo qaybiyo buug-yaraha codbixiyeyaasha deegaanka, si waafaqsan K.C.C. 1.10.010, doorashada gaarka ah ee loogu baaqay xeerkan, kharashka buug-yaraha in lagu daro qayb ka mid ah kharashka doorashada.

QAYBTA 10.  **Ka-dhaafitaanka.**  Canshuuraha hantida caadiga ah ee dheeraadka ah ee xeerkan oggol yahay waxaa lagu dari doonaa wax kasta oo canshuur dhaaf ah oo hanti dhab ah oo uu oggolaaday RCW 84.36.381, haddii sharcigaas uu wax ka beddelo golaha sharci dejinta ee gobolka inta lagu jiro muddada canshuurtaan.

QAYBTA 11.  **Ansixinta.** Shahaadaynta soo jeedinta ee karaaniga golaha degmada ee ku aaddan agaasimaha doorashooyinka ee Degmada King si waafaqsan sharciga ka hor doorashada Nofeembar 4, 2025, iyo fal kasta oo kale oo waafaqsan maamulka iyo ka hor taariikhda dhaqan gelinta xeerkan waa la ansixiyay oo la xaqiijiyay.

QAYBTA 12.  **Kalagoynta.** Haddii wax qodob ah oo ka mid ah xeerkan ama dhaqankiisa oo ku aaddan qof ama xaalad kasta laga helo inay tahay mid aan ansax ahayn, inta ka hartay xeerka ama ku dhaqankiisa ma ay saameynayo qodobka dadka kale ama xaaladaha kale.

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Lr. 127238

XEERKA la xiriira canshuuraha guryaha ee caadiga ah; codsanaya in doorashada gaarka ah la qabto iyadoo la raacayo Nofeembar 4, 2025 doorashada guud ee loo gudbinayo codbixiyeyaasha u qalma ee Magaalada, soo jeedinta in la qaado xadka canshuuraha guryaha ee caadiga ah sida ku cad cutubka 84.55 RCW iyo in loo oggolaado Magaaladu in ay qaado canshuuro dheeraad ah ilaa lix sanno ujeeddada bixinta adeegyada taageerada waxbarashada ee loogu talagalay in lagu horumariyo helitaanka barashada hore, oo ay ku jiraan dugsiga ka hor, taageerooyinka tacliinta, caafimaadka, iyo badbaadada ardayda K-12; iyo dariiqooyinka jaamacadda iyo shaqada ee ardayda Seattle; codsanaya ka dhaafitaanka waayeelka dakhligoodu hooseeyo, halyeeyada hore ee naafada ah, iyo kuwa kale ee ay oggolaatay RCW 84.36.381; oggolaanshaha abuurista maalgelin loo qoondeeyay; hagida ku dhaqanka dakhliga canshuurta; dejinta shuruudaha u-qalmitaanka ee hey'adaha iskaashiga; sameynta isla xisaabtanka iyo qaab-dhismeedka warbixinta; u baahan Qorshaha Hirgelinta iyo Qiimeynta ee soo socda; soo jeedinta ciwaanka warqadda codbixinta; oggolaanshaha fulinta heshiisyada kor-u-qaadidda canshuurta ee loo yaqaano Qoysaska, Waxbarashada, Dugsiga ka hor, iyo Canshuurta Ballanqaadka; iyo ansixinta iyo xaqiijinta falal hore oo gaar ah.

HALKA AY, Magaalada Seattle (Magaalada) ay ku haminayso bulsho kasta oo carruur ah inay helaan kheyraadka si ay ugu diyaar garoobaan bilaabista xanaanada, diyaar u noqdaan inay wax bartaan, iyo inay u diyaar garoobaan xirfad, iyo halka ardaydu ay caafimaad qabaan oo ammaan yihiin; iyo

HALKA AY, qiimaha la awoodi karo uu yahay walaac qoysas badan oo Seattle ah oo leh carruur; iyo

Halka ay, Waaxda Waxbarashada iyo Barbaarinta Hore ee magaalada Seattle hadda maamusho Canshuurta Qoysaska, Waxbarashada, Barbaarinta, iyo Ballanqaadka (FEPP) waxayna mas'uul ka tahay horumarinta siyaasadda waxbarashada ee magaalada iyo istiraatiijiyadda maalgashiga ee lacagaha canshuurta si ay uga caawiso carruurta iyo dhallinyarada inay ku guuleystaan iyada oo loo marayo helitaanka daryeelka carruurta iyo barbaarinta hore ee la awoodi karo; taageerooyinka waxbarasho, caafimaad, iyo ammaan ee ardayda K-12; iyo waddooyinka jaamacadda iyo xirfadaha; iyo

HALKA AY, codbixiyeyaasha magaalada Seattle ay horrey u ansixiyeen afar kor-u-qaadid canshuur oo kala duwan oo midkiiba ahaa toddoba sanno, mid kasta oo loo yaqaanay Kor-U-Qaadista Canshuurta ee Qoysaska iyo Waxbarashada, sanadihii 1990, 1997, 2004, iyo 2011; iyo

Halka ay, sannadkii 2014, codbixiyeyaasha magaalada Seattle ay ansixiyeen canshuur afar sanno ah oo loogu talagalay barnaamijka xanaanada carruurta ee Seattle si loo siiyo carruurta Seattle adeegyo xanaanada carruurta oo la heli karo oo loogu talagalay in lagu hagaajiyo diyaarintooda dugsiga iyo in lagu taageero guusha waxbarasho ee mustaqbalka;

HALKA AY, sannadkii 2018, codbixiyeyaasha magaalada Seattle ay ansixiyeen kor-u-qaadista canshuurta hantida ee muddo toddoba sanno ah, oo loo yaqaan Canshuurta FEPP, si loo maalgeliyo carruurta, ardayda, iyo qoysaska Seattle si loo kordhiyo helitaanka fursadaha waxbarashada oo dhan; iyo

HALKA AY, qoysaska ku nool Degmada King, kharashka celceliska ah ee daryeelka carruurta ee xarunta daryeelka carruurta uu u dhexeeyo boqolkiiba afar ilaa boqolkiiba 25 ee dakhliga celceliska qoyska, iyadoo ku xiran nooca xarunta. Kharashka daryeelka ee dhallaanka, carruurta yar yar iyo kuwa dugsiga ka hor inta badan wuxuu dhaafaa boqolkiiba toddoba ee xadka dakhliga qoyska ee lagu taliyay ee Maamulka Federaalka ee Carruurta iyo Qoysaska, oo ka tirsan Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha; iyo

HALKA AY, Barnaamijka Xanaanada Carruurta ee Seattle uu helay Biladda Dahabka ee CityHealth ee Xanaanada Carruurta ee Tayada Sare leh, La Heli Karo, saddexdii sanno ee la soo dhaafay (2022-2024). Aqoonsigan waxaa la siiyaa barnaamijyada xanaanada carruurta ee buuxiya ugu yaraan sagaal ka mid ah toban heerarka tayada ee Machadka Qaranka ee Cilmi-baarista Waxbarashada Hore ee ku saabsan shuruudaha macallimiinta, tirada fasalka, tababarka iyo taageerada shaqaalaha, nidaamyada hagaajinta tayada, iyo baaritaannada caafimaadka; iyo

HALKA AY, ardayda K-12 ay sii wadaan inay la kulmaan dhibaatooyin, labadaba dhinaca waxbarashada iyo bulshada, oo ka dhashay luminta waxbarashada iyo caqabadaha caafimaadka maskaxda ee la xiriira cudurka faafa ee COVID-19 ee caalamiga ah, waxayna u baahan yihiin adeegyo taageero waxbarasho iyo kuwo dhammaystiran si ay uga caawiyaan guusha waxbarashada; iyo

HALKA AY, ardaydu si fudud u heli karaan baahiyahooda daryeelka caafimaadka iyo daryeelka maskaxda marka helitaanka daryeelkaas lagu bixiyo dugsigooda; iyo

HALKA AY, jawi ammaan ah oo dugsiyada ay hagaajiyaan waxqabadka tacliimeed iyo dabeecadaha caafimaadka; iyo

HALKA AY, dakhliga ka soo baxa kor-u-qaadista canshuurta FEPP ay yihiin kuwo dheeraad ah oo lagu daray waxbarashada aasaasiga ah ee ay maalgeliso Gobolka Washington iyo soo rogitaan canshuur hanti ee Degmada Dugsiga Seattle, mana beddelaan, ama yareeyaan, maalgelinta gobolka ama Degmada Dugsiga ee Seattle; iyo

HALKA AY, tan iyo markii la bilaabay 2018, barnaamijka Seattle Promise wuxuu ka sareeyay saadaasha diiwaan gelinta, sida laga soo xigtay xogtii ugu dambeysay ee la heli karo, heerka qalin-jebinta barnaamijku wuxuu ka sareeyay celceliska qaranka; iyo

HALKA AY, sannadka 2023, Golaha Guusha Ardayda ee Washington uu saadaaliyay in sannadka 2031, boqolkiiba 72 ee dhammaan codsadeyaasha shaqada ay u baahan doonaan inay haystaan shahaado jaamacadeed kadib dugsiga sare iyo boqolkiiba 33 ee dhammaan shaqooyinka bannaan ee Gobolka Washington ay u baahan doonaan shahaado jaamacadeedka labada sanno ama shahaado xirfadeed; iyo

HALKA AY, si ay u ilaaliso tartankeeda, u sii haysato loo-shaqeeyeyaasha jira, iyo soo jiidashada warshado cusub oo leh shaqooyin mushahar qoys, Seattle waxay u baahan tahay inay bixiso shaqaale si wanaagsan loo baray, si wanaagsan loo tababaray oo leh xirfado iyo karti horumarsan oo lagama maarmaan u ah tartanka qarniga 21aad;

HALKA AY, marka laga soo tago kala duwanaanshaha dhaqaale-bulsheed, arrimo kale, sida helitaanka la'aanta waxbarashada tayada leh ee carruurnimada hore iyo K-12, hababka kala soocidda deegaanka iyo dugsiyada, iyo siyaasadaha gobolka ayaa sidoo kale saameyn taban ku yeelan kara guusha ardayda; iyo

Halka ay, nidaamka dugsiga dadweynaha oo keliya aanay wax ka qaban karin dhammaan caqabadaha guusha ardayda, iyo sababtoo ah dadka magaalada Seattle waxay taageeraan wanaagga dhaqaale, bulsho, iyo madaniga ee Magaalada, maalgelinta dheeraadka ah ee la bixiyo iyada oo loo marayo Canshuurta FEPP waxay u adeegtaa ujeeddo sax ah oo Magaalada ah; iyo

HALKA AY, ururinta canshuuraha ee Soo Rogitaanka Canshuurta FEPP ee hadda jirta ay ku dhammaan doonto 2025, adeegyada lagu maalgeliyo canshuurtaasna ay dhammaan doonaan haddii aan la oggolaan soo rogitaan cusub;

HALKA AY, Duqa Magaalada uu soo jeediyay in Magaalada ay ku darto codbixinta Noofeembar 4, 2025 tallaabo lagu beddelayo Canshuurta FEPP ee dhacaysa, lana beddelo Canshuurta FEPP cusub oo lix sanno ah; HADDABA,

**HA NOQOTO MID AY AMARTAY MAGAALADA SEATTLE SIDA SOO SOCOTA::**

Qaybta 1. Guntinno iyo bayaanno. Golaha Magaalada wuxuu helay oo ku dhawaaqay:

A. Carruurta magaalada Seattle waa mustaqbalkeeda, tayada mustaqbalkaasna waxay ku xiran tahay in carruurta iyo qoysaskooda

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Lr. 127238

la siiyo helitaan siman oo joogto ah oo ku saabsan adeegyada iyo taageerada waxbarashada.

B. Magaalada Seattle waxay u baahan tahay dad waxbartay oo si firfircoon uga qayb qaata nolosha madaniga ah isla markaana ka qayb qaata wanaagga dhaqaale iyo bulsho ee Magaalada.

C. Cilmi-baarista ayaa muujisay muhiimadda waxbarashada tayada leh ee carruurnimada hore iyadoo la aqoonsaday wakhtiyo muhiim ah oo horumarka maskaxda ee ilmaha uu fududeeyo helitaanka xirfado gaar ah, sida luqadda iyo baahida loo qabo in laga faa'iidaysto fursadaha waxbarasho iyo waayo-aragnimada bulshada. Caruurtu waxay helaan erayo badan iyo xirfado luqadeed oo xooggan haddii ay la kulmaan dadka waaweyn oo leh erayo badan.

D. Barnaamijka Taageerada Daryeelka Carruurta wuxuu taageeraa qoysaska aan lagu daboolin barnaamijyada deeqda ee gobolka iyo degmooyinka jira. Sannadka 2024, barnaamijkan wuxuu taageeray 684 carruur ah oo ka hooseeya boqolkiiba 94 dakhliga dhexe ee gobolka (SMI). Barnaamijka Dugsiga Hore ee Seattle (SPP) wuxuu u adeegay 2,182 arday sannad dugsiyeedka 2023-24, 69 boqolkiiba oo ka mid ah waxay u qalmeen deeq buuxda oo dakhligoodu ka hooseeyo 94 boqolkiiba SMI. SPP waxay ku socotaa waddada ay ku adeegto 2,500 carruur ah sannadka ugu dambeeya ee canshuurta dhacaysa (sannad dugsiyeedka 2025-26).

E. Ka qaybgalka tayada leh ee dugsiga barbaarinta dadweynaha wuxuu saameyn wanaagsan ku leeyahay waayo-aragnimada carruurta ee dugsiga iyadoo la dhimmayo baahida loo qabo ku celinta fasalka, meelaynta waxbarashada gaarka ah, adeegyada caafimaadka maskaxda, ku lug lahaanshaha nidaamka garsoorka, iyo taageerada shaqo la'aanta. Tayada dugsiga barbaarinta waxay diiradda saartaa horumarinta xirfadaha bulshada, dareenka, iyo garashada; taageerada caafimaadka iyo nafaqada; iyo iskaashiga qoysaska iyo dugsiyada hoose. Baareyaasha waxay xisaabiyeen in maalgashiga tayada sare ee dugsiga barbaarinta uu soo celinaayo faa'iido boqolkiiba toddoba ilaa toban ah.

F. Sannadka 2024, qiimeeyeyaasha dibadda waxay heleen saameyn togan oo ka dhalatay ka qaybgalka SPP ee waxqabadka tacliimeed ee dugsiyada hoose: Ka qaybgalayaasha SPP waxay ka fiicnaayeen 18 ilaa 29 dhibcood boqolkiiba diyaar u ah dugsiga xanaanada iyo qiimeynta xisaabta iyo akhriska ee fasalka saddexaad marka loo eego carruurta kale ee leh astaamo bulsho-dhaqaale iyo demografiyadeed oo la mid ah ee ka qayb galay xanaanada ay maalgeliso gobolka.

G. Canshuurta FEPP ee 2018 waxay maalgelisay adeegyada taageerada waxbarashada, caafimaadka, iyo adeegyada dhammaystiran ee ardayda K-12 oo dhan 19,450 arday ah guud ahaan magaalada sannad dugsiyeedka 2023-24. In ka badan 76 boqolkiiba dhallinyarada ka faa'iidaystay barnaamijyada ku saleysan bulshada ayaa is-xaqiijiyay kororka xirfadaha sida hoggaaminta, wada shaqeynta, isgaarsiinta, iyo xirfadaha dareenka bulshada.

H. Xogta cilmi baarista waxay muujinaysaa in xarumaha caafimaadka ee ku yaal dugsiyada (SBHCs) ay hagaajiyaan caafimaadka iyo wanaagga shucuureed ee ardayda, taasoo iyaduna ka caawisa waxqabadka tacliimeed iyadoo kordhinaysa heerka joogitaanka dugsiga iyo celceliska dhibcaha ardayda waqti ka dib. Intaa waxaa dheer, dhallinyarada ayaa 21 jeer ka badan u badan inay helaan adeegyada caafimaadka maskaxda ee SBHCs marka loo eego rugaha caafimaadka ee bulshada ku saleysan.

I. SBHC-yada K-12 waxay u adeegaan 17,762 arday oo ku sugan 29 dugsi sannad dugsiyeedka 2023-24, iyagoo siinaya helitaan adeegyo caafimaad oo dhammaystiran oo bilaash ah sida talaalada, baaritaannada caafimaad, daaweynta cudurrada daran iyo kuwa daba-dheeraada, daryeelka caafimaadka taranka, iyo la-talinta caafimaadka maskaxda iyo gudbinta.

J. Dayrta 2023, 892 arday oo dugsiyada sare ee dadweynaha Seattle ah ayaa iska diiwaan geliyay Barnaamijka Ballanqaadka Seattle. Marka la gaaro 2023, waxaa jiray in ka badan 900 oo Seattle Promise ka qalin jebiyay. Marka loo eego xogta ugu dambeysay ee la heli karo, heerka qalin-jebinta barnaamijka ayaa ka sareeyay celceliska qaranka.

K. Waxaa jira baahi cad oo loo qabo in la sii wado maalgelinta Magaalada ee daryeelka carruurta iyo barbaarinta la awoodi karo; taageerada waxbarasho, caafimaad iyo badbaado ee ardayda K-12; iyo waddooyinka jaamacadda iyo xirfadaha, oo lagu maalgeliyo canshuuraha hantida caadiga ah. Baahidaan waxay u baahan tahay soo gudbinta soo jeedin oggolaanaysa soo rogitaan canshuurta hantida caadiga ah oo lix sanno ah oo ka badan xaddidaadaha soo rogitaanka ee cutubka 84.55 RCW. Hindisaha waa in loo gudbiyaa codbixiyeyaasha u qalma ee Magaalada Seattle doorasho gaar ah oo lagu qaban doono isku mar doorashada guud ee Nofeembar 4, 2025.

Qaybta 2. Bayaanka siyaasadda. Waa waajibka ugu muhiimsan ee Dowladda "inay si buuxda u bixiso waxbarashada dhammaan ardayda." Hey'adaha waxbarashada, oo ay ku jirto degmada dugsiga Seattle, ayaa si toos ah mas'uul uga ah bixinta waxbarasho tayo leh oo loogu talagalay dhammaan ardayda. Si loo taageero guusha waxbarasho ee ardayda, dowladda, ganacsiga, xubnaha bulshada, iyo qoysaska waa inay sidoo kale iska kaashadaan horumarinta guusha ardayda magaalada Seattle.

A. Mudnaanta maalgelinta canshuurta

1. Maalgelinta carruurta, dhallinyarada, iyo qoysaska magaalada Seattle si loo kordhiyo helitaanka iyo sinnaanta: daryeelka carruurta iyo barbaarinta; taageerada waxbarashada, caafimaadka, iyo badbaadada ardayda K-12, oo ay ku jiraan fursadaha waxbarashada la ballaariyay; adeegyada taageerada dhammaystiran; iyo waddooyinka jaamacadda iyo xirfadaha shaqo.

2. Samee heshiisyo lala yeesho bixiyeyaasha daryeelka carruurta iyo barashada hore, Degmada Dugsiga Seattle, Caafimaadka Dadweynaha–Seattle & Degmada King, Jaamacadaha Seattle, ururada ku saleysan bulshada, iyo la-hawlgalayaasha kale ee hey'adaha si loo hirgeliyo adeegyada loona hubiyo kormeerka maalgashiga iyo qiimeynta ujeeddooyinka iyo natiijooyinka.

3. Hirgelinta xeeladaha ku saleysan caddaynta iyo hababka ugu wanaagsan si loo hagaajiyo tayada adeegga iyo/ama loo ilaaliyo adeegyo tayo sare leh.

4. Bixi fursado tababar iyo hagid si joogto ah loo horumariyo bixinta adeegyada iyo tilmaamaha barnaamijka, tayada, iyo hawlgalada.

B. Mabaadi'da hirgelinta

1. Maalgelinta mudnaanta leh si loo gaaro carruurta, dhallinyarada, iyo qoysaska, kordhinta helitaanka adeegyada ee bulshooyinka taariikhiyan la faquuqi jiray, iyo gaarsiinta natiijooyinka canshuurta ee horumariya sinnaanta waxbarashada.

2. La shaqee ururada bulshada, dhaqanka, iyo luqadda ku saleysan si loo bixiyo adeegyo taageero waxbarasho iyo/ama adeegyo dhammaystiran.

3. Hubi in maalgashiga amniga ay mudnaanta siiyaan wax ka qabashada sababaha asaasiga ah ee rabshadaha iyo hababka aan ciqaabta ahayn, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn dhaqamada soo celinta.

4. Hubi in dakhliga canshuurta uu yahay mid dheeraad ah oo kaabaya qaab-dhismeedyada iyo adeegyada maalgelinta dadweynaha ee aan ahayn kuwa magaalada; maalgelinta waligeed looma isticmaali karo in lagu beddelo adeegyada ay dawladdu waajibisay.

5. Hirgelinta habraacyo tartan ah si loo aqoonsado ururo u qalma inay la shaqeeyaan Magaalada si ay u bixiyaan adeegyo loogu talagalay carruurta, dhallinyarada, iyo qoysaska.

6. Hirgelinta qaab-dhismeedka la xisaabtanka oo ku saleysan natiijooyinka ardayda, heshiisyada ku saleysan waxqabadka, abaalmarinta ku saleysan waxqabadka, iyo ku dhaqanka hagaajinta tayada joogtada ah.

7. Warbixin sanadle ah ka bixi maalgeshiyada, helitaanka adeegyada,

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Lr. 127238

iyo horumarka lagu gaarayo natiijooyinka canshuurta iyo buuxinta waajibaadka qandaraaska, sida wadaagga cabbirrada waxqabadka iyo xogta.

Qaybta 3. Qeexitaannada. Sida loogu isticmaalay xeerkan:

A. "Helitaan" micnaheedu waa awoodda lagu heli karo ama lagu dalban karo adeeg ama barnaamij la heli karo iyada oo aan loo eegin caqabadaha juqraafiyeed, dhaqaale, dhisme, bulsho, ama dhaqan.

B. "Daryeelka carruurta" wuxuu ka dhigan yahay kormeerka carruurta meel ka baxsan guriga ilmaha muddo ka yar 24 saacadood maalintii.

C. "Magaalo" waxay ka dhigan tahay Magaalada Seattle.

D. "Waddooyinka jaamacadda iyo shaqada" waxay ka dhigan tahay waxbarasho iyo/ama tababar shaqo oo ka dambeeya dugsiga K-12 oo ay ku jiraan barnaamijyada shaqo-barashada, xirfadaha, barnaamijyada shahaadooyinka, iyo shahaadooyinka heerka sare.

E. "Urur ku saleysan bulshada" macnaheedu waa urur dadweyne ama gaar loo leeyahay oo leh awood la caddeeyey oo matalaya bulsho ama qaybo muhiim ah oo ka mid ah bulshada, isla markaana bixiya adeegyo waxbarasho ama adeegyo la xiriira dadka ku nool bulshada.

F. "Adeegyada taageerada dhammaystiran" waxay ka dhigan yihiin taageerooyin aan ahayn tacliin oo loo fidiyo dhallinyarada iyo qoysaska si loo daboolo baahiyaha aasaasiga ah, jawi waxbarasho oo ammaan ah, iyo horumarinta carruurta iyo dhallinyarada.

G. "Adeegyada taageerada waxbarashada" waxay ka dhigan yihiin barnaamijyada iyo hawlaha lagu sheegay Qaybta 6 ee xeerkan.

H. "Maalgelinta adeegyada taageerada waxbarashada" waxay ka dhigan tahay in aan ka yarayn $1.2583 bilyan oo doolar oo ka mid ah kororka canshuurta lixda sanno, taasoo ka dhalatay ansixinta xeerkan.

I. "Fursadaha waxbarashada ee la ballaariyay" waxay ka dhigan tahay barnaamijyada ka hor dugsiga, ka dib dugsiga, xagaaga, iyo fasaxyada dugsiga kuwaas oo abuura helitaanka waxbarashada sannadka oo dhan, iyo barnaamijyada horumarinta dhallinyarada kuwaas oo kor u qaada diyaarinta jaamacadda iyo xirfadaha iyada oo loo marayo hawlo sida waxbaridda, hagidda, barashada bulshada iyo shucuurta, barashada ku saleysan mashruuca, sayniska, tignoolajiyada, injineernimada, farshaxanka, iyo xisaabta, ka qaybgalka qoyska, iyo taageerooyinka dhaqanka u jawaabaya.

J. "Diyaar u ah dugsiga xanaanada" waxay ka dhigan tahay carruurta leh aqoonta iyo xirfadaha loo arko inay muhiim u yihiin guusha xanaanada, sida lagu cabbiro Washington Kindergarten Inventory of Developing Skills (WaKIDS).

K. "Waxbarashada ka dambeysa dugsiga sare" waxay ka dhigan tahay waxbarashada ka sarreysa dugsiga K-12, oo ay ku jiraan tababarada, shahaadooyinka xirfadaha, ama shahaado jaamacadeedka labada sanno ama shahaado jaamacadeedka afar sanno.

L. "Dugsiga barbaarinta dugsiga ka hor" wuxuu loola jeedaa barnaamij waxbarasho oo abaabulan oo la siiyo carruurta ka hooseysa da'da iyo heerka fasalka ee gobolka uu bixiyo waxbarashada dadweynaha ee bilaashka ah ee dhammaan.

M. "Dakhliga" macnaheedu waa qaybta canshuuraha hantida caadiga ah ee la soo rogay oo la ururiyey sida ay ansixiyeen codbixiyeyaasha iyadoo la raacayo xeerkan, kuwaas oo ka sarreeya xaddidaadaha soo rogista ee lagu bixiyay RCW 84.55.010, iyo dhammaan dulsaarada iyo dakhliga kale ee laga helo qaybtaas soo rogista.

N. "Caafimaadka Dadweynaha–Seattle & Degmada King" waxay ka dhigan tahay hey'adda dowladda ee maamusha caafimaadka dadweynaha ee aagga King County Metro ee Gobolka Washington.

O. "U qalmidda," marka laga hadlayo meel ka baxsan erayga "codbixiyeyaasha u qalmidda," waxay ka dhigan tahay in si rasmi ah loo aqoonsaday in lagu tababaray in la qabto shaqo gaar ah, ama la shahaado siiyay.

P. "Xarumaha caafimaadka ee ku saleysan dugsiga" waxay ka dhigan tahay xarumo ku yaal dugsiyada oo bixiya adeegyo caafimaad oo dhammaystiran, caafimaadka jireed iyo maskaxeed, caafimaadka afka, iyo adeegyada kor u qaadista caafimaadka oo ay bixiyaan xirfadlayaal caafimaad oo aqoon leh ka hor, inta lagu jiro, iyo ka dib dugsiga.

Q. "Jaamacadaha Seattle" waxay ka dhigan tahay Degmada Jaamacadaha Seattle, oo ah degmo ka kooban dhowr jaamacadood oo ay ku jiraan South Seattle College, Seattle Central College, iyo North Seattle College.

R. "Degmada Dugsiga Seattle" waxay ka dhigan tahay Degmada Dugsiga Seattle Lr. 1.

Qaybta 4. Soo gudbinta canshuuraha hantida caadiga ah. Magaalada waxay u gudbineysaa codbixiyeyaasha u qalma ee Magaalada soo jeedin sida ku xusan RCW 84.55.050 si loo dhaafo xaddidaadda canshuuraha hantida caadiga ah ee ku xusan RCW 84.55.010 ee canshuuraha hantida ee la soo rogay 2025 ilaa 2030 si loogu ururiyo 2026 ilaa 2031 siday u kala horreeyaan. Soo jeedinta waa in lagu xaddidaa si Magaalada aysan u soo rogin heerka canshuurta guud ee ka badan $3.02 halkii $1,000 ee qiimaha la qiimeeyay sannadka ugu horreeya, taasoo ka dhigan heerka canshuurta dheeraadka ah ee $0.72 halkii $1,000 ee qiimaha la qiimeeyay sannadka ugu horreeya. Waxaa la filayaa in soo jeedinta ay ku soo kordhiso qiyaastii $1.2583 bilyan guud ahaan lix sanno si loogu maalgeliyo adeegyada taageerada waxbarashada ee loo isticmaalo in lagu bixiyo adeegyada taageerada waxbarashada ee carruurta, dhallinyarada, iyo qoysaska magaalada Seattle. Lacagta canshuurta ee sannadka ugu horreeya waa in loo isticmaalo in lagu go'aamiyo xaddidaadda canshuuraha caadiga ah ee sannadaha xiga iyadoo la raacayo cutubka 84.55 RCW. Qaddarka lagu ururiyo ka badan lacagta taageerada adeegyada waxbarashada waxaa loo heli karaa ujeeddooyin kale oo Magaalada ah oo lagu dabaqi karo canshuurta caadiga ah ee Magaalada. Iyadoo la raacayo RCW 84.36.381 iyo RCW 84.55.050, Magaalada waxay ka dhaafaysaa waayeelka, halyeeyada naafada ah, ama dadka kale ee naafada ah ee u qalma sida ku xusan RCW 84.36.381 lacagta canshuurta kordhay ee ka dhalatay ansixinta soo jeedinta. Sida ku cad RCW 84.55.050(4), canshuurta hantida caadiga ah ee ugu badan ee la soo rogi karo sannadka 2031 si loo ururiyo sannadka 2032 iyo sannadaha dambe waa in loo xisaabiyaa sidii in kor-u-qaadista canshuurta ee RCW 84.55.010 aan lagu qaadin xeerkan.

Qaybta 5. Codsiga dakhliga la helay. Haddii aan si kale loo amrin xeerka, dakhliga waxaa lagu shubi doonaa sanduuq la aasaasi doono mustaqbalka, Sanduuqa Qoysaska, Waxbarashada, Dugsiga Hore, iyo Ballanqaadka 2025. Agaasimaha Maaliyadda ee Magaalada ayaa maamuli doona Maalgelinta. Dakhliga waxaa si ku meel gaar ah loogu shubi karaa ama loogu maalgelin karaa si waafaqsan sharciga maalgelinta lacagta Magaalada, waxaana dulsaar iyo faa'iidooyin kale loo isticmaali doonaa ujeeddooyinka la midka ah dakhliga.

Magaalada Seattle waxaa loo oggolaaday inay dib u qaybiso sannadka miisaaniyadda dhexdiisa lacagaha aan la isticmaalin iyo kuwa aan la xirin ee ka yimid istiraatijiyad aasaasi ah mid kale iyadoo la sameynayo wareejinta miisaaniyadda hawlgalka oo waafaqsan Qaybta 3.14.220 ee Xeerka Dowladda Hoose ee Seattle. Haddii maalgelin dibadda ah la heli karo si loo taageero mid ama in ka badan oo ka mid ah xeeladaha aasaasiga ah, ama haddii maalgelinta dibadda la laalo, markaa maalgelinta waxaa loo wareejin karaa xeeladaha kale ee aasaasiga ah.

Qaybta 6. Adeegyada taageerada waxbarashada. Adeegyada lagu maalgeliyo dakhliga waxaa loogu talagalay in lagu kordhiyo helitaanka iyo gaarsiinta daryeelka carruurta iyo dugsiga barbaarinta; taageerada waxbarashada, caafimaadka, iyo badbaadada ee ardayda K-12; waddooyinka jaamacadda iyo xirfadaha; iyo adeegyada taageerada dhammaystiran. Maalgeshiyada canshuurta waxaa lagu hagayaa Bayaanka Siyaasadda, Mudnaanta Maalgelinta Canshuurta, iyo Mabaadii'da Hirgelinta ee lagu qeexay Qaybta 2 ee xeerkan. Ugu horrayn, xeeladaha aasaasiga ah waxaa lagu raadin doonaa adeegyada

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Lr. 127238

taageerada waxbarashada oo ay ku jiraan:

A. Barbaarinta carruurnimada goorta hore. Qodobada ugu waaweyn ee barnaamijku waxay ujeedadoodu tahay inay kordhiyaan helitaanka daryeelka carruurta iyo dugsiga barbaarinta ee la awoodi karo ee carruurta magaalada Seattle iyo qoysaskooda, iyadoo adeegyada ay ka mid noqon karaan, laakiin aan ku koobnayn: taageero dhaqaale oo qoysaska ah, kharashaadka hawlgalka daryeelka carruurta iyo dugsiga barbaarinta, deeqaha xarumaha, iyo taageerooyinka dhaqaale ee shaqaalaha barbaarinta carruurta sida, tababar, hagid, waxbarasho, iyo dhiirigelinta shaqada, iyo adeegyada caafimaadka iyo horumarinta carruurta sida barnaamijyada booqashada guriga. Adeegyada waxaa sidoo kale ka mid noqon kara barnaamijyada kalkaalisooyinka guriga ee bixiya taageerada uurka ka hor. Adeegyada waxaa kale oo ay ka mid noqon karaan daraasad suurtagal ah oo lagu baari doono barnaamijka xanaanada carruurta ee magaalada oo dhan, iyo barnaamij tijaabo ah oo lagu taageerayo kharashka xanaanada carruurta ee qoysaska shaqeeya ee xaafadaha aan laga heli karin boosaska Barnaamijka Xanaanada Carruurta ee Seattle.

B. Taageerada ardayda K-12. Qodobada ugu muhiimsan ee barnaamijku waxay ujeedadoodu tahay in la kordhiyo diyaar garowga ardayda magaalada Seattle ee jaamacadda iyo xirfadaha shaqo, iyadoo adeegyada ay ka mid noqon karaan, laakiin aan ku koobnayn: fursadaha waxbarasho ee la ballaariyay oo ay ku jiraan hawlaha sannadka oo dhan, wakhtiga ka baxsan dugsiga; barnaamijyada waxbarashada deegaanka; hagida tacliinta, la-talinta, iyo maaraynta kiisaska; dhisidda xirfadaha bulshada, shucuurta, iyo dhaqanka; barnaamijyo ku habboon dhaqanka iyo hawlaha ka-qaybgalka qoyska; hawlaha diyaarinta jaamacadda iyo shaqada iyo taageerada gelitaanka jaamacadda; hawlaha sahaminta shaqada; iyo talo-bixinta iyo hagida la xiriira jaamacadda iyo xirfadaha shaqo.

C. Caafimaadka iyo badbaadada K-12. Qaybaha ugu muhiimsan ee barnaamijka waxaa loogu talagalay in lagu kordhiyo caafimaadka jireed iyo maskaxeed ee ardayda magaalada Seattle, iyadoo adeegyada ay ka mid noqon karaan, laakiin aan ku koobnayn: daryeel caafimaad oo dhammaystiran, daryeelka caafimaadka maskaxda, daryeelka caafimaadka afka, waxbarashada caafimaadka, isku dubaridka daryeelka, deeqaha xarumaha, isku xirka iyo gudbinta taageerada bulshada, caawinta cuntada, barnaamijyada dugsiga kadib ee dhallinyarada halista ku jira, ka hortagga rabshadaha, iyo wacyigelinta.

D. Taageerada kulliyadda iyo xirfadaha. Qodobada ugu waaweyn ee barnaamijku waxay ujeedadoodu tahay inay kordhiyaan dhamaystirka ardayda magaalada Seattle ee shahaadada dugsiga sare kadib iyo/ama fursadaha waddooyinka xirfadeed, oo ay ku jiraan xirfadaha, iyadoo adeegyada ay ka mid noqon karaan, laakiin aan ku xaddidnayn: diyaarinta tacliinta iyo codsiga, haynta, taageerada wareejinta, iyo caawinta maaliyadeed. Adeegyada waxaa sidoo kale ka mid noqon kara taageerada dhallinyarada daryeelka korsashada ee u gudbaya qaangaarnimada. Fursadaha waddooyinka xirfadeed ee la taageeri karo waxaa ka mid noqon kara, laakiin aan ku koobnayn: xirfadaha farsamada, xirfadaha waaxda dadweynaha, sida kuwa Waaxda Dab-damiska ee Seattle ama Waaxda Booliiska ee Seattle; iyo xirfadaha teknolojiyadda macluumaadka oo adeegsada xirfadaha dhijitaalka ah ee barnaamijyada, injineernimada software-ka, iyo luqadaha barnaamijyada kombuyuutarka ee ay aad u raadinayaan loo-shaqeeyeyaasha waaxda teknolojiyadda ee gobolka, kuwaas oo hadda ka mid ah Java, JavaScript, iyo Python.

Magaalada waxay go'aamin doontaa sannadba sannadka ka dambeeya adeegyada taageerada waxbarashada iyo qaybinta maalgelinta ee ugu waxtarka badan lagu gaari karo mudnaanta iyo natiijooyinka kor-u-qaadista canshuurta, iyadoo la adeegsanayo miisaaniyadda sannadlaha ah ee Magaalada ama xeer gaar ah.

Qaybta 7. Qorshaha hirgelinta iyo qiimeynta. Qorshe hirgelin iyo qiimeyn ("Qorshe") waa in lagu ansixiyaa xeerka. Qorshaha waxaa sidoo kale lagu beddeli karaa xeerka. Qorshaha wuxuu soo bandhigi doonaa waxyaabaha soo socda: shuruudaha mudnaanta, oo ay ku jiraan nooca taageerada waxbarashada; habka iyo hannaanka lagu dooran doono xeeladaha lagu maalgeliyo canshuurta; iyo habraaca lagu kormeeri doono lana qiimeyn doono saameynta guud iyo natiijooyinka maalgeshiyada kala duwan ee shakhsiyeed.

Waaxda Waxbarashada iyo Barashada Hore (DEEL) waxay qorshaha u abuuri doontaa iyada oo la kaashaneysa Fulinta iyo Golaha Magaalada. DEEL waxay la shaqeyn doontaa daneeyayaasha la xiriira oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, waaxyada Magaalada, Degmada Dugsiga Seattle, Kulliyadaha Seattle, Caafimaadka Dadweynaha–Seattle & Degmada King, ardayda, qoysaska, macallimiinta, ururada ku saleysan bulshada, ururada ku saleysan dhaqanka iyo luqadda, hey'adaha kale ee dowliga ah, iyo hey'adaha kale ee waxbarashada. Qorshaha waa inuu ka koobnaadaa dulmar ku saabsan daneeyayaasha lala tashaday.

Qorshaha waa in loo gudbiyaa Golaha Magaalada si loo ansixiyo. Maalgelinta lagu ururiyay soo rogitaan canshuur hanti waxaa lagu bixin doonaa iyadoo la raacayo shuruudaha Qorshaha Hirgelinta iyo Qiimeynta. Illaa iyo inta Qorshaha Hirgelinta iyo Qiimeynta cusub uu ansixinaayo Golaha Magaalada, shuruudaha, tilmaamaha, iyo shuruudaha ku jira qorshaha ugu dambeeyay ee la ansixiyay ayaa sii ahaan doona kuwo shaqeynaya, ilaa laga bixiyo xeer kale.

Qaybta 8. La xisaabtanka iyo warbixinta. Marka codbixiyeyaashu ansixiyaan soo jeedinta warqadda codbixinta ee xeerkan, waxaa la aasaasay Guddiga Kormeerka (Guddiga) si uu talo iyo talooyin ugu soo jeediyo Duqa Magaalada iyo Golaha Magaalada barnaamijyada iyo hawlaha lagu taageerayo canshuurta iyo si uu ula socdo daah-furnaanta iyo la xisaabtanka.

A. Guddiga wuxuu dib u eegi doonaa warbixinta sannadlaha ah ee natiijooyinka canshuurta iyo tilmaamayaasha, wuxuu kormeeri doonaa hirgelinta barnaamijka iyo qiimeynta horumarka lagu gaarayo mudnaanta iyo yoolalka loogu talagalay canshuurta, wuxuuna talo bixin doonaa ku saabsan hagaajinta koorsada la soo jeediyay.

B. Guddiga wuxuu ka koobnaan doonaa 17 xubnood oo ay ka mid yihiin Duqa Magaalada, guddoomiyaha guddiga Golaha Magaalada ee kormeerka barnaamijyada waxbarashada, Kormeeraha Guud ee Degmada Dugsiga Seattle, xubin ka tirsan Guddiga Dugsiga Seattle, Madaxa Kulliyadaha Seattle, iyo 12 xubnood oo la magacaabay oo xiriir la leh Seattle. Duqa magaalada iyo golaha magaalada mid kasta wuxuu magacaabi doonaa lix xubnood oo ka mid ah guddiga. Dhammaan xubnaha uu magacaabay Duqa Magaalada waa in ay ansixiyaan Golaha Magaalada.

C. Xubnaha la magacaabay waxaa loo magacaabi doonaa muddo laba sanno ah oo kala duwan, iyagoo leh ikhtiyaarka muddo kale oo dheeraad ah haddii dib loo magacaabo. Marka uu xubin ka tirsan Guddiga is casilo, hawlgabo, dhinto, awoodi waayo, ama laga saaro, hey'adda magacaabista xubintaas waxay magacaabi kartaa beddelka inta ka dhimman muddada xilka. Maamulka magacaabaya wuxuu ka saari karaa xubin kasta sabab wanaagsan awgeed, sida maqnaanshaha aan cudur daar lahayn ee laba ama in ka badan oo kulamo isku xiga ah.

D. Xubnaha la magacaabay waa inay leeyihiin khibrad xirfadeed, shakhsiyeed, ama cilmi baaris oo la xiriirta koritaanka iyo horumarinta carruurta, oo ay ku jiraan guusha waxbarashada ardayda iyo fursadaha shaqo ee dugsiga sare kadib. Magaalada waxay horumarin kartaa boosaska cayiman oo qeexaya aagagga khibradda la doonayo ee xubnaha guddiga muwaadiniinta ee la magacaabay, oo si siman loogu qaybiyo Duqa Magaalada iyo Golaha Magaalada, ee ku jira Qorshaha oo lagu xusay Qaybta 7 ee xeerkan. Magaalada waxay sidoo kale raadin doontaa musharaxiin si ay ugu adeegaan Guddiga kuwaas oo fahmaya, khibrad u leh la shaqeynta, iyo matalaya kooxaha taariikhiyan aan loo adeegsan oo ay ku jiraan Afrikaan/Ameerikaan, Isbaanish/Latino, Native American, Jasiiradaha Baasifigga, bulshooyinka Aasiya ee aan loo adeegsan, ardayda kale ee midabka leh, qaxootiga iyo soo galootiga, kuwa hoy la'aanta ah, iyo ardayda LGBTQIA+.

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Lr. 127238

E. Wakhti kasta, xubnaha Guddiga ee ka badan shan ma noqon karaan sarkaal, agaasime, xubin guddiga, aamin, lammaane, ama shaqaale ka tirsan hey'ad ka hesha ama u tartanta maalgelinta xeerkan; ama ma noqon karaan xubin qoys dhow ah, ama qof la degan, sarkaal, agaasime, xubin guddiga, aamin, lammaane, ama shaqaale ka tirsan hey'ad ka hesha ama u tartanta maalgelinta xeerkan; ama ma noqon karaan qof raadinaya ama leh heshiis ku saabsan shaqo mustaqbalka oo la leh hey'ad ka hesha ama u tartanta maalgelinta xeerkan. Ujeeddada xeerkan, "qoyska dhow" ee qofka waxaa loola jeedaa xaaska ama lammaanaha guriga, carruurta, carruurta xaaska ama lammaanaha guriga, walaalka, walaalka lammaanaha guriga, walaalka guurka, walaasha guurka, waalidka, waalidka xaaska ama lammaanaha guriga, qofka uu qofku yahay ilaaliye sharci ah, ama qof lagu sheegay inuu ku tiirsan yahay canshuur celinta dakhliga federaalka ee ugu dambeysay ee qofka. Iyadoo la raacayo jumladda hore iyo sharciga khuseeya, qofka ka shaqeeya sidii sarkaal, agaasime, xubin guddiga, aamin, lammaane ama shaqaale ee hey'ad helaysa ama u tartamaysa maalgelin hoos yimaada xeerkan, ama leh dan gaar ah oo ku saabsan hay'addaas, looma diidi doono inuu ka shaqeeyo Guddiga, laakiin waa inuu si buuxda u shaaciyo xiriiradaas oo dhan, isla markaana uusan u codeyn wax arrin ah oo si toos ah u khuseeya danaha hey'addaas. Ujeeddooyinka qaybtaan, "hey'ad" kuma jiraan waaxda ama xafiiska Magaalada. Qodobbada qaybtaan waxay ku darsanayaan shuruudaha Cutubka 4.16 ee Xeerka Dowladda Hoose ee Seattle.

F. Duqa magaalada iyo guddoomiyaha guddiga Golaha Magaalada ee kormeerka barnaamijyada waxbarashada, ama wakiilladooda, ayaa si wadajir ah u guddoomin doona Guddiga. Guddiga Kormeerka wuxuu qaadan karaa xeerar u gaar ah habraacyadiisa, oo daboolaya mowduucyo sida shuruudaha kooramka, iyo inta jeer ee kulamada.

G. Kulamada Guddiga Kormeerka waxay u furan doonaan dadweynaha iyadoo la raacayo Xeerka Kulamada Furan ee Dadweynaha, cutubka 42.30 RCW. Guddigu wuxuu kulmi doonaa laga bilaabo Janaayo 2026. DEEL waxay siin doontaa taageero shaqaale iyo mid farsamo Guddiga. Xubnaha la magacaabay waxay xaq u yeelan karaan in dib loogu celiyo qaar ka mid ah kharashyada la xiriira ka qaybgalka fool-ka-foolka ah, sida baarkinka, iyadoo ay ku xiran tahay go'aanka Agaasimaha Waxbarashada. Xubnaha waxay u shaqeyn doonaan iyaga oo aan wax mushahar ah qaadan, marka loo eego waajibaadka ay u xilsaartay Guddiga. Guddigu wuxuu sii jiri doonaa ilaa Diseembar 31, 2032.

H. Guddiyada la sameeyay ee ay ku dhammaadeen canshuuraha ku saabsan isla mawduuca sida canshuurta uu abuuray xeerkan waa la joojiyay.

Qaybta 9. Heshiisyada lala galo hey'adaha dadweynaha. Agaasimaha Waxbarashada waxaa loo oggolaaday inuu galo heshiisyo ku saabsan adeegyada taageerada waxbarashada la hey'adaha dadweynaha sida Degmada Dugsiga Dadweynaha Seattle, Seattle Colleges, Caafimaadka Dadweynaha–Seattle & Degmada King, iyo Gobolka Washington. Agaasimaha Waxbarashada waxaa sidoo kale loo oggolaaday inuu galo heshiisyo lala galo hey'adaha aan dadweynaha ahayn ee ku saabsan adeegyada taageerada waxbarashada iyadoo la adeegsanayo hab la xayeysiiyay, sida codsi soo jeedin ama aqoon, marka laga reebo xaaladaha degdegga ah sida uu go'aamiyo Madaxa Fulinta ama marka Agaasimaha Waxbarashada uu go'aamiyo in habka aan suurtagal ahayn sababtoo ah adeegyada waxaa laga heli karaa hal ilo ama waa adag tahay in la codsado. Marka laga reebo hannaanka xayaysiisan ee loo isticmaalo in lagu galo heshiis lala galo hey'ad aan dadweyne ahayn, Agaasimaha Waxbarashada waa inuu ku daro sharaxaad qoraal ah oo ku saabsan go'aanka xaaladaha gaarka ah ee heshiiska.

Dhammaan heshiisyada Magaalada ee adeegyada taageerada waxbarashada waa inay daboolaan qodobo ay ka mid yihiin, laakiin aan ku koobnayn, adeegga gaarka ah ee la bixiyo, heerarka gaarsiinta adeegyada, natiijooyinka la doonayo, cabbirrada waxqabadka iyo shuruudaha wadaagga xogta sannad walba si loo go'aamiyo qiimeynta barnaamijka iyo sixitaanka koorsada. Heshiisyada Magaalada waxay sidoo kale u baahan doonaan hey'adaha qandaraaslaha inay u hoggaansamaan dhammaan shuruudaha markaas khuseeya ee aan takoor lahayn ee shaqaaleysiinta ee shuruucda iyo xeerarka federaalka, gobolka, iyo Magaalada. Dhammaan heshiisyada Magaalada ee lagu maalgeliyo dakhliga waxaa lagu xusi doonaa in aan wax ballanqaad ah laga samayn sii socoshada kadib sannadaha dugsiga 2026–32 marka kor-u-qaadista canshuurta ee ay ansixiyeen codbixiyeyaashu ay dhammaato.

Qaybta 10. Doorashada – Ciwaanka warqadda codbixinta. Golaha Magaalada ayaa faraya Karaaniga Magaalada inuu xeerkan la diro Agaasimaha Doorashooyinka ee Degmada King, Washington, isagoo ah kormeeraha doorashooyinka, isagoo ka codsanaya Agaasimaha Doorashooyinka inuu ku dhawwaaqo oo qabto doorasho gaar ah Magaalada iyadoo la raacayo doorashada guud ee gobolka ee la qaban doono Nofeembar 4, 2025, ujeeddada ah in loo soo bandhigo codbixiyeyaasha xaqa u leh ee Magaalada soo jeedinta ku cad xeerkan. Karaaniga Magaalada waxaa la faray inuu u caddeeyo Agaasimaha Doorashooyinka ee Degmada King ciwaanka warqadda codbixinta ee uu ansixiyay Qareenka Magaalada iyadoo la raacayo waajibaadkooda hoos yimaada RCW 29A.36.071. Ciwaanka warqadda codbixinta ee soo socda waxaa loo gudbiyay Qareenka Magaalada si loo tixgeliyo:

MAGAALADA SEATTLE

SOO JEEDINTA LR. 1

Canshuurta Qoysaska, Waxbarashada, Dugsiga Hore, iyo Ballanqaadka

Golaha Magaalada Seattle ayaa hirgeliyay Xeerka Lr. XXXXX oo ku saabsan beddelidda canshuur dhacaysa si loo maalgeliyo adeegyada taageerada waxbarashada.

Soo jeedinta 1 ee Magaalada Seattle waxay beddeli doontaa canshuur wakhtigeedu dhammaanayso, iyadoo maalgelinaysa daryeelka carruurta iyo dugsiga barbaarinta; taageerooyinka aqooneed, caafimaadka, iyo ammaanka ee ku aaddan ardayda K-12; u diyaargarowga jaamacadda iyo shaqada; iyo taageerooyin kale, sida ku xusan Xeerka XXXXX.

Waxay oggolaanaysaa canshuur lix-sanno ah oo ururinta laga bilaabi doono 2026 oo ah $0.72/$1,000 dheeraad ah ee qiimaha la qiimeeyay, oo noqonaysa ugu badnaan heerka wadarta guud ee canshuurta oo ah $3.02. Caddadka 2026 ayaa noqon doona saldhigga canshuuraha xiga ilaa 2031. Ka dhaafitaanka RCW 84.36.381 ee muwaadiniinta waayeelka iyo dadka naafada ah ayaa khuseeya.

Ma tahay in canshuurtaan la ansixiyo?

Haa

Maya

Qaybta 11. Ansixinta. Ficil kasta oo waafaqsan awoodda xeerkan oo la sameeyo ka dib ansixintiisa iyo ka hor taariikhda uu dhaqan galayo waa la ansixiyay oo la xaqiijiyay.

Qaybta 12. Kalagoynta. Qodobbada xeerkan waxaa lagu dhawaaqay inay kala gooni yihiin oo la kala saari karo. Ansax la'aanta qodob kasta, jumlad, faqrada, qayb, qaybta, ama qayb ka mid ah xeerkan, ama ansax la'aanta codsigiisa qof ama xaalad kasta, ma saameyneyso ansaxnimada inta ka hartay xeerkan ama ansaxnimada codsigiisa dadka kale ama xaaladaha kale.

Qaybta 13. Qaybaha xeerkan ee bixiya soo gudbinta warqadda codbixinta ee codbixiyeyaasha waxay dhaqan galayaan oo ku jiri doonaan xoog 30 maalmood ka dib marka uu ansixiyo Duqa Magaalada, laakiin haddii aan la ansixin oo aan dib loogu soo celin Duqa Magaalada toban maalmood gudahood ka dib marka la soo bandhigo, waxay dhaqan galaysaa sida ku cad Qaybaha Xeerka Degmada Seattle 1.04.020 iyo 1.04.070. Qaybaha xeerkan ee ku xiran ansixinta codbixiyeyaasha ee warqadda codbixinta la sheegay waxay dhaqan galayaan si waafaqsan sharciga khuseeya.

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Lr. 127259

XEERKA la xiriira ganacsiga iyo canshuur shaqada; Codsiga in doorashada gaarka ah la qabto iyadoo la raacayo doorashada guud Nofeembar 4, 2025 si loogu gudbiyo codbixiyeyaasha u qalma ee magaalada soo jeedinta in la qaado xadka ganacsiga iyo heerka canshuur shaqada ee hoos imanaysa RCW 35.21.711, u fasaxaya Magaaladu in ay qaado canshuuro canshuur ah ujeeddooyinka bixinta guryaha, adeegyada bini'aadamka, kobcinta ganacsiga, abuurista ganacsiyada yaryar iyo ganacsiyada yaryar dhimmista heerka canshuur shaqada, abuurto dhibco dhimmis ganacsiyada u qalma qaarkood, oo dib u eegid ku sameyso canshuur shatiga ganacsiga iyadoo la raacayo isbeddelada ganacsiga iyo canshuur shaqada; ku darista Qaybta cusub 5.45.105 xeerka degmada Seattle; wax ka beddelka qaybaha 5.45.050, 5.45.100, 5.55.030, iyo 5.55.040 ee xeerka degmada Seattle; soo jeedinta ciwaanka warqadda codbixinta; iyo ansixinta iyo xaqiijinta falal hore oo gaar ah.

..jirka

HALKA AY, saadaasha dakhliga ee Xafiiska Saadaasha Dhaqaalaha iyo Dakhliga ee Abriil 2025 ay saadaalisay hoos u dhac $241 milyan ah oo ku yimaada dakhliga sannadaha 2025 iyo 2026, marka la barbar dhigo qaddarka loo isticmaalay in lagu dheelitiro miisaaniyadda sannadaha 2025 iyo 2026; iyo

HALKA AY, sida lagu soo bandhigay kulanka Maaliyadda, Dawladaha Qabiilka, iyo Bulshooyinka Asaliga ah ee May 7, 2025, qorsheyaasha maaliyadeed ee isku dhafan ee Sanduuqa Guud ee Magaalada iyo Sanduuqa Canshuurta Mushaharka ee JumpStart waxay muujinayaan nusqaanta celceliska ah ee $233 milyan sannadka 2027 iyo sannadaha soo socda; iyo

HALKA AY, hagidda miisaaniyadda 2026 ee xafiiska Duqa magaalada ay codsatay, dhammaan waaxyada ay taageerto Sanduuqa Guud iyo Canshuurta Kharashka Mushaharka, in la yareeyo laba boqolkiiba oo lagu bartilmaameedsanayo hoy la'aanta, amniga dadweynaha, iyo waaxyada la xiriira amniga dadweynaha iyo in la yareeyo sideed boqolkiiba dhammaan waaxyada kale;

HALKA AY, dhimmisyadaas, haddii lagu daro Miisaaniyadda la soo jeediyay ee 2026 ee Fulinta, ay saameyn karaan awoodda Magaalada ee bixinta adeegyada muhiimka ah ee taageera shaqaalaha nugul iyo ganacsiyada yaryar, iyo kuwa wax ka qabta amni darrada cuntada, rabshadaha ku saleysan jinsiga, iyo hoy la'aanta;

HALKA AY, sida ku cad soo bandhigidda Guddiga Guriyeynta iyo Adeegyada Aadanaha ee Abriil 23, 2025, dowladda federaalka ay horrey u joojisay $1.6 bilyan oo maalgelin ah barnaamijyada cuntada, iyadoo aan lagu darin wax isbeddel ah oo ku saabsan Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP); iyo

HALKA AY, Qaraarka Sii Socda ee ay ansixiyeen Golaha Bishii May 2025 uu ku dhimmi doono ku dhawwaad $300 bilyan oo ka mid ah SNAP ilaa 2034; iyo

HALKA AY, Qaraarka Sii Socda ee ay ansixiyeen Golaha Wakiilada bisha May 2025 uu yareyn doono maalgelinta Daryeelka joogtada ah (Continuum of Care (CoC)), oo ah isha muhiimka ah ee maalgelinta adeegyada hoy la'aanta ee magaalada Seattle, iyo in la beddelo shuruudaha u-qalmitaanka si mashaariicda Guryaha Taageerada Joogtada ah ee ku tiirsan $20 milyan oo doolar oo ah deeqaha sannadlaha ah ee CoC aysan mar dambe u qalmin;

HALKA AY, Waaxda Federaalka ee Guriyeynta iyo Horumarinta Magaalooyinka (HUD) ay siisay Kuubannada Guryaha Degdegga ah (EHVs) qoysaska la kulmaya hoy la'aanta inta lagu jiro COVID, iyadoo ballanqaaday inay maalgelin doonto EHVs ilaa 2030, laakiin HUD ayaa dhawwaan ku dhawwaaqday in maalgelinta ay dhamaan doonto goor hore, taasoo boqolaal qoysas ah halis ugu jirta hoy la'aan sannadka 2026; iyo

Halka ay, bixiyeyaasha guryaha la awoodi karo ay la kulmaan culays dhaqaale oo ka yimaada kororka kharashaadka hawlgalka iyo arrimo kale, taas oo khatar gelinaysa awooddooda muddada dheer ee bixinta guryaha la awoodi karo ee loogu talagalay kiraysteyaasha dakhligoodu hooseeyo;

HALKA AY, magaalada Seattle ay si weyn uga faa'iideysato tirada badan ee soogalootiga kala duwan iyo qaxootiga kuwaas oo ka qayb qaata horumarinta bulsho dhaqan ahaan iyo dhaqaale ahaan kala duwan oo kobcisa, iyadoo ganacsiyada ay leeyihiin soogalootiga ee Gobolka Washington ay soo saaraan in ka badan $2.3 bilyan oo dakhli sannadle ah isla markaana abuura kumanaan shaqo;

HALKA AY, Magaalada Seattle waxay hirgelisay Qaraarka 32168 oo dib u xaqiijinaya Seattle inay tahay Magaalo Soo Dhawweynaysa soogalootiga iyo qaxootiga bisha May 2025, kaas oo goluhu ku ballan qaaday inay tixgeliyaan ilaalinta maalgelinta barnaamijyada iyo siyaasadaha taageera soogalootiga iyo qaxootiga, shaqaalaha mushaharka yar, bulshooyinka halista ugu jira barakaca, iyo sidoo kale taageeridda bulshada ganacsiga kala duwan ee Magaalada iyo dheelitirka miisaaniyadda Magaalada si loo yareeyo waxyeellada ganacsiyada ay leeyihiin haweenka iyo dadka laga tirada badan yahay, bulshada ganacsiga LGBTQ, iyo istiraatiijiyadaha dhisidda hantida bulshada ee Xafiiska Horumarinta Dhaqaalaha; iyo

HALKA AY, sicir bararka sii kordhaaya iyo suurtagalnimada luminta taageerada federaalka ee meelaha adeegyada muhiimka ah ay sababi doonto farqi ku yimaada heerka adeegyada ay bixin karaan la-hawlgalayaasha aan ka tirsanayn Magaalada;

HALKA AY, magaalada Seattle ay hoy u tahay in ka badan 100,000 oo ganacsi, 75 boqolkiiba oo ka mid ah ay leeyihiin dakhli sannadle ah oo ka hooseeya $100,000; iyo

HALKA AY, marka loo eego falanqeynta[1] isbarbardhigga, ganacsi ka bilaabidda Seattle waa qaali, wakhti badan qaadata, iyo adag; iyo

HALKA AY, ganacsiyada sidoo kale wajahaan caqabado ka yimaada sicir bararka sii kordhaaya, walaacyada ammaanka dadweynaha, iyo kharashaadka guryaha, dhismaha iyo caymiska, kuwaas oo si wadajir ah cadaadis dheeraad ah saaraya awooddooda ay ku sii jiri karaan kuna horumari karaan magaalada;

HALKA AY magaalada Seattle ee bartamaha ay muujinayso calaamado rajo leh oo soo kabasho ah, boosaska dukaamada ee bannaan ayaa wali sare u ah sagaal boqolkiiba ilaa dabayaaqada 2024, waxaana Ururka Magaalada Seattle ee Bartamaha uu soo sheegayaa in ay jiraan in ka badan 500 oo dukaamo bannaan oo heerka waddooyinka ah oo ku yaal xaafadaha magaalada, kuwaas oo badankood ay horrey u buuxiyeen ganacsiyo yaryar; iyo

Halka ay, heerarka bannaan ee sare ee xaafadaha ganacsiga waxay abuuri karaan wareeg xun, halkaas oo ganacsiyo yar ay soo jiitaan dad socod ah, taasoo keenta xiritaanka ama guuritaanka ganacsiyo badan, taasoo markaa sii yaraynaysa tirada booqdeyaasha aagga;

HALKA AY, ganacsiyo badan oo yaryar ay ku shaqeeyaan faa'iidooyin yar yar oo ay si aan caadi ahayn u saameeyaan cadaadisyada dhaqaale ee soo food saara magaalooyinka, bulshooyinka, macaamiisha, iyo shaqaalaha;

HALKA AY, bixinta ganacsiyada yaryar ee ka nasashada canshuurta ganacsiga iyo shaqada waxay siin doontaa taageero loo baahan yahay ganacsiyadan; iyo

HALKA AY, iyadoo la kordhinayo canshuur dhaafka ganacsiga iyo shaqada ilaa $2 milyan oo dakhli guud ah iyo iyadoo la hirgelinayo ka-dhaafis caadi ah $2 milyan ee ugu horreeya ee dakhli guud ah ee la kasbaday, in ka badan 90 boqolkiiba ganacsiyada ku yaal magaalada Seattle midna ma bixin doonaan ama canshuur yar ayay bixin doonaan; iyo

HALKA AY, wax ka qabashada saadaasha mustaqbalka fog ee qaab-dhismeedka Guud ee Miisaaniyadda iyo Miisaaniyadda Canshuurta Mushaharka ee JumpStart (Sanduuqa JumpStart) ayaa u baahan doona Golaha Magaalada inuu sameeyo go'aanno adag oo wax ka qabta miisaaniyadda joogtada ah ee miisaaniyadda iyo soo saarista miisaaniyad isku dheelitiran, oo ay ku jiraan go'aaminta caddadka maalgelinta mustaqbalka ee qaybaha maalgashiga Sanduuqa JumpStart, sida guryaha; iyo

HALKA AY, Qorshaha Maalgashiga Guryaha ee Seattle, sida lagu codsaday Bayaanka Ujeeddada Sharci-dejinta ee Golaha Magaalada OH-001S-A, uu

1 https://ij.org/report/barriers-to-business/city-profile/seattle/

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Lr. 127259

siin doono macluumaad muhiim ah oo ku saabsan isticmaalka istaraatiijiga ah ee maalgelinta Magaalada, oo ay ku jirto Sanduuqa JumpStart, si loo taageero yoolalka wax-soo-saarka guryaha; iyo

HALKA AY, RCW 35.21.711 ay u baahan tahay codbixin aqlabiyad ah oo dadweynaha ah si loo kordhiyo heerarka canshuurta ganacsiga iyo shaqada ilaa heerarka lagu soo jeediyay xeerkan; HADDABA, SIDAAS DARTED,

**HA NOQOTO MID AY AMARTAY MAGAALADA SEATTLE SIDA SOO SOCOTA:**

Qaybta 1. Golaha Magaaladu wuxuu helay oo ku dhawwaaqay:

A. Saadaasha Oktoobar 2024 ee ka timid Xafiiska Saadaasha Dhaqaalaha iyo Dakhliga (Xafiiska Saadaasha) ayaa saadaaliyay in la filayo in ay jirto $89 milyan oo ah miisaaniyad guud (GF) oo aan ku filnayn, laga bilaabo 2027.

B. Bishii Abriil 2025, Xafiiska Saadaasha ayaa soo saaray saadaasha dakhliga ee la cusbooneysiiyay, taas oo muujinaysa:

1. Khasaaraha $150 milyan ee ku jira Sanduuqa Canshuurta Mushaharka ee JumpStart (Sanduuqa JumpStart) sannadaha 2025 iyo 2026;

2. Isku celcelis ahaan, isku darka Sanduuqa JumpStart iyo GF oo leh nusqaan dhan $232 milyan sannad walba, laga bilaabo 2027. Ka mid ah khasaarahaas, $85 milyan ayaa ku jira Sanduuqa JumpStart iyo $147 milyan ayaa ku jira GF.

C. Xafiiska Saadaasha wuxuu qiyaasayaa in dib-u-habeynta Canshuurta Ganacsiga iyo Shaqada ee xeerkan ay soo saari karto $90 milyan oo dheeraad ah oo ah dakhliga saafiga ah ee GF sannadkii, ka dib marka la tixgeliyo heerka ka-dhaafidda sare iyo ka-dhaafidda heerka cusub.

D. Ka mid ah $90 milyan oo dakhli saafiga ah, ilaa $30 milyan ayaa loo isticmaali karaa in lagu yareeyo saameynta dhimmista maalgelinta federaalka, taasoo ka tagaysa ugu yaraan $60 milyan si ay uga caawiso in lagu yareeyo khasaaraha la saadaaliyay ee GF iyo Sanduuqa JumpStart.

E. Haddii xeerkan la ansixiyo doorashada guud ee Nofeembar 2025 oo uu soo saaro $90 milyan oo doolar oo ah dakhliga saafiga ah ee GF, haddii $30 milyan oo ka mid ah loo isticmaalo in lagu yareeyo dhimmista maalgelinta federaalka iyo $60 milyan loo isticmaalo in lagu magdhabo khasaaraha la saadaaliyay GF iyo Sanduuqa JumpStart, Magaalada waxay weli wajihi doontaa khasaaro la saadaaliyay oo isku dhafan oo ah Sanduuqa JumpStart iyo GF oo qiyaastii ah $90 milyan sannadka 2026 iyo celcelis ahaan $172 milyan sannad walba laga bilaabo 2027. Sidaas darteed, Magaalada waxay u baahan doontaa inay qaado tallaabooyin kale si ay wax uga qabato qiyaasta khasaaraha.

F. Golaha Magaalada, marka ay hirgelinayaan miisaaniyadaha mustaqbalka, waxay u baahan doonaan inay gaaraan go’aanno adag oo wax ka qabta cilladda miisaaniyadda ee socda oo soo saara miisaaniyad dheelitiran, oo ay ku jiraan go’aaminta caddadka maalgelinta mustaqbalka ee qaybaha maalgashiga Sanduuqa JumpStart ee lagu sharaxay Xeerka 127155, sida uu Golaha hirgeliyay Nofeembar 2024. Kuwaas oo ah qaybaha maalgashiga waa: guryaha iyo adeegyada; Hindisaha Horumarinta Sinnaanta; horumarinta dhaqaalaha iyo dib-u-soo nooleynta; dadaallada qorsheynta bulshada; barnaamijka Green New Deal ee Magaalada; caafimaadka dhimirka dhallinyarada; tabarucaadka xisaabta xasillinta dakhliga ee Sanduuqa JumpStart; iyo barnaamijyada iyo adeegyada ay taageerto Sanduuqa Guud ee Magaalada.

Qaybta 2. >Iyadoo la raacayo oo ay ku xidhan tahay ansixinta codbixiyeyaasha magaalada sida uu oggolaaday RCW 35.21.711, Qaybta 5.45.050 ee Xeerka Dowladda Hoose ee Seattle, oo markii u dambaysay lagu beddelay Xeerka 125211, ayaa loo beddelay sidan soo socota:

**5.45.050 Soo Rogidda Canshuurta—Canshuur ama Lacag La Soo Rogay**

Marka laga reebo sida ku cad qaybta 5.55.040.D.1, waxaa halkan lagu soo rogay oo laga ururin doonaa qof kasta canshuur ku saabsan falka ama mudnaanta ku lug lahaanshaha hawlaha ganacsi ee gudaha Magaalada, haddii xafiiska ama goobta ganacsiga qofka ay ku taal gudaha ama dibadda Magaalada. Canshuurta waxaa lagu go’aamin doonaa iyadoo la adeegsanayo heerar lagu dabaqo dakhliyada guud ee iibka, dakhliga guud ee ganacsiga, ama qiimaha alaabta, oo ay ku jiraan alaabo-hoosaadyada, sida xaaladdu tahay, sida soo socota:

A. Marka qof kasta oo magaalada dhexdeeda uga hawl gala ganacsi soo saarid ahaan; sida dadka noocaan ah, caddadka canshuur ee ku saabsan ganacsiga noocaas ah waa in ay la mid tahay qiimaha alaabta, oo ay ku jiraan alaabohoosaadyada, laga soo saaro gudaha magaalada iibka ama isticmaalka ganacsiga ama warshadaha, qiimaha lagu dhufto heerka .00215 ilaa Diseembar 31, 2016, iyo laga bilaabo Janaayo 1, 2017, ilaa Diseembar 31, 2017, heerka .00219, ((~~iyo~~)) laga bilaabo Janaayo 1, 2018, ilaa Diseembar 31, 2025, marka la qiimaha .00222, oo bilaabmaya Janaayo 1, 2026, illaa Diseembar 31, 2032, marka loo eego qiimaha .00342, oo bilaabmaya Janaayo 1, 2033, marka loo eego qiimaha .00273. Cabbirka canshuurta waa qiimaha alaabta, oo ay ku jiraan alaabta kale ee laga soo saaray, iyadoon loo eegin meesha lagu iibiyo ama xaqiiqda ah in alaabtu loo geyn karo meel ka baxsan Magaalada.

B. Qof kasta oo ku hawlan magaalada Seattle ganacsi ahaan soo saaraha; dadkaas, caddadka canshuurta ee la xiriirta ganacsigaas wuxuu la mid noqon doonaa qiimaha alaabta, oo ay ku jiraan alaabta kale ee la soo saaray ama lagu farsameeyay magaalada Seattle, oo lagu dhufto heerka .00215 ilaa Diseembar 31, 2016, iyo laga bilaabo Janaayo 1, 2017, ilaa Diseembar 31, 2017, heerka .00219, ((~~iyo~~)) laga bilaabo Janaayo 1, 2018, ilaa Diseembar 31, 2025, heerka .00222, iyo laga bilaabo Janaayo 1, 2026, ilaa Diseembar 31, 2032, heerka .00342, iyo laga bilaabo Janaayo 1, 2033, heerka .00273. Cabbirka canshuurta waa qiimaha alaabta, oo ay ku jiraan alaabo-hoosaadyada ee la soo saaray ama la farsameeyay, iyadoon loo eegin meesha lagu iibinayo ama xaqiiqda ah in alaabtu loo diri karo meel ka baxsan Magaalada.

C. Qof kasta oo ku dhex hawlgalaya Magaalada ganacsiga iibinta adeegyada tafaariiqda, ama iibinta jumlo ama tafaariiq; dadkaas, caddadka canshuurta ee ganacsigaas waxay la mid noqon doontaa dakhliga guud ee ka soo gala iibka ganacsigaas iyada oo aan loo eegin goobta lagu geeyo maqaallada, alaabta, ama alaabta la iibiyay, oo lagu dhuftay heerka .00215 laga bilaabo December 31, 2016, iyo laga bilaabo January 1, 2017, ilaa December 31, 2017, oo lagu dhuftay heerka .00219, ((~~iyo~~)) laga bilaabo January 1, 2018, ilaa December 31, 2025, oo lagu dhuftay heerka .00222, iyo laga bilaabo January 1, 2026, ilaa December 31, 2032, oo lagu dhuftay heerka .00342, iyo laga bilaabo January 1, 2033, oo lagu dhuftay heerka .00273.

D. Qof kasta oo ku hawlan magaalada Seattle ganacsiga:

1. Daabacaadda

2. Daabacaadda iyo soo saarista wargeysyada, joornaalada, majalladaha, buugaagta, muusikada, iyo waxyaabaha kale ee la daabacay;

3. Daabacaadda joornaalada, majaladaha, iyo wargeysyada;

4. Ka saarista la kireysteyaasha;

5. Habeynta la kireysteyaasha; ama

6. Hawlgelinta ganacsiga shirkad dalxiis; dadkaas, caddadka canshuurta ganacsigaas waxay la mid noqon doontaa dakhliga guud ee ganacsiga oo lagu dhuftay heerka .00215 laga bilaabo December 31, 2016, iyo laga bilaabo Janaayo 1, 2017, ilaa December 31, 2017, oo lagu dhuftay heerka .00219, (~~iyo~~)) laga bilaabo Janaayo 1, 2018, ilaa December 31, 2025, oo lagu dhuftay heerka .00222, iyo laga bilaabo Janaayo 1, 2026, ilaa December 31, 2032, oo lagu dhuftay heerka .00342, iyo laga bilaabo Janaayo 1, 2033, oo lagu dhuftay heerka .00273.

E. Marka gaadiidka xamuulka ee magaalada gudaheeda ka shaqeeya ee xamuulka qaada; dadkaas, caddadka canshuurta ee ganacsigaas wuxuu la mid noqon doonaa dakhliga guud ee laga helo xamuulka laga qaado magaalada oo lagu dhufto heerka .00415 ilaa Diseembar 31, 2016, iyo laga bilaabo Janaayo 1, 2017, ilaa Diseembar 31, 2017, heerka .00423, ~~iyo~~ laga bilaabo Janaayo 1, 2018, ilaa Diseembar 31, 2025, heerka .00427, iyo laga bilaabo Janaayo 1, 2026, ilaa Diseembar 31, 2032, heerka .00658, iyo laga bilaabo Janaayo 1, 2033, heerka .00526. Ganacsiga qaadista xamuulka ee kirada waxaa ka mid ah ganacsiga kireynta ama kireynta gaadiidka matoorka ah ee ay maamusho kiraystaha, ama qof ku hoos jira

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Lr. 127259

xakamaynta kiraystaha, si loo qaado xamuulka kirada.

F. Qof kasta oo kale oo ku hawlan Magaalada gudaheeda hawl ganacsi oo aan ahayn ama dheeraad ah kuwa lagu xusay qaybaha kore; dadkaas, caddadka canshuurta ee hawlahaas waxay la mid noqon doontaa dakhliga guud ee ganacsiga oo lagu dhufto heerka .00415 ilaa Diseembar 31, 2016, iyo laga bilaabo Janaayo 1, 2017, ilaa Diseembar 31, 2017, heerka .00423, ((~~iyo~~)) laga bilaabo Janaayo 1, 2018 ilaa Diseembar 31, 2025, heerka .00427, iyo laga bilaabo Janaayo 1, 2026, ilaa Diseembar 31, 2032, heerka .00658, iyo laga bilaabo Janaayo 1, 2033, heerka .00526. Qaybtan yar waxaa ka mid ah, iyo kuwo kale, iyada oo aan la xaddidin baaxadda halkan (haddii ama haddii kale lahaanshaha agabka loo isticmaalo fulinta ganacsigaas uu u gudbo mid kale iyada oo loo marayo ku biirid, is-dhexgal, ama aan ahayn iib toos ah), dadka ku hawlan ganacsiga horumarinta ama soo saarista software-ka gaarka ah ama habeynta software-ka la diyaariyay, xuquuqda isticmaalka ama komishannada, dadka ku hawlan ganacsiga dalaalka xamuulka, iyo dadka ku hawlan ganacsiga bixinta adeeg kasta oo aan ahayn iibinta tafaariiqda, iibinta jumlada, ama adeeg tafaariiq ah.

Qaybta 3. Iyadoo la raacayo oo ku xiran ansixinta codbixiyeyaasha u qalma ee Magaalada Seattle, Qaybta 5.55.040 ee Xeerka Dowladda Hoose ee Seattle, oo markii ugu dambeysay wax ka beddel lagu sameeyay Hindisaha 137, waxaa wax laga beddelay sida soo socota:

**5.55.040 Goorta la bixiyo iyo goorta la qaado—Muddada warbixinta—Bishii, saddexdii biloodba mar, iyo sannadkii—Qodobbada xadka—Xisaabinta muddada—Ku guuldareysiga in la soo gudbiyo warbixinnada**

* * *

D.

1. Ujeeddooyinka canshuur uu soo rogay Cutubka 5.45, qof kasta oo dakhligiisa guud ee iibka, dakhliga guud ee ganacsiga, iyo qiimaha alaabta, oo ay ku jiraan alaabo-hoosaadyada, sida laga yaabo inay xaaladdu noqoto, dhammaan hawlaha lagu qabto gudaha magaalada ee canshuur ka dib dhammaan la oggol yahay in laga gooyo, waa in ka yar caddadka heerka canshuurta laga rabo ee lagu qeexay qodobka 5.55.040.D.3 ee sannadka hadda jira, waa in ay dhammaystiraan oo ay xareeyaan soo celinta, caddeeyaan in aanay wax canshuur ah ku lahayn soo celintooda, una gudbiyaan soo celinta Agaasimaha. Rasiidhada dakhliga guud iyo caddadka ka jarista waa in lagu shubaa canshuur celinta inkasta oo aan laga yaabo in wax canshuur ah laga qaado.

2. Qof kasta oo si macquul ah u qiyaasa in dakhligiisa guud ee iibka, dakhliga guud ee ganacsiga, iyo qiimaha alaabta, oo ay ku jiraan alaabo-hoosaadyada, sida ay tahay, dhammaan hawlaha lagu qabtay magaalada oo ay saameyn ku leedahay canshuurta ka dib marka la jaro dhammaan kharashaadka la oggol yahay, ay ka yar tahay xaddiga canshuurta ee lagu qeexay qaybta 5.55.040.D.3 ((~~hoos,~~)) sannadka kalandarka ah ee hadda jira, wuxuu soo gudbin karaa caddeyn ku saabsan arrintaas foomka uu bixiyo Agaasimaha isla wakhtigaas ((~~isaga ama iyada~~)) qofka uu soo gudbiyo ((~~isaga ama iyada~~)) codsi shahaadada canshuurta ruqsadda ganacsiga ama cusbooneysiinta. Agaasimaha ayaa u qoondeyn kara qof kasta oo soo gudbiya bayaankaas inuu yeesho muddada warbixinta sannadlaha ah.

3. ((~~Sannadaha kalandarka ee ka horreeya 2008, xadka canshuurta Ganacsiga iyo Shaqada wuxuu ahaan doonaa Konton Kun oo Doolar ($50,000) sida lagu aasaasay Xeerka 116945. Sannadaha kalandarka 2008 iyo 2009, xadka canshuurta Ganacsiga iyo Shaqada wuxuu noqon doonaa Siddeetan Kun oo Doolar ($80,000).~~)) Sannadaha kalandarka 2010 ((~~iyo ka dib,~~)) ilaa 2025, ((~~Ganacsiga iyo shaqada~~)) ganacsi iyo shaqo caddadka heerka canshuur ((~~waxay noqon doontaa Boqol Kun oo Doolar~~)) waa $100,000 ((~~)~~)). Sannadaha kalandarka ee ka bilaabmaya 2026, xadka canshuurta ganacsiga iyo shaqada waa $2,000,000.

* * *

Qaybta 4. Iyadoo la raacayo oo ku xiran oggolaanshaha codbixiyeyaasha u qalma ee Magaalada, Qaybta 5.45.100 ee Xeerka Magaalada Seattle, oo markii ugu dambeysay wax ka beddel lagu sameeyay Xeerka 124089, ayaa wax laga beddelay sida soo socota:

**5.45.100 Lacag-bixinno.**

Marka la xisaabinayo lacagta ruqsadda ama canshuurta, waxaa laga jari karaa cabbirka canshuurta waxyaabaha soo socda:

* * *

W. Ka-dhaafista heerka caadiga ah. Marka la xisaabinayo canshuurta, canshuur bixiyeyaashu waxay ka jari karaan $2 milyan cabbirka canshuurta. Canshuur bixiyeyaasha soo sheegaya noocyada kala duwan ee hawlaha ganacsi waxay dooran karaan hawlaha ganacsi ee ay ku dabaqayaan dhimmista caadiga ah. Goynta canshuurtaani waxay diyaar u tahay canshuur bixiyeyaasha sannadaha canshuurta ee ka bilaabanaya Janaayo 1, 2026.

Qaybta 5. Iyadoo la raacayo oggolaanshaha codbixiyeyaasha u qalma ee Magaalada, Qayb cusub oo ah 5.45.105 ee Xeerka Dowladda Hoose ee Seattle ayaa lagu daray sida soo socota:

**5.45.105 Qadarinnada**

Deeqda xarumaha kansarka ee dhammaystiran. Qof kasta oo canshuur laga qaado sida ku cad Qaybta 5.45.050 oo hela dakhli guud oo ka reeban canshuurta ganacsiga iyo shaqada gobolka sida ku cad RCW 82.04.4265 waxaa loo oggolaan doonaa abaalmarin ka dhan ah canshuurahaas oo u dhiganta caddadka dakhli guud ee ka reeban canshuurta ganacsiga iyo shaqada gobolka sida ku cad RCW 82.04.4265 oo lagu dhufto: heerka canshuurta ee ganacsigaas, laga jaray heerka ka horreeya taariikhda dhaqan-galka ee xeerkan.

B. Qadarinta isbitaallada carruurta. Isbitaalada aan faa'iido doonka ahayn ee ku takhasusay daaweynta carruurta oo canshuur laga qaado sida ku cad Qaybta 5.45.050 waxaa loo oggolaan doonaa in laga jaro canshuurahaas lacag u dhiganta dakhliyada guud ee canshuurta laga qaado sida ku cad Qaybta 5.45.050 oo lagu dhufto: heerka canshuurta ee ganacsigaas, laga jaray heerka ka horreeyay taariikhda dhaqan-galka ee xeerkan.

1. Ujeeddooyinka qaybtaan:

"Isbitaal" wuxuu leeyahay macnaha lagu aasaasay Xeerka Dib-u-eegista ee Washington Cutubka 70.41.020.

"Aan faa'iido doon ahayn" waxay ka dhigan tahay shirkad ama urur laga dhaafay canshuurta dakhliga federaalka ee hoos yimaada Qaybta 501(c)(3) ee Xeerka Dakhliga Gudaha.

c. "Ku takhasusay caafimaadka carruurta" waxay ka dhigan tahay isbitaal bixiya daryeel caafimaad oo ku habboon baahiyaha gaarka ah ee carruurta iyo dhallinyarada kuwaas oo daryeelkooda iyo ogaanshahooda ugu wanaagsan lagu daweeyo khibradda caafimaadka carruurta.

2. Xisaabinta amaahdu waxay khuseysaa oo keliya dakhliga guud ee adeegyada isbitaalka mana ku jiraan dakhliga guud ee ganacsiga tafaariiqda, jumlada, ama wax soo saarka.

Qaybta 6. Iyadoo la raacayo lana raacayo ansixinta codbixiyeyaasha u qalma ee Magaalada, Qaybta 5.55.030 ee xeerka degmada Seattle, oo markii u dambaysay wax laga beddelay xeerka 126880, ayaa loo beddelay sidan soo socota:

**5.55.030 Shuruudaha shatiga - heerka ugu hooseeya ee shatiga**

A.

1. Qofna, haddii aan si gaar ah looga reebin, ma geli karo wax hawl ganacsi, xirfad, ganacsi, ama shaqo kale oo ku taal Magaalada iyada oo aan marka hore la helin oo aan la haynin shati sax ah oo ansax ah oo loogu talagalay in lagu sameeyo, oo loo yaqaan "shahaadada canshuurta shatiga ganacsiga."

2. Wax ku ool ah laga bilaabo Janaayo 1, 2019 ilaa Diseembar 31, 2019, khidmada shahaadada canshuurta ruqsadda ganacsiga waxay noqon doontaa:

((~~1.~~)) a. Konton iyo shan doolar oo loogu talagalay dadka leh dakhliga guud ee ganacsiga iyo qiimaha alaabta oo ka yar $20,000 sannadkii ugu dambeeyay ee kalandarka oo dhammaystiran kuwaas oo ku hawlan

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Lr. 127259

waxqabad ganacsi, xirfad, ganacsi, ama shaqo kasta Magaalada ka hor Juulaay 1 iyo $27.50 dadkaas oo bilaabaya hawlahooda Juulaay 1 ama ka dib;

((~~2.~~)) b. Boqol iyo toban doolar oo loogu talagalay dadka leh dakhliga guud ee ganacsiga iyo qiimaha alaabta oo ah $20,000 ama ka badan laakiin ka yar $500,000 sannadkii ugu dambeeyay ee kalandarka oo dhammaystiran kuwaas oo ku hawlan waxqabad ganacsi, xirfad, ganacsi, ama shaqo kasta Magaalada ka hor 1-da Julaay iyo $55 dadkaas oo bilaabaya hawlahooda 1-da Julaay ama ka dib;

((~~3.~~)) c. Shan boqol oo doolar oo loogu talagalay dadka leh dakhliga guud ee ganacsiga iyo qiimaha alaabta ee $500,000 ama ka badan laakiin ka yar $2,000,000 sannadkii ugu dambeeyay ee kalandarka oo dhammaystiran kuwaas oo ku hawlan waxqabad ganacsi, xirfad, ganacsi, ama shaqo kasta oo ka jirta Magaalada ka hor Julaay 1 iyo $250 oo loogu talagalay dadkaas bilaabaya hawlahooda ama ka dib Julaay 1;

((~~4.~~)) d. Kun iyo laba boqol oo doolar oo loogu talagalay dadka leh dakhliga guud ee ganacsiga iyo qiimaha alaabta oo ah $2,000,000 ama ka badan laakiin ka yar $5,000,000 sannadkii ugu dambeeyay ee kalandarka oo dhammaystiran kuwaas oo ku hawlan waxqabad ganacsi, xirfad, ganacsi, ama shaqo kasta Magaalada ka hor Julaay 1 iyo $600 oo loogu talagalay dadkaas oo bilaabaya hawlahooda Julaay 1 ama ka dib.

((~~5.~~)) e. Laba kun iyo afar boqol oo doolar oo loogu talagalay dadka leh dakhliga guud ee ganacsiga iyo qiimaha alaabta oo ah $5,000,000 ama ka badan sannadkii ugu dambeeyay ee kalandarka oo dhammaystiran kuwaas oo ku hawlan waxqabad ganacsi, xirfad, ganacsi, ama shaqo kasta Magaalada ka hor Julaay 1 iyo $1,200 oo loogu talagalay dadkaas bilaabaya hawlahooda ama ka dib Julaay 1.

3. Janaayo 1, 2020 iyo Janaayo 1 ee sannad kasta wixii ka dambeeya, khidmadaha shahaadada canshuurta ruqsadda ganacsiga waxaa loo kordhin doonaa dhammaan dadka iyadoo la waafajinayo heerka koritaanka ee tusaha qiimaha macaamiisha (CPI-U) ee Juun ilaa Juun ee sannadkii hore ee aagga Seattle-Tacoma-Bellevue sida ay daabacday Waaxda Shaqada ee Mareykanka. Si loo xisaabiyo khidmadaha sannadlaha ah ee cusub, khidmadda sannadkii hore waxaa lagu dhuftaa wadarta hal iyo isbeddelka boqolkiiba sannadlaha ah ee CPI-U. Haddii isbeddelka sannadlaha ah ee CPI-U uu noqdo mid taban, wax isbeddel ah lama sameyn doono sannadkaas. Caddadka lacagaha lagu xisaabiyay waxaa loo soo koobayaa doolar dhan oo u dhow.

4. Si loo xisaabiyo khidmada shahaadada canshuurta ruqsadda ganacsiga ee 2026 iyo sannad kasta wixii ka dambeeya, khidmadaha ku xusan qaybaha 5.55.030.A.2 iyo 5.55.030.A.3 waxaa lagu salayn doonaa dakhliga guud ee ganacsiga ee la canshuuray ka hor inta aan la qaadan dhimmista caadiga ah ee ku xusan qaybta 5.45.100.W.

5. Kharashka waa inuu la socdaa codsiga ruqsadda. Qof kasta oo aan ganacsi ku lahayn Magaalada sannadkii ugu dambeeyay ee kalandarka oo dhammaystiran waa inuu bixiyo lacagta ugu yar ee sannadka oo dhan ama qayb ahaan marka uu codsanayo, waxaana Agaasimuhu qofka u soo diri doonaa biilka kadib marka uu dhammaado sannadka kalandarka ee codsiga wixii lacag ah ee haray iyadoo lagu saleynayo jadwalka lacagta ee qaybtaan 5.55.030.A iyo dakhliga guud ee ganacsiga ee la canshuuray iyo qiimaha alaabo-hoosaadyada inta lagu jiro sannadka kalandarka ee codsiga.

6. Shahaadada canshuurta ruqsadda ganacsiga waxay dhacaysaa dhammaadka sannadka taariikhda ee loo soo saaray. Shahaadada canshuurta ruqsadda ganacsiga waa inay ahaato mid shakhsiyeed oo aan la wareejin karin marka laga reebo sida ku cad qaybta 5.55.030.F. Codsiyada shahaadada canshuurta ruqsadda ganacsiga waa in loo gudbiyaa Agaasimaha Maaliyadda iyo Adeegyada Maamulka iyadoo la isticmaalayo foomamka uu bixiyo Agaasimaha. Shahaadada canshuurta ruqsadda ganacsiga kasta waa in la lambar yeelo, waa in ay muujiso magaca, goobta, iyo nooca ganacsiga ee ruqsad haystaha, iyo macluumaad kale oo Agaasimuhu u arko in loo baahan yahay, waana in mar walba si muuqata loogu dhejiyo goobta ganacsiga ee loo soo saaray.

7. Haddii ruqsad haystaha uu beddelo goobta ganacsiga, ruqsad haystaha waa inuu ku soo celiyaa shahaadada canshuurta ruqsadda ganacsiga Agaasimaha, waxaana la soo saari doonaa shahaado cusub oo canshuurta ruqsadda ganacsiga oo loogu talagalay goobta cusub ee ganacsiga iyada oo aan wax lacag ah laga qaadin.

Qaybta 7. Iyadoo la raacayo oo ku xiran ansixinta codbixiyeyaasha u qalma ee Magaalada:

A. Qasnadda guud ee Magaalada ayaa sii wadi doonta in lagu shubo dakhliga canshuurta ganacsiga iyo shaqada. Kordhinta heerarka canshuurta ganacsiga iyo shaqada ee lagu oggolaaday Qaybta 2 ee xeerkan waxaa loo qoondeyn doonaa isticmaalka lagu sharraxay faqradaha 7.B iyo 7.C ee xeerkan. Ugu yaraan saddex bilood ka hor inta aan Duqa Magaalada soo gudbin miisaaniyadda sannadlaha ah, Fulinta waa inay la tashato Golaha Magaalada si ay uga wada hadlaan saameynta dhimmista dakhliga dhabta ah iyo tan la filayo iyo dhimmista maalgelinta federaalka ee barnaamijyada lagu sheegay cutubyada 7.B iyo 7.C ee xeerkan si loo ogaado sida dakhliga cusub ee xeerkan uu loo isticmaali doono. Duqa magaalada waa inuu u gudbiyaa Golaha Magaalada isla wakhtigaas miisaaniyadda la gudbiyo qorshe qoraal ah oo soo jeedinaya sida dakhliga cusub ee xeerkan uu u soo saaray loo isticmaali doono meelahan.

B. Dakhliga waxaa loo isticmaali doonaa:

1. Kor-u-qaadista xadka canshuurta ganacsiga iyo shaqada iyo dhimmista ganacsiyada yaryar.

2. Si loo bixiyo barnaamijyada ama hawlaha hela maalgelinta Sanduuqa Guud ee Magaalada ama Sanduuqa Canshuurta Mushaharka ee JumpStart (Sanduuqa JumpStart) laga bilaabo taariikhda dhaqan-galka ee xeerkan, ee ku jira aagagga barnaamijyada soo socda:

Helitaanka cuntada

b. Rabshadaha ku saleysan jinsiga;

c. Taageerada ganacsiyada yaryar, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn dayactirka dukaamada iyo Aagagga Horumarinta Ganacsiga;

d. guri degdeg ah

e. Ka hortagga hoy la'aanta;

f. Taageerada xuquuqda iyo ilaalinta shaqaalaha;

g. Caafimaadka dadweynaha;

h. Horumarinta shaqaalaha iyo tababarka diyaarinta shaqada;

i. Fanka iyo dhaqanka; iyo

j. Adeegyada soogalootiga iyo qaxootiga, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn caawinta sharciga iyo matallaadda.

C. Ilaa $30 milyan oo dakhli ah ayaa loo isticmaali karaa:

1. Ee ku aaddan kharashaadka hirgelinta iyo maamulka joogtada ah ee canshuur.

2. Si loo yareeyo saameynta dhimmista maalgelinta federaalka ama isbeddelada siyaasadda federaalka ee aagagga barnaamijyada soo socda:

a. Xasilloonida guryaha ee kiraysteyaasha dakhligoodu yar yahay

b. Cuntada oo aan la heli karin, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku koobnayn, bangiyada cuntada iyo barnaamijyada cuntada lagu bixiyo;

c. Xasilloonida maaliyadeed ee bixiyeyaasha guryaha la awoodi karo iyo hantida;

d. Guryaha degdegga ah iyo hoy la'aanta;

e. Daaweynta cudurka isticmaalka maandooriyaha; iyo

f. Mashaariicda gaadiidka.

D. Duqa magaalada waa inuu soo gudbiyaa warbixin qoraal ah 1-da Sebtembar sannad walba, laga bilaabo 2026 ilaa afar sanno kadib taariikhda dhaqan-galka ee xeerkan, oo wata macluumaadka soo socda:

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Lr. 127259

1. Natiijooyinka ilaa hadda la gaaray ee ka dhashay miisaaniyadda sannadkii hore ee Sanduuqa Guud ee Magaalada ama Sanduuqa Canshuurta Mushaharka ee JumpStart, oo ay ku jiraan dakhliga saafiga ah ee laga soo saaray xeerkan, dhammaan aagagga barnaamijka ee ku xusan qaybta 7.B.2 ee xeerkan. Warbixinta waa inay ka koobnaataa natiijooyinka sida tirada: qoysaska helaya kaalmo cunto; shaqsiyaadka helaya adeegyada rabshadaha ku saleysan jinsiga; habeenada sariiraha hoyga degdegga ah la bixiyay; qoysaska laga saaray hoyga degdegga ah oo la dejiyay guryo joogto ah; qoysaska aan la isugu darin ee helaya adeegyada ka hortagga hoy la'aanta, oo ay ku jiraan kaalmo kirada, caawinta sharciga ee ka saarista, ama maaraynta kiiska si ay u sii joogaan guryahooda; ganacsiyada yaryar ee aan la isugu darin ee helaya kaalmo; iyo kiisaska xuquuqda shaqaalaha ee la xalliyay.

2. Maalgelinta cusub ama dheeraadka ah ee la bixiyay si loo yareeyo dhimmista maalgelinta federaalka, oo ay ku jiraan barnaamijyada iyo caddadka maalgelinta, sida lagu sharxay qaybta 7.C.2 ee xeerkan. Warbixinta barnaamij kasta oo helaya maalgelin hoos yimaada qaybta 7.C.2 ee xeerkan, waa inay ku jiraan natiijooyinka la gaadhay sannadka ilaa hadda sababtaas awgeed, sida tirada: unugyo la awoodi karo oo la ilaaliyay iyada oo loo marayo deeqaha xasilloonida maaliyadeed; qoysaska helaya kaalmo cunto; habeenada sariiraha hoyga degdegga ah la bixiyay; iyo kiraysteyaasha awood u leh inay si xasilloon u sii joogaan guryahooda.

Qaybta 8. Xeerkan ma xaddidayo awoodda Magaalada Seattle inay soo saarto xeerar kale oo wax ka beddela amaahda ku jirta Qaybta 5.45.105 ee Xeerka Magaalada Seattle, xadka canshuurta ganacsiga iyo shaqada ee Qaybta 5.55.040 ee Xeerka Magaalada Seattle, ama ka-dhaafka caadiga ah ee Qodob-hoosaadka 5.45.100.W ee Xeerka Magaalada Seattle.

Qaybta 9. Joogtaynta maaliyadeed

A. Dakhliga laga helo canshuurta ganacsiga iyo shaqooyinka waxaa lagu shubaa Sanduuqa Guud, kaas oo sidoo kale ku tiirsan wareejin ballaaran oo joogto ah oo ka timaadda Sanduuqa Canshuurta Kharashka Mushaharka ee JumpStart. Iyadoo ku xiran Miisaaniyadda la soo jeediyay ee Duqa Magaalada ee 2027 oo ay ku jiraan dakhliga cusub ee laga soo saaray xeerkan, soo jeedinta miisaaniyaddaas waa inay ku jirtaa qorshayaal maaliyadeed oo dheelitiran oo loogu talagalay Sanduuqa Guud ee Magaalada iyo Sanduuqa Canshuurta Mushaharka ee JumpStart, qaab iyo habka loo dejiyay Barnaamijka Daah-furnaanta Maaliyadeed, qaybta 3.140.060.B ee Xeerka Magaalada Seattle sida lagu daray Xeerka 126962. Marka lagu daro shuruudaha ku xusan qaybta 3.140.060.B, labadaba qorsheyaasha waa inay:

1. Si cad u muuji sida kheyraadka cusub ee ka soo baxa dib-u-habeynta canshuurta ganacsiga iyo shaqada, oo ay weheliyaan kheyraadka jira iyo kuwa cusub ee la soo jeediyay, loo maareeyo si loo abuuro saadaal eber ama mid togan oo ku saabsan dheelitirka lacagta aan la xafidin ee Sanduuqa Guud iyo Sanduuqa Canshuurta Kharashka Mushaharka ee JumpStart sannadka 2027 iyo dhammaan sannadaha mustaqbalka marka canshuurtu shaqeyso. Si loo gaaro dheelitirnaan eber ama mid togan oo lacagta ah, qorsheyaasha maaliyadeed waa inay muujiyaan mid ka mid ah qaybaha kharashka ee soo socda ee la dhimayo iyo inta la dhimayo. Kordhinta kharashaadka la filayo waa in lagu diiwaangeliyaa qorshaha maaliyadeed si la mid ah.

Qaybaha kharashka ee Sanduuqa Guud: Maamulka; Farshaxanka, Dhaqanka, iyo Madadaalada; Waxbarashada iyo Adeegyada Aadanaha; Bulshooyin La Noolaado oo Isku Dhafan; Badbaadada Dadweynaha; Adeegyada, Gaadiidka, iyo Deegaanka.

Qaybaha Sanduuqa Canshuurta Kharashka Mushaharka ee JumpStart: Guryaha la awoodi karo, Hindisaha Caddaaladda Cimilada, Horumarinta Dhaqaalaha, Hindisaha Horumarinta Sinnaanta; iyo Caafimaadka Maskaxda Dhallinyarada.

2. Waa in lagu tiirsanaadaa mala-awaal macquul ah, oo hufan oo si guud loo heli karo kuwaas oo lala socodsiiyo qorsheyaasha.

3. Ku jirto saadaasha dakhliga, kharashka iyo keydka ee sannadaha 2027, 2028, 2029, iyo 2030.

4. Ku jirto xariiq gaar ah si loo muujiyo sannad kasta wareejinta laga sameeyay Sanduuqa Canshuurta Kharashka Mushaharka ee JumpStart ilaa Sanduuqa Guud.

B. Haddii mid ama labadaba qorsheyaasha maaliyadeed ee la soo gudbiyay hoos xeerka 9.A ee xeerkan ay muujiyaan dheelitir la'aan oo taban oo aan la xadidin sannadka 2030, Duqa Magaalada iyo Golaha Magaalada waa inay galaan habraac dib-u-eegis ku sameeya kharashaadka socda iyo dakhliga si ay u taageeraan horumarinta tallaabooyinka miisaaniyadda ee lagu hirgelin karo Miisaaniyadda 2030 si loo xalliyo gaabisyadaas.

Qaybta 10. Doorashada – Ciwaanka warqadda codbixinta. Golaha Magaalada ayaa faraya Karaaniga Magaalada inuu qaybaha khuseeya ee xeerkan la wadaago Agaasimaha Doorashooyinka ee Degmada King, Washington, isagoo ah kormeeraha doorashooyinka, isagoo ka codsanaya Agaasimaha Doorashooyinka inuu ku dhawwaaqo oo qabto doorasho gaar ah Magaalada iyadoo la raacayo doorashada guud ee gobolka ee la qaban doono Nofeembar 4, 2025, ujeeddada ah in loo gudbiyo codbixiyeyaasha xaqa u leh ee Magaalada soo jeedinta ku xusan Qaybaha 2 ilaa 7 ee xeerkan. Karaaniga Magaalada waxaa la faray inuu u caddeeyo Agaasimaha Doorashooyinka ee Degmada King ciwaanka warqadda codbixinta ee uu ansixiyay Qareenka Magaalada iyadoo la raacayo waajibaadkooda hoos yimaada RCW 29A.36.071. Ciwaanka warqadda codbixinta ee soo socda waxaa loo gudbiyay Qareenka Magaalada si loo tixgeliyo:

MAGAALADA SEATTLE

SOO JEEDINTA LR. 2

Beddelaadyada Ku Aaddan Canshuurta Ganacsiga iyo Shaqada

Golaha Magaalada Seattle ayaa hirgeliyay Xeerka Lr. XXXXXX oo ku saabsan isbeddelada canshuurta ganacsiga iyo shaqada.

Hindisaha 2 ee Magaalada Seattle wuxuu kordhin doonaa xadka lacag bixinta ee canshuurta ganacsiga iyo shaqada laga bilaabo $100,000 ilaa $2 milyan oo dakhli guud ah; wuxuu abuuri doonaa $2 milyan oo ah ka-dhaafitaan caadi ah; wuxuuna kordhin doonaa, muddo toddoba sanno ah, heerarka canshuurta ee hadda ah .00222 iyo .00427 ilaa .00342 iyo .00658, siday u kala horreeyaan. Bilowga 2033, heerarka canshuurta waxay hoos ugu dhici doonaan .00273 iyo .00526, siday u kala horreeyaan. Dakhliga waxaa loo isticmaali doonaa in lagu taageero sanduuqa guud iyo adeegyada muhiimka ah ee magaalada oo ay halis gelin karaan goynta federaalka.

Ma tahay in Soo Jeedintaan la ansixiyo?

Haa

Maya

Qaybta 11. Falanqeyn Mustaqbalka. Goleyaasha Magaalada ee Mustaqbalka waa inay tixgeliyaan inay u diraan su'aal codbixinta codbixiyeyaasha si ay dib ugu soo rogaan heerarka ku meel gaarka ah ee canshuurta ganacsiga iyo shaqada haddii loo baahdo si loo hubiyo joogtaynta maaliyadeed ka dib dhimmista heerarka.

Qaybta 12. Ficil kasta oo waafaqsan awoodda xeerkan oo la sameeyo ka dib ansixintiisa iyo ka hor taariikhda uu dhaqan galayo waa la ansixiyay oo la xaqiijiyay.

Qaybta 13. Qaybaha 2 ilaa 7 ee xeerkan waxay dhaqan geli doonaan iyadoo la raacayo oggolaanshaha codbixiyeyaasha u qalma ee Magaalada sida uu oggolaaday RCW 35.21.711 iyo iyadoo la raacayo sharciga khuseeya. Dhammaan qaybaha kale ee xeerkan waxay dhaqan geli doonaan oo ay ku jiri doonaan xoog 30 maalmood ka dib marka uu ansixiyo Duqa Magaalada, laakiin haddii xeerkan aan la ansixin oo aan dib loogu soo celin Duqa Magaalada 10 maalmood gudahood ka dib marka la soo bandhigo, markaas qaybahaas waxay dhaqan geli doonaan sida ku cad Qaybaha Xeerka Dowladda Hoose ee Seattle 1.04.020 iyo 1.04.070.

# Runtu waa muhiim




**Inta u dhexeysa dooda xisbinimo ee halka dhinac raacsan iyo xogta khaldan, mararka qaarkood dariiqa loo maro runta ayaa noqon kara mid aan caddeyn. Waxaad halkan ka heli kartaa qaar ka mid ah talooyinka loo maro sidii aad u heli lahayd xaqiiqooyinka:**




## Su'aal xogta.

Haddii aad oonleenka ku aragto wax jahawareer ah ama aad ka maqasho saaxiib, xubin ka mid ah qoyskaaga, ama qof wax isla wadaagtaan, daqiiqad qaado si aad u ogaato halka macluumaadka uu ka yimid. Ogaanshaha in xogta la yaqaano oo la aaminni karo waxay kaa caawini kartaa inaad ogaato in xogtu run tahay iyo in kale.



## Si maskax leh uga fikir.

Waxay noqon kartaa mid waxtar leh (gaar ahaan marka aad shay si xooggan dareen ugu hayso) inaan daqiiqad qaadano oo aan ku dabaqno xiisaha xaaladda. Is celi si aad uga fiirsato dhowr su'aalood oo fudud: Yaa soo gudbinaaya macluumaadkan? Waa maxay sababtu? Goorma ayaa markeedii ugu horeysay la daabacay? Maxaa kale oo iga caawini kara inaan ogaado?



## Raadso fikrado kala duwan.

Raadinta macluumaadka laga helo ilo leh aragtiyo iyo asallo kala duwan waxay ka caawin kartaa inaad hesho waddada ugu cad ee loo maro macluumaadka runta ah.




## Anaga na weydii!

Shaqaalaha Doorashooyinka Degmada King waxay u heellan yihiin inay adiga iyo codbixiye kasta siiyaan doorashooyin sax ah, la heli karo, oo daah furan. Si wadajir ahaan ah, waxaan u leenahay khibrad boqolaal sanno ah. Naga soo wac taleefanka 206-296-VOTE (8683) ama iimeel noogu soo dir halka **elections@kingcounty.gov**.

Abdullahi, Bedria 38
Achziger, Gene 27
Alberson, James 34
Alvarado, Emily 18
Alvarez, Angelica M. 50
Bailey, Jim 75
Balducci, Claudia 20
Barber, Carol 80
Barbon, Marie 25
Berge, Tim 71
Bergquist, Avanti 57
Bernhardt Nielsen, Gina 49
Bishoff, Mike 32
Blosse, Pierre 28
Calkins, Ryan 23
Campbell, Holly 83
Campbell, Robin 82
Chikh, Lama 63
Clark, Sarah 59
Clymer, Mary 34
Coy, Gary 72
Daigle, Polly M 71
D'Ambrosio, Karl 74
Davison, Ann 41
Dembowski, Rod 21
Denino, David 27
Desimone, Robyn 28
DeVito, Rocco 26
Ducksworth, Adonis 42
Dutton, Paul 35
Egal, Mohamed 37
Espinoza, Damarys 52
Evans, Erika 41
Fain, Steffanie 22
Fannin, Nicholas 75
Fernandez, Gabriel 26
Fischer, Kimberly 69
Forhan, Mitch 64
Fortine, Ben 84
Foster, Dionne 44
Frangello-Anderson, Jeri 85
Furutani, Tracy 30
Gallez, Laura C 72
Garcia, Hugo 25
Giner, Jessica 36
Gobena, Takele 37
Goldman, Larry 31
Grant, Fred 29
Greathouse, Suzanne 81
Hale, Patty 74
Harrell, Bruce 40
Harris, Gary 82
Hasegawa, Toshiko Grace 24
Hatcher-Mays, Gloria 68
Hayes, Sandy R 55
Hedrick, Hannah 48
Henry, Donald L. 78
Hiatt, Julie 68
Hohimer, Sue-Ann 50
Ho, Jane 49
Holien, Blaine 53
Hornung, Dave 75
Ivey, Jessica 25
James, Bryce 29
Jensen, Lindsay 58
Johnson, Dan 71
Kelly, Kimberlee 56
Kemp, Ken 52
Kerner, Isabelle 37
Konya, Caitlin 37
Kresly, Katie 51
Kruller, Kate 49
Kwon, Peter 22
LaVallee, Jen 62
Lawson, Bob 66
Lebo, Jon 30
Lin, Eddie 42
Lytle Jr., Lloyd Elliott 28
Maidesil, Leebue 73
Malek, Jack 46
McCarthy, Peggy 48
Méndez, Sam 25
Miller, Rita J. 79
Mizrahi, Joe 60
Mohamed, Hamdi 23
Monroe, Martese 70
Moore, Sarah 26
Mora, Stephanie 26
Mork, Laura 46
Muilenburg, Matt 29
Murphy Richards, Kara 36
Nelson, Sara 44
Nye, Rick 69
Obras, Edwin 17
Olsen, Reid 30
Orwall, Tina L. 16
Papyan, Ara 65
Pérez, Ruth 35
Piontkowski, John 84
Pobee, Eben 47
Polintan, Rick 79
Powell, Meagan 58
Pratt, Josh 67
Rava, Carol 62
Riddle, Semra 29
Rinck, Alexis Mercedes 43
Rivera, Carmen 34
Rivera, Laura Marie 60
Roberts, Christopher 47
Rosenau, Josh 30
Russ, Debbie 85
Samra, Ziggy 49
Sanderson, Carson 54
Sanford, Michael 38
Savage, Rachael 43
Schilling, Kevin 17
Schram, Lynda 56
Seal, Verna 48
Sharma, Arun 54
Sharp, Tosh 48
Sherlock, Greg 64
Simpson, Charles 65
Smith, Brent 77
Smith, Kathleen 59
Snider, Valerie 46
Song, Vivian 61
Stahl, Andrew 85
Steinmetz, Harry 27
Stewart, Nancy J 81
Sutherland, Pat 77
Swaab, Dick 76
Thomas, Brianna K. 18
Tolentino, JoAnn 55
Van, Joe 51
Webster, Rick 67
Westgaard, Michael 34
West, Mike 76
West, Susan Jeanne 32
White, Janis 61
Williams, Emily 63
Wilson, Katie 40
Young, Shane 83
Zahilay, Girmay 20
Zehner, Eli 73
Zimmerman, Eric 33

King County
Department of Elections
919 SW Grady Way, Ste 100
Renton, WA 98057-2906

OFFICIAL ELECTION MAIL
Authorized by the U.S. Postal Service

NON PROFIT ORG
US POSTAGE
PAID
SEATTLE, WA
PERMIT NO 1455

## Dhammaan codbixiyeyaasha ku nool:

# Daabacaadda 1aad

**Nala soo xiriir si aad u hesho buug-yarahaan oo ah qaab kale.**

Contact us to receive your voting materials in Chinese, Korean, Russian, Somali, Spanish or Vietnamese.

如需獲取您的中文投票資訊,請與我們聯絡。

한국어로 투표 자료를 받으시려면 저희에게 연락하세요.

Свяжитесь с нами, чтобы получать материалы для голосования на русском.

Nala soo xiriir si aad u hesho agabkaaga codeynta oo ku qoran Af-Soomaali.

Comuníquese con nosotros para recibir sus materiales de votación en español.

Xin vui lòng liên lạc với Sở Bầu cử Quận King để nhận tài liệu bầu cử bằng tiếng Việt.

206-296-VOTE(8683) | elections@kingcounty.gov | kingcounty.gov/elections